GURI WAA HAWEEN
(The Bedrock of the Family)

Haddaan guudka laga jirin
Gudihiisa xaabkiyo
Cayayaanka laga gurin
Marwo dumar garka u xidhan
Illayn guri dugsoon ma leh

Kuma galo adduunyada
Ninna goonni-socodkoo
Marwo garasho dheer baa
Ninka raga u gudinoo
Iyadaa guddoonkiyo
Gadh-hayaa naftaadiyo
Gaadiidka reerkiyo
Gurgurshaaga noqotoo
Arrin kula gorfaysee
Haddaan gaari kula jirin
Illayn noloshu guul ma leh

Hablaha Geeska Afrika
M.I.Warsame (Hadraawi)

Marka uu ninku reerka ka maqan yahay gurigu il buu la' yahay
Marka haweeneydu ka maqan tahayna labada indhoodba wuu la' yahay!

Murti Mug Weyn

Faaqidaad iyo Faallayn Ku Saabsan Buugga

Marka hore Ilaahay baa mahad leh aan cidi ka maydheynin ama aan laga masuugeynin. Marka labaad waxa mahad leh ruuxii maskaxdiisa maaxda ku jirta u miira ummaddiisa.

Haddii aynu milicsanno macnaha iyo murtida buuggani xambaarsan yahay, ma aha wax la malaysan karayo oo muddo gaaban lagu soo minguurin karayo. Waxa aan shaki lahayn, in qoraaga buuggani u huray ama hibeeyey ururintiisa iyo ebyiddiisa wakhti badan. Waxa kale oo aan iyana muran lahayn, in uu qoraagu geliyey buuggan maal iyo maskax badan, islamarkaana waxa laga milicsan karaa buugga bulsheynimada qoraha. Curiyaha buuggan waxa ka muuqata aqoon ballaadhan oo uu u leeyahay afka soomaaliyeed dhan kastaba. Waxa kale oo taa u raacday oo buugga ka muuqata aqoon sare oo qoraagu u leeyahay dhaqanka iyo dhulka ay soomaalidu degto.

Dhan kasta oo aad ka eegtaba waa buug dhammaystiran oo aad ka dhuuxi karto murti iyo maad iyana dhammaystiran oo miisaan leh. Waa buug dhab ahaan u muujinaya oo soo bandhigaya hibada ay haweenka soomaaliyeed u leeyihiin halabuurka iyo haasaawaha ay noloshu ku hirato.

Hubaal waxa ah, Ilaahay baa la hubaaye; in uu buuggani harraad tiri doono qof wal oo u harraaddan ka haqabbeelka halabuurka haweenka soomaaliyeed. Waxa kale oo buuggan ku gadhoodhay gododka suugaanta soomaaliyeed oo dhan – tix iyo tiraabba! Waxa iyana marag-ma-doon ah, inuu buuggani yahay mid loo cuskan karo xigashada iyo xigmadda soomaaliyeed ee xoolaha iyo xawawarintooda ku saabsan.

Habka xulashada ereyada iyo xaradhaamintooda ayaa iyana si xigmadaysan la isugu ebyey oo buuggan xiiso gaar ah u yeelay.

Gabagabadii iyo gunaanadkii, ha ka abaalmariyo Guulluhu geesigaa garashadiisa gabdhaheenna (haweenkeenna) u hibeeyey. Aamiin!

Cabdillaahi Maxamed Cumar
Aqoonyahan ku xeel dheer dhaqanka iyo afka soomaaliyeed
Bolton, UK



Gabadh timo tidcan oo xidhan hu'gii hiddaha iyo dhaqanka, xadhigna soohaysa.
Gabadh yar oo la joogta iyo tusmooyin ka mid ah qalabyada aqalka hiddaha iyo dhaqanka soomaalida, sida harrar (caws) Googoos ah, Dhiil sudhayo ah iyo fadhi casri ah.

TUSMADA BUUGGA

QAYBTA 1AAD

QAYBTA 2AAD

QAYBTA 3AAD

QAYBTA 4AAD

HIBEYN

Buuggan ***Guri Waa Haween*** ee Kartida Haweenka Soomaalida waxa aan u hibeynayaa dhammaan haweenka soomaalida guud ahaantood, gaar ahaanna waxaan ku maamuusayaa hooyaday Faadumo Odowaa Cawl oo aanan xaqeeda gudi karayn, waxa kale oo aan maamuuskaas hooyo la wadaajinayaa eeddadey Aamina Yuusuf Diiriye Sool (Aamina Shiino) oo kaalin weyn ku leh barbaaritaankayga iyo waxbarashadaydiiba. Marka xiga hibeynta ***Guri Waa Haween*** waxa aan u xambaarinayaa hablaha aannu walaalaha nahay ee Ilma Baashe X. Xasan Diiriye Sool oo kala ah: Aamina-Hinda, Caasha-Yurub, Cibaado, Xaliimo-Saado, Suleekha, Ubax, Rooda, Khadra, Ayaan (Ba' Aamina), Barwaaqo, Ayaan (Ba' Jawaahir), Hibaaq, Xayaad iyo Hani iyo hablaha ilma-abtiyaday ee Ilma Maxamuud Aw Cabdi Sh. Xasan-Yare oo kala ah: Khadra, Farduus, Kaltuun, Shukri, Nimco iyo Ugbaad. Ugu Dambayntii aan ku maamuuso ***Guri Waa Haween*** xaaskayga Siciida Saleebaan Siciid, Hooyo Siraad Maxamuud Ducaale iyo walaashay Caasha Saleebaan Siciid.

HOR-DHAC

Guri Waa Haween waa laan-gooyo ku saabsan kartida haweenka soomaalida. Buuggu waxa uu ka kooban yahay afar qaybood. Ta hore waxa ay ka tibaax bixinaysaa korriimada iyo hanaqaadka inanta soomaaliyeed, maalinta ay laba jirsato ee ay raad dhaqaajiso iyo hawlaha ay qabato ilaa maalinta ay ka aqal gelayso iwm. Waxaa qaybtan lagula kulmayaa aqalka hiddaha iyo dhaqanka soomaalida waaxyihiisa iyo qalabyadiisa uu ka kooban yahay iyo kuwa lagu dhex isticmaalo. Aqoonta durugsan iyo kartida haweeneyda soomaalida ee aqalkaas iyo wacaashiisa la xidhiidha ayaa halkan wax lagaga faaqidi doonaa, sida samaynta qalabyadiisa, dayactirka iyo nadiifintiisa, rarkiisa xilligga geeddiga, furriinkiisa wakhtiga guri dhiska iyo yagleesha iwm. Xilligan casriga ah iyo daaraha magaalada iyo saamayntooda ayaa qaybtan iyana wax lagaga soo qaadi doonaa si guud mar ah.

Qaybta 2aad ee buuggan ***Guri Waa Haween*** waxa loogu tegayaa oo dhex ceegaaga xog iyo wacaalo ku saabsan mahadhooyinka hal-abuurka haweenka soomaalida. Waa miidda, maadda iyo murtida ku taxmaysa hal-abuurkaas haweenka tixda iyo tiraabtiisaba. Waa qalabyada farshaxanka ah ee ay u adeegsadaan wax kasta oo ay haweenku qabanayaan ama ay ku cabbiraan dareenkooda gudaha ee maanka iyo maskaxda. Waxyaalaha qaybtan lagu soo qaadayo waxaa ka mid ah heesta maaweelada iyo koolkoolinta carruurta, hees hawleedda xoolaha, gaar ahaan adhiga, maqasha iyo lo'da oo ka mid ah meesiga xoolaad ee hoos taga waajib gudashada haweeneyda soomaalida. Salsalkii raridda awrta, geeddiga iyo dhaanka, iyo heesta dameeraha ayaa ka mid ah qodobbada halkan lagula kulmayo.

Isla qaybta 2aad ee buuggan waxaa wax lagaga xusayaa hees hawleedyada lagu dareeriyo ama unko harrarka iyo kebedda marka la samaynayo iyo ta lagu ridho (sameeyo) aloolka aqalka hiddaha iyo dhaqanka soomaalida. Heesta haanta marka la lulayo loogu qaado iyo tii mooyaha marka hadhuudhka la tumayo, ayaa iyana halkan laga heli doonaa. Gelbiska iyo damaashaadka arooska suugaanta loo adeegsado ayaa iyana qaybtu aanay ka tegin oo wax lagaga xusayaa. Waxaa kale oo qaybtani aanay ka il-duufin suugaanta sitaadka iyo ducada oo ka mid ah fanka ruuxiga ah ee haweenka soomaalida u buuxiya kaalinta dhaashiga ama subkashada iyo indho-kuusha nafsaaniga ah ee quluubta iyo dareennada gudaha ee aan dusha sare ka muuqan.

Hal-abuurka haweenka soomaalidu kama dhaco nuxur ahaan iyo farshaxan ahaanba ka ragga soomaalida. Sidaas darteed ayaa qaybtan 2aad ee ***Guri Waa Haween*** loogu tegeyaa dheeg ka warramaya kaalinta libaax ee ay haweenku ka qaataan doorarka maansada soomaalida, waxaana ka mid ah waxyaalaha halkan lagu eegayo buraanburka oo ah sed haweenka u gaar ah, kaalintooda maansada kale sida jiiftada, gabayga iwm. Waxaana

halkan lagu soo qaaday suugaan mug leh oo gabayo iyo maanso kaleba ka kooban, haweenna ay tiriyeen iyo suugaan kale oo ku saabsan wacaasha haweenka, sida kaalintooda nolosha, jacaylkooda, quruxdooda iwm, ragguna ay qiraal ahaan u curiyeen. Ciyaarihii hiddaha iyo dhaqanka ee heesta fagaareyaasha caweyska iyo haasaawaha, hees badeedda iyo hees dagaaleedka (Rigo) ayaa iyana buuggu qaybtiisan wax kaga taataabanayaa. Waxyaalaha kale ee halkan wax lagaga xusay waxaa ka mid ah maahmaahda, hal-ku-dhigga iyo hal-hayska haweenka, haasaawaha, kaftanka iyo hal xidhaalaha haweenka, iyo ugu dambayntii tusmooyin ka mid ah sheeko xariirta hiddaha iyo dhaqanka soomaalida iyo maadeysiga la hal maala.

Qaybta 3aadna waxa ay ku saabsan tahay nolosha casriga ah iyo saamaynta ay ku yeelanayso haweenka soomaalida. Waxaa halkan si dul ka xaadis ah loogu soo qaadayaa taariikhda waxbarashada soomaalida, gaar ahaan ta haweenka, iyo sida ay dagaallada iyo eedaha sokeeyuhu u saameeyeen haweenka soomaalida. Nolosha qurbaha iyo qoyska soomaalida ayaa iyana wax laga iftiiminayaa, waxaana qaybtan lafteeda laga dhex helayaa suugaan si teel teel ah ugu dhex iidaaman, uguna badhxan oo ka qayb qaadanaysa soo dhoweynta fahamka marba arrinta shillalka ama kawaanka saaran ee la lafo gurayo ama laga faalloonayo.

Qaybta ugu dambaysa ee buuggu waa qun u eegis ku saabsan magacyada haweenka soomaalida. In ku dhow 600 magac oo kala duwan, kana kooban kuwii hore ee qadiimka ahaa (waayo waayo) iyo kuwan casriga ah ee loo bixiyo hablaha soomaalida ayaa halkan lagu weeleeyey ama kaydiyey, iyada oo magacyada qaarna tusaale ahaan wax looga bidhaaminayo macnaha ama sababaha la bixitaankooda. Qaybtan iyo buuggaba waxaa gunaanad u ah maansada Hablaha Geeska Afrika oo koobaysa kartida iyo kasmada haweenka soomaalida.

ARAAR

Guri Waa Haween (Kartida Haweenka Soomaalida) – ***The Bedrock of the Family*** (Somali Woman and Her Potential Role) waxa uu ka soo jeedaa dedaal iyo isku day shakhsi ah oo leh duruufihiisa, waayihiisa, nuqsaantiisa, il-duufkiisa, hog-seeggiisa iwm. Hase yeeshee waxa aan aqoonsanahay in uu buuggani dardar gelin karo geeddi socodka iyo hirgelinta qoraalka af soomaaliga iyo quweynta ama xoojinta awoodda ereygiisa qoran oo sahan u ah badhxidda dhaqanka soomaalida ee hadlaaga ah. Dhinaca kale buuggu waa biiro ku saabsan ururinta iyo kaydinta hiddaha iyo dhaqanka soomaalida, waxaana ku tala galku yahay in la goleeyo ama la curiyo madal iyo mawduucyo carinaya maanka iyo maskaxda, laguna wada wadaago isla gorfaynta ra'yiga iyo aaraada ama aragtida iyo fikradaha is diidi kara ama iska hor imanaya ee ku saabsan nolosha iyo wacaalaheeda, gaar ahaan dhaqanka soomaalida dheefta iyo dhibtiisaba.

Guri Waa Haween wax buu ku biirin karayaa oo kuma qadi doono, kumana hungoobi doono ruux kasta oo xiiseeya hiddaha iyo dhaqanka soomaalidu, gaar ahaan waxa uu xog iyo aqoon kobocsan ku kordhinayaa hooyooyinka casrigan ee reer magaalka ah, dhallinyarada rag iyo dumarba, gaar ahaan kuwooda qurba-joogga ah ee ku indha dillaacsanaya hiddaha iyo dhaqammada kale. Qof walba oo soomaali ah waxa uu buuggu dib u milicsiinayaa oo uu xusuusinayaa waaya-waayo iyo beri hore halkii ay godolba soo

joogtey, waana ‘xoorkii laga dhamay xagaagiyo xusuus baa geela lagu xer geeyaa’’. Dadka shisheeyaha ah ee xiiseeya ama dersa hiddaha iyo dhaqanka soomaalida waxa uu iyana buuggu ku hubaynayaa aqoon iyo xog aasaasi ah. Dhinaca kalena buuggu waa dawan iyo caroog hurdada ka kicinaya oo baraarujinaya dadka soomaalida, kuna boorrinaya ama dhiirri gelinaya in ay jiifka ka hinqadaan oo dib u soo nooleeyaan dhaqanka iyo aqoonta hiddahooda habaasku fuulay, boodhkana ka jafaan oo ku dhaataan, horena u mariyaan, halkaasna uga sii gudbaan xidhiidhka adduunka kale iyo wixii laga korodhsanayo ama laga soo ammaanaysanayo.

AFEEF

Aan ku bilaabo oo idhaahdo: ‘*Eedi hayga hadhee waan afeefanayaa’*. Intaas ka dib Buuggani waxa uu ka hadlayaa arrin culayskeeda leh oo mug weyn. Marka la eego baaxadda iyo ballaadhnida dhaqanka soomaalida, gaar ahaan arrimaha haweenka soomaalida, marka la eego filiqsanaanta iyo kala fogaanta degaannada, kala duwanaanta qalabyada adeegsiga iyo qabbaansiga, kala geddisnaanta sida magacyada loo isticmaalo, loola kala baxo, marka la eego burburka iyo kala gantoobnaanta waayaha iyo wacaasha dadka af soomaaliga ku hadla iyo degaannada ay ku kala nool yihiin iyo sida aanay u jirin meel loo cuskado tix-raac ahaan; marka la gelayo hawshan oo kale, marka la eego duruufaha iyo waxyaabaha ku xeeran ee ka hor iman kara qof kasta oo maanta u hollada in uu weel la galo dihinta soomaalida ee wada qabyaysan, waxyaabahaas oo dhan iyo qaar kaleba waxay keeni karaan in hawl kasta oo la qabto uu saluuggeedu iska badnaan karo, wada qancinna kari weydo dhaayaha dhuganaya ee la hor geynayo.

Waxaa dhab ah in aan anigu u adeegsadey buuggan aan qoray xogtii aan heli karayey ama aan gaadhi karayey, waxaana ugu badan xogta iyo aqoonta aan adeegsi-cuskaday tii aan kala soo ag gurguurtey taftii ama goshii hooyaday gacaliso, aan ka dhaxlay degaankii aan ku hanaqaaday, aan ka helay intii aan nolol wadaagga la yeeshay noole iyo ma nooleba; ama aan la kulmay intii aan daraaseynayey mawduucan kartida haweenka soomaalida oo markii hore ahaa maqaal kooban oo ku soo baxay wargeysyada iyo mareegaha soomaalida ee Internet-ka.

Buuggu waa laan-goyn dhabbaha u sii xaadhaya in qalmaan (qalimmo) kale godladaan oo halkaas ka sii amba qaadaan inta qabyada ah ama aan hubo in ay halkan ka maqan tahay; ama ha la tahli waayo oo duruufuhu ha diidaan ama garashaduba ha gaadhi weydee. Ujeeddada ugu weyn ee buuggan laga leeyahayna waa weelayn (kaydin) ku saabsan hiddaha iyo dhaqanka soo jireenka ama sooyaalka ah ee ummadda oo ay gun iyo baar haweenku ugu mudan yihiin. Waxaanan akhristaha sharafta leh ku baraarujinayaa haddii uu ereyada ama weedhaha, magacyada ama macneyaasha ama buugga qaybihiisaba uu ka dhex waayo wacaashii dhaqanka degaankiisa ama kuwii uu u muraaqoon (u bogi) lahaa in uu ogaado in kuwa halkan ku yaalla ee u dhigma kuwaas uu akhristuhu tebayo ay labadu isu taagan yihiin, isna metelaan oo hadba tii la hayo lagu baadi dooni karo ta maqan. Akhristahaas qudhiisa ayaa ugu horreeya cidda laga doonayo soo bandhigga ama soo gudbinta ta maqan ee uu hayo ama uu soo helo ee buuggani gaadhi waayey. *Aqoon la’aan Allow ha nagu cadaabin eexna ha nagaga tegin*!

Ereyga Qoraaga Buugga
Maxamed Baashe X. Xasan

MAHADNAQ

Waxa aan halkan uga mahadnaqayaa oo ku maamuusayaa dhammaan dadkii sida hufnaanta, xilkasnimada, kalsamaanta iyo hagrasho la'aanta ah gacanta iigu fidinayey, iina siinayey intii aan ku hawlanaa daraasaynta, agab ururinta iyo geeddi gelinta qoraalka buuggan ***Guri Waa Haween***. Aan ugu horraysiiyo **Maxamed Ibraahim Ismaaciil-Dhuuhe** oo aan midigtiisa ka taabay, muquuno ahaanna iigu deeqay kayd muhiim ah oo ku saabsan suugaanta iyo dhaqanka soomaalida iyo **Ibraahim Ismaaciil Faarax-Laqan** oo isna xog badan oo tix iyo tiraabba leh igu biiriyey. Dadka kale ee mahadnaqa iyo maamuuska iga mudan waxaa ka mid ah Tusmo Xasan-Low Saleebaan-Dheere, Khadiija Maxamed-Qoodaaf, Ifraax Maxamed Cabdillaahi (Ifraax Cirro), Khadra Daahir Afqarshe, Canab Jibriil Gaaxnuug, Hinda Ciise Axmed, Yuusuf Cismaan Cabdille (Shaacir), Maxamed Cabdillaahi Riiraash, Maxamed Yuusuf Cabdi (Keyse), Cabdillaahi Jaamac Galaal, Maxamed Xasan (Alto), Cabdillaahi Cawed Cige, Liibaan Cabdiraxmaan Axmad, Cabdi Cabdillaahi Xasan Mataan, C/risaaq C/laahi X. Cumar-Camey, Canab Xasan Aadan, Saynab Dhoocil, Ifraax Cawil Cali Kabadhe, C/samed Axmed Food, Cali Raabbi Ducaale (Barrac Barrac), Ibraahim X. Ducaale Cabdalle, Ibraahim Ducaale Saleebaan (Tallaabo), Ismaaciil Faarax-Laqan, Maxamed Yuusuf Mire, Cabdullaahi Xasan Axmed (Gurato), Cabdalle Xaaji Cismaan Ceelaabe, Cismaan Abokor Dubbe iyo Baashe Faarax Cali oo intuba si ay u kala badsadeenba ahaa udug-xoogga buugga dhinaca agabaynta iyo xog qaybsiga ama la baadi-doon-tagga, iyaga oo ila raad gurayey mar walba si aan daal lahayn xog aanu buuggu ka maarmeen soo helitaankeeda. **Abokor Ibraahim Xasan (Ina Qoorgaab)** ayaa isna ku mudan, kuna mahadsan kaalintiisii makiinadda marka wax la qorayo garaacidda loo adeegsado.

Dr. Jaamac Muuse Jaamac iyo aaladda **Ubbo** ayaan mahadnaq iyo maamuus maguuraan ah ugu hayaa kaalinta ay ka qaateen tafatirka iyo dib u saxa buuggan, gaar ahaan qaabaynta buugga iyo sixidda higgaadda ereyga. ***Ubbo***" waa hal alooseen markii hore u dhalatay sixidda higgaadda afsoomaaliga iyo sugidda hannaanka qoraalka far soomaalida. Haddase Ubbo waa quraar dhammays tiran oo awood u leh badanaaba farsamooyinka ay leeyihiin barnaamijyada nooceeda oo kale ah sida (Microsoft Word, OpenOffice, iwm). Ubbo waxaa sameeyey Dr. Jaamac Muuse Jaamac, waxaana gacan ka gaystay aqoonyahanno badan oo isugu jira afmaallo iyo saynisyahanno. Wacaasha Ubbo oo faahfaasan waxaa laga heli karaa http://www.redsea-online.com/ubbo.

Waxaan kale oo mahadnaq iyo maamuus aan duugoobin halkan ugu madhxinayaa **Dhuux Digaale Ducaale** oo buugga nakhtiimay, dib u sax iyo tafaftirna ku sameeyey, lahaana soo ururinta sawirrada buuggu adeegsadey. **Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan)** ayaan isna halkan ugu hayaa milge iyo mahadnaq ku aaddan kaalinta uu ku lahaa qaabaynta buugga. Waxaa kale oo iyana mahad iga mudan **Cabdiraxmaan Cabdillaahi Jibriil (Awliyo), Cabdillaahi Maxamed Cumar, Xasan Macallin Maxamuud Cige** iyo **Maxamuud**

Nadiif Cajeb oo buuggan isha soo mariyey, dib u sax iyo nakhtiinna ku soo sameeyey. Waxa aan mahad gaar ah iyana u celinayaa Ismaaciil Odowaa Laari, Safiya Cigaal, Hinda Qawdhan, Liibaan Cabdiraxmaan Axmed, Cabdilqaadir Qawdhan Cilmi, Ibraahim Maxamed Yuusuf, Jaamac Cali Tooxyare iyo Maxamed Ducaale Nuux (Qays) oo ka mid ahaa dad badan oo runtii xilliyo kala duwan igu dhiirri geliyey in aan mawduucan Kartida Haweenka Soomaalida, gaar ahaan maqaalkii ***Guri Waa Haween*** u kobciyo buug ahaan, dhiirri gelinta ay ila daba joogeenna ay igu dudduucdey in aan qalinka iyo warqadda isa saaro oo aan isku dubba rido buuggan hortiinna yaalla. Waxa kale oo mahadnaq iyo maamuus aan gaboobayn iga mudan intii hiilka hooda ah buugga u qumisay, una hurtay ee hantidooda kaga qayb qaadatay inuu galo oo dabacaadda u gudbo, soona baxo oo dhaayaha akhristayaasha hor yimaaddo, waxana dadkaas ka mid ah:

Ocean Somali Community Association
Ibraahim Aadan Daldal
Axmed Jaamac Hurre
Faysal Cilmi Cali
Kaltuun Maxamuud Aw Cabdi
Abokor Ibraahim Xasan (Ina-Qoorgaab)

Waxaa kale oo mahadnaq iyo maamuus iga mudan inta kale ee mar walba taageerada iyo dhiirri gelinta ila garabka taagnayd intii aan ku jirey hawsha buuggan, waxaana ka mid ah dadka aanan doorkooda illaawi karin:

Jaamac Abokor Dubbe (Jaamac-Dheere)
Siciid Jaamac Xuseen
Siraad Maxamuud Ducaale
Siciida Saleebaan Siciid
Hodan Cali Dhoorre
Caasha-Luul Dhoocil
Maxamed Axmed Cismaan (Fariid)
Caynaawi Cismaan Ducaale
Cabdi Gaadh
Baashe Waylaraac
Cabdillaahi Diiriye Sooraan
Keyse Maxamed Geelle
Cabdilqaadir Maxamuud Guud-cadde

Mahadnaqaygu ha wada gaadho inta mudan ee aanan magacyadooda soo koobi karin ee igala qayb qaadatay ama igu dhiirri gelisey si toos ah ama si dadban in buuggani hor yimaaddo dhaayaha akhristayaasha.

QAYBTA 1AAD

HEERARKA BARBAARINTA INANTA SOOMAALIDA

Beri baa; beri baan
wax la dhaloo; bannaan jiifta ahaa

Beri baa; beri baan
bilig bilig; baraar celisa ahaa

Beri baa; beri baan
daba jeex; dabka qaadda ahaa

Beri baa; beri baan
rukun rukun; reeraha u wareegto ahaa

Beri baa; beri baan
Raamaley; ri'yo raacda ahaa

Beri baa; beri baan
hablo weyn; had hadaafta ahaa.

Dumarka soomaalidu waxa ay dhaxal ahaan u dugsadaan, hantina u leeyihiin oo Alle ku mannaystay karti, aqoon iyo wax-qabad ballaadhan oo wada hadhaynaya, wada taabanaya oo ku wada dacal dhebaya idil ahaan muuqaallada iyo isirrada hab-nololeedka bulshada ay ka soo jeedaan doc kasta oo laga eegaba. Kartidaas haweeneyda soomaalida waxaa laga soo dheegi karaa, lagana dhex halacsan karaa taxanaha sooyaal ee Hiddaha iyo Dhaqanka Soomaalida. Habka nolosha soomaalidu waxa uu ka soo jeedaa, kuna arooraa asal-ahaan hannaanka reer guuraannimo ee xoolo dhaqashada. Runnimada jiritaan ee kartida haweenka soomaalida waxaa la dhadhamin karaa, lana aqoonsan karaa ahmiyaddeeda marka la is dul-taago ee lagu hakado kaalintooda (haweenka) ku aaddan hab nololeedkaas (miyiga) iyo xitaa kan maanta ee magaalo galeennimo ee benderka.

Hooyadu waa macallinka ugu mudan kaalinta hidde-sidennimada, waana unuggii dhaqan madhxinta bulshada. Hooyadu waxa ay dhexda marada ugu xidhataa habidda iyo ababinta ubadka guud ahaan, waxanay u tafa xaydataa, gaar ahaan carbinta iyo layliga inanteeda oo ah hooyadii mustaqbalka.

GAANGAAMBIYAAY GURI WAA ADIGA

Gaangaambisku noocyada socodka ayuu ka mid yahay. Macnuhu waxa uu abbaarayaa socod gaagaaban oo bar (meel cayiman) soo noqnoqodkiisu ku meeraysanayo. Fal-dhaca wax-qabadkiisa si toos ah looma wada dhaadi (dareemi) karo, hase yeeshee waxaa marwada soomaalidu socodkeedaasi guriga dhexdiisa ka ilma roganaya (ka dhacaya) ay ku baylah tiraysaa, kuna hagaajinaysaa wax kasta oo qabyo ka ahaa, ugana hadhsanaa hawshii aqalka dhexdiisa. Hawraar murtiyeeddani waxaa dhegta loogu sii ridayaa inanta yar ee weli tafta ama xaynka hooyadeed aan ka bixin, waxaa la doonayaa in loo sii iftiimiyo oo wax laga sii baro hanashada xilalka sugaya aayatiinka dambe iyo ka soo dhalaalidda kaalinteeda hooyannimo ee berrito. Barbaarintan habluhu waxa ay soo martaa dhaqanka soomaalida dhawr marxaladood oo kala dambeeya.

Marka ay inantu raad dhaqaajisaba (laba jirsigeeda) waxaa lagu baraarugaa oo sida laamaha dhirta fuf iyo caleen; man iyo ubax u bixiya adeegga ciidaminteeda. Aabbaheed iyo hooyadeedba waxa ay indhaha qac ku siiyaan qabbaankeeda iyo manaafacaadkeeda oo aan wax loo dhigaa jirin.

Khadiija Maxamed Qoodaaf waxa ay ka mid tahay haweenka soomaalida ee muddada dheer ku nool Qaaraddan Yurub. Waxa aan beri dhoweyto kala sheekaystay arrintan kartida haweenka soomaalida ku saabsan. Khadiija oo iigu muuqata haweeney aqoon u leh dhaqanka soomaalida, ayaa waxa ay ka hadlaysaa hanaqaadka gabadha yar ee soomaalida.

Khadiija: " *inantu marka ay laba jirsato ayay aabbaheed kabaha u soo qaaddaa, hooyadeedna u qabbaantaa (u shaqaysaa). Hooyadu waxa ay inanteeda xilligaas ku tidhaahdaa: Hooyo kaalay oo waxan ama waxaas ii soo qabo; hooyo tan ii dhiib, taas kale i sii, teer la kaalay, toona ii tiigso iwm. Inantu intaaba waa ta ku tallaabsata ee ku addeecda hooyadeed ee u soo qabata*". Qabbaansigaas iyo adeeg-dirashadan inanta ka sakow, waxaa meesha ku jirta sir nololeed duluc raaridan oo ku biyo shubaysa kaalintii carbinta iyo jara-baridda hablaha ee ku salaysan hanashada hawsha hooyannimadooda berrito looga fadhiyo in ay ka jibbo keenaan.

Marka uu gu'geedu afarta sannadood ka gudbo, waxaa inanta lagu tiriyaa ciidanka reerka. Waxa ay noqotaa kambal joog aan ka fogaan jabadka reerku deggan yahay, maqashana waa ta loo diro ee ku soo rogrogta oollimaadka iyo degelka reerka duleedkiisa. Muddo yar ka dib, marka ay gabantu sii kortaba (hanaqaaddaba), waxa ay hooyadeed ka kaabtaa (ka caawisaa) hawlo badan oo guriga dhexdiisa iyo dibeddiisaba yaalla. Khadiija Maxamed Qoodaaf oo taasi sii gorfaynaysa: "*Adhiga ayay wax ka xaraysaa, maqasha ayay qoolasha mareegta ku xidhxidhaa ama qalwada (edegga) ku gurtaa. Marka adhiga la lisayo (la maalayo) ayay hooyadeed ri'yaha ama idaha u qaqabataa, caanahana ka qaaddaa oo weelkii dhitada ku shubtaa.*" Waxa ay inantu xilligani u go'daa oo lagu

aaminaa raacitaanka iyo xannaanaynta maqasha waxaro iyo naylaba, waxarta ama naysha muqlowda ama shilintu cuntay ee u dhaqaaqi weydana daryeeshaa oo shilinta ka gurtaa.

Gu'tirsigeeda 5aad laga bilaabo, waxaa kale oo inanta soomaalidu ay ka adkaataa in ay hooyadeed xaabada u soo gurto, dabka u huriso (u shiddo), shaaha u dhardhaarto (dabka u saarto), ilmaha hoos uga sii yarna u ciyaarsiiso oo u koolkooliso. Marxaladda taas ka sii dambaysa oo ah 7-10 jirkeeda, waxaa gabantu ay hooyadeed kala wareegtaa dhammaanba hawlaha fudud oo dhan guriga dhexdiisa iyo dibaddiisaba. Waxa ay bilowdaa in ay cuntada bislayso, maacuunka ama weelkana way cushaa, hogaysaa ama xashaa, aqalka gudihiisa iyo hareerihiisa ayay nadiifisaa oo mafiiqda ama xaaqinka marisaa, waxaa kale oo ay hagaajisaa gogosha iyo dharka carruurta oo ay laalaabto, waxa ay ka adkaataa haynta carruurta, iyada oo u heesta oo maaweelisa inta ay hooyadu u soo gacan baxayso. Waxa kale oo ay inantu lushaa oo weedhaamisaa haanta caanaha lagu lulo, waxanay raacdaa oo dayaca iyo dacawada ka hirtaa (ka ilaalisaa) adhiga, iyada oo wax ka baranaysa inta ay adhiga la joogto sida maydhaxda loo diiro, sida maadha loo guro, sida xadhigga loo sooho ama harrarka (cawska) loo unko (sameeyo), sida dermada loo falkiyo, sida haanta ama dhiisha loo tolo iwm.

Nolosha magaalada lafteeda inanta yar ee soomaalidu waxa ay il-buuxin ku samaysaa nolosha oo dhan guriga gudihiisa iyo dibeddiisaba. Nadiifinta guriga iyo weelkiisa, diyaarinta qooshka laxooxda, xashidda sabaayadda, maaweelinta carruurta, maydhidda dharka fudud, ka soo adeegga sariibadda iyo waxyaalo kale oo badan ayay inantu hooyadeed ka furataa.

Karen Blixen waa haweeney qoraa ahayd oo u dhalatay asal ahaan waddanka Denmark. Sannadkii 1937kii ayay buuggeeda la magac baxay ***Out of Africa*** wax kaga qortay nolosha iyo kartida haweeneyda soomaalida. Karen Blixen waxa ay ninkeeda oo Ingiriis ahaa kula noolayd intii aanay kala tegin waddanka Kenya wakhtiyo ka mid ah intii u dhaxaysey labadii dagaal ee adduunka. Ninkeeda ayaa beero bunku ka baxo ka sameeyey xilligaas kuraha loo yaqaan Ngong Hills oo ku yaalla meel Nairobi duleedkeeda ah. Shaqaalaha beerta bunka waxaa ka mid noqday nin soomaali ah oo Faarax Aadan la odhan jirey. Faarax markii uu muddo u shaqeeyey qoladii beerahaas lahayd, ayuu sida qoraalka Karen Blixen ka muuqata Somaliland ka soo kaxeeyey xaaskiisa, hooyadeed, walaasheed oo xaaskiisa hoos uga yar, ina adeerkeed iyo gabadh yar oo rajo ah (aan hooyo lahayn) oo ay Faarax isku laf hoose yihiin.

Karen Blixen waxaa ay buuggeeda ku tilmaamaysaa haybadda, sumcadda, milgaha iyo sharafta, hanka iyo qabka, kartida iyo aqoonta haweenka soomaalida. Waxaa ay la saaxiibaysaa oo wada sheekaysi joogta ah iyo nolol wadaag la yeelanaysaa haweenkii qoyska Reer Faarax, gaar ahaan inantii yarayd ee rajada ahayd. Waxa ay Karen qoraalkeeda ku tilmaamaysaa in inantaas yari ahayd shaaddirad, fariid cirka laga soo hindhisay oo nool nool. Waxaa xiiso lahayd bay Karen leedahay in hoos loola socdo oo la sokeeye daymoodo sida ay inantaas yari u korayso. Karen Blixen waxa ay qortay: '*Way ila rafiiqi jirtey inantaasi yari, waxa ay jaraha iigu soo taxaabi jirtey oo ii soo hoggaamin jirtey faraskayga yar, waxaanay ii qaadi jirtey qorigayga. Waxa ay xilliyada qaarkood la tartami jirtey Tikuyu Totos, si ay kalluunka ugala soo jillaabato hara-*

biyeedda yar. Tafta googaraddeeda yar iyada oo haysa, ayay gucle iyo kadlayn ku gaadhaa qarka biyaha harta yar oo shebekaddeeda yar dabinka u dhigataa kalluunka!'

Karen Blixen waxaa kale oo ay tibaaxaysaa in hablaha soomaalidu marka ay yar yar yihiin ay timaha iska mudhxiyaan marka laga reebo dhoor wareegsan oo madaxa badhtankiisa ah iyo food dheer oo wejiga ka horraysa. Waxa ay Karen leedahay: '*taasi waa arrin faashin (fashion) ah oo qurux badan, hayeeshee inanta foodleyda ah ee soomaalidu xilligan way ka caaggan tahay ina-rag iyo la sheekaysigiisa*'. Inanta foodleyda ahi sida la og yahay wax dan iyo muraad ah ragga kama yeelato, ragguna dumarnimo kama quuddarreeyaan. Karen weli qoraalka way sii ambaqaadaysaa oo waxa ay ka hadlaysaa sii barbaaritaankii inanta yar, waxanay ka qortay: '*Xilli dambe markii inanta yari ay sii kortay, waxaa saamayn qalbigeeda ku raadeeyey hablaha kor uga sii weyn, waanay is beddeshey. Culays ayaa ku soo kordhay oo indhaha ayay hoos u rogtaa ama way hogataa marka ay nin aragto, haddii qof aan qoyska ka tirsanayn guriga yimaaddana way dhuumataa oo is qarisaa, timahana hadda ma xiirto oo way la baxdaa.'*

Xilligii gashaantinnimada ayay inantu u sii xuub siibanaysaa, waana xilligii laaca iyo labeenta quruxdeedu muuqan lahaayeen ee nin waliba ku baraarugi lahaa, joog iyo jookh wanaagga shacnigeeda, feedhashadeeda iyo rableynta timaheeda kala rogan ee hal-qooqa leh. Ugu dambayn waxa ay Karen Blixen tilmaamaysaa in inantaasi leedahay hab-dhaqan anshax iyo asluub sare leh, dhacdhacna aan lagu ogayn. Gashaantinnimadeeda ama gabadhnimadeeda oo guur hortiis ka jabtaa ama ka luntaana waxa ay inantaasi mar kasta ka xigtaa geeri ama gabow!

GASHAANTINNIMADA

Dharka saddex qayd dhalaashiyo dhaclaan lahaa
Dhixirka iyo qoolku waa dhaqan ayeeyaday
Markay Dhool xidhato sharaf laguma dhaafi jirin
Dhiggeed way ugu qurxoonayd dhar qaadashada
Dhayalin maayee qalbiga wuu ku dheehan yahay.

Gu'yaasha 12aad, 13aad iyo kuwa ku sii xiga, waxa ay inantu noqotaa qof garaadda goys ah (qalin jebisa), waxaanay isu dhigtaa bilcantii haweennimo ee mustaqbalka dhow. Waxa ay meel iska dhigtaa oo ka adkaataa idil-ahaan hawsha guriga gudihiisa, waxanay la foofi kartaa xilligan oo lagu aaminaa meesi kasta oo ka mid ah xoolaha qoyskooda (adhi, lo', gammaan ama geelaba). Waxaa maankeeda ku soo kordha hammi iyo qammi cusub oo hoosta ka xarriiqaya dareenkeeda ku saabsan hooyannimadeeda kaabiga (qarka) ku soo haysa. Geyaan u feedhasho (u hanqal-taag guurkii berrito ah) ayaa maskaxdeeda la soo dersa oo ku soo biira, waxanay u qalqaalo gashaa qalab urursi iyo diyaar-garow ku taxmaya hoygeedii mustaqbalka marka ay reeraysato ee ay docda hooyadeed ka baxdo ay geli lahayd.

Khadiija Maxamed Qoodaaf iyo mar kale: "*Gu'geeda 12aad waxa ay inanta soomaalidu ku tallaabsataa in ay maydhaxda soo diirato, xadhigga soohdo, maadha soo gurato oo harrarka dareeriso oo unugto ama samayso. Da' kastaba ha ku gaadhee, waxa ay inantu docda hooyadeed ku diyaarsan jirtey kaydkii aqal-galkeeda ka dib barada u noqon lahaa*". Wax yar oo aan badnayn ayaa kaydkaasi inanta loogu kordhin jirey oo loogu biirin jirey, inta kale iyada ayaa gacanteeda farshaxannimo ku samaysan jirtey, dhisina jirtey guri qiimo leh oo bilcanta, ninkeeda iyo ubadkeeda gabbood uga noqda milicda, dhaxanta, dabaysha, roobka iwm.

Dhinaca kale waxaa loo daymo lahaan jirey oo la soo sooci jirey in inantu gashaanti tahay. Habka iyo hannaanka dhar xidhashadeeda iyo muuqeeda guud ayaa laga garan jirey in ay tahay gabadh timo tidcan oo aan weli reeraysan, guur-doonna ah. Maro xariir ah ama bafto ah oo niidhi ah sida caddada shan iyo tobnaadka ah oo Saddex–qayd loo yaqaan, Boqor iyo Dhacle baarka loo soohay, Kuul cunnaabi ah ama Tusbax dhawr laab ah iyo timaha oo tidcan, ayaa baadi sooc u ahaan jirey inanta soomaalida ee gashaantida ah. Iyada iyo hooyadeed xilligan isha ayay isku fahmaan. Hooyadu sheedda ayay ka milicsataa oo kala socotaa maalinba waxa caqliga inanteeda ku soo kordhay, uurka ayaanay ka garataa waxa cindigeeda ka guuxaya. Maalinta ay inantu guri yeelato ayay beddeshaa hannaanka dhar xidhashadeeda, una macaamiishaa sida haweeney hooyo ah oo kale, hooyadeedna nefistaa oo xilkii gubayey ka gama'daa. Way dallacdaa afadu oo waxa ay qaadataa derejo alifle ka bilaabanta, hadhowtana ilaa maarshaalnimo sii kufaa kacda marka loo eego kartida iyo aqoonta ay ku waajahdo xilalkeeda cusub ee derejadaasi la guryo timid.

AQAL-DHISMEEDKA SOOMAALIDA

Dhismaha hoygeennu dhalan gooniyuu lahaa
Dhigo mara iyo gobiyo dhebiga lool ka dheer
Hohob la dhaliciyey soogan la dhaqanyo tiray
Alool dheeriyo jarcadaan dhaxantu soo marayn
Dhigaan iyo udubaan liicahayn dhacaynin abid
Dhoollaha iyo Moole anuu dhiskayga yahay.

Waxa dhex yaalla miyaay dhaayo tirin karaan
Dhugasho maalmeed miyaa lagu dhammayn karaa
Ubbadii daar ka dheerayd dhigaaya subag
Dhiil gobeed oo markaas dhayda lagu gingimo
Dhalaal weyn xeedhadii lagu dhigaayey kayd
Dhayda maalkeenna ee dhuuni ugu macaan
Dhiilo rarmiyo kadhaha lagaga dhaliyo subag
Dheriga iyo oontii dhadhamadiisu gaar ahayd
Fandhaal dhosoq laga qoroo xaradhku uu dhan yahay
Sama dhig iyo dermadii loo dhigaayey gacal

Maacuunkii dhaqankayga yaa dhammayni kara.

Dhabeel iyo gaari mooyee dhiddadu ma ridhan
Doqon dhasheediina dheelkaa cidlada ka helay
Geesi maal dhiiba warac aan dhalliil lahayn
Libaax dhab u muuqda mooyee dhurwaa ma galo.

Naag aan duur ridhaneey
Doca dalooleey
Ninkeedii dabayl raacyeey

Haweenku waa laf-dhabartii qoyska, waana udub-dhexaadka uu ku qotomo aqal dhaqameedka soomaalida iyo waaxyihiisa uu ka koobmo. Aqal-soomaaligu waa guriga farshaxanka ah ee ay hindisto, una qalab qaadato ee ay dhisto marwada soomaalidu. Waa isir bar-tilmaameed u ah kartida haweenka soomaalida. Aqalkani waxa uu ka koobmaa: meel la seexdo oo qaayo leh (guro caws ama as-gogol leh), meel wax la dhigto oo kala habaysan oo raarta ah, waana halka lagu raseeyo gurgurka qoyska oo yeelata yacay wanaagsan, meel wax lagu karsado oo doc u leexsan ama dibedda u baxsan (kun-gows), halka lagu caweeyo (ardaaga), meel martidu seexato ama lagu sooro oo aqalka ka go’an, halka lagu qobeysto oo dhinac u sii barbarsan ama aqalka sintiisa ah iwm. Aqalkaasi hiddaha iyo dhaqanka soomaalida qalabyadiisa lagu dhiso waxaa ka mid ah: cawska (harrarka) oo noocyo iyo muunado badan leh, sida Maydhaxyaale ama falakh falakh qofba sida uu u yaqaanno, Saddexle, Shanle, Toddobaadle, Tobanle, Googoos, Waaxyaale Isku-joog iwm. Waxaa soo raaca kebedda, aloolka, dhigaha oo qabax iyo lool u kala baxa, udbaha oo udub-xoogga iyo udub-dhexaadku ay ka mid yihiin, abjedka, weedhka, gibisha ama saanta lammada ah, weylaalista, yeesha iyo baydda, karbaashka iyo kooraha, heensaraarka iyo qotimmada, hoggaamada iyo qoofallada, dawlisyada iwm.

Waxaa kale oo muhiim ah weelka ama maacuunka uu aqalka soomaalidu ku dhaato ee uu leeyahay, laguna isticmaalo cuntada, caanaha ama biyaha iyo qalabyada kale ee adeegga, waxaa ka mid ah: haan-biyoodda qabada ah, ubbada subagga, qumbaha, haanta caanaha lagu lulo, agaanta lagu dhiteeyo, dhiilaha iyo dhiilasha caanaha oo noocyo badan, hadhuub-gaalka geela ama qorrogga caanaha, jaarka, doobiga, qarbedka, wadaanta biyaha, sibraarka caanaha lagu kaydiyo, dheriga cuntada lagu huuriyo marka la bislaynayo, xeedhada soorta, fandhaalka, dhuraha haanta caanaha lagaga bixiyo, kolayga alaabta lagu guro, gembisaha, saababka, masafta, fujaanka satiyada leh, tibta iyo mooyaha, dabaqa hilibka solayga ah lagu kaydiyo, mudaca iyo maxaadhka, mindida iyo lisinkeeda, soofaha, maddanaha, sabaradda, wegerka, gudinta iyo hangoolka, qabaalka xoolaha carrada loogu dhigo ama lagu waraabiyo, diga-xaadhka iyo diga-gurta ama dhiriqa iwm.

Aqal soomaaligu waa laba nooc: Aqalka caadiga ah ee inta badan la dhisto oo laba qol ka koobma, loona yaqaan Gembise iyo nooca labaad oo lagu magacaabo Laba-deryaale ama Moole. Noocan dambe waa laba aqal oo nooca Gembisaha ah oo la isu furay, barta

labada aqal ku kulmaan oo dhexda ahna deri ku yeeshaa. Noocan Mooluhu waxa uu ka koobmaa afar maqsin. Waxaa isna jira oo labadaas soo raaca Buul-cawska oo ah qol yar, had iyo goorna laga barbar dhiso aqalka weyn, hablaha ayaana u wareega, una durka halkaas marka ay roonaadaan.

Arrinta biyo-kama-dhibcaanka ah ee meesha ku jirtaa waxa ay tahay, in waaxyaha iyo qaybaha uu aqalka soomaalidu ka koobmo iyo weelkiisuba ay ahaan jireen waxyaalo ka iman jirey oo ay haweeneydu ka heli jirtey deegaanta (dhirta) iyo carrada ama dhoobada (ciidda) soomaalida, iyada oo bilcantu aanay dibad iyo dhul shisheeye waxba ka sugi jirin, baahi ku laba-dibleysaana aanay meesha iman jirin.

Aqal-dhaqameedka soomaalida iyo waaxyaha uu ka koobmo waxa ku fara yaraysata oo muhandis (Engineer) ka ah haweeneyda soomaalida. Weelka iyo waxa lagu dhex isticmaalo aqalkaasi waxa ay marwada soomaalidu ka soo dheegataa oo kala soo baxdaa deegaankeeda ku hareeraysan iyo ciidda ay ku dul socoto. Aqalkaas dhan ee soomaalida iyo weelka iyo gogoshiisuba, waxa ay ka kooban yihiin qori, caws, maydhax, harag (saan) iyo dhoobo. Marwadu iyada ayaa aqalkaasi dhista, waxaanu gurigaasi iyada (haweeneyda), odaygeeda iyo ubadkeeda gabbood uga noqdaa oo ay ka dugsadaan dhaxanta, waxanay ka jirsadaan roobka, kana hadhsadaan milicda, waana gaashaan ka celiya halista bahalka hoose iyo ka sareba.

AQOON DURUGTAY LAHAYD

Si fog oo duluc raaridan ayay haweeneyda soomaalidu ula fal gashaa, uguna milantaa nolosha iyo waxyaalaha ku hareeraysan ee ay qabbaansanayso adeegsigooda. Waxa ay ahayd khabiir ku dheeraysa daah-furka waxyaalaha cusub, iyo horumarinta iyo dayactirka waxyaalaha duugga ah ee ay nolosha ka hesho dhaxaltooyo ahaan ama ay uga baahan tahay adeegsi ahaan.

Dhig dhexo ayay u baahataa in ay la soo baxdo ama ka soo qodato xididka geed bilcil, galool, qansax ama qudhac ah. Kaynta ayay sabarad iyo gudimo la tagtaa oo geed bay is hoos taagtaa. Jirriddiisa ayay eegtaa. Inta xidid ee jirridda geedku fidisay ayay cilmi baadhis ku samaysaa. Waxa ay aqoon u leedahay xididdada geedka iyo ahmiyadda ay geedka ugu fadhiyaan. Waxa ay taqaannaa xidid aanu geedku ka maarmi karin oo haddii laga saaro uu qallalayo, dhacayo ama dhimanayo iyo xidid dheeraad ah oo uu ka maarmi karo sida aadamiguba qabsinka uga maarmo. Waxa ay ka dheregsan tahay xidhiidhka sokeeye ee ka dhexeeya geedka iyo iyada iyo sida aanay nolosheeda iyo ta geedku u kala maarmi karin. Waxa ay isku taxallujisaa in ay geedka ka hesho xidid dhig dhexo u noqon kara, geedkuna ka maarmi karo! Sabaradda iyo gudinta iskagama dhufato geedka ee waxaa ka horreeya u kuur-galkaas badan iyo aqoon-maalnimadaas qotada dheer. Haddii ay haweeneydu aragto in xididkii geedku ka maarmi lahaa ee iyana dhigta u noqon lahaa uu geedka ka maqan yahay oo haweeney ka horraysay kala baxday, way ka tagtaa geedkaas oo kuma tahanbaabto, kumana hunguri xumaato, waxanay raadisaa geed kale oo iska xejin kara ama u qalma in ay xididkaas dhigta kala baxdo. In geedku aanu ganto siibmin oo sii jiro ayay taas marwadu uga gol leedahay.

Dhigtii bay la soo baxday. Dharkii baa ka wasakhoobey oo uskag iyo gaashooyin ka yeelanaya. Saabuun ay dharka uskagga kaga saarto ayay u baahatay. Hayjad magaalo ka fogna way joogtaa oo saabuuni ka durugsan. Dhirta geed iyo geed ayay u kala taqaan. Geed walba manaafacaadkiisa ayay aqoon durugsan u leedahay. Waxa ay og tahay geedka u buuxin kara ee u geli kara halkii saabuunta. Geedka Maskax-buqda loo yaqaan xididkiisa ayay la soo baxdaa oo diirka ama dubka sare ka dhishaa, kana heshaa intii saabuuntu u qaban lahayd oo dhan. Waxaa kale oo ay saabuunta ka heshaa dhirta ay ka mid yihiin Dhaloosha iyo Adaahidu. Labadan geedba waa dhir biyood sal ballaadhan, aadna xumbeeya, kuna habboon dhar qasaalashada.

Geedka Xaskusha ama Xigga loo yaqaan waa geed qodax badan leh oo halis ah. Haweenku wax bay ku habaaraan oo waxa ay yidhaahdaan: '*Xaskuli ku muddey*'. Sida magacaba ka muuqata macnaha geedkani waa 'Xas iyo Kul' oo ah 'Xaskii Kululaa'. Haweeneydu haddaba waxa ay halkaas khatarta ah kala soo baxdaa farsamo ahaan xigga ay ka samaysato xadhkaha aqalkeeda iyo awrteeda sida hoggaamada, dhegaatiyada, dawlisyada iwm. Dhigaha loolka waxa ay ka samaysaa inta badan Duurka iyo marar qaar Dhuyaca iyo Dhafaruurta, iyada oo adeegsanaysa suuman dhuudhuuban oo loo yaqaan Jil, kana soo jeeda harag ama saanta geela, lo'da ama adhiga iwm oo la hoodhiyey. Kebedda waxa ay ka samaysaa maydhax ay ka soo diirato geedka Galoolka loo yaqaan. Weelka qabada ah, sida haanta qabada ah ee biyaha, haanta caanaha lagu lulo, dhiilasha iyo dhiilaha kala duwan ee aan qoriga ahayn, hadhuubka qorrogga ah ee geela iyo maacuun kaleba, waxa ay ka tidicdaa ama ka toshaa geedka Qabada loo yaqaan. Qabada ayay rarmisaa, dubtaa oo hadhowto feedhaa ama falkisaa, ka dibna ka toshaa weelka noocii ay doonayso. Aloolka marka ay samaynayso waxa ay soo gurataa Duur dhuudhuuban oo u toos toosan sida ulaha dhebiga ah. Duurkii iyo xadhko midab isku dhafan leh ayay haweeneydu isku ridhaa, kana samaysaa alool qiimo leh oo dugsi uga noqda gurigeeda gabadanada dhaxameed iyo roobka weedhkiisa. Harrarkuna waxa uu ka kooban yahay maadh iyo xadhko laga sameeyey maydhax iyo dun la midabeeyey. Baldhoole cagaarka iyo dareemadana waxaa laga sameeyaa Abjedka iyo Kooraha iwm. Saabku waxa uu ka soo jeedaa laamaha dhuyaca, madheedhka ama xididka qansaxa. Waxaa qaybaha saabka isku haya jilkii iyo gadow ama gedaan sida giraanta u samaysan oo afka saabka ku wareegsan sida goobada oo kale, laguna maray xadhig laga sameeyey mergiga geela iwm.

Qaybo badan oo weelka aqalka ka mid ah waxaa laga qoraa dhirta ay ka mid yihiin Dhebiga, Lebiga iyo Bisiqa. Maacuunkaas waxaa tusaale looga soo qaadan karaa dhiilasha iyo dhiilaha qaarkood, hadhuubbada qaar ka mid ah, fandhaalka wax lagu cuno, dhuraha (bixiyaha ama quddaha) haanta caanaha lagaga bixiyo, qabaalka xoolaha lagu carraysiiyo ama lagu waraabiyo, xeedhada, tibta iyo mooyaha iyo qaar kale. Ragga ayaa inta badan soo qora oo dumarka ku taakuleeya, waana dhacdaa in haweenka qaar ka jibbo keenaan oo ku guulaystaan qoritaankooda. Qoridda weelku ma sahlana oo dhirta laga soo qoraa waa geed adayg goyntiisa gacmuhu ku daalaan.

CULIDDA, HOGEYNTA, HAAWINTA, ASLIDDA IYO CARTIRAYNTA WEELKA

Nadaafaddu waxa ay ka mid tahay waxyaalaha laf dhabarta u ah guriga iyo qalabyadiisa lagu isticmaalo, gaar ahaan kuwa loo adeegsado lisidda, dhamidda iyo kaydinta caanaha dhay iyo dhanaanba ama kuwa dhaaminta, cabbidda iyo kaydinta biyaha ama weelka karinta, cunidda iyo kaydinta cuntada, siiba hilibka oo ahaan jirey calaliska ugu mudan cuntada soomaalida. Maacuunka ama weelka aqalka dhaqanka iyo hidduhu intiisa ugu badani ma qaayibo xalliinka biyaha. Marwadu waxa ay weelkaas ka samaysaa waxyaabo ku nuglaada biyaha joogtada ah. Weelka qabada ama qoriga laga sameeyaana sidoodaba xalliinku uma wacna, waayo kuma fillaado oo si wanaagsan biyuhu keligood uma nadiifin karaan. Si haddaba weelka loo nadiifiyo, loogana ilaaliyo cabudhka iyo *bacteeriyada* ama jeermiska waxaa haweenku isticmaalaan habab kala duwan oo wax-aqoon badani ka dambeeyo. Culidda weelku waa arrinta ugu muhiimsan ee sida maalinlaha ah loo isticmaalo. Dab ayaa laga shidaa xaabada dhir gaar ah. Maygaagga iyo Jeedhjeedha ayaa ka mid ah dhirtaas xaabadeeda la shido ee loo adeegsado weelka culiddiisa. Culitaanku nadaafadda ka sakow waxa uu caanaha u sameeyaa damcad wanaagsan iyo caraf udgoon. Hogeyntu waa nooc kale oo weelka lagaga ilaaliyo wasakhda iyo ka hor tagga cabudhka ama *bacteeriyada*. God ballaadhan oo af dhuuban ama ka badanba leh, ayay haweeneydu dhulka ka qoddaa oo daloolisaa. Docaha ayay u hushaa. Xaabo maaci ah oo ka soo jeedda geedka bilcilka ama qalaanqasha iwm, ayay godkaas ku gurtaa, dabna ku shiddaa. Dhuxul dhamacowdey ayaa ka dhacda. Ka dibna baarka maygaagga oo hore u gubta ayay dhamacdaas dul saartaa, weelkiina marba shay bay ku foororisaa (ku hogeysaa) oo muddo ku uumisaa ilaa weelku si wacan uga kululaanayo. Hogeyntu waxa ay u dhigantaa mishiinka maanta wiciyadda lagu maydho ama habka *steralization*-ka ee uumigiisa wax lagu nadiifiyo. Uumiga hogeynta waxa ay marwadu weelka kaga ilaalinaysaa ama kaga dileysaa cabudhka ama *bacteeriyada* ku dhalata iwm, waana nadiifin aan wax loo dhigaa jirin oo dabiici ah, udug iyo carfoonna leh.

Marka weelka la culo ama la hogeeyo, waxaa looga dambaysiiyaa wax loo yaqaan cartir ama cidaad. Cartirta ama cidaaddu waxa ay ka samaysan tahay maydhax galool oo si hufan loo buleeyey ama shay kale oo nadiif ah. Weelka gudihiisa ayaa lagu soo masaxaa oo la soo mariyaa, si ay uga soo tirtirto wax alle wixii dabka ama dhamacdu ku reebeen ee weelka gudihiisa kaga tageen. Habkanina caanaha ayuu carta ka ilaaliyaa, cartuna waa waxyaalahaas ku soo hadha weelka marka la culo ama la hogeeyo, waana laga cartireeyaa ama cidaadaa. Haawintuna waa nooc kale oo kuwaas soo raacaya. Weelka, gaar ahaan, haamaha, dhiilasha iyo dhiilaha iwm ayaa haddii ay leeyihiin aabudhka laga qaadaa oo hawada loo dhigaa, lana neecaabiyaa ama la laydhiyaa ilaa inta ay ka engegayaan. Asliddu iyana waa hab kale oo weelka lagu nadiifiyo. Weelku marka uu cusub yahay waa in la aslaa. Asalku waa jidhifta dhirta qaarkeed oo inta biyo lagu radiyo la budeeyo, dabadeedna weelka lagu dhex rido ama hareeraha, dusha iyo gudaha laga mariyo. Asalka waxa ay marwadu ka heshaa jidhifta dhirta ay ka mid yihiin Galoolka, Muqlada, Qadhoonta, Gawlallada iyo qaar kale. Jidhiftu waa dahaadh ama dub ka kaca jirridda iyo laamaha dhirtaas. Waxaa kale oo la aslaa saamaha, jilka ama mergiga dhigaha iyo xadhkaha sida Yeesha oo kale laga sameeyo, udbaha iwm. Asalku waxa uu weelka iyo qalabyada aqal soomaaliga ka ilaaliyaa cabudhka iyo xarka, waxaanu u sameeyaa qurux il-qabatin leh oo midabaysan sida sibbaaqa ama xinnaha haweenku isku qurxiyaan.

Arrimaha nadaafadda iyo fayo-dhawrka guud ka sakow haweeneyda soomaalidu waa khabiirad ku xeel dheer baxnaaninta iyo dhaymaha qofka xanuunsada ama dhaawacma. Dhakhaatiirta casriga ah xaalkoodu waxa uu ka dhigan yahay ‘baddu shalay’ oo arlada lagama aqoon, meelaha qaarkoodna ilaa hadda weli ma gaadhin. Haweeneyda soomaalidu waxa ay hawl-karnimadeeda iyo kartideeda kaga jawaabtaa muruq iyo maan dhibaato kasta oo kaga timaadda kufaa kaca waayaha nolosha gurigeeda iyo bulshada kaleba. Qof baa laf dheeri jabaysaa ama ruuggu kala wareegayaa oo malow odhanayaa. Kabniinyo ayaa nin khabiir ahi laftaas jabtay saarayaa oo ka tegeyaa. Dhakhtarka ku soo hadhayaa waa haweeneyda. Waxa ay soo qabataa neef adhi ah oo ay gawrac marisaa. Baruura-fudle ayay neefka oo dhan ka dhigtaa oo ku baanataa qofkii jabnaa ilaa uu ka bogsanayo oo biririx ka noqonayo. Baruura-fudluhu waa hilib si gaar ah loo farsameeyey oo naqwo ama xul ah. Muqumadda ama ood-kacuna way ku dhowdahay baruura-fudlaha oo baanta way gashaa. Baruura-fudlaha iyo muqumadda waxaa soo raacaya Saato kayd loo yaqaan oo ka samaysan Hadhuudh si wanaagsan isha iyo baalka looga idleeyey oo si gaar ah loo bisleeyo, laguna daro iidaan ahaan subag sixin ah iyo geedo. Saatadu way kayd gashaa oo ilaa sannad badhkii ayay xeedhada ama weel kale ku jiri kartaa, waana baan u wanaagsan kabniinyaha qofka jaba la saaro.

Xilliga shubaasha ceelka ee waraabka xoolaha ama yagleesha reerka iyo oodda, waxaa ragga qaar ku dhaca oof-wareen. Toobin ay marwadu saarto iyo baruura-fudlihii ayay u kala dambaysiisaa oo ku baxnaanisaa. Geed baa qof mudaya oo seedo ama laba biixiyood dhexdooda ku soo go’aya. Geedka jillabka loo yaqaan caleentiisa ayay u ridiqdaa oo budaysaa oo nabarka afkiisa ku gurtaa, baruura-fudlena u raacisaa. Maalmo ka dib ayaa nabarkii dillaacaa, qodaxdii oo kankoonsanina dibedda u soo booddaa. Ka-soo-baxda ayaa halkan soo gelaysa. Fin ayaa meel jidhka ka mid ah qof ka soo baxa. Meeshii ayaa dhiig iyo dheecaan is gunta yeelanaysa. Kaar iyo kurbo ayaa qofkaas jiif iyo joogba u diidaya. Baruura-fudle ama Saato hadhuudh iyo dhir ayay haweeneydu diyaarisaa oo lagu dabiibaa qofkii kaarayey iyo meeshii finku ka soo fad-kudiyeyba. Baxnaano yar ka dib finkii wuu qarxaa oo waxa uu soo tufaa wax alla wixii dheecaan, dhiig iyo gunaad uurkiisa jiifey, qofkiina wuu nefisaa oo bogsadaa.

Ninka ayaa safar dheer u baxaya ama sahan tegaya ama baadi doonaya xoolo reerka ka lumay. Marwadu marxaladahan oo kale waxa ay ninkeeda u diyaarisaa hilib solay ama jabdhan ah iyo dhiil caano kayd ahi ka buuxaan oo siddeyaal la laalaadiyo iyo shaqal qariya leh. Hilibka solayga ahi waa ka ugu qiimaha badan, waa hilib hogaysan ama duban oo macaan oo jiritaan ahaan kaydsama oo riiq dheeraada. Jabdhanka waa la shilaa, qudhiisuna waa hilib damcad leh oo kaydinta gala oo ku wanaagsan.

Ninkii ayaa safarkii ama baadi doonkii ka soo laabanaya. Busaarad ayay marwadu ka dareentaa guudkiisa, gaar ahaan timihiisa. Malaas ama xaraar ayay u diyaarisaa. Malaastu waa dhagax gaar ah oo sida beedka gacanta si fudud loogu bururin karo oo biyo lagu yara budeeyo sida *shampoo*-gana u xumbeeya, una wanaagsan nadiifinta timaha. Ragga, gaar ahaan, duqaytida ayaa lagu sharfaa oo haweenku madaxa u mariyaan.

Dara-dhigtu waa xool-carruureedka aqalka dhaqanka iyo hiddaha soomaalida. Dara-dhigta marka ilmuhu dhasho ayay marwadu u samaysaa ilmaheeda. Rako dhulka ka

kacsan oo dheer ayay ka samaysaa jillab, duur cobol ah oo geedo weyn, dareemo iyo maryo ay hoosta, docaha iyo dushaba kaga sar jartay dahaadh ahaan iyo barkimo dhabanka u macaan sida dhogorta ama baalka gorayada, bulbusha libaaxa iwm. Halkaas ayaa ilmuhu ku naalloodaa, una ahaata baro gabbood uga noqota dhaxanta iyo intii ba'an ee baas iyo belo leh.

Aqoontaas ballaadhan ayay haweeneydu u lahayd nolosha iyo waxyaabaha ku xeeran ogoggeeda (agagaarkeeda). Waxa ay ula macaamili jirtey si xigmadaysan oo saaxiibtinnimo iyo dhaqaalaysi, ititibin iyo tashiilasho ama madhxin leh. 'Berraa darane bur dhaaf' ayaa u guntanayd, taas ayaana badbaadin jirtey iyada nolosheeda iyo noolaanshaha waxyaalaha adeegsigooda ay maalin walba u baahan tahay. Dhirta iyo degaanka way daryeeli jirtay, waanay dhawri jirtey oo kuma aanay xad gudbi jirin. Hunguri xumo iyo gujo dhaadhina hadalkooda dhaaf!

Waayadii dambe xilligii ay tuulooyinka iyo magaalooyinku abuurmayeen, waxaa bilaabmay Waababka, Cariishka, Mutullaha, Dergedda dhoobada ah ama lebenka ah, Sandaqadda ama Jiingadda iyo Daarta dhagaxa ka samaysan. Aqal soomaaligii dhaqanka iyo hidduhu ma bara bixin xilligii magaaladu qaydantey, waxaanu soo galay oo laga dhisay tuulooyinka iyo magaalooyinka gudahooda.Waagaas dambe waxaa aqal soomaaliga ku soo kordhay qalabyo cusub oo waxaa la odhan karaa wuu is reer magaaleeyey. Waxaa soo galay oo la isticmaalay bir-qalax badan iyo qalabyo kale oo ka samaysan dhagax, qori, qabo ama caw iwm. sida: girgiraha, Bir-qaabka, dab-qaadka, dab-xeerta, midxinka, qori-kimseedka, gambadhka, salliga, dermada darfooleyda ah, shiraaca, kiishka, selledda ama dambiisha, jalxadda ama ashuunka, digsiga jaandiga ah, joogga, wiciyadda ay ka mid yihiin maddiibadda, sufurka, faraajiinta, suxuunta, malqacadda, foogga ama fargeetada iwm.

DUDDUMO LA XORDAY

Tuulada iyo magaaladu waxa ay u fideen si la-yaab leh. Dhismeyaal iyo bino ka kooban waab, cariish, mutulle, sandaqad, derged ama daar, berked, wara-biyeedyo, xorfado iyo xagaafyo (wadiiqooyin) ayaa asqaysiiyey oo hujuun ku qaaday dhulkii xoolaha iyo ugaadhu ku tarmi jireen ee ay ku dhaqnaayeen. Gudin af weyn, faash ma-naxe ah, cagaf ilko waaweyn iyo mishiin xiiraya iyo dab naar ah, ayaa la geliyey dhirtii iyo kaymihii sida laxda iyo naysheeda is wada ransan jirey ee feedha isku hayn jirey, isna wada dugsan jirey. Waxaa dab la sudhay oo dhuxulaysato dagaag ah oo iimaan li'i ku qamaantay kaymahaas iyo dhirtaas dhiilladu ku waaberiisatey. Maanta waxaa waddanka laga dhisaa daaro balballaadhan iyo saro ama fooqyo dhaadheer oo casri ah. Saddex qolo ayaa daarahaas loo dhisaa: qurba-joogga, tujaarta iyo madaxda. Ishu waxa ay ku dhacaysaa waddankeenna dhismayaal badan oo daafaha, dacallada iyo gudaha magaalooyin badan qarqiyey . Waxaa guryahaas loo dhistaa si u muuqan karta in ay tahay isku dayasho ama isugu faan indho la'aan ah. Tusaale ahaan qurba-jooggu guryaha ay dhistaan waa guryo ku fadhiya dhul u dhexeeya lix ilaa siddeed baloodh. Waxa gurigiiba ku wareegsan deyr weyn. Gurigiiba waxa uu ka kooban yahay lix ilaa siddeed qol, dhawr madbakh ama kijo, dhawr suuli, dhawr baad ama maqasalo, qolkii baabuurku ku xeroonayey, qol guriga ka

baxsan oo loogu tala galay ilaaliyaha guriga, qolka nefiska iyo nasashada oo isna guriga ka baxsan, una dhisan sida mutullaha iyo maqaasinta raashinka iwm. Inta badan guryahaas dhulka iyo gidaarada qaarkood waxaa laga sameeyey marmar iyo dhagax cas ama dhagax baruur la qorqoray oo la xardhay. Guriga oo dhan ayaa qurux badan. Suuliyadu waa nooca casriga ah ee salka la dhigo, una habaysan in saxarada la biyo raaciyo. Waxaa uu gurigiiba ku kacay inta u dhaxaysa US $50.000 - $100.000.

Runtii waa guri casri ah oo aad uga duwan guriga dhaqanka iyo hiddaha soomaalida, hayeeshee ku yaalla goob uu dib u dhac badani hadhaynayo. Gurigaas casriga ah iyo meesha uu ku yaallaa isma waafaqsana oo waa laba isir oo is burinaya, iskana soo horjeeda. Aqalka dhaqanka iyo hidduhu waxa uu ku salaysan yahay aqoonta *muhandis*-keeda ama *Engineer*-keeda oo ah haweeneyda soomaalida iyo dhaqaalaheeda oo ah waxa ay haysato mood iyo noolba. Xaqiiqadii guryahan dambe ee casriga ahi kuma salaysa aqoonta iyo dhaqaalaha dadka dhisanaya oo rag iyo dumar ka kooban. *'Dhar aanad lahayni dhaxan kaama cesho'*. Waa ku 'toobal caaro' guryahaasi dulsaar ku ah dhulka ay ka dhisan yihiin.

Tusaale ahaan Gurigaasi biyo ma leh oo booyad ama biyoole ayaa u dhaamisa. Sidaas darteed lama isticmaali karo suuligiisa hannaanka biyo raacinta u dhisan ama dadkuba inta badan isticmaalkiisa aqoon uma leh! Xitaa magaaladuba ma leh dhuumihii bullaacadda qaadi lahaa. Gurigaasi habeenkii waa mugdi oo laydh ma leh, maalintii ayuun baana lagu arkaa iftiinka cadceedda. Xitaa nalku inta badan magaalooyinka wuu ka bakhtiisan yahay haddii ay jiraanba birihii laydhka ee waddooyinka ku taxnaa. Magaaladuba waa mugdi. Mugdi siman. Guriga waddo ma soo gasho, kamana baxdo. Xitaa meelaha qaar ma jirto waddoba, xitaa waddo wada bohol, wada god iyo wada dalool ah (Rough Road) oo la iska qarda jeexaana waa dan! Waddoba ma jirto! Waa guri qurux badan oo ku yaal meel qorfe ah. Marin loo maraa ma jiro haddiiba dab ka kaco gurigaas qaaliga ah. Haddii masiibo kale ka dhacdana xitaa deg deg looguma gurman karo. Waxaa lagu tagaa qarda jeex iyo lug. Meelaha qaar xitaa in lug lagu tagaa ma sahlana. Badiba guryahaas waxaa ku nool gurigiiba qof ama dhawr qof oo loogu tala galay in ay ilaaliyaan oo lagu biiliyo. Gurigaas casriga ah waxaa loogu yeedhaa tilmaan ahaan naanaystan taban ee duur-xulka ah 'Ifka lagu dhaxal'. Waayo waxa meesha taalla runta ku arooraysa in qolyihii soo dhistay aanay gelayn oo ay yihiin Qurba-joog ka maqan, sida ay ugu soo noqdaanna uu shaki badani ku jiro.

Xaaladda guryahaas waxaa laga baranayaa wax badan. Waxaa laga korodhsanayaa in dhiska binada ahi uu ku reeroobo ama guriyoobo isticmaalka maalinlaha ah: neefta dadka, jaantooda, dabka ay ku shidanayaan, ku noolaanshahooda iwm. Waxaa dad badan oo guryahaas xaaladahooda u dhuun daloolaa tibaaxayaan in guryaha qaarkood, gaar ahaan kuwa aan la degganayni ama aan si fiican loogu noolayni ay iska qarqarxaan; iska dildillaacaan, loogana taag iyo maare la' yahay shimbiro, caaro, qoolley, qorratooyin, goodaaddooyin, mas-cagaley (abeeso-cagaley) iwm. Daartii casriga ahayd ee quruxda badnayd, maalka badanina ku baxay, waxa ay markaas u muuqanaysaa duddumo la xorday, lana xardhay oo la qurxiyey oo bahalo galeen ah. Waxba ma soo saarto oo tayada waa ka caydh, iyada ayaana dalbaysa in dib wax loo sii geliyo dayac-tir ahaan, waxanay ka oohinaysaa oo ilmadu dhabannada ka qubanaysaa aqal-dhaqameedkii soomaalida,

agaasinkiisii iyo marwadiisii oo gacmaha dib u laabatay, da'yaraanna ku hawl-gabaysa oo u muuqata sida 'calakudda' oo kale; qof aan waxba qaban; meelna iska soo kuududda!

HIYI KACSAN IYO HAN BUKA

Waxaan dhuuniga iyo oonta ka dheefsan jirey
Dulbaax iyo dhaylo dhiig caafimaad ku jiro
Haamo dhay iyo gadhoodh culaygu uu dhadhamo
Hadhuudh Cilmi Jaamac soo dhigay iyo galley
Sarreen dhilan heed la feedhoo dhab loo shukumay.

Waxaas oo dhereg ah oo noloshayda dheelli tiray
Dhammaan dhulka hooyaday baan ka dheefsan jirey
Haddaan dhulka beero kayd baan u dhaadhacaa
Haddaan dhaqo maalka waan dhaashanaanayaa
Dheemmanta iyo Luulka way dhaaban tahay carradu
Dhankii loo dayaba hiddahaygu waa dhammays
Dhalliil laga waa oo midnimuu ku dhiirradaa.

Mushkilad kale oo weyn ayay daaruhu horseed ka noqdeen. Waxa ay dileen hankii dadka; inta waddankii ku dambaysa yar iyo weyn; carruur iyo cirroole; rag iyo dumarba. Waxa ay ku abuureen hiyi kac waalli ah. Waxaa badiba dadku ka aammin baxeen in ay biyo-dhiijiyaan kartidooda, in ay qarxiyaan ama ibo-bixiyaan hibooyinkooda, in ay adeegsadaan aqoontooda iyo waaya aragnimadooda, in ay ku qancaan dalkooda, in ay manfac ka doontaan khayraadkiisa iyo in ay iimaansadaan wax soo saarkooda xag maskaxeed ama muruqeedba. Waxaa la soo dersey hammi iyo qammi ku xidhiidhsan in dalka laga dhuyaalo oo qaxooti doonnimo la isugu biimeeyo hanfiga iyo kulka lama degaannada waaweyn iyo badaha caalamka! Qof kastaa marka aad hoos ula sii sheekaysato waxa uu ku dareensiinayaa in hebel ama heblaayo oo shalayto ka dhoofay/tay dalku ay guryahaas ka soo dul dhisteen, qof kastaana waxa uu u laab kacsan yahay in uu dalka ka haajiro, si loo soo helo maalkii daar casri ah lagu soo dhisan lahaa!

DHIR DHAR XIDHAN

Mashaakilka daaruhu soo kordhiyeen ma qara iyo quwad yara. Daaruhu wax karti iyo awood ah ma leh, waana ka bes! Aqalkii hiddaha iyo dhaqanku sidii uu awoodda ugu lahaa inuu samaysto weelka ama maacuunkiisa uu ka heli jirey carrada, dhoobada iyo dhirta ciiddiisa daartu ma karto oo ma samaysato. Sida aynu goor dhow hoos ugu tegi doonno daartu Bac ayay weel ahaan u adeegsataa! Marka aad in badan qurba-joog ahayd, dalkiina aad ku laabato waxaa kaa soo hadhaya dhabanka iyo gacanta oo aad isa saarto

iyo Dhaka faar! Kal hore (2005) ayaan booqasho ku tegey magaalada Hargeysa oo ah baradii aan ku barbaaray, aniga oo qurbaha ka laabtay.

Madaarka Caalamiga ah ee caasimadda Hargeysa guudkiisa marka diyaaraddu beerka kula soo dhigato, waxaa ku saaqaysa madax iyo minjo jidhiidhico ka soo jeedda isku dhafnaanta boholyow iyo dal-tabyo maan-ku-raag ah, maskaxdana degsiimo iyo degel ku yeeshay iyo miliilica aragtida il-qabateenka ah ee muuqaalka la-yaabka leh ee buuraleyda magaalada ku gudo iyo hareero gadaaman iyo il-doogsiga dhirta is-ransanaysa ee sida dabiiciga ah sida 'isku-dhoonka' oo kale magaalada ugu dhex iyo dhinacyo googo'an. Dareenkan hamuunta leh waxa aan la qabaa qurba-joog badan oo waddanka dibaddiisa ku laalnaa, soona booqday waddanka muddo kolkii ay ka maqnaayeen, waxaase dareenku sii kala daaq tegayaa, siina kala fogaanayaa marka diyaaraddu caga dhigato iyo wixii ka sii dambeeya. Qofba waa indhuhuu wax ku eego iyo hal-beegga uu wax u qiimeeyo!

Weli indhuhu eegmada dhulka iyo qooraansigiisa ayay ku sii maqan yihiin, una sii haliilayaan. Diyaaraddu marba hoos ayay u sii degaysaa oo dhulkaas ilwaadka leh ugu sii dhowaanaysa. Dalku waa dalkii. Dhulku waa dhulkii. Hawadu waa cimiladiisii. Dhirtu waa dhirtiisii iwm. ayaa maskaxdu soo celcelinaysaa, hase yeeshee marka diyaaraddu shafka dhulka soo dhiganayso, ayaad dareemaysaa in wax aan caadi ahayn oo kugu cusubi jiraan. Dhirtu maaha dhirtii! Dhirta waxaa la moodaa muslimiin maalin iideed u taagan. Geed kasta waxa ay laamihiisu ku jookhan yihiin oo sitaan cimaamado iyo koofiyado cad-cad! Dhir dhar xidhan! Waxa ay taasi u muuqanaysaa arrin ugub ah iyo lama-arag! Hase yeeshee marka aad caga dhigato isla markiiba waxa aad dareemaysaa in dhirtu aanay dhar xidhnayn ee ay wada cabudhsan tahay! Geed kasta naftaa haysa oo fuqa ayuu kor u taagayaa. Waxaa laan kasta ku gadaaman oo naqaska ku dhejisey BAC . Meeshii ishu ku dhacdaba waxaa sudhan ama ka lulmanaya bacdaas oo hawadii kaga gudban, taas oo keeni karta in dhirtuba waxyeello u keento dadka iyo duunyadaba halkii laga manaafacaadsan lahaa. Waayo bacdu waxa ay ka soo jeeddaa isku dhafyo kiimikooyin ku jiraan, marka ay cadceedda la sii fal gashana waxa soo bixi kara sun cusub. In ka badan ½ malyuun baco ah ayaa tusaale ahaan maalintii Hargeysa lagu isticmaalayey xilligaas (Noofembar 2004). Waxaa bacaha lagu shubtaa raashinka miiska ah oo dhan: bariiska, sonkorta, shaaha, milixda, basbaaska, caanaha, subagga, saliidda, malabka, gaasta iwm, waxana ugu daran oo bacaha sii firdhiya mijinta qaadka ah oo iyana lagu laabto. Bacuhu ma laha meel lagu ururiyo marka la isticmaalo ka dib, waxana lagu tuuraa guryaha hortooda, waxana qaadda dabaysha oo dhirta ku dul wadha. Sida daartu u bara bixisay aqalkii dhaqanka iyo hiddaha, ayay bacuhuna u sii bara bixinayaan maacuunkii iyo weelkii wax lagu shuban jirey. Kartidii haweeneyda soomaalida ayaa iyana halkaas isku dhintay. Waayo waxaa meesha ka baxay wax qabad dhan oo ka dhignaa wershed guuxaysa! Waa aqal soomaaligii, waaxyihiisii iyo weelashiisii! Geel jiruhu geela xilligan maddiibad buu ku maalaa, caanaha caagad saliidi ka madhatay ayuu ku shubtaa! Qorroggii ama hadhuub-gaalkii qabada haweeneydu ka toli jirtey maddiibaddaas marka hasha lala galo caanuhu ka boodayaan, ayaa ka qaalib noqotay. Xitaa maddiibadda lafteeda ma samaysan naqaanno! Sibraarkii caanaha kaydin jirey caagaddaas 'suyaca' badan, ayaa ka qaalib noqotay. Caagadduna dibadda ayay ka soo dhooftaa oo iyana ma samaysan karno!

BEER WADA BALOODHAYSAN

Dhibaatada kale ee daaruhu soo kordhiyeen waxaa ka mid ah in dhulkii la wada baloodheeyo, iyada oo aan loo miidaan ama meel deyeyn dhul kaydsan (dhul dan guud), beer, garoon kubbadeed, bannaan iyo buur toonna.

Tusaale ahaan magaalada caasimadda ah ee Hargeysa waxaa ku badnaa dhul beereedka qarqarrada ka raaca dooxa weyn ee Maroodi Jeex ee magaaladu caanka ku tahay. Qaybo badan oo beerahaas ka mid ah waa la baabi'iyey, waxaana loo baloodheeyey dhisme ahaan. Dhul beereed baaxad leh oo dhiraysnaa, cagaarraana, ayaa si naxariis darro ah birta looga aslay oo cagaf la geliyey, dhirtiina laga xagaafay oo la banneeyey, lagana unkay binayn xoog leh oo dhisme ah. Magaaladu waa cidhiidhi isku raran. Meel walba waxaa ka taagan duddumo la xorday iyo waddo dhuuban oo wada booraan ah (daldaloosha) oo daaruhu dhinacyada kaga soo fideen. Xeradii Libaaxyada ee Shanta Maylku waa wada duddumo. Garoomadii kubbadda ee iskuullada iyo xaafaduhu waa wada duddumooyin kale oo waslad dhul ahi kama bannaana. In daaro la dhistaa mushkilad maaha, hase yeeshee waxaa tabaalo ah in sidan indhaha la' loogu qamaamo iyo in daaraha noocan ah ee kharashka badan ku fadhiya oo keliya loo wada beretamo. Daarahaasi kuma salaysna nolosha iyo dhaqaalaha waddankaas saboolka ah, kumana sargo'na aqoonta, dhaqanka iyo baahida dadka ku nool dalkaas dib u dhaca iyo burburku ragaadiyeen. Horumarku maaha daaro casri ah oo keliya, haddii sidaas loo fahmana waxa uu noqonayaa horumar bog keliya ka raran ama ka reeryeysan oo dheelli-tirayaashii ka maqan yihiin, waxaanuu ku dambeeyaa horumar luggooyo oo waa la eedaa hadhowto muddo ka dib, haddii aan hore loo daba qabatayn. Horumarka ay ummadi u kohataa (u hollataa) ma noqon karo 'cir ka soo dhac' ee waa in ay jirtaa meel laga soo dheegtaa oo loo gun raacaa. Horumar aan dhalanteed iyo qosol ku jab ahayna waxaa lagu beegsan karaa dib u soo noolaynta iyo sii casriyaynta dhaqanka iyo aqoonta noloshii dhaladka ahayd ee ummadda iyo xeerarkeedii, dhigaalladeedii iyo qabitaannadeedii. Waa halkaas halka looga sii gudbi karaa adduunka kale iyo wax ka soo xigashadiisa muhiimka ah. Hayaankuna bartaas ayuu ka dhaqaaqi karaa, laguna higsan karaa degaan ka laac iyo tigaad roon kobta abaarta ah ee maanta la-kadaloob yumbudho ama yuururo. In la guuro weeyaan!

GEEDDIGA IYO YAGLEESHA GURIGA

Ma intaan ranramanaayeey, reerihii dareereen
Ma intaan gambada waayaa, awrtii gibisha loo xidhay

Guuritaanku waa astaan kale oo lagu tilmaansan karo kartida haweenka soomaalida. Xilliga geeddiga badanaa marwadu iyada ayaa aqalka furfurta oo rarta, shay kastana ku hubsata meel ku habboon oo hadhowto loogu hagaago. Waxa ay marwadu soo qaqabataa oo soo fadhiisisaa awrta rareyda ah. Cullaabta ama rarka oo u kala baxa Heeryo, Gurgur iyo Surrad ayay awrta saartaa.

Haylaale haylaaloow
Heeryadu hu'gaa weeyee
Ma ku laba hagoogaayoo
Hadh ma kaa sameeyaa.

Heeryadu waa rarka ugu horreeya ee awrka la saaro, waana qalabyada awrka ka ilaaliya inuu garba beelo iyo in ay miskuhu mudhxaan iwm. Waxaa Heeryada ugu muhiimsan karbaashyada oo ka samaysan maryo suuf ah oo la isku dul iyo qoob tolay, kebedda oo leh bulbusha libaaxa oo kale, kana samaysan maydhaxda geedka galoolka laga soo diiro, harrarka maydhaxyaalaha ama falakh falakha loo yaqaan oo caws ama maajeen kale ka samaysan, abjedka oo baldhoole cagaar ka samaysan, kooraha oo isna baldhoolaha laga sameeyo iwm. Heeryada waxaa soo raaci kara Yeesha iyo Baydda oo ah xadhkaha loo isticmaalo isku xidhka awrka iyo heeryadiisa, iyo rarkiisa kale. Awr kasta oo la rarayaa kama maarmo in heeryo la saaro. Kabaallada ayaa iyana heeryada ku lammaan. Kabaalladu waa afar udub oo laba tahay kabaallo hore, labada kalena kuwo dambe. Laba kabaal oo kasta si is waydaar ah ayaa la isu dhaafiyaa sida xarafka 'X-da' oo kale. Kabaalladu waxa ay u taagan yihiin meel marinta isku xidhka awrka laftiisa, heeryada iyo rarka intiisa kale.

Heeryada marka awrka loo dhammaystiro xilliga geeddiga waxaa rarka xigaa noqon karaa nooca Gurgurka ama ka Surradda loo yaqaan midkood. Gurgurka ayaa ugu muhiimsan rarka geeddiga, waxana la saaraa awrka gurgurshaaga ama hayinka biyo ma daadshaha ah. Carruurta iyo maqasha ayaa loo gureeyaa oo la saaraa awrka gurgurshaaga. Rarkiisuna waa gurgurka reerka oo dhan, sida haamaha biyaha iyo kuwa caanaha, agaamaha, saababka, koleyga. Gembisaha, qumbaha, ubbada, doobiyada ama hadhuubbada kala duwan waaweyn iyo yaryarba iyo maacuunka oo dhan. Sida qaanso-roobaadda ama bisha oo kale ayay marwadu rarka awrka u dul qandoodisaa dhigihii aqalka lool iyo qabaxba. Qabaxu waa laba nooc. Waxa loo kala yaqaan mid sare ama dhaadheer oo ah ka mara guriga xaggiisa sare iyo qabaxa hoose ama gaagaaban oo ah dhigaha aqalka labada feedhood ka gala. Qabaxa noocan hoose waxa ay raacaan rarka noociisa Gurgurka, qabaxa sarena Surradda. Ugu dambaynna gibisha oo ah saan lammo ama jarco ah ayay haweeneydu ku gadaantaa rarka oo gam ku siisaa.

Rarka nooca kale ee Surradda la magac baxay waxa uu ka koobmaa waaxyihii dhismaha guud ee aqalka sida harraradii, aloolladii, weedhadhkii, udbihii, qotimmadii, heensaraarradii iwm. Dhigaha loolka iyo qabaxa sare ayaa rarkanna raaci kara. Heeryada ugu culus ayuu rarka Surraddu u baahdaa, waayo cullaabtiisa ayaa ka miisaan weyn ta rarka Gurgurka, hayeeshee Surraddu waxa ay ka kaaftoontaa gibisha. Haddaba awrtii oo rarkii saaran yahay oo isku xidhiidhsan, awrkii gurgurshaaguna ugu horreeyo, ayay kicisaa oo marwada soomaalidu keenada (hoggaanka) u qabataa, iyada oo ilmihii ugu yaraa ubadkeedana xanjeeratay (dhabarka u ridatey oo xambaarsan). Adhiga ayay ood-rogada (afsaarta) ka dhufataa (ka rogtaa) oo dareerisaa. Awrta iyo adhigii ayay haweeneyda soomaalidu wada kaxaysaa oo is-raacisaa masaafo (fogaan) dhan 10-20 km ama ka badanba xilliga geeddiga hayaanka loo yaqaan.

Xilliga degsiimada iyo yagleesha degelka cusub, waxa ay haweeneydu rarka ka dhigtaa awrta. Marka shayba meeshii ku habboonayd ay dhigto, ayay u dhaqaaqdaa dhanka carruurta oo in badan soo lahayd: "*hooyo caano i sii*", ayna ku soo sasabaysey (maaweelinaysey) "*horta reerku ha dego*"! Caano ayay ku qabataa ama anfaco kale ayay afka u gelisaa oo ay ku aamusiisaa. Dabadeed waxa ay marwadu dhexda marada ugu xidhataa dhidib u taagidda aqalkii caawa loo hoyan lahaa. Hadda garo oo waxa ay u taagan tahay sidii ay saaka hiirtii waaberi u kacday, waxaana dhacda in aanay iyadu wax cunto ah weli afkeeda gelin oo hawsha iyo rafaadku ilowsiiyeen in ay lafaheeda wax u dhadhamiso. Aqalka ayay taagtaa, way yacaydaa, kaskaash ayay ka ciil tirtaa, ilo-xidh ayay gam ku siisaa, ka dibna waxa ay gashaa hawshii adhiga iyo kala xarayntiisii, lisitaankiisii iyo kala habayntiisii.

Marka uu geelu soo galo ayay haweeneydu odaygeeda kala shaqaysaa geela iyo u soo godolkiisa. Nirgaha ayay ka celcelisaa, way la laba-listaa, caanahana way ka qaaddaa. lama soo koobi karayo kartida haweenka soomaalida, waxaas oo hawl ah iyo qaar kale oo fara badan oo bulshada laf-dhabar u ah ayay qabtaan. Ammaan kumaanay dooni jirin oo xilkooda ayay ahaayeen. Kalsooni ayay bilcantu nafteeda iyo shakhsiyaddeeda ku qabtey. Dal kale u hanqal-taaggii ayaan maskaxdeeda ku jirin, cid kale ku dayo ayaan ag oollin, dabci dad kalena ma aanay wadan. Nolosheeda oo dhan baa soomaali ahayd, cid kale uma rari jirin, cid kalena uma furi jirin, iyadaa danteeda taqaanney, ninkeeda ku wadatey, kulana socotey oo ku rabtey, waxanay ahaayeen laba ruux oo isku dhiibsan, is gargaarsada oo hawl qaybsi, dhib iyo dheef wadaag u dhex yihiin.

QAYBTA 2AAD

MAHADHOOYINKA HAWEENKA SOOMAALIDA

Kartida haweenka soomaalidu kuma urursana hawl-karnimadooda ku qummaan ama ku aaddan inta gacanta laga qabto oo keliya, hayeeshee waxa u dheer hibooyin iyo aftahannimo ay u cuskadaan, kuna meel mariyaan wax kasta oo ay qabanayaan, kuna cabbiraan dareenkooda gudaha iyo garaadkooda. Dadka soomaalida waxaa lagu tilmaamaa *'Ummaddii Gabayga ama Maansada'*. Maanta kolkii ay qarxeen dagaallada sokeeye iyo bara kacyada qaxootinnimo cawradii ayaa ka faydantey wax alla wixii dadka soomaalidu ceeb iyo xumaan ay lahaayeen. Waxaa shiiqay oo xayaabo hadhaysay wax alla wixii ay wanaagyo lahaayeen. Waxaa laga dhuyaaley halkii lagu asturnaa, waxaana la burburiyey wixii lagu asturnaa dhul iyo dhaqaaleba. Marka arrimaha soomaalida ajanebigu ka hadlayaan ayay doc kasta ka muujiyaan *'baago madmadow ama baro wasakhaysan'* oo ku gaashaaysan ama ku dul yaalla dadka soomaalida. Marka ay wax walba wax xun u muujiyaan, ayay aakhirka tibaaxaan in soomaalidu leedahay suugaan wanaagsan oo hodan ah. Suugaantaas ayaa lagu tilmaami karaa kaydka keliya ee wax uga hadheen badbaado ahaan soomaalida burburkii Soomaaliya ka dhacay ilaa maantana meelaha qaar ka sii dhisaalan.

Haweenka soomaalidu suugaantaas iyo wanaaggeeda waxa ay ku leeyihiin qaybtooda libaax. Ragga ayaa had iyo goor isu buriya ama badiya oo isa siiya in ay gaar u leeyihiin hal-aabuurka maansada soomaalida. Waxa dhacda in suugaanta raggu ay ka saameyn badnayd ta haweenka marka la eego dhaqanka iyo nolosha soomaalida. Maansada oo gabaygu ugu horreeyaa, waxa ay ahayd afhayeenka qabiil kasta oo soomaalida ka mid ah. Waxa ay ahayd idaacadda, wargeyska, Tv-ga ama bogga Internet-ka (Website) beeshaas. Colaado mararka qaarkood riiq dheeraada iyo dagaallo joogta ah oo lagu kala riixanayo dhulka carro-sanka ah ee baadka iyo biyaha leh, daaqsintana ku wanaagsan, ayaa ka dhexayn jirey oo dhex mari jirey beelaha is feedh dega ee deris wadaagta ah. *Afku wuxu la xoog yahay, magliga xawda kaa jara.* Dirirta qabaa'ilka ayuu gabaygu qayb muhiim ah oo waranka u dhigma ka ahaan jirey, dumarkuna si toos ah ugama aanay qayb qaadan jirin dirirtaas. Hal-abuurka haweenku shuqul kuma yeesho hurinta colaadaha, eedaha sokeeyaha iyo hirgooda dire-diraale ee qabaa'ilka, suugaantooduna ma reebto utin, uur ku taallooyin iyo nac beerma oo huursama oo hadhowto milil dillaaca. Ragga ayaa taas ku soo caan baxay oo ku fara dhuudhuuban. Waxa dhacda in haweenku dagaalka iyo colaadaha ka soo galaan dhinaca guubaabada, dhiirri gelinta iyo abaabulka iwm.

Gurmashada dagaalkiyo
Gulufkiyo colaadaha
Goobaha naf waagiyo
Halka laysku gawraco
Marka gorodda lays daro
Haddaan dumarku goonyaha
Guubaabo kicinayn

Sida galowga dhiilloon
Illayn geesi qayrkii
Birta kuma gumaadeen!

Maansada soomaalida waxaa loo adeegsadaa nolosha oo dhan. Maansadu waxa ay ka hadashaa quruxda iyo fool-xumada, farxadda, murugada iyo qoomammada, hiifka iyo haaraanka, ducada, habaarka iyo guhaanka, barwaaqada iyo abaarta, garta iyo gardarrada, guusha iyo guuldarrada, ammaanta iyo cayda, faanka iyo baanidda, jacaylka iyo nacaybka, nabadda iyo colaadda iwm. Suugaanta colaad hurinta iyo dire-diraalaha qabaa'ilka oo ragga u gooni ah, ayaa shiiqisa suugaanta inteeda kale, taas ayaana ka mid noqon karta sababaha keenaya in hal-abuurka haweenka iyo saamayntiisa si wanaagsan loo dhaadi waayo amaba loogu daymo lahaan waayo. Waxaa taas soo raacaysa oo jirta dhayalsi iyo hagrasho weyn oo ku waajahan mahadhooyinka hal-abuurka haweenka soomaalida. Qaybtan buugga Guri waa Haween ayaa haddaba si laan-goyn ah wax uga taataabanaysa mawduuucaas.

MIIDDA, MAADDA IYO MURTIDA HAL-ABUURKA HAWEENKA

Haweenka soomaalidu waxa ay leeyihiin hal-abuur ballaadhan oo qaro iyo miisaanba leh. Laaska biyihiisu dhadhanka macaan leeyihiin ee xareedda iyo xigmadda hal-abuurka soomaalida lagu majeertaa ay ka soo miir-dillaacaan maaxdiisa ayay haweenkuna u aroor tagaan oo ka soo dhaansadaan, kana soo dheegtaan hal-abuurkooda sida ragguba uga sameeyaan suugaantooda si la mid ah. Si kasta iyo hab kasta oo loo adeegsado tixda iyo tiraabta suugaanta soomaalida ayay haweenkuna la fal galaan oo si qoto dheer ugu milmaan. Kaalin aan muran iyo madmadow toonna geli karin ayay haweenku ku leeyihiin hees-hawleedda iyo hees-ciyaareedda dhaqanka iyo hiddaha soomaalida. Suugaanta ku taxmaysa haasaawaha, kaftanka, hal-haysyada, hal-ku-dhigyada, hal-xidhaalaha, maahmaahda iwm ayay haweenku ragga la qaybsadaan. Waxa kale oo aanay dumarku ka madhnayn oo ragga la wadaagaan gabayga, jiiftada, geeraarka iwm. Heesaha maaweelinta iyo koolkoolinta carruurta, buraanburka, heesaha gelbiska arooska iyo suugaanta sitaadku waa sed iyo quud iidaan leh oo u gaar ah haweenka soomaalida.

Suugaanta haweenka soomaalida waxaa laga helayaa oo ka buuxa tin iyo cidhib halkii laga dayaba xigmad iyo murti ku xiddaysan sarbeebtii, duur xulkii, afgobaadsigii, hummaagayntii, astaamayntii, dhaabadayntii, hoga-tuskii, hawaale warrankii, qayayaabkii, abbaartii, madadaaladii, miiddii, macaankii, hufnaantii, xishoodkii, anshaxii iyo aftahannimadii nolosha, afka iyo suugaanta soomaalida. Goor dhow waxa aynu sadarrada soo beegan ugu tegi doonnaa heesihii maaweelinta carruurta oo hablo iyo wiilalba ka kooban, heesihii maqasha, kuwii adhiga iyo lo'da, heesihii dameeraha, heesihii kebedda, aloolka, harrarka ama cawska, lulista iyo bixinta haanta, salsalka rarka awrta iyo geeddiga, tibta iyo mooyaha, heesihii gelbiska iyo alalaaska arooska, kuwii sitaadka iyo ducada, heesihii ciyaaraha dhaqanka iyo hiddaha ee golaha iyo fagaarayaasha iwm. Waa bad weyn wada hal-abuur geedaysan ah, waana bad weyn quusinaysa bad kale oo dhan oo sida looga dabbaashaa aanay sahlanayn. Aynu ku

binaynno ama ku ibo-furanno heesihii maaweelada iyo koolkoolinta ubadka ee hooyada iyo inanteedu ku dhaadan jireen ee indha kuusha u ahaa, wiil iyo gabadh walbana ay ugu soo heeseen, kuna soo hadaaq iyo hadal bareen. Waa *hobeeyaa hobeey hobeeyaa.*

HEESTA CARRUURTA

Ubadku waa habliyo inammo. Heestoodu waa saddex. Mar way ka dhaxaysaa oo waa lagu wada maaweeliyaa dheddigga iyo laboodkoodaba. Mar labaadka midi waxa ay u gooni tahay inammada iyo ta saddexaad oo hablaha u gaar ah. Saddexda goorba waxaa ka dhexeeya luuqda iyo inta badan dhextaalka *hobeeya hobeey hobeeyaa*. Heesta carruurtu waa farshaxan ka soo jeeda nolosha iyo dhaqanka, kuna arooraya noloshaas iyo dhaqankaas. Inanka ama inanta yar ee dara-dhigta (xool-carruureedka) saaran heestu way dhaafaysaa oo waa duur-xul dhegta loogu sii ridayo, laguna ababinayo gabdhaha ama wiilasha roon roon ee garaadka leh, waxna fahmi kara ee ka ag dhow hooyada iyo inanteeda. Heesaha carruurtu waa dugsigii bilowga ahaa ee ababinta ubadka sidda inta aan la geyn waxbarashada rasmiga ah. Nolosha iyo la macaamilkeeda ayaa wax loogaga sii iftiimiyaa, afkana waa lagu sii baraa.

Dhawrkan heesood ee soo socdaa waa nooca ka dhexeeya hablaha iyo inammadaba. Habeenkii oo dhan ayay hooyadu niyadda ka soo jeeddaa oo ilmaheeda gaadh ka haysaa. Waagu marka uu gunta ka soo casaado ayaa hooyadii oo sii gataati dhacaysa waxaa gama'a ka soo kaca oo soo baraaruga ilmihii oo hurdo ka soo go'ay. Way naas nuujisaa ama dhuuni kale ayay afka u gelisaa. Iyadu (hooyadu) lulo ayay la il-daran tahay oo la ciir-ciiraysaa, ilmuhuna hadaaq iyo maaweelo doonnimo ayuu la waaberiistey! Waa kaaf iyo kala dheeri. *Nimaad dhashayna kuma dhalin*! Halkaas bay hooyadu ka bilowdaa maaweelinteedii. Sasabid, sabaalis iyo bajin ayay isugu dartaa oo ku beer-laxawsataa ilmaheeda, iyada oo u sheegaysa in ay tahay subax hore oo la wada hurdo marka laga reebo dhurwaa (waraabe) raadinaya ilmo soo jeeda oo uu qaato.

Hobeeya hobeey hobeeya
Ka soo seexooy subeexa
Ka soo dhuumooy dhurwaaga
Dharaartii wuu socdaayoo
Dhulkuu dhaban dhootiyaayoo
Dhallaamada wuu gurtaaye
Ka soo dhuumooy dhurwaaga.

Heestan kalena waxaa lagu aamusiiyaa ubadka hablo iyo inammaba.

Ninkii diley ee dagaalay
Ninkii duur kulul ku jeexay
Aseen duunyo u diraynin
Dagaal baa naga dhexeeya
Anaa diliyoo dagaali

Anaa duur kulul ku jeexi.

Tanna waxaa carruurta lagu sabaaleeyaa marka ay gaajadu hayso, si ay u sugaan inta naaska hooyada ama manfac kale loo diyaarinayo, waana hees ka dhaxaysa inammada iyo hablahaba.

Ma naaskii baa gabloolay
Gablooloo godol ku raagey
Ma odaygii baa socdaalay
Socdaaloo socod ku raagey
Ma geelii baa arooray
Arooroo oon ku raagey.

Heestan soo beegan waxaa la socda oo ay ka kooban tahay hummaagyo qurux leh oo farshaxankoodu sarreeyo. Waa nooca ekeeyayaasha, waxana halkan hooyada soomaalidu is barbar dhigaysaa jacaylka ay u hayso ilmaheeda iyo sida ay oohintiisu u damqayso oo uga dhiganta iyada (hooyada) sida ay u olosho hasha ka-reebka ama eridhabanka ah ee nirigteeda laga ulaa ama ta igadhka ah ee maqaarka laga qaadaa:

Sidii Ayroo maqaar leh
Amaba eeridhabanka geela
Ilmii laga soo uleeyey
Markaad ooydey anna ololey.

Hooyada ayaa muraad meel u yeelata. Way yar raagtaa, ilmihiina waxa uu tabaa maqnaanshaheeda. Inantii lagaga tegey ayaa xaaladda fahmaysa, markaas bay ilmihii kula sheekaysanaysaa heestan soo socota:

Huwaay ya huwaay, huwaay ya!

Hooyadaa ma joogto
Kor iyo koonfur aaddey
Kabaheedii illatay
Kabash kabash u socotay.

Geed seexataa mooyi
Geel-jire helyaa mooyi

Hooyadaa meeday
Geedkii Habaas-weyne
Ku hallowdayaa mooyi
Geel-jire helyaa mooyi.

Heesta inammada u gaarka ahi waxa ay hadhaysaa hees-maaweeleedda carruurta. Dhawrkan heesood ee soo kala horreeyaa waa koolkoolin, ammaanid iyo duco loo xambaarinayo inanka yar. Waxa uu ka dhigan yahay cir curtay ama cosob laacay. Mar

kale waxa ay hooyadu ku metelaysaa inankeeda yar hilbaha kuwa ugu sita sida sararta iyo legga ama sakaarka iyo maydhaqa iwm. Way u ducaynaysaa oo waxa ay leedahay: ha waayin hooyadaa, aabbaha, in kula walaal ah, ha saqiirin, soona kor oo halkaaga lagaama seexdo, hashaadana lagaama maalo iwm.

Calow wa Calow Calow wa
Calow Cabdillaahiyow wa
Calaacala maydhanow wa
Calow cir darroorayow wa
Calow cosob laacayow wa

Calow meel laga carraabay
Carruurihii laga xanbaartay
Allow aadan carari waayin
Allow aadan ciil ku seexan.

Samow wa Samow Samow wa
Samow sarar iyo legow wa
Sakaar iyo maydhaqow wa
Sedkii Rabbi keenayow wa.

Hobeey ya hobeey hobeey ya
Ha waalan ha waalalloobin
Ha waayin wax siisa hooyo
Ha waayin wardheere aabbe
Ha waayin walaalo dhawr ah
Halkaaga lagaama seexdo
Hashaada lagaama maalo.

Halkaad xalanow xoqayso
Halkaad xara dhaaminayso
Halkaad xalay ledis ka waydey

Malaa'igi ha kuu salaaxdo.
Qawiile ha kuu qaboojo!

Hooyadu inankeeda u sii samaynaysaa laan-gooyo ku saabsan sidii uu uga feejignaan lahaa haweenayda goonbaarta loo yaqaan marka uu heerka guurka gaadho ee Alle ku simo. Waxa ay inankeeda yar u sii iftiiminaysaa dhaqanka iyo dhibaatada goonbaartu leedahay. Goonbaartu waa haweeney aan u wanaagsanayn ehelka oo xidh xidhan ama camal xun, cidla' ciirsila'na ula go'doonta ninka iyo ubadkiisa. Waa hees dardaaran iyo hoga tusaalayn ah, duur xulkeeduna yahay ahmiyadda guurka oo lagu baraarujinayo carruurta xilliga cayddinimadooda in ay sii ogaadaan. Waxa ay tidhaahdaa:

Haddaad gaadhoo gabowdo
Haddii guur kuu maloobo

Haddii guulle Alla yeelo
Ma go'e goonbaar ha guursan
Gabbood bay kugu furtaayoo
Bahdaa bay gawdhisaayoo
Go'doon bay kaa dhigtaaye
Ma go'e goonbaar ha guursan

Haddeertana waxa ay farta ugu fiiqaysaa halkuu inankeedu ka guursan lahaa, waxanay dardaaran u siinaysaa in uu reer abtigii ka guursado.

Haddaad gaadhood geyootid
Haddii Guulle Alle yeelo
Gabooboo gaatiyow wa
Gadh weyni u soo baxyow wa
Haddaad gaadhood gaboobin
Haddii guur kuu samaado
Gabooboo gaadhi maayee
Tolkay waa gobe ka guurso.

Inankii ayay hooyadii korinaysaa oo kaalin-qaad gelaya. Geela inuu raaci doono ayay oddoros ku sii eegaysaa, waanay la sii dardaarmaysaa. Fuleynimada iyo fool xumadeeda ayay uga sii digaysaa, waxanay tidhaahdaa:

Haddaad gaadhoo gabowdo
Markaas geeliinna raacdo
Haddii guluf kuu yimaaaddo
Ma go'e geela ha ka roorin

Fuluu wuu baydadaaye
Haddaad fiigto
Ha fogaannin.

Ammaan ay dusha kaga waabto ka dib, hooyadu waxa ay inankeeda kula sii talisaa in uu dal shisheeye iyo dibedda u dhoofo oo u xoogsi tago:

Biloowa biloow biloow wa
Biloow loo baahanoow wa
Sidii barrax maalin geeddiya
Amaba burcad loo basaasay
Amaba biyo loo harraaday
Biloow loo baahanoow wa

Baxreyn iyo beled shisheeye
Bariisku halkuu ka beermo
Tolkaa baa lagu boqraaye
Tagoo adiguba badh doono.

Mar kalena waxaa inammada loogu heesaa, iyada oo loogu duur xulayo in ay hablaha ka 'hamuun gorayo' badan yihiin:

Hunguriyoow halaalac
Hashii diiddee halaalac
Hangool qaadoo halaalac
Horteed seexoo halaalac.

Dhaqanka soomaalida marka la eego haweeneyda soomaalidu ma jecla in ay ku ummusho doc reer kale; xitaa guriga hooyadeed. Xilligan waxaa jira magaalooyinka Rug Ummuliso ama Cusbitaal iwm, una gaar ah in dumarku ku ummulaan. Xilliyada qaar Waxaa dhacda in qoonsimaad ama khilaaf dhex yimaaddo ninka iyo haweeneydiisa. Is qabadka ka dib ayay marwadu qoondaysataa in ay guriga iyo ninka ka dhaqaaqdo dudmo ahaan. Iyada oo qorfaynaysa sidii ay u ambabixi lahayd, ayay ogaataa uur ku soo baxay. Way is beddeshaa. Socdaalkii ay u xidh xidhnayd ayay ka negaataa, iyada oo ku tala gelaysa in ay gurigeeda ku ummushu, waayo ma doonaysa in ay xabka iyo xanankeeda la dul fadhiisato meel kale. Dib ayay haweeneyda iyo odaygeedu isku maslaxdaan cadho burbur ka dib, waxana dhammaada sagaalkii bilood ee uurka. Wiil baa dhasha. Waa Negeeye ama Maslax, Caabbi, Xidhe, Xayir ama Nabad iwm. Haweeneydii oo niyadda iyo qalbigaba ka negaatey baa wiilkeeda markaas u heesta oo tidhaahda:

Anoo jiitoo jarmaad leh
Kabaha suunka u adkaystay
Sibraarka anoo biyeystey
Ayuu Rabbi kaa i siiyey
Markaas baan dhab u negaadey.

Habluhu sida inammada waxa ay leeyihiin heeso u gaar ah. Hablaha soomaalida iyo xishoodka ama xayadu habeen bay wada dhashaan. Hooyada oo ah isha bu'deeda dhinaca barbaarinta ubadka, gaar ahaan laylinta iyo jaraynta inanteeda, ayaa kolka ay dhalataba ku canqarisa tababarkeeda ku xidhiidhsan xishoodka, xayada, anshaxa iyo asluubta hufan. Heesaha maaweelinta ayay taas ugu sii lifaaqdaa, kuna bartaa in ay hoos u hadalka qaayibto, in ay afkeeda ilaaliso, in ay isheeda iyo addinkeeda dhawrsanaanta sii barto iwm. Waxaas oo dhami waa wada duur xul iyo sarbeebo u jeeda inantaas yar ka sakow hablaha kale duleedkeeda gaangaambinaya ee hadalku dhegahooda ku dhacayo.

Go'dooyaa go'dooy go'dooy ya
Go'dooy gaagaabso hadalka
Geyaan baa guriga yimiyoo
Rag baa goonyaha fadhiya'oo
Fardiyo geel bay wadaane,
Go'dooy gobannimo sameeyoo
Go'dooy gaagaabso hadalka.

Haddeerna way ku dhaadanysaa hooyadu inanteeda. Waa dhuuxiyo lafteeda dheer. Waa u nuurkii indhaheeda, waana dhalad dhalashadeedu. Waxa ay odhanaysaa:

Dhammoy ya Dhammoy Dhammoy ya
Dhammoy dhuuxiyo laftooy ya
Dhammoy dhaayaha adduunyo
Dhammoy dhalashadii rumaadeey
Ku dhaado dhalashadaada.

Hablaha dhalashadooda looguma farxo soomaalida dhexdeeda sida inammada loogu riyaaqo dhalashadooda. Adduunyada kale ummado badan ayaynu cilladdaas la wadaagnaa, qaarna hoos ayayba inaga sii xigaan. Eeshiyaan badan, siiba waddamada Koonfurta Aasiya lagama soo dhoweeyo dhalashada hablaha. Hees carruureeddan soo socota, ayay hooyadu ku muujinaysaa dhibaatooyin ay leedahay inantaada yar ayaa la soo hindiwaasaysa, waxanay odhanaysaa:

Dhibay ya dhibay dhibay ya
Dhibay gabadh dooni maayo
Dhibteediyo halacyadeeda
Dhibaad baan doonideeda
Ninkii ma dharaaranteeda
Aqalkii ma dhammaaninteeda
Dhibay ya dhibay dhibay ya.

Hooyo kale oo inanteeda koolkoolinaysa, kuna faanaysa ayaa leh:

Waxaa wiilowda la hayo
Waxaa loo waalanaayo
Aduun baa igala wanaagsan.

BAJINTA CARRUURTA

Haweenka soomaalidu waxa ay aqoon u lahaan jireen cilmi nafsaaniga. Waxa ay yaqaanneen sida carruurta looga farxiyo, sida loo maweeliyo, sida loo aamusiiyo, sida sheeko loogu seexiyo, sida loo bajiyo ee loo cabsi geliyo ama sida loo dhiirri geliyo iwm. Xoolaha qudhooda waa kuwa la hadla ee la sheekaysta, sida af-aqoonka ahna ay u fahmaan ee ay ula dareen wadaagaan sida aynu xagga hoose ugu tegi doonno.

Caws iyo biyo ku nool, *Reer guure raac*, *Madax kuti iwm.* ayaa ku jira sheeko xariirta dhaqankeenna. Carruurta ayaa intaba lagu bajiyaa xilliga ay ka gudbaan xaaladda heesta iyo koolkoolinta ee ay caqliyeystaan. Waxa lagu yidhaahdaa '*ka soo carar Caws iyo biyo ku noosha, ka soo dhuumo Reer guure raaca iyo aamus yaan madax kutidii ku maqline iwm*.' Waxaa la adeegsadaa sheekooyinkan xilliga carruurta lagu dhiirri gelinayo in aanay geeddiga ka gaabin, in ay seexdaan, in aanay ooyin iwm.

Caws iyo biyo ku noosha iyo Reer guure raacu labaduba waa qaar ka mid ah xoolaha reerka, sida lo'da oo kale, hayeeshee waxaa carruurta loo baraa in ay bahalo dad qaad ah yihiin, carruurtuna waxba isma waydiisee way ka baqdaa. Madax kutiduna waa bahal isu soo ekaysiiya dadka oo malluug ama muuq qof yeesha. Male awaal ahaan waxa la yidhaahdaa Madax-kutidu waxay isa soo taagtaa meel u dhow muska ama duleedka reerka. Waxa ay dhegta u raaricisaa magaca qofka yar. Hadhowto ayay u yeedhaa oo marka uu yimaaddana qaadataa, dabadeedna is marisaa oo cuntaa!

HEESTA ADHIGA

Adhigu waa meesiga ugu muhiimsan xoolaha ee haweenku la foofaan, hawl ahaanna hoos yimaadda inta badan waajib gudashadooda. Sidaas darteed hal-abuur badan ayaa ku gorora hawshiisa kala geddisan, sida xilliga uu oomman yahay iyo aroorkiisa, xilliga fulinta ee uu cokan yahay, xilliga geeddiga iyo xawawarintiisa, xilliga mayraca ama daajinta iyo soo rogrogitaankiisa, xilliga hadh gelinta iwm.

Adhigu waa ido iyo ri'yo. Waxa jira heeso ka dhexeeya idaha iyo riyaha iyo qaar ay kala leeyihiin, una kala gooni ah. Waxa intaas soo raaca maqasha oo waxaro iyo naylo ka kooban. Maqashu waxa ay iyana leedahay hees-hawleed u gaar ah. Xilliga geeddiga iyo diga rogashadiisa waxa ay haweenaydu la hadashaa darkii ceelka adhigu ka cabbi jirey, iyada oo maqashiinaysa adhigeeda in la guurayo, waxanay tidhaahdaa:

Darka ceelkow
Maanta dabadeed
Lagaa durugyoo
Lagaa doog raac.

Murtida dhawrkan beyd ku duugani waxa ay tilmaamaysaa xidhiidhka ka dhexeeya adhiga iyo ceelka, iyo sababta looga guurayo oo ah in agagaarkii ceelku xaalufay oo uu abaarsaday, lagana naq raacayo. Sida muuqata xilligu waa hogo kaliileed. Waa wakhtigii curashada roobka oo durba meelaha qaar ka hogla hogleeyey, xoolahana loo walwal raacinayo in ay cosobka ugu horreeya goostaan.

Haweenaydu adhigii ayay kaxaysaa. Muddo markii ay toobiyaha sii wada maqiiqnaadaan masaafo dheer, ayuu durba adhigu uriyaa carafta iyo udugga ka soo baxaya hadowga yar ee doogga iyo il-waadka ka soo hiraya laaca cosobkaas. Runtii is beddel weyn oo cir iyo dhul ah ayaa u dhexeeya labada degaan; kii ay ka soo dheelmadeen iyo kan ay kaabiga ula saaran yihiin. Waa kala geddisnaanta abaarta kaxda ah iyo ku il-doogsiga naqa hawray. Dacalka ugu horreeya dhulka geedaha leh, waxa uu adhigu si hamuun leh ugu dhegaa dhirta ugu soo xigta. Haweeneyda adhiga waddaa way u yara kaadisaa oo sugtaa in cabbaar ah inta adhigu geedaha kaga hamuun baxayo. Adhigii oo isla baraad la' oo jam jamta raamsigiisu isu baxayo, ayay haweeneyda oo si fiican u dareensan halkii loo geeddiga ahaa in aanay ahayn halkan ay ku dhufataa hees kale oo ay adhiga ugu sheegayso in uu kaga fuqo dooggan foolaadka ah, socod hor lehna isu diyaariyo, waxanay tidhaahdaa:

Xaayooy xeehexee
Xaya xaayooy
Xeehexee

Hamuun tiratay e
Hannaasi haddaba.

Sidii aynu hore u soo taabannay iduhu waxa ay leeyihiin heeso iyo luuq u gooni ah oo marwadu ku haloosido. Waxa ka mid ah:

Daylo foorora
Foolan mayside
Foodda kor u qaad.

Mar kale waxa ay gabadhi ku hal-qabsanaysa lax hayl leh oo jeeni madow. Hayshu waa sumad ama baadi sooc idaha loo yeelo, gaar ahaanna dhegta laba loo kala jeexaa (Hayl). Waxa ay tidhi:

Wallee Jeeni-halaq
Haddaad hayshiyo
Horaaddada lulin
Wallee la hadhyoo
Wallee la hallow

Haddeerna waxa ay haweeneydu faan iyo ammaan ka badinaysaa lax adhigeeda ka mid ah. Iyadoo u heesaysa adhigeeda ayay laxdaas ku tilmaamaysaa in ay dheerayn iyo orod dartiis xilliga geeddiga ku gaadho adhyaha kale ee laga hor dareeriyo, hiirta subaxdiina cidhibta loogu dhufto. Waxay gabadhu laxdeeda ku leedahay:

Adhyo subax tegey
Oo salaad kacay
Sariiran ogeey.

Xilliga aroorka iyo adhiga fulintiisa ayay haweenku u adeegsadaan hees-hawleedyo u gaar ah. Heestan tuducyadeedu hoos ku qoran yihiin waxa ay ugu heesaan idaha, gaar ahaan marka ay darka ceelka ka soo fan jeedshaan ee dib loogu sii wado halkii laga soo aroorshey markii ay oommanaayeen. Waxaa idaha loo diidayaa nasiinada iyo hadhsiinada labadaba, si ay u guryo tagaan inta aanay ncawo-daranta noqon. Guul-oommane ayay iduhu ahaayeen xalayto, caawase waxa heestu ka sii hor degeysaa guul-cokane in ay ku dhacaan oo candha dhexe gabbalku ugu dumo, waxanay yidhaahdaan:

Daylo xaayooy
Aroor xaadleba
Adaa xagayoo
Xalaad guushaye
Caawa xero qabo.

Mar kale adhigii oo la soo waraabiyey oo wabax ah inuu socdana la doonayo, ayay gabadhi idihii lax lax ula hadlaysaa, kana dalbaysaa in ay socodka deedamaan, haddii kale dhurwaagii habaarka qabey ayaa loo wada halis yahay. Tilmaamaha afar laxaad ayaa heesta ka dhex muuqda, waa Daylo, Galaalo, Dhuubo iyo Dharo:

Sidii dogob dhacay
Oo duleed yaal
Hay dingiigini
Daylo dulubo
Galaalo is dadab
Oo is giringiri
Oo garbaha jebi
Dhuubo dhalan dhool
Oo dhabbada qaad
Oo dhag dhag u soco
Dharow nayshii
Dhaneegaataye
Dharaarnimo hoyo,
Habaar qabihii
Hooyadaa diley
Yuu ku heerine
Horay uga carroow.

Xilliga aroorka ayaa adhiga loo qaadaa heestan ducada ah:

Maalin dayr-waa'
Oo dabaylo leh
Oo dadba is nacay
Allow daylooy
Ha ku dilinoo
Ha ku dabargoyn.

Daylo foorora
Adoon filanayn
Fooro galabeed
Foodda kaa qabey,

Daylo foorara
Allaw fad u keen
Oo na kala furo!

Ammaan iyo koolkoolin bay inantu u xambaarinaysaa ido ay soo xaranayso markii ay soo mayracday ka dib, waxaanay odhanaysaa:

Siigo walanwalo
Sanqaroor godan
Caano saxansaxo
Sal waraarido
Siniinta udgoon
Way na saaqdaye
Maadigaa sida
Oo sibraha ku leh.

Ri'yuhu waxa ay iyana leeyihiin heeso u gaar ah oo aanay iduhu la wadaagin. Riyuhu waa geesley oo lo'da ayay isku bah yihiin, waanay ka nugul yihiin idaha. Ri'yo gorodda lalminaya, ayay haweeney weydiinaysaa in geesuhu xanuunayaan iyo in kale, ri'yihiina uga jawaabayaan in aan geesaha laga hayne ay ku xarragoonayaan:

Naa garooy garooy
Naa garooy garbaha
Iyo labada gees
Ma lagaa hayaa,
Laygama hayee
Xaashaa lillee
Waan ku xarragoon.

Had iyo goor marka martida ama cid kaleba loo loogayo looma qalo ri'yaha ee waxa ka hilib wanaagsan oo loo loogaa idaha, gaar ahaan wan yar oo dhaylo ah. Haweeney arrintaas ka duulaysa ayaa ri'yaheeda u heestay, waxaanay tidhi:

Walwaliicdaye
Wiilashaydii
Wan ma loo qalay,
Looma qalinoo
Waa la quudhsaday.

Ayro waa magac ammaan ah ka dhexeeya geela iyo ri'yahaba. Yagleesha guriga cusub ee degsiimada ayay haweeneydu tilmaamaysaa, iyada oo ri'yaheeda la hadlaysa, in aanay odayada gaboobaa ka adkayn ama ay dhib ku tahay in ay oodda soo gooyaan, soona qadaan oo adhiga xero u sameeyaan:

Ayro ayrooy
Ayrooy odayadu
Ood ma gooyaan
Hadday gooyaan
Way la luudaan
Oo la liicaan.

Ri'dii bay haddeerna ku guubaabinaysaa in aanay ka san taagin hambada cawska ah ee geelu u soo reebay. Iimaanso oo miyir u guro ayay haweeneydu ri'deeda ku leedahay oo iska cun kugu filan adiga'e!

Gahaydh maanyada
Geelu kuu nacay
Ha gawdh gawdhine
Garooy gura'oo
Aayar googoo.

Haddana waxa ay haweeneydu ri'yaha ku leedahay iska daaya qaylada iyo qaloonbiga badan.

Ri'yeey qalabooy
Wax ma qaaddido
Wax ma qabatide
Qaloonbiga daa.

Waxa la yidhaahdaa adhigu waxa uu yaqaan madhxinta iyo tashiilashada cawska. Xilliga barwaaqada ee cawsku baxo waxa uu xusuustaa xilliga abaarta ee baad la'aanta. Marka uu bur caws ah in ka goostaba bur kale ayuu u dhaafaa oo yidhaahdaa.

Berraa darane
Bur dhaaf

Ugu dambayntii orgiga ayaa ri'da la sheekaysanaya, waxaanu xilliga maalin weynta ah ee duhurkii ku yidhaahda:

Ri'yeey tagoogahayga ku daaq.

Waxa uu orgigu ujeedaa oo leeyahay aniga isku kay hallee oo cidna ha ka baqan! Ri'dii baa kalsooni hesha oo cabsi oo dhan halkaas iska dhigta, isku hallayna labada garabba geedaha ugu gurata. Gabbalkaa dhaca oo madowgii habeennimo ayaa isa soo cun cuna. Orgigii ayaa mar labaad ri'dii la hadla, una beyaamiya in uu ballantii ka baxay. Waa nafley oo mugdiguu aamini waayaa, waxaanu yidhaahdaa:

Giirooy dabadaa i giigii leh!

HEESTA MAQASHA

Maqashu waxa ay leedahay heeso u gaar ah iyo sheekooyin la xidhiidha raaciddeeda marka habluhu la joogaan. Hadda waxa aynu tusaale u soo qaadanaynaa tusmooyin ka

mid ah heesaha maqasha, hadhowtana meel kale ayaynu ugu tegi doonnaa sheekooyinka carruurtu, gaar ahaan habluhu isku maaweeliyaan marka ay maqasha la joogaan. Aan ku hor marno heesta caanka ah ee duul duulkeedu wada gaadhey dhegaha qof kasta oo soomaali ah gobol kasta dhulalka ay soomaalidu degto. Waa maqaleey warlaay! Waxaa heestu ku bilaabmaysaa waraysi lala yeelanayo maqasha, ka dibna maqasha ayaa jawaabaysa:

Heey hobeey maqaleey warlaay
Heey hobeey ma laguu warramay
Heey hobeey waxa weerar dhacay
Heey hobeey waxa waran dhul galay
Heey hobeey waxa dhiig qulqulay
Heey hobeey waxa wiil cad go'ay
Heey hobeey in Cumar la diley
Heey hobeey oo Cali god galay
Heey Hobeey ma laguu warramay

Heey hobeey yaa ii warramay
Heey hobeey ma walaalkayoo
Heey hobeey laba waran sitaa
Heey hobeey webi hoose iyo
Heey hobeey waaleed ka yimid
Heey hobeey yaa ii warramay

Haddeerna waxaa lala dardaarmayaa sumalkii adhiga oo ah odaygii naylaha dhalay, waxaana loo sheegayaa inuu kaxeeyo oo dooxo maajeen ama caws leh soo daajiyo, hadhowtana geed damal ah naylaha hadh geliyo, caddaaladna sameeyo oo aanu soo kala dhoweysan.

Heey hobeey sumalow darbane
Heey hobeey naylaha dudduuc
Heey hobeey oo dooxo gee
Heey hobeey oo damal hadh geli
Heey hobeey haw kala darraan

Mar kalena waxaa loo heesayaa naylihii oo socod ku jira oo gabadhi waddo. Waxa ay ku hal qabsanaysaa wan yar oo baraar ah oo gaabinaya, waxaanay leedahay mindi af darani ku muddey oo lagu qal, waxaana wankaas yari socod xumida ka raacay oo ku dhalay aabbihii (sumalkii dhalay ee hebel):

Saawiri muddoow
Solay lagu wadhyoow
Dumar saafayoow
Raggu sahayayoow
Sumalkii dhalaa
Sida loo socdiyo

Socod yaal aqoon.

Inantii oo maqashii wadda xilli geeddi la yahay, ayaa nayl Hawlo magaceeda la yidhaahdo ku hal qabsanaysa, una sheegaysa in reerkoodu gob yahay, geelna leeyahay, hadduu guurana aan cidi xaab ka soo qaadin oo aanay soo gaadhin . Dheeree oo yaan lagaa tegin ayay maqasha ugu duur-xulaysaa:

Naa Hawlo Hawlo
Naa Hawlo reerkeennu
Waa reer goboo geel leh
Waa reer hadduu guuro
Aan geenyo mooyaane
Aan garabsi lagu gaadhin
Hawlooy ha heet heetin
Hawlooy horaa doog leh
Hawlooy lugtaa horaw dhig

Haddeerna waxarihii bay dabada iska raacinaysaa. Waxaruhu way hawl badan yihiin. Kolba geed bay ka hoos galaan oo laga saari kari waayaa. Inantii baa hiiftamaysa oo maqashii haaraamaysaa, waxaanay odhanaysaa haadka baqayaha loo yaqaan idin laayey oo labadayda iyo laba kale idinka reeb, si ay kaxayntoodu ugu fududaato. Baqayuhu waxa uu ka mid yahay haadda hilib cunka ah, sida coomaaddaha, geel-toosiyaha, gorgorka, tukaha iwm.

Waxarahayagoow
Baqaye idin laa
Idin laba labee
Labadayda iyo
Laba kale ka reeb!

HEESTA LO'DA

Lo'du waa ishinka adhiga soo raacaya ee ay dumarku ka shaqeeyaan. Haweenku lo'da ragga way la xannaaneeyaan, waanay lisaan, xilliga waraabka iyo darka ceelkana way soo horaan. Heeso kala duwan ayaanay u qaadaan. Dhawr tusaale ayaynu halkan ku soo qaadan doonnaa.

Xilli xun oo arladu kululaatay, baad iyo biyona dhammaadeen, ayay haweeney u heesaysaa lo'deedii oo caws la'aan iyo harraad wada haleeleen, weydna la togantey. Cirkii baa raagayoo, durba lo'da badh baa dhalay, waylihiina qaar baa le'day, sac kastaana weyshiisii buu nacay oo diidey. Way u ducaynaysaa dabadeed oo roob ayay u baryaysaa, waxanay tidhi:

Adoo haydaley

Oo horraan dhalay
Oo ilmii huray
Hagoogane roob
Kuu hillaacyoo
Kuu hoglo hoglee.

Heestan kale waxa ay tilmaantaa xidhiidhka adag ee ka dhexeeya saca iyo haweeneyda leh. Dulucda heestu waxa ay hoosta ka xarriiqaysaa in qofka dumarka ah iyo saceedu isu ekaadaan, isku sina u socdaan!

Sacba naagta leh
Salsallawyoo
Sideeda u socoy.

Sac lo'da ka mid ah oo midabkiisu dhiin ama casaan yahay ayay haatanna haweeney ku hal qabsanaysaa. Waxa ay saca u sheegaysaa in haweeney kasta oo caanihiisa dhadhamisaa, ay u garba duubnaanayso in ay sacyahow ku dhaqato. Nuxurka loo jeedaa waa qiimaha ay lo'du leedahay. Ragga qudhooduna way isticmaalaan heesaha qaar ay tani ka mid tahay.

Dhiinow dheydaa
Naag dhadhamisaa
Ma dhinnaatee
Way ku dhaqataa.

Saca ayaa loo sheegayaa qiimaha gaarida iyo geesigeeda qaba iyo haddii gaarida la furo natiijada ka dhalan karta oo ah guur la'aan iyo goblan.

Geesi lama dilo
Gaari lama furo
Gosha lama dego
Geesi kii dila
Gaadis fara badan
Iyo gawrac waw halis
Gaari kii fura
Guur la'aan iyo
Goblan waw halis.

Lo'du biyaha iyo cawskaba way uga nugushahay xoolaha kale, kamana maarmi karto oo maalin walba ama maalin dhaaf ayay u baahataa. Biciidka oo ka mid ah ugaaadha geesleyda ah ee ay lo'da isku bahda yihiin iyo lo'da ayaa heestan soo beegani xidhiidhinaysaa, waxanay ka tibaax bixinaysaa duur-xul ku socda lo'da, una sheegaya in biciidka oo ka dheereeyaaba isla waayey meel biyo iyo caws wada leh.

Meel bur cawsa leh
Oo biyo u dhow

Baadi goobyoo
Biciidkuba waa.

Xilliga waraabintana iyada oo sac lo'da ka lagu hal qabsanayo waxaa lo'da loogu heesaa:

Hoogto inaad tahay
Oo hadhaa tahay
Oo horyo cab tahay
Oo lo'da hirdido
Maxaad ku heshaa.

Lo'du waxa ay sharaf ku leedahay biyaha oo ay ladaab ka dhigato ama ay ugu badnaan laba ilaa saddex cisho ka qaddo. Jiilaalka iyo biyo la'aantana xoolo kuma aha oo way u nugushahay.

Xiix wanaagsane
Biyo xoorliyo
Xareeddii buu
Xoolo ku ahaa

Weris waa sac magacii, waana magac loo bixiyo haweenka, ragga iyo geela oo lo'da la wadaaga. Sac Weris la yidhaahdo ayaa lagu hal qabsanayaa heestan soo socota oo ka hadlaysa weyl xalayto sacaasi dhalay oo wiil la moodey, loona wanqali gaadhey.

Wanaagsane Weris
Weyluu xalay dhalay
Wiil la moodyoo
Loo wanqali gaadh.

SALSALKA RARIDDA AWRTA IYO GEEDDIGA

Haweenka soomaalidu maaha af-yaqaanka ubadka oo keliya hayeeshee waxa ay la hadlaan xayawaanka ay adeegsadaan oo dhan. Awrka rareyga ahi waxaa uu ka mid yahay ciidanka ugu muhiimsan ee reerka. Dhaaminta ka sakow, waa doonnida la rarto ee la gurguurata cullaabta aqalka oo dhan, ubadka iyo maqashaba. Silsilad dhan oo heeso ah ayay awrtu leedahay, gaar ahaan awrta la rartaa. Salsal ayaa loo yaqaan heesta awrta rareyda ah. Heesuhu waxa ay u hormaysan yihiin xidhmooyin, xidhmo kastana Salsal ayaa loogu yeedhaa. Baar-qabka ayaa isna leh heeso u gaar ah, hayeeshee haweenku shuqul kuma laha oo raggaa isaga u heesa.

Awrta qaar ayaa marka rarka loo soo fadhiisiyo si xun u candhaadhsata. 'Samayso, Samayso' oo macnaheedu yahay 'is hagaaji' ayay haweeneydu awrka ku tidhaahdaa. Wuu kuur-kuursadaa oo markaas ka dib saani u fadhiistaa, awrta qaarna marka la soo

qabto ee rarka loo soo fadhiisiyaba qummaati ayay shafka dhulka u dhigtaan. Haweeney ayaa ammaanaysa haddaba awr ay lahayd oo midabkiisu casaan yahay , looguna yeedho Xamar Feked magaciisa ka dib markii uu si hufan rarkii ugu soo fadhiistay:

Waaryaa Xamar Feked
Fariid inaad tahay
Ood fayow dahay
Fiirinta indhaha
Fadhigaagiyo
Feedho laga garey.

Mar kalena iyada oo la hadlaysa awr aan si wacan u soo fadhiisan waa tii lahayd:

Samay samay markaan idhi buu
Sinta ii warwaarriyey.

Marka ugu horraysa ee awrka rarka loo soo fadhiisiyana waxaa lagu yidhaahdaa:

Suubbane sidaan kuu raro
Saakaaba la ogaan.

Dhogor yare dhedaa qubataye
Bal aan dhaxanta kaa dedo.

Haylaale haylaaloow
Heeryadu hu'gaa weeyee
Ma ku laba hagoogaayoo
Hadh ma kaa sameeyaa.

Rarka reerku waxa uu noqon karaa laba ilaa afar awr rarkood. Baydadkan soo beegan, waxa ay ka hadlayaan qoys afar ku guura iyo hawsha u taalla marka laba ka mid ah rarka la saaro, labana u hadhsan tahay:

Allahayow nin laba rarayoo
Laba u raamsanaysaa
Rubad gooyo weynaa.

Haddeerna waa ducadii. Waa habaar in la qalaa awrka rareyga ama gurgurshaaga ah. Waxa ay marwadu Alle uga baryaysaa in aan awrkaas la qalin, haad iyo haanraawe kale aanay hilbaysan. Cimri dherer ayay u baryeysaa iyo in aan la odhan oo waa ina hebla' ee maxaa diley, meel dheerna lagaama mudo ayay ku leedahay awrkeeda, haweenkuna hilibkaaga uma soo habar- wacdaan iwm. Waxa ay muujinaysaa ahmiyadda uu awrku ugu fadhiyo iyo jacaylka ay u haysaa inta uu qodan yahay:

Allahayow yaan lagu qalinoo
Haad kugu qaloonbiyin.

Allahayow maxaa diley iyo
Duul ururay kaa hay.

Waqaan calaacal beenaaliyo
Gaws laguugu ciidamin.

Waqaan shalow lagaa mudin
Oo shillal dheer laguu dhigin
Oo habro kugu shaloonbiyin.

Allahayow soliyo saaf iyo
Saab dhiig le kaa hay.

Afartaada cagood
Adhaxdaad wax ku qaaddo
Indhahaad ku gudayso
Midna iin ha ku yeelan.

Waa haweeney dhabeel ah (Gaari dumarka kale shan taako dheer). Had iyo goor reeruhu way wada guuraan. Marwadaas ayaa si uun wax ka noqonayaan oo yara habsaamaysa, goor dambena ku baraarugaysa in awrtii reeraha kale laga hor kiciyey oo laga hor dareerayo. Awrkii ay rarka ku waddey ayay la hadlaysaa, una sheegaysaa sida wax u jiraan. Dhinaca kalena waa sarbeeb ay wax ku dareensiinayso dadka kale. Waxa ay odhanaysaa:

Ma intaan ramramanaayey
Reerihii dareereen

Ma intaan ganbada waayaa
Awrtii gibisha loo xidhay.

Waa hees tawaawac iyo calaacal ah. Waa nin uu ku soo fara baxsaday rarkii reerku. Biyihii iyo caanihii baa iskaga qasmay. Immisaa dhegaati ah (xadhko yar yar), immisaa haylo ah (maryo yar yar)? Waxa uu ka garaabayaa hawsha rarriinka, waxaanu qirayaa kartida haweeneyda ee arrintan uu la kadeedmey ku aaddan! Waxa uu yidhi:

Haylaale haylaalow
Dumar bayna heeraayee
Aqal hogobyo badanaa.

Geeddigu waa laba. Mid gaaban iyo mid dheer (hayaan). Haddeer waa geeddiga kiisa dheer oo hayaanna loo yaqaan. Muddo dheer ayaa awrku rarnaa oo socdaal ku jirey.

'Hooyaday gacalaa afkuun garata'. Haweeneydu waxa ay isha awrka ka dareemaysaa in caynku hayo oo ku roorsan yahay socodka dheer dartii. Caynku waa xadhigga awrka raran hoosta (caloosha ama bogga) ka mara ee heeryada, rarka iyo awrka isku xidha. Caynku Yeesha ayuu ka mid yahay. Waxa ay u caqli celinaysaa awrkeeda, una sheegaysaa in iyaduba dhibaatada iyo daalka ay la wadaagayso oo aanay isaga (awrka) u gooni ahayn. '*Sida uu caynku kuu hayo, ayay anna kabuhu cidhibta iyo cagta iiga hayaan*' ayay awrkeeda ku leedahay. Bal hogo daymood sida farshaxanka ah ee ay ula hadlayso!

Waa adigan cataabaayee
Sida caynku kuu gubayaa
Anna cidhibta hoosiyo
Cagtu ii dalooshaa.

Waar Caddaawe caddaawow
Waar Caddaawe halyeeyoow
Labadeennan cirroole
Iyamaa cabanaaya'oo
Cagaha loo dufniyaa.

Haddeerna haweeneydu way u af gobaadsanaysaa awrkeeda, waxaanay ku leedahay cayn ay kugu giijisay islaan weyni ayaad la cataabaysaa ee maxaad yeeli lahayd haddii aan anigu ama gabadhiba caynka kugu jiiddo, doqon ha noqone iska giiji shaqallada iyo godadka labanlaabma oo carruurtii yar yarayd iyo cirrooleba way ina sugayaane cidhibta ku soo dhufo oo soo dheeree:

Cayn habari kugu jiiddaad
La calaacalaysaayood
La cabaadday caga yare!

Waar Caddaawe caddaawow
Waar Caddaawe Halyeeyoow
Carruurtii yaryaraydiyo
Cirroolay na sugaayee
Cagta soo fududee.

Dhaanku mararka qaar guul-oommane ama guul-cokane ayuu ku dhacaa oo dhexda ayuu kaga sii dhaxaa ceelka ama kaga soo dhaxaa guriga soo noqoshadiisa. Sheedda ayay haweeneydu ka garataa socodka awrkeeda iyo diifta haysa, waanay la hadashaa oo waxa ay ku tidhaahdaa:

Shaluu taagan ahaa
Xaluu tiir ku xidhnaa
Wuu tagoogo casaadayoo

Dhulkuu taakinayaa.

Haweeneydu xaq-soorkeeda iyo ilaalinta xuquuqda awrkeeda kama tagto, waxanay ku buuxinaysaa ereyadan soo socda. Waxa ay uga garaabaysaa hawsha uu qabanayo baaxaddeeda:

Adigana gartaa weeyoo
Guul oomman baad tahay
Anigana gartay weeyoo
Gaadiidkaygi baad tahay.

Haddeerna waa qiimaha awrka la dhaamiyaa reerka ugu fadhiyo. Waxa ay haweeneydu la kalgacayl hadlaysaa awr Dhooble la yidhaahdo oo awrteeda ka mid ah:

Haddaan dhay la maalayn
Asaan Dhooble dhaan wadin
Gurigii dharaar maleh.

Waa ammaantii ugu sarraysey. Nin bay ka dhigaysaa awrkeeda. Go'yaal bafto ah ayay u xidhaysaa. Bun ayay u dubaysaa. Wan baraar ah ayay u qalaysaa ama u loogaysaa, bilcan (gabadh) in ay u meherisana way u kohanaysaa! Bacadle ayaa awrka magaciisa la yidhaahdaa, waxanay odhanaysaa:

Bacadle yaa bun kuu duba
Oo bafto kuu hagoojiya
Oo wan baraara kuu qala
Oo Bilcan kugu nikaaxiya

Waa mar kale iyo ammaan kale oo ballaadhan, kuna dacal dhebeysa ilaa hashii awrka dhashay iyo geelba sibir godan dhammaantiis. Geelu caanaha ka sakow waa doonida la rarto, waa xoolaha ilmaadeertu isku disho, waana ishinka walaalaha is jecel kala geeya ee ay isku qabtaan, waxaanay odhanaysaa:

Ma wax kalaa la fuulaayoo
Fadhi lagu gureeyaa,

Ma wax kalaa la maalaayoo
Laba lagu magowshaa,

Ma wax kalay ilmaadeerradu
Isku oofa gooyaanoo
Isku aayiraayaan,

Ma wax kalaa walaalo is jecel
Wajigood ku kala go'ay!

Mar kalena haweeneydu iyada oo awrkeeda ku aammaanaysa socodkiisa toolmoon ama dheerayntiisa marka uu soconayo waxa ay tidhaahdaa:

Markuu dawga maraayo'e
Daadinaayo hoggaanka
Ma diyaarad sarkaaloo
Dagaal meel ku og baa.

Haddeerna haweeneydu waxa ay ku taamaysaa kaalinta uu awrkeedu u buuxiyo gaar ahaan awrka la dhaamiyaa.

Habeenkaad dhalanaysey
Haddaan dhuunta ku taabto
Maxaan dhaansan lahaayoo
Hadba soo dhufan laa.

Mar kale iyada iyo awrka ayay simaysaa oo ka dhigaysaa laba isu dhigma:

Habeenkii aniga lay dhalay
Adna lagu dhaqaaleeyaa
Dhibba layska meel dhigay
Oo waynu isu dhigannaa.

Halkanna waa dhafoor taabasho iyo sarbeeb ay haweeneydu kaga faa'iidaysanayso munaasib kale oo geeddi nooc kale ahi soo galay. Shil dhacay iyo dhiillaa timid. Fidmo ayaa furta goosanaysa. Waa in caawa awrta caynka lagu giijiyaa oo la qaxaa. Waxaa laga digniin helayaa col iyo cadaawe beesha ku soo maqan. Awrtii oo rarka lagu boobayo, ayay haweeney la hadlaysaa awrkeedii oo sakati uga muuqday, una duur xulaysaa raggii beesha, iyada oo tilmaamaysa in baqdini ku jirto kashooda. Waa guubaabo, waxanay odhanaysaa:

Raggayaga raggii qabey baa
Laga rooray Riiraash.

Orgi qabad ah qalistiisiyo
Ma is qaawintaydaa
Loo qaayo weynaa!

Marka reerka awrtu ku yaraato waxaa la siiyaa gaadiid qaad ama gaadiid celis (awr celis). Waa laga guuraa oo marka meel la soo dego ayaa awr ama laba loo soo celiyaa, si ay beesha uga soo daba guuraan. Haweeneydii oo arrintaas saluug ka muujinaysa ayaa awrkii gaadiid celiska ahaa ugu heesaysa:

Awr reero laga keenow
Rar ma qaadi waydaa.

Mar kalena iyada oo awrkaas gaadiid qaadka ah la hadlaysa, iskana xil saaraysa ammaanonimadiisa oo ilaalinaysa, waxa ay lahayd:

Haddaan dheelli kuu raro
Iyo dhoomo laalaad
Igu dhiibis baad tahay
Oo waadan ii dhalan

HEESTA DAMEERAHA

Dameeruhu xoolaha la dhaqdo ayay ka mid yihiin. Waa la dhaansadaa sida awrta oo kale ama waa la rartaa, fuullimaad ahaanna sida rakuubka oo kale ayaa laga dhigtaa. Sida marka awrta la rarayo loogu heeso ayay dameeruhuna heeso u gaar ah leeyihiin.

Haweeney dameeruhu ugu jiraan halkii awrta rareyda ah oo kaalintaas u buuxiyaan, ayaa ammaan u dhig dhigaysa dameeraheeda, una sheegaysa in aanu iyaga geelu waxba dheerayn cabaadka iyo socodka galow galowda ee foosha xun mooyaane. Awrta ayay liidaysaa oo leedahay iyaga marka la rarayo waa la soo fadhiisiyaa, dameereey adigase sara joog ayaa lagugu rari karaa:

Hagi hagi dameeraadeey
Haasaawe malableeyeey

Geelu waa jilbiibaayeey
Joog lagu rartaydiiyeey

Geelu waa cabaadaayeey
Ma cabaadadaydiiyeey

Geelu waa dhukaamaayeey
Ma dhukaamadaydiiyeey

Geelu muxuu ku dheer yahay
Galow galowda baas mooyiye.

Haddeerna dameertii oo dhaansan ayay u heesaysaa oo ku leedahay la soo kadlee oo ku soo dhakhso biyaha waa lagu sugayaaye. Ficilo samee ayay ku leedahay oo waxaa harraad hayaa ubadkeennii, waxaa biyo uu ku weysaysto u baahan wadaadkeennii, waxaana oomman ummulaheennii ayay ku beer-laxawsanaysaa, iyadoo u tilmaamaysa in wadaaddadii reeraha kale weysooyinku u buuxaan, ummulahoodii agaamihii biyo uga milaalan yihiin:

Hagi hagi dameeraadeey
Haasaawe malableeyeey
Ma haddaa dhallaankeennii
Dhacamaha ku joogaan

Ma haddaa wadaadkeennii
Weysooyda ku hayaa

Ma haddaa wadaad kale
Weysadu u taallaa

Ma hadday ummulaheennii
Oonoowda ku hayaan

Ma haddaa ummulo kale
Aagaamuhu u yaalliin.

Mar kalena haweeney dameer uu adeerkeed siiyey dhaansata ammaanaysa ayaa lahayd:

Gaabeeya gaabeeyaay
Gaabeeya geel dhaaneey
Ma goblame adeerkay baa
Gaabeeya ii dhaqay.

HEESTA HARRARKA

Sida nolosha kaleba, dumarku waxa ay ku kala horreeyaan samaynta harrarka noocyadiisa kala duwan. Waxaa la yidhaahdaa heblaayo way far wacan tahay. Si farshaxankeedu sarreeyo ayay harrarka uga unugtaa xadhigga ay maydhaxda ka soohdo iyo maadha ay soo gurato. Sida ay haweeneydu isugu xabbad qaaddo xadhiga iyo cawska la isku tidcayo ayaa aad u qurux badan farshaxan ahaan sida qoraalka qalinkaba loogu kala far fiican yahay, harrarka ay samaysana waa laga soo sooci karaa harrarada haweenka kale sameeyaan. Waa loo soo daawasho tagaa, harrarkeeduna wuu ka qiimo badnaadaa harrarada haweenka kale, waana nooca dhibaadda ama kaalada loo bixiyo. Haddaba gabadh ka mid ah gaarida haweenka soomaalida ah, far wanaag iyo farshaxannimona sheegatay oo ku turatay, ayaa waxa ay ka sii webinaysaa haddii xilligu xumaado oo abaar iyo oodo-lul ka dhacaan arlada in waayuhu ku kellifi karaan in ay cawskeeda suuqa xaraash ahaan u dhigto. Way u heesaysaa harrarkeeda, waxanay uga ducaynaysaa in aan xaaladdaasi la kulmin iyada iyo harrarkeeda, waxanay tidhi ereyadan caanka ah ee gabadh kastaa adeegsato marka ay harrarkeeda unkayso:

Cawdu billooy belooy baydheey, hoyal
Belo daran ka yaasiineey, hoyal
In shar lehba sharkeed li’ineey, hoyal
Aay hooyalaayow, hooyayaleey, hoyal.

Cawskanow sabool diidow, hoyal
Waqaan suuqa lagu dhigineey, hoyal
Soddon lagugu baayicineey, hoyal
oo yaa sameeyey lagu odhaneey; hoyal
aay hooyalaayow hoyalayow
hoyaalayow hooyee, hoyal.

HEESTA KEBEDDA

Kebeddu waxa ay ka mid tahay horyaalka aqal dhismeedka dhaqanka iyo hiddaha soomaalida. Waxa ay ka kooban tahay maydhax si gaar ah loo diiray, loona falkiyey oo la sibbaaqay iyo xadhig si farsamaysan loo soohay. Waxaa maydhaxda iyo xadhigga la isugu xabbad qaadaa sida sagsaagga oo kale min unuggeeda ilaa dhammaadkeeda. Kebedda guudkeeda waxaa laga hooshaariyaa bul faraqyo leh oo wada maydhax ah, dacalladana waxaa laga lulaa faraqyo kale. Kebedda waxaa la saaraa aqalka guudkiisa, mararka qaarkoodna qaybtiisa hore ee foodda. Bulbushu waxa ay kebedda u tartaa quruxda ka sakow xoojin iska difaaceeda milicda iyo dhibicda ama barta roobka xoogga leh ama miiraalaha ah. Faraqyada dacalladu waxa ay iyagu u taagan yihiin bilic abuur keliya.

Kebeddu waxa ay ka mid tahay agabyada sida wada jirka ah loo sameeyo. Dhawr haween ah ayaa isu yimaadda oo ku fara yaraysta isku habaynta iyo unkiddeeda. Samaynta kebedda waxaa lagu yaqaannaa hawl badan iyo wakhti badan oo lagu foognaado. Gabadha leh kebedda cusub ee la samaynayo, waxaa dumarka kale ee la samaynayaa ka quuddarreeyaan firfircoonaan dheeraad ah iyo diyaar garow dheefi ku lammaan tahay. Heesta kebeddu waxa ay leedahay luuqda ugu macaan hees hawleedda haweenka soomaalida. Heesta kebedda ee soo beegani waa guubaabo iyo af gobaadsi duur xul ah oo ku socda gabadha kebedda lala samaynayo.

Naagta kebedda leheey
Kaalin daraneey
Adaan kayd u sii dhiganeey

Koronkor cuni maynnoo
Kariba maynnee
Karuur geel ma la hayaayeey

Caanihii geela ee jinowga ama karuurka ahaa ayaa marka la keeno dumarka qaarkood ka wayiigaan oo diidaan, waxanay dalbadaan caano ka-soofeen ah (caano dhay ama lis ah), gaar ahaanna kuwa adhiga, waxaanay yidhaahdaan:

Karuur geel
Waa kuloo
Kabbanba maynnee

Ka-soofeen ma la hayaayeey.

Marka intaas la yidhaahdo, ayaa haddana qaafiyadda la beddelaa oo bad cusub la galaa, lana yidhaahdaa:

Baarqab waa seedoo
Sariba maynnee
Sagaal jiraan irmaanayneey.

Dhab loo baraaruji gabadhii kebedda lala samaynayey, loona tilmaan in ay oon xoolaad oo weliba la carrabbaabay ay diyaariso. Waa caano geel oo jinow ah (karuur ama dhanaan macaan). Hilib la soo qaad oo hablihii codsade in loo qalo tulud geel ah (qaalin ama hal aan irmaanayn). Marka intaasi dhacdo ayaa loo daadegayaa in si toos ah loo abbaaro ammaantii kebedda iyo dhirta laga soo diiro maydhaxda xadhiggeeda.

Geedba geedka u dheer
Laga garaacyeey
Galool mudhay mulaaxdiiyey.

Intaas ka dib, iyada oo hawshii kebed samaynta lagu jiro, ayaa waxaa isa soo daruurisa oo soo muuqata lo'dii reerka. Saha iyo hamuunta loo hayn karo caano lo'aad oo lis ah oo diirrani waa shay iska caadi ah. Dumarkii kebedda wax ka samaynayey ayaa dabadeed ku madiixa oo yidhaahda:

Waa tan soo xiixlee
Xaaxi ka cadeey
Xalaawoy lo'deenniiyeey.

Samaynta kebeddu waxa uu bilaabmaa xilliga barwaaqada ee arladu roobban tahay, waxaana haweenaydu ku dadaashaa in ay kebedda dhammayso inta naqaas lagu jiro ee aan gurigaas laga guurin. Inta badan waxaa geeddigu yimaaddaa marka jiilaal dhaco, roobkuna ka hillaaco ama ka hogla hogleeyo meel kale. Qof dumar ah ayaa haddaba dareentay in jiilaalkii afka ku soo kala qaaday kebeddii oo weli ka qabyo ah, halisna ay u tahay in la guuro oo xoolaha meel kale loo naq raaciyo. Alle ayay ka baryeysaa in uu raxmadda roobka gurigan ku siiyo oo geeddi kala baxsado, waayo kebedda ayaan u rar gelayn, kana xumaanaysa oo tacab khasaar ayay ka webinaysaa. Waxa ay tilmaamaysaa in samaynta kebeddu ku muddo dhaafsan tahay, waxanay tidhi:

Waana igu raagtey
Waana iska reebayaa
Roonow roob iigu keen
Reerku hay negaadee.

Allaa ducadeedi ka aqbalay. Roobkii baa da'ay oo reerkii negaa. Idihii, ri'yihii, lo'dii iyo geeliiba way isla wada dhaleen, odaygii reerkuna guriga ayuu joogaa. Iyada oo faraxsan oo hoosta Alle uga mahad-naqaysa, ayay marwadii Rabbi soo asturay ku goohaysaa:

Gelin dambeedkaa
Gaaridu raboobataa
Gelin dambeedkaa
Nin gob ah gogosha loo dhigaa
Gelin dambeedkaa
Mawana nirigta loo godlaa
Gelin dambeedkaa
Caanuhu gadhoodhayaan.

HEESTA ALOOLKA

Aloolku waxa uu ka mid yahay qalabyada muhiimka ah ee aqal soomaaliga. Waxa uu ka samaysan yahay duur dhuudhuuban oo dhumuc ahaan cuddoon iyo maryo suuf ah oo hun ah oo kala duwan, midabaysanna oo si farshaxan ah la isugu soohay isku dhaf ahaan. Aloolku waxa uu had iyo jeer aqalka ka galaa docda, waana gabboodka ugu muhiimsan ee guriga ka xeera dabaysha, kana dugsiya gabaddanada dayra-dhaaf. Harrarka waa la unkaa, hase yeeshee aloolka waxa la yidhaahdaa waa la ridhaa oo la mid ah waa la sameeyaa. Heesta aloolka oo luuq iyo jiib leh waxaa ka mid ah:

Naagan duur ridhaney
Doca dalooleey
Ninkeedii dabayl raacyeey

Naagan duur ridhaney
Doco dalooleey
Wan loo diley
Dugaag gurayoo
Tukuu doonyo doonyooyeey.

Heestan kale ee Aloolka waxaa lagu dhalliilayaa geel xeradiisa diida oo xero kale u olola, faras xeradii diida oo xero kale u danana iyo gabadh xilaha diidda oo ah halka heestu u socoto marka laga gudbo ololka geela iyo dananka fardaha oo lagu suntayo kala duwanaanta sanqadhaha codka ay sameeyaan ama ci'dooda. Guurka iyo qiimayaasha xilaha ayay haweenku ku dhiirri gelinayaan hablaha yar yar ee heestooda dhegaysanaya.

Alla waa xujooy waa xujooy
Geel xerada diidaa waa xujooy
Xero kale ka ololaa waa xujooy.
Alla waa xujooy alla waa xujooy.

Alla waa xujooy alla waa xujooy
Faras xerada diidaa waa xujooy
Xero kale ka dananaa waa xujooy
Alla waa xujooy alla waa xujooy.

Alla waa xujooy alla waa xujooy
Gabadh xilaha diiddaa waa xujooy
Xeelad bay ka wadataa waa xujooy
Alla waa xujooy alla waa xujooy.

HEESTA HAANTA

Lulista haantu waa hawl muhiim ah. Marka caanaha dhitada ahi gadhoodhaan waxa ay diyaar u yihiin in haanta lagu shubo oo hawshii lulliinka la guda galo, haddii kale waxaa caanuhu u kala baxayaan biyo, iyo fud iyo faar oo way xumaanayaan. Heesaha haanta waxaa ka mid ah:

Hoobeey hiyeey haanta
Haan yahay Bullooy ii bax
Yaan bacadka kuu dhigine
Baranbaradu kugu xayane
Hoobeey hiyeey haanta
Haan yahay Bullooy ii bax.

Maagistaas iyo hanjabaaddaas haanta ku dhacaysa ee iyada lagu qofaynayo ka dib, waxaa dhacda in haantu wayraxdo oo haweeneyda ama inanta lulaysa dhega adayg kale ku keento. Hore uma cagaarto. Marka lulitaanka lagu sii wado cabbaar ee laga war helo in ay caagaaritaankii ka gudbayso oo in la bixiyo iyo weedhaamintii soo fool yeelatay, ayaa waxaa lagu sii kordhiyaa xanuunka iyo maagistii, tiiq tiiqsi ahaanna waxa loogu yidhaahdaa:

Hoobeey hiyooy haanta
Haan yahay bullooy ii bax
Laba qaar laguu kala jar
Laba qaalin kugu buube
Geel jire ku qooraansey
Geed dheer lagaa soo lul,
Qoollaaligay baratay
Qoodhaha raggay aragtay
Hoobeey hiyeey haanta
Haan yahay Bullooy ii bax.

Haan yahay ku garan waayey
Geel-jire ku qooraansey
Geed dheer lagaa soo lul

Ma fayoobidoo ogiye
Ma furtaa lagaa dhuugey.

Haantu iyada oo doora
Oo doora oo doora!!!!!
Laba doobi laga buuxsho
Yay dooro doob aragtay
Oo dooro dooroowdey!!

Marka ay haantu baxdo ee caanaha iyo subagga la kala saarayo xilliga weedhaaminta, ayay haweeneydu ammaan iyo faanin haanteeda ula dhaqaaqdaa:

Haaneey hiyeey haanta
Haantaydu waa ceebla'
Waa ceebla' caga toosan
Waa gabadh casoo gaaban
Hoobeey hiyeey haanta.

Haantaydu waa gaari
Waa gorof aan xooleeyey
Oon geed ka soo qaaday
Gacalkayna ima siinnin.

HEESTA TIBTA IYO MOOYAHA

Hadhuudhka ama garowgu waa raashin u baahan shaqo gaar ah ka hor karintiisa. Hawsha aanu ka maarmin waxaa ka mid ah in tib iyo mooye lagu la tumo iyo in isha iyo baalka laga tuuro oo la hufo, lana haadiyo. Haddaba hees hawleed u gooni ah ayaa hadhuudhka tumiddiisu leedahay. Inta badan laba hablood ayaa laba gacmoodiya oo si darandoorri ah laba tibood isu daba mariya mooyaha, iyaga oo adeegsanaya hees xambaarsan jaan, jiib iyo luuq. Inan ayaa doonaysa in ay hadhuudh tunto. Waxa ay og tahay in ay kelideed tahay, waxase ay la socotaa in adduun xeerba xeer iyo xabag cadaadeed yahay oo adhi jirina ay xil wadaagto. Waa xeer nolosha ka mid ah in maalinba qof u baahdo kaalmada qofka kale oo taas abaal la isugu hayo. Hees qaylo-dhaan ah ayay ku bilaabaysaa tumiddii hadhuudhkeeda:

Alla yay la tumaay
Ila taakuliyaay
Uu tolkay dhalayeey
Alla yay la tumaay.

Qaddar yar dabadeed ayaa gurmad soo gaadhayaa, si darandoorri ahna budulku u duulayaa:

Ma caddee ha caddaado
Caano geel haw egaado
Culimaa cuni doonta
Iyo caalin wadaad ah

Iyo coofle barbaar ah
Iyo reer curadkiiye
Ma caddee ha caddaado
Caano geel haw egaado.

Hadhuudhkaan la tumayn
Ama layla tumayn
Waa qush waa qudhunoo
Waana qoola madoobe
Waana quud habareed.

Nin cunaa ma casheeyo
Cidda roori ma raaco
Ciidan loogama yaabo.

Heesta mooyaha ee soo socota, waxa ay ka mid tahay dhudda ugu yar ee tix maanso laga sameeyo, waxaana raaca oo ay heestu leedahay jiibkii, jaantii iyo jugtiiba.

Mooyaha
Malablaha
Magacii
Mooyaan!

Mooyaha
Mooyaha
Magacii?

Calaliye
Ciil-tire

Tibahana
Tibahana
Magacood?

Culus iyo Culus iyo
Cabban baa la yidhaa.

Shukulidda hadhuudhku (Tumidda hadhuudhka) waxa ay u baahataa hawl badan, hadhowtana karin badan ayuu doonaa. Heestan kale ayaa haddaba ka hadlaysaa hadhuudhka la tumayo hawshiisa, meeshii lagu tumayey, wixii lagu tumayey, ciddii loo tumayey iwm.

Adagaa adagaa
Adagaa ma bir baa
Ma bidaar oday baa
Saw ma soo budo duulo

Ma bakaar subax baa.

Ma karoow dhagax weeye
Ma kacoow dhulka weeye
Ma karaan Xirsi weeye

Mutulloow aqal weeye
Mako naagaha weeye
Meerto waa hal la maalo
Mooy waxa la yidhaa
Isha meesha madow

Mooye geed la jaroo
Muuno loo qoray weeye
Maqaarkii la aslaana
Masallaa la yidhaa
Naagtii maamul taqaan
Maakhiidaa la yidhaa
Muslinkii la wacoo
Minankaaga yimaaddana
Marti baa la dhahaa
Waa la meel mariyaa
Midigtaa la qabtaa
Wixii ay mar damcaan
Marxabbaa la dhahaa.

GELBISKA IYO ALALAASKA AROOSKA

Arooska iyo gelbintiisu waa dheegag ka mid ah docaha loogu hagaagi karo ee loogu tago kartida haweenka soomaalida iyo miidda hal-abuurkooda. Aqalkii hiddaha iyo dhaqanka soomaalida oo ashqaraar huwan, qaayana leh, una wada duug la' sal iyo baar sida caruuska iyo caruusaddu isugu cusub yihiin, ayay haweenku gangaamaan oo ku fara yaraystaan xilliga arooska. Suugaan kala duwan ayay dumarku ku beegaan oo kaga qayb qaataan fantansiyaha iyo dammaashaadka arooska gelbiskiisa iyo la kala wareegga xeedhadiisa. Waxaa jira buraanburro iyo hal-abuur kale oo la tiriyo inta lagu gudo jiro xafladda arooska iyo furitaanka xeedhada. Halkan waxa aynu ku eegi doonnaa gelbiska iyo arooskiisa.

Marka inanta gurigooda laga soo gelbinayo ee lagu soo wado goobta aroosku ka dhacayo waxa ay haweenku ku heesaan:

Gabadha soo gelbiyaay
Gedo xariireey

Nin bay jamatay
Jookh dheereey.

Waxaa kale oo xilliganna la yidhaahdaa:

Qaalmo geel wadatooy
Gabadh Qaliifooy
Wacayskii qorraye
Adigu qaadooy

Qaalmo geel wadatooy
Gabadh Qaliifooy
Wacays raagey
Laga reebyeey.

Marka gelbinta inantu soo gudo gasho ee ay soo gaadho golihii aroosku ahaa ayay dumarka sii joogey goobtu ku soo dhoweeyaan gabadha iyo dhiggeedaba oo yidhaahdaan:

Arooskeenna aamiin
Ummulo wiil leh aamiin
Arooskeenna aamiin
Allow tiiri aamiin
Allow taqabbal aamiin
Arooskeenna aamiin.

Habeenka hore marka xafladdu dhammaato golaha arooska caruusadda waa laga sii gelbiyaa, waxaana lagu hooyaa aqalkii loogu tala galay in labada lammaane ee cusubi nolosha ku wada wadaagaan. Hees kale ayaa halkanna gabadha lagaga sii gelbiyaa oo lagu geeyaa guriga cusub, waxana la yidhaahdaa:

Foodda kuu gelinnoo
Kuugu feedhnaye
Ku faatfaatiyeey
Adigu faayooy.

Halkanna waxaa ku xusan dardaaran iyo waanooyin wax-ku-ool ah oo ku saabsan hab dhaqanka laga doonayo inanta, loona sii guntayo caruusadda:

Ninku weedhuu ku yidhaahdo
Minka hooyo lama geeyo
Minka aabbe lama geeyo
Minka walaalna lama geeyo
Ama duuduub oo dabka saar

Ama liqoo laabta ku hay!

Ninka xeerkiisa ma taqaan?
Xoolaha xeerkooda ma taqaan?
Gobta xeerkeeda ma taqaan?
Aqalka xeerkiisa ma taqaan?

Ninka xeerkiisu xasili weeye
Xuluuliyaa loogu galaa
Xusulkaa loo dul dhigaa
Xamxam baa loola hadlaa

Xoolaha xeerkoodu xadhig weeye
Gobta xeerkeedu xurmo weeye
Aqalka xeerkiisu asal weeye
Ururiskiina naag adag weeye!

Gambo-saarku waa nooc ka mid ah hees maamuuseedka gelbiska iyo arooska, waxaana lagu tiriyaa fadhiga iyo sara jooggaba, iyada oo la raacinayo luuq macaan, jiib iyo jaanba.

Eeho hoobaloow haaya weeye
Kaama dhintoow lagu siiyeey
Kaama dhacdooy lagu saaryeey

Gobta gobteeda lagu siiyeey
Gaashaan xariiroow lagu siiyeey
Gogol ma laabow lagu siiyeey
Garasho dheeroow lagu siiyeey.

SITAADKA IYO DUCADA

Hal-abuurka haweenka soomaalidu waxa uu garaacaa irrid ama albaab kasta oo laga galo nolosha soomaalida dhaqan iyo dhaqaaleba, waxaanu ku guulaystaa in uu iska dhex cabbiro noloshaas ballaadhan, kana jawaabo baahi kasta oo dhex timaadda; haddii ay noqoto mid maaddi ah iyo mid ruuxi ah labadaba. Sitaadka iyo Ducadu waxa ay ka mid yihiin fanka ruuxiga ah ee haweenka soomaalida u buuxiya kaalinta dhaashiga iyo indho kuusha nafsaaniga ah ee quluubta iyo dareennada gudaha ee aan dusha sare ka muuqan. Xidhiidhka haweenku ay la leeyihiin Alle iyo diinta ayay ku cabbiraan hal-abuurka ducada iyo sitaadka. Sida culayga iyo cidaaddiisu (cartirtiisu) ay weelka ugu nadiifiyaan, ugagana ilaaliyaan in ay jeermiska ama bakteeriya iyo cabudhku ku dhashaan si la mid ah ayay haweenku Sitaadka iyo Ducadana maskaxdooda ugaga nadiifiyaan walaahowga, ugagana ilaaliyaan shaydaanka, sharka iwm.

Waxaa dhacda in mararka qaar diin jacaylku la taraaraxo oo aqoon la'aani kala caga taagleyso dumarka xilliga sitaadka iyo ducada meelo ka caagganaa in la cuskado ama la

baryo, sida Awliyada, Shuyuukh ama dad beri hore allaystay (xijaabtey) iwm. Hayeeshee mar walba dulucda ujeeddadoodu maaha in diinta iyo wixii xeerar jira laga tallaabsanayo ama lagu tumanayo xad gudub ahaan.

Sitaadku waa hoga-tus iyo waanooyin la xidhiidha xaqiiqooyinka iyo wacaasha dumarka dhexdooda ka jirta iyo muujinta xidhiidhka ka dhexeeya iyaga iyo Diinta. Teeda kale sitaadku waa u bulshayn ay haweenku ku wada baashaalaan, ku wada farxad qaybsadaan oo ku wada kulmaan, si ay ugaga nastaan hawshii reerka ee soo martay, uguna diyaar garoobaan ta ku soo foolka leh. Si wanaagsan ayay u lebbistaan, una cusburtaan oo xinnaystaan, iyaga oo isticmaalaya waxyaalo udug iyo caraf leh. Cunto caqiibo leh oo kala cayn cayn ah ayay xilliga sitaadka haweenku samaystaan oo isku casuumaan.

Luuq u gaar ah oo macaan, jiib, jaawo-sacab iyo darammal-durbaaneed ayuu sitaadku muunadaystaa oo leeyahay. Tusaale ahaan waxa ay ku bilaabaan cuskashada Bisinka:

Bisinka ku bilaaba
Shaydaan ha baydadee.

Wax la bartaan
Bisin lahayn
Barko yeelan waa'.

Bisinku waa afka bulkii
Carrabka baalashii.

Bisin Allow
Barako qabe
Baro malaa'igeed.

Quruxda iyo hodantinnimada af soomaaligu leeyahay ayay haweenku u adeegsadaan sitaadkooda. Maskaxda iyo maanka ayay ku cariyaan, kuna godliyaan weedho rib ah oo wax waydiin iyo ogaal abuuris ah. Aan soo qaadanno tusaalahan u taagan isku xidhka kasmada qofka iyo awoodda Alle. Samayska cirka iyo dhulka la-yaabka ku sugan ayay ku taakaynayaan garaadka aadanaha oo ay leeyihiin bal cirkaas ka eega tiir bir ah iyo udub-xoog kor u haya, dhulkana ka eega karkarriin iyo tolliimo isu haysa. Intaas marka ay sheegaan ayay odhanayaan Allaha awooddaas leh ee abuuray cirka iyo dhulkaas samayskoodu sidaas u falsan yahay, ayaa berrito la hor tegeyaa ee ogaada!

Bal cirka tiir bir ah ka eeg
Dhulka tolliin ku yaal
Rabbiga taladaa leh baa
Berrito la is hor taagayaa!

Baryada iyo weynaynta Alle ayay haweenku sitaadkooda ku bilaan, waxaanay yidhaahdaan:

Ilaahaan baahanee
Loo baahanyow
Aduun lagu baryaaye
Boqorka weynoow.

Allihii Makiyo Madiina
Sameeyayoow
Aduun baa lagu baryaaye
Boqorka weynoow.

Allihii janniyo cadaab
Noo kala jaheeyayoow
Aduun baa lagu baryaaye
Boqorka weynoow.

Alliihii gaal iyo islaam
Midba gaar ka yeelayoow
Aduun baa lagu baryaaye
Boqorka weynoow.

Haddeerna waxa ay isu sheegayaan, iskuna baraarujinayaan sheekooyinka taban ee dhexdooda yaal ee dembigu ku jiro iyo sida taas ay qaarkood u moog yihiin, uguna faya qabaan ku dhaqankeeda. Waxa ka mid ah xumaanta ay leeyihiin caadaysiga iyo ku dhaqanka xanta, xiqdiga iyo xaasidku. Waa dardaaran xumo reeb ah, waana waano samo far ah. Xaawo ayay hal-qabsi taariikheed ka dhiganayaan, waxanay yidhaahdaan:

Naa xumo ku faayooyinoow
Xaawi waxay lahayd
Na xanta dhiga
Xaasidka daaya'oo
Xaawaleey dadaaloo
Xadhig Ilaah cuskada.

Aakhiro sida aanay cid iyo ciirsi u lahayn iyo in aan laga guurayn, lagana gaboobayn, ayay haddana is xasuusinayaan si farshaxan iyo hummaagyo maskaxeed oo qurux badan leh, waxa ay yidhaahdaan:

Meelaan curadkaagu
Ceel kaa waraabinayn
Oon laga gaboobayninbaa
Layna geynayaa.

Meelaan laan la hadhsadiyo
Laas biyood lahayn
Oon laga gaboobaynin baa
Layna geynayaa.

Mar kalena iyaga oo ka hadlaya dhimashada ka dib, waxa ay is xasuusinayaan cidhiidhiga marka iilka la is dhigo. Waxa ay Alle ka baryayaan inuu qabriga u waasiciyo, waxaanay yidhaahdaan:

Qabriga labadiisa dhinac
Waysku dhow yihiin
Allahayow kala dhifooy
Maalintaan dhex galo.

Imikana waa dheegaggii quruxda hal-abuurka ee hilayga u ahaa madhaxa iyo kaydka taariikhda. Nebi Maxamed NNKH iyo Faadumo Rasuul ayay ku hal qabsanayaan.

Muxumadow Maxamedow
Malablow reer Quraysh
Alla malab la shubayow
Adaan muxubbo kuu hayaa.

Sitooy Faadumo ma aragteen
Aragnayoo way amranayd
Way indha kuulkuullanayd.

Ducada iyo baryada Alle meel weyn bay ka fadhiistaan hog-tiraabeedka haweenka soomaalida, waxanay u adeegsadaan muuqaal kasta oo nolosha ka mid ah, waxanay cuskadaan ammin iyo goor kasta oo wakhtiga ka mid ah. Dumarku duco ayay ugu nabaadiino xidhaan reerka iyo xoolihiisa labada cir-guduudood ama labada goorood ee gabbal dhaca iyo waaberiga. Waa duco tixaysan oo murti duluc raaridani ku duugan tahay, waxanay yidhaahdaan:

Belaayada hore rooran
Ta dambe reebban
Ta sare raaran
Ta hoose radeeban
Ta hareeruhuna riixan.

Fiidkii kolka shaacu sii madoobaanayana waxa ay carraabiyaan oo madowga habeenkii raaciyaan Shaydaanka iyo intii shar leh, waxanay soo dhoweeyaan malaa’igta iyo intii khayr leh. Waxa ay yidhaahdaan:

Shaydaanoow fogow
Oo fiidka raac,

Malaa’ig Allaay soo hoyoo
Soo hanuun raac
Awliyo Allaay oohow.

Xilliga habeenkii la sii seexanayana waxa ay haweenku yidhaahdaan:

Allow waasan noo beri
Oo warsan na maqashii.

Haweenay ayaa inankeedii ama qof kale oo ku dheeri ka ambabaxayaa reerka, una socdaalayaa meel durugsan. Waxa ay u sii gunuddaa ducadan:

Dhulku taako taako
Qorraxdu dallaalimo
Dadku aabbiyo hooyo
Wax ku dheefa mooyee
Wax ku dhiba ha arkin.

Waxa kaloo ay ka ducaystaan cadhada waalidka, carcaraafka iyo masiibooyinka dunida ka dhaca, ciqaabta iyo cadaabta aakhiro iwm. Waxa ay iftiiminayaan isku xidhnaanta ka dhexaysa labada daarood ee ifka iyo aakhiro, waxanay yidhaahdaan:

Allow naga hay:
Cadho waalid
Carcaraaf adduun
Ciqaab aakhiro
Iyo cadaabtaada.

Sida aanay haweenka soomaalidu cuntada ugu masuugin xilliga martidu ardaaga joogto, ayaanay ducadana ugu dhabcaalin xilliga Alle bariga. Ducadan soo socota ayaa arrintaas abbaaraysa. Haweeneydu denbi dhaaf ayay Alle u waydiinaysaa nafteeda iyo inta la joogta goobtaas, waalidiinteed iyo waalidiintood, inta kale ee xaq iyo xurmo ku leh, inta ay ka soo jeeddo ama iyada ka soo jeedda badhi iyo buuryaba ilaa Nebi Aadan iyo hooyo Xaawo! Waxa ay tidhaahdaa:

Allahayow:
Dembigayaga dhaaf
Kii waalidkayo dhaaf
Kii waalidiintood dhaaf
Inta nagu xaqliyo
Inta nagu xurmo leh
Nasab keenayee
Nikaax keenay
Ilaa abuunaa Aadan
Iyo ummuunaa Xaawo
Dembigooda dhaaf.

Marka haweeneydu xaamilada tahay ee ay uurka leedahayna waxa ay ugu duceeyaan:

Ilaahay kan iyo kelli kaa dhig
Iyo keliya buluq mar ah.

‘Kan iyo kelli’ waxa looga jeedaa kellida hilibka xoolaha iyo xaydha ama baruurta dusha kaga getfan oo ‘kan’ loo yaqaan. Kanka iyo kellidana si fudud ayaa loo kala dhaliyaa. ‘Buluq mara’ waxa looga gol leeyahay sidaas kanka iyo kellida oo kale Alle ha kuu kala keeno oo foosha kuguma dhibo. Mar kalena waxa ay dumarku yidhaahdaan kolka ay soo booqdaan qof dumar ah sidkeedii ama wakhtigeedii taagan yahay, iyaga oo ku ducaynaya ereyadan la macnaha ah kuwa sare, afarta indhood ee isa soo eegaya ee loogu ducaynayaa waa labadeeda indhood iyo labada ilmaha uurkeeda ku jira oo caafimaad qab isku arka oo eega looga jeedo:

Ummul udgoon
Iyo Afar indhood
Oo is soo eegaya
Alle ha kaa dhigo.

BURAANBURKA IYO MAANSADA KALE EE HAWEENKA

Hal-abuurka haweenka soomaalidu kama dhaco nuxur ahaan iyo farshaxan ahaanba ka ragga soomaalida. Sida meelo dhawr ah oo buuggan ka mid ah aynu ku soo tibaaxnay, meelo kalena ku arki doonno, haweenku waxa ay maydhaxda iyo dunta hal-abuurkooda ka diirtaan oo ka soo gurtaan dhirta galoolka ah ee ragguba ka soo dheegtaan miidda, maadda iyo murtida hal-abuurkooda. In la kala badsado ama la kala bursado ha joogtee, waa u dhex hal-abuurka iyo quruxdiisa ragga iyo haweenka soomaalida sida nolosha kaleba uga dhexayso.

Buraanburku waa sed dumarka u gooni ah. Sida gabayguba u sii bannaynayo kaalintii uu suugaanta ku lahaa, ayaad mooddaa in waayadan dambe buraanburkuna ka sii baxayo halkii uu haweenka u buuxin jirey. Heesta iyo jiiftada ayaa laabta la soo kacay. Qayb kasta oo ka mid ah laamaha suugaanta haweenku way la jaan qaadaan oo way hal abuuraan, sida gabayga, jiiftada, geeraarka iwm. Halkan waxa aynu ku soo bandhigi doonnaa tusaaleyaal ka mid ah guud ahaan maansada haweenku tiriyeen iyo ta loo tiriyey ee raggu ku muujinayaan garwaaqsiga iyo qiritaankooda ku aaddan kartida, hawl karnimada, lama huraannimada haweenka, nolol la wadaaggooda, jacaylkooda iyo ku il qabowsiga quruxdooda. Buraanburka iyo maansada kale ee haweenka ayaynu ugu horrayn tusaaleyaal ka soo qaadan doonnaa, buraanburkaynuna ugu horraysiinaynaa. Sida dheeggan hoose ka muuqata Buraanburku waxa uu ogolaadaa in qaafiyaddiisu hadba xaraf raacdo oo aanay ku socon hal xaraf oo keliya sida maansada inteeda kale, marka laga reebo jacburka.

Gabadh baa beri nin hungureeyey. Waxa ay gabadhu dareentay in ninkani si xun u dalag dalag leeyahay, arrinkiisuna aanu guur-doonnimo ahayn ee ay ka tahay gaabsi iyo agagasnimo. Fariid bay ahayd oo waxa ay tirisay buraanburkan aannu ka helnay dhawrkan beyd, iyada oo sarbeeb ahaan muujinaysa sida ay gabadhnimadeedu ula weyn tahay, una ilaashanayso waxa ay tidhi:

Hobaalo hobaalayeeey haddaba, (Waxaa lagu ibo-furtaa ama bineeyaa buraanburka)

Waa dhinbiishaa yaroo waan ku dhohololayaa
Haddaan qoomo waan laygu qaadanayn.

Haweeney kale oo ninkeedu inta uu maagay, haddana subaa-salaax iyo sasabo ula soo gole fadhiistay, ayaa iyada oo odaygeeda dhafoor-taabanaysa waxa ay tidhi:

Calool nugulaa carruurtayda aabbahood
Intuu i canaantay buu Caasha-Weris i yidhi.

Dumarka soomaalidu waxa ay buraanburka u cuskadaan wax kasta oo ay doonayaan in cabbiraan. Guurku waxa uu ka mid yahay dhacdooyinka ugu waa weyn ee ugu qiimaha badan gun dhigyada nolosha aadmiga. Dhaqanka soomaalida marka la eego guurku waxa uu ku fadhiyaa rukun weyn oo nolosha soomaalida ka mid ah. Milge iyo maamuus ayaa dhex yimaadda labada qoys ee guurka ku xididaya ee inanka iyo inanta is guursanayaa ka soo kala jeedaan.

Soddoh inanteedii la guursaday ayaa beri u timid qoyskii inanteedu gashay. Maalmo markii ay la joogtey reerkii ay inanteedu u dhaxday, xaaladdii ay kala kulantayna dhab u deristey ayaa dareenkeedu kula faqay in ninka inanteeda qabaa milgo-jiidh arrinkiisu yahay oo aanu sidii loo baahnaa u dhaqmayn dheg weynnimo ama dhayal waxa ay doonta ha ka ahaatee. Soddohdii way buraanburtay oo waxa ay tidhi:

Soddohi soo dhaadhacdoo dhawrsi iguma jiro
Ee 'Dhabar-jabkaygii' nin dheereeya iigu dira!

Dhabar-jabku waa qayb ka mid ah milgaha guurka iyo xididnimada. Soddohda ayaana milgahaas yeelata. Marka inanta la doono ee loo soo geed fadhiisto waxaa la bixiyaa Gabbaati, marka inanta la kala guddoonto ee la guursadana waxaa la bixiyaa Yarad. Gabbaatiga iyo Yaradkaba waxaa bixiya inanka guursanaya, waxaana la siiyaa tolka inanta la guursanayo. Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa: *'Geel waa geel, wixii gooyaana waa geel'.* Gabbaatiga iyo Yaradkuba waa geel ama waa wax kale oo geela goyn kara ama u dhigmi kara. Yabadh ayaa isna jira. Yabadhka waxaa bixiya inanka guursadey, waxaanu siiyaa inanta la guursadey iyo hooyadeed haddii uu inan-la-yaal yahay, haddii kalena xaaskiisa oo waa marriin ama dahab, dhar iyo xoolo kale, siiba adhi iwm. Yarad-sooran ayaa ka mid ah milgaha xididka. Xoolihii Yaradka ahaa ee inanta laga bixiyey ayaa la qaybiyaa oo saddex daloolkood lagu soo celiyaa inankii inanta guursadey. Xoolahaas waxaa loo yaqaan Yarad-sooran. Soddohda inanta laga guurtsadeyna waxa ay diyaarisaa Dhibaad ama Diiqo oo ay inanteeda ku dhistaa. Dhabar-jab xoolo loo yaqaan ayay soddohdu inanka inanteeda guursaday milge ahaan ugu yeelataa. Dhabar-jabku waa qaalin geel ah ama wax u dhigma oo Dhibaadda dabadeed soddohdu mutaysato. Waa arrinta buraanburka sare ka soo jeedo, waana dhafoor-taabasho iyo af gobaadsi ka soo yeedhay soddoh mudantideedii laga meermeerayo ama la macne garan waayey. Waxaa intaas soo raaca marka la eego maamuuska guurka iyo dhaqanka soomaalida xoolo loo yaaqaan Kaalo iyo kuwa labaad oo loogu yeedho Gaafo. Kaalada waxaa lagu xooleeyaa qoyska cusub, waxaana bixiya tol-weynaha inanka guursadey, waana sabeeno ama ceesaamo inta badan iwm. Gaafadana waxaa bixiya afar nin oo siiya qoyska cusub. Laba

nin waa ku sharci in ay Gaafada bixiyaan oo waa inanka guursadey seeddigii walaashii qaba iyo abtigii hooyadii la dhashay, waana tulud geela Gaafadu inta badan. Haddii labadaas nin gaafada laga waayo waa ku sharaf dhac oo cimaamadda Rishwaanta ah ayaa dhulka kaga dhacda. Labada nin ee kale oo kala ah seeddiga labaad iyo abtiga labaad ee inanka guursadey Gaafadu waa ku milge keliya. Waxaas oo dhan oo la is dhaafsanayo oo wada milge iyo maamuus ah waxaa looga jeedaa: '*Gacmo is dhaafay galladi ka dhalataa*' iyo '*Taban taabaday laba gacmood tamar ku yeeshaan iwm*.'

Halkan hoose waxa aynu ugu tegi doonnaa dhawr buraanbur oo halis ah oo qiimo leh. Kan ugu soo horreeya waxa tirisay Aamina Aw Cali oo ku nool magaalada Jabuuti, waxaanay kaga hadlaysaa dhaqanka iyo nolosha soomaalida, gaar ahaan wacaasha haweenka, hiddaha iyo noloshooda guud ahaan. Dhawrsanaanta iyo xishoodka, caddaalad falka iyo is garabsiga, isla naf qaybsiga iyo is gargaarsiga iwm oo intuba ku aroora dhigaallada Diinta ayay Aamina Aw Cali buraanburkan ku tilmaamaysaa in ay ka mid yihiin hantideeda maguuraanka ah. '*Hunguri calaf baa shushuba; dadkana hiddihiisa guud; wixii la hayaa dhex yaal*'. Waxa ay halkaas Aamini u sii dhaafaysaa aqalka hiddaha iyo dhaqanka soomaalida iyo waxa qalab iyo maacuun kala duwan dhex yaal. Aqalkaas iyo waxa lagu dhex isticmaalo qalab iyo dhuuni ama oon cunteed, ayay ku dhaadanaysaa, kana tibaax bixinaysaa in ay iyadu carradeeda iyo ciiddeeda kala soo baxdo. Waxa ay tusaale u soo qaadanaysaa hilibka noocyadiisa kala geddisan sida dulbaaxda iyo dhaylada, iyo caanaha dhayda iyo gadhoodhkaba leh ee ay ka maasho cuudka ay dhaqato iyo inta ay ka hesho ee ay kala soo baxdo dhulka iyo dalagga beeraha sida *Hadhuudhka Cilmi Jaamac.*

Cilmi Jaamac waxaa loo yaqaan hadhuudh waddani asalkiisu yahay oo caan ah, kana baxa dhul beereedka hodanka ah ee degmada Gebiley. Waa hadhuudh ay taydiisu sarrayso. Geedkiisu waxa uu ku baxaa muddo lix bilood ah, halka noocyada kale kaga baxaan 2 – 3 bilood. Waa geed adkaysi leh oo aan u nugleyn abaarta iyo roobka midkoodna. Midhihiisu waa caddaan baruurta u eg oo dhumuc weyn oo cuddoon yeesha. Dhadhankiisu damcad macaan ayuu leeyahay, waxaanu hodan ku yahay oo ka buuxda nafaqooyin kala duwan oo u wanaagsan jidhka qofka aadamiga ah. Sababta hadhuudhkaas loogu bixiyey Cilmi Jaamac iima suurtoobin in aan helo, waxaase laga yaabaa inuu noqon karo ninkii lahaa beeritaankiisa ama hirgelinta soo shaac bixiisa iwm.

Dhinaca kale waxa ay Aamina Aw Cali ka webinaysaa oo maankeedu diiddan yahay sida maanta looga sii guurayo qabbaansiga iyo isticmaalka wax kasta oo dhalad ahaa, waddani ahaa, looguna sii hanqal taagayo dhul shisheeye iyo wax ku jira gacmo durugsan oo meel fog ka laacaya. *Midho gunti ku jira looma daadsho midho saaran geed guudkiis.* Ragga ayay duraysaa oo ku tilmaamaysaa in ay dhabbo qarda jeex ah oo wada bohol iyo hog ah u horseedeen oo dumarka ku hageen. Ugu dambaynna waxa ay soo dhowaynaysaa in iyada oo la isku duuban yahay dhibaatada xalkeeda la wada galo raad goobkiisa. Baraanburkan waxa ay Aamina Aw Cali alliftey 1988-kii, waxaanay kaga qayb qaadatay tartan suugaaneed magaalada Jabuuti ka dhacay Diisembar 1988. Waxa ay tidhi:

Haddaan dhaqankayga nololeed u dhaabbo galo
Haddaan dhaaxiyo wakhtiga dhallinta maanta baro

Aniga dhaqankaygu waa dhawrsani iyo xishood
Dhabbaha diinteennaa dhaadku u saaran yahay
Cadliga lama dhaafi karee wuu ku dheehan yahay
Intay ini dheregto inina gaajo uma dhintaan
Dhuuniga iyo oonta ninna gooni uma dhigsado
Dhayal maahee dhabbaa loo walaal ahaa
Naxariistaan dhammaan buu ku dhiirradaa.

Dharka saddex qayd dhalaashiyo dhaclaan lahaa
Dhixirka iyo qoolku waa dhaqan ayeeyaday
Markay Dhool xidhato sharaf laguma dhaafi jirin
Dhiggeed way ugu qurxoonayd dhar qaadashada
Dhayalin maayee qalbiga wuu ku dheehan yahay.

Dhismaha hoygeennu dhalan gooniyuu lahaa
Dhigo mara iyo gobiyo dhebiga lool ka dheer
Hohob la dhaliciyey soogan la dhaqanyo tiray
Alool dheeriyo jarcadaan dhaxantu soo marayn
Dhigaan iyo udubaan liicahayn dhacaynin abid
Dhoollaha iyo Moole anuu dhiskayga yahay.

Waxa dhex yaalla miyaay dhaayo tirin karaan
Dhugasho maalmeed miyaa lagu dhammayn karaa
Ubbadii daar ka dheerayd dhigaaya subag
Dhiil gobeed oo markaas dhayda lagu gingimo
Dhalaal weyn xeedhadii lagu dhigaayey kayd
Dhayda maalkeenna ee dhuuni ugu macaan
Dhiilo rarmiyo kadhaha lagaga dhaliyo subag
Dheriga iyo oontii dhadhamadiisu gaar ahayd
Fandhaal dhosoq laga qoroo xaradhku uu dhan yahay
Sama dhig iyo dermadii loo dhigaayey gacal
Maacuunkii dhaqankayga yaa dhammayni kara.

Dhabeel iyo gaari mooyee dhiddadu ma ridhan
Doqon dhasheediina dheelkaa cidlada ka helay
Geesi maal dhiiba warac aan dhalliil lahayn
Libaax dhab u muuqda mooyee dhurwaa ma galo.

Waxaan dhuuniga iyo oonta ka dheefsan jirey
Dulbaax iyo dhaylo dhiig caafimaad ku jiro
Haamo dhay iyo gadhoodh culaygu uu dhadhamo
Hadhuudh Cilmi Jaamac soo dhigay iyo galley
Sarreen dhilan heed la feedhoo dhab loo shukumay.

Waxaas oo dhereg ah oo noloshayda dheelli tiray
Dhammaan dhulka hooyaday baan ka dheefsan jirey

Haddaan dhulka beero kayd baan u dhaadhacaa
Haddaan dhaqo maalka waan dhaashananayaa
Dheemmanta iyo Luulka way dhaaban tahay carradu
Dhankii loo dayaba hiddahaygu waa dhammays
Dhalliil laga waa oo midnimuu ku dhiirradaa.

Ninkii dhalanteedka beenta ah dhab moodayoow
Dhaqan shisheeyaha ninkii dhega u taagayoow
Dhediyo ceeryaan ninkii dhool gu' moodayoow
Dhabbaha shaydaan kuwaa galab ku dheelmadoow
Ceeb ka dhawrsada kuwaa dhimasho moodayoow
Dhinbiil iyo gaas kuwaa lagu dhaqaajiyoow
Kuwaa dhaqanka iyo Diintaba dhalliilayoow
Kuwaa dhagar fool xun dhabarkooda saarayoow
Dheeftii hooyadood jacaylkeedi dhiirranaa
Dhibtii loo galay kuwaa dhab u khasaariyoow,
Dhuxulo Naareed intaynaan ku wada dhammaan
Intaan dhaladkii Marwada liiska laga dhammayn
Dhambaalkii Eebbe yaa dhab ugu noqdaay
Ayaa Dhabbihii xaqa ahaa ku wada dhaqmaay!

Hablihii Dhool iyo lahaa Dhuuxa iyo Kordahab
Dhawaaq iyo socodba hablihii u dhawrsanaa
Ninkii dheehdaa qalbigu u dhashanaani jirey
Ledayey ninkii dhaliyo kii la dhaqayey reer
Markii dhaqankii qurxoonaa la sii dhildhilay
Dhiggoodu halkii uu maray sahanku uu dhib galay
Dhan tacliineed markii dhiilo loogu shubay
Maxaa dhadhankii macaanaa dhunkaal u rogey!
Dhalliishu dhankay ka timid ee dheelku naga hayaa
Dheddigga maahee raggaa noo horkacay dhabbada
Mas'uuliyaddii dhigoon shayna dhawranayn
Dhisaynin walaashi iyo tii uu dhaqan lahaa!

Waxaan murtidaydi dheerayd ku dhaabayaa
Tiiyoo dheddig iyo labood hawsha loo dhan yahay
Dhibaatada maanta dhab ha looga wada fekero.

Saciida Cilmi Rooble waxa ay ka mid tahay hal-abuurka Jabuuti. Xilligii raad goobka loogu jirey gobannimada Jabuuti, ayay Saciida Cilmi qarxinaysaa hibadeeda hal-abuurnimo, kagana qayb qaadanaysaa halgankii xoraynta Jabuuti. 10/3/1976 waxaa la diley nin dhallinyaro ahaa oo la odhan jirey Gaashaamaale, kana mid ahaa dadkii u dhaqdhaqaaqayey gobannimada heliddeeda. Dhallinyarada Jabuuti ayuu haddaba dilkaasi si ba'an u saameeyey oo kiciyey. Si ka duwan sidii hore ayay isu abaabuleen, shirarna u qabsadeen oo halgan in ay gumaysiga la galaan isugu hormeeyeen. Arrintaasi ayay Saciida Cilmi Rooble ka tirinaysaa buraanburkan qiimaha leh ee soo socda. Buraanburku

waa hoga-tus guubaabo iyo dhiirri gelin ah oo ku aaddan dhallinyarada Jabuuti. Waxaa jira buraanburka dhexdiisa ereyo qalaad sida Baartiiga oo looga jeedo Xisbiga, Balaas oo macnaheeda yahay meel, Baawar oo ah xoog ama awood, Baabiyee oo looga jeedo sharci ama waraaqaha aqoonsiga, Baariis iyo Berliin waa laba magaalo oo ku kala yaal waddamada Faransiiska iyo Jarmalka sida ay u kala horreeyaan. Saciida hadda waxa ay nooshahay waddanka Ingiriiska, waxanay buraanburkeedan tirisay 15/3/1976 oo ku beegnayd maalmo ka dib dilkaas Gaashaamaale, waxanay tidhi:

Barbaartaay waa laydiin baaqay waayo badan
Baartiiguna baahi weyn buu idiin qabaa
Barbarkiinna hawlihiinni way bannaan yihiin
U soo beretama haddaad u soo baraarugteen
Bagiyo baga'e haddeer baylahda iska jira
Biirsha xooggiinna oo baallaha is qabsada
Barjaha soo dhaafa iyo bidix u jiifsigii
Balaas yuu idinka helin bahalka reer galbeed
Billaawaha qaata oo baydda cadowga jara
Badheedh ugu taga haddii laga yar baydhi jirey
Baquu waa ceebe nafta beegso dhaha dagaal
Biilideennii maqnayd waa in lagala baxo
Beri siday noo galeen maanta ha u burburo
Raguu u baroorto waa inaad ku baashatiin
Ayuuna badbaado heline waa inuu babbado
Barkimo uu jiifsadiyo raaxadaw uga ba'a
Belel ka leefsiiya xeebtanuu beyaan u degey
Baqool ha ku guuro isaga oon bini la tegin
Baariis ha u qaxiyo beledkii uu ka yimid
Basaas iyo beenlow labaduba ha baydadaan
Kuwii boholaha ku jirey beerka ha u dhacaan.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Barbaarteennii xabsiga lagu bireeyey shalay.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Beydkii Diinteenna iyo baawarkeenna lumay.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Bohosha lagu awdey Boqorkeen wuxuu ina faray.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Barasho fool xumadan ubixii ku baaba'een.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Adoo beydkaaga seexdoon belo ogeyn
Habeenkoo badh ah intoo baadh laguugu kaco
Baabiyee iyo waraaqihii budhcad weerarkii.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Badh baan gurayaaye bari bay ka soo galeen.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Baroortii haweenka iyo ubadkii kala baxday.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Deyrkan Berliin ee miinadu ku baahsan tahay.

Walaal ku ballama sidii looga bixi lahaa
Baahida shisheeyaha iyo gacan ballaadhsigii
Oo bulshadan u horseeda meelay barwaaqo taal!

Cibaado Maxamed Cadduur waxa ay ka mid ahayd haweenka hal-abuurka ah ee soomaalida. Beryihii uu dhammaaday dagaalkii 1aad ee dunidu wax yar ka dib ayay Cibaado ku dhalatay magaalada Hargeysa, halkaas oo ay ku hanaqaadday, kuna idlaysatay maalmo nololeedkeedii. Cibaado Aabbaheed Maxamed Cadduur hablo miidhan ayay carruurtiisu ahaayeen oo wax inammo ah isaga oo aan dhalin, ayuu Allaystey. Cibaado waa la guursadey oo way reeraysatay. Hablo badan ayay dhashay, rag la'aanta xagga aabbe kaga timi, waxaa ugu soo kordhay tan xaggeeda ka socota. Iyada oo arrimahaas aanay iyadu shaqada ku lahayd ka uur xun, ayaa nasiib wanaag beri dambe wiil u dhashay. Xoog ayay ugu riyaaqday dhalashadiisa. Farxadda wiilkaas dhalashadiisa ayay ka tirisay buraanburkan xagga hoose ku xardhan. Si kalgacaltooyo ah ayay inankaas yar ula talinaysaa, una durduursiinaysaa waanooyin iyo wacaalo ku saabsan danaha mustaqbalkiisa iyo waayihii ka horreeyey dhalashadiisa wixii ay hooyadii ku sugnayd. Waxa ay tidhi:

Dagaalladii baabbi'iyo reerihii dam yidhi
Ilmo waxaan duugi jirey kaan ku daayayow
Dunida oo ii sinnayd danabkii ii dhashoow
Diiriyoow kii hablaa soo dugsiiyayoow
Hooyo Deyrow ma jiro waxaan dad kuula simo
Ilaahay daayoow waxaan hooyo kaaga digay
Fariidka dan seega doqon xoolo laa ka roon
Dadkuna ma jeclaado ninaan duunyo badan lahayn
Dedaal hooyo oo weligaa ha duud galayn
Dumarna waa bahalo ee kay duufsadaan ha noqon
Ayaad ku dulloobin aqalkay dadkow dhistaan.

Saado Cabdi Amarre waa haweeney hal-abuur ah. Sannadkii 1994-kii markii dagaalada sokeeye ka qarxeen magaalada Hargeysa ayay tirinaysaa suugaan badan oo ka horjeedda dagaalkaas sokeeye oo nabad doon ah. Buraanburkan soo socda waxa ay kaga hawaale warramaysaa xanuunka iyo macnadarrada dagaalladii sokeeye ee waddanka xilligaas ka dhacayey, gaar ahaan kii magaalada Hargeysa. Saado Cabdi Amarre waxa ay la yaabban

tahay sababta labada daamood ee Hargeysi isu duqaynayaan ee dirirtii ka dhex oogantey salka ku hayso! Waxa ay Saado ku hal qabsanaysaa saaxiibaddeed Deeqa, waxanay tidhi:

Haddaba Deeqaay dagaalkani muxuu ahaa!?
Degelba degelkuu ku xigey daabcad kula kacyeey,
Shisheeye hadduu is dilo waabuu kala durkaa,
Maradaa labadeeda dacal buu dab ii qabsaday,
Haddaba Deeqaay dagaalkani muxuu ahaa?
Oo maxay daantani daantaa ku diiddan tahay?

Intaan dacar leefay waabay durduurtayeey,
Dabbaasha anoon aqoon daad i qaadayeey,
Agoonkii daallanaa dub u caymadyeey,
Hooyadii weerku daashaday dibbootayeey,
Dadkii iyo Hargeysaba is diidnayeey,
Berberadaan soo day idhi dib uga roorayeey,
Haddaba Deeqaay dagaalkani muxuu ahaa?
Oo maxay daantani daantaa ku diiddan tahay?

Faadumo Aadan Jaamac waa haweenay hal-abuurka casriga ah ka mid ah. Buraanburkan soo socda waxa ay iyana kaga hadlaysaa xaaladda maanta ee colaadaha iyo eedaha sokeeyuhu waddanka ku bateen, dadkana wada naafeeyeen, waxaanay ku baaqaysaa, Ilaahna ka baryaysaa nabad iyo nolol, waxa ay tidhi:

Alifka ka bilaabay iyo aayadaa qur'aan

Allaa awoodda badanoow aduu amar kaa fulaa,
Islaamnimada iyo Allow diinta nagu addeec
Allow iimaanka iyo tiirka noo adkee,

Allahayow aradkayaga aaminaad ka yeel
Allahayow yaan Iblays olole nagaga shidin.

Hobaalo hoobaleey haddaba

Ba'daan mariyayoo bisinkiina waan qabsaday,
Beledka Somaliland waa u bushaaro wacan,
Allaannu barinayoo bisinkaannu haysannaa,
Bulshada joogtaana nabad bay ku baaqaysaa,

Hobaalo hoobaleey haddaba

Sa' baan mariyayoo Saatirkaan qabsaday,
Waxaan ku sifaynay suuradaha qur'aan!

Sannadkii 1973 waxaa hal-abuurka soomaalida ka dhex oogmey silsilad-maanseeddii la odhan jirey Siinleyda. Waxaa Siinley ka qayb qaatay rag gaadhaya dhawr iyo toban nin oo ku kala sugnaa soomaaliya, gaar ahaan intooda badani Lafoole iyo caasimadda Jabuuti. Ragga Siinleyda ka qayb qaatay waxaa ka mid ah: Cabdi Adan Xaad (Qays), Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), Siciid Saalax Axmed, X. Aadan Axmed (Afqallooc), Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), Ibraahim Aw Saleebaan Maxamuud (Gadhle), Maxamed Cabdillaahi Riiraash, Cali Saleebaan Bidde, Xasan Cilmi iyo rag kale. Siinleyda waxaa lagu bilaabay Saxarla' oo Hadraawi lahaa, kana mid ahayd Riwaayaddii Aqoon iyo Afgarad.

Waan soo socdaa kow dheh
Waxna waan sidaa laba dheh
Saxarlaay ha fududaan
Samir yeelo weligaa.

Cabdi Aadan Xaad (Cabdi-Qays) oo joogey Jabuuti oo xilligaas ku hoos jirtey taliskii gumaysiga Faransiiska, ayaa Saxarla' kaga soo jawaabaya heesta Suubban.

Waxay Saxarli kugu tidhi
Ninka soo socdow joog
Waxaad soo siddana celi
Anigu waan sal fududee.

Halkaas ayay silsiladdu ka sii furfurantay oo maansooyin badan la isku wada dhaafsaday. Siyaasad, waddaniyad iyo dhoolla tusyo af soomaaliga la xidhiidhaba ayay silsiladdu si sarbeeb ah ugu saabsanayd. Waxaa haddaba Siinleyda ka qayb qaatay oo ragga tarraxasey gabadh soomaaliyeed oo ka tirsanayd hal-abuurka Jabuuti. Caasha Jaamac Diiriye ayaa maansada ku lahayd laba gabay oo sarbeeb ah oo halis ah. Caasha Jaamac waxa ay ku dhalatay degmada Ceel Afweyn ee Gobolka Sanaag sannadkii 1940-kii. Ilaa sagaal jirkeedii waxa ay ku noolayd miyiga Ceel Afweyn, ka dibna waxa ay u wareegtey dhinaca magaalada. Ceerigaabo, Berbera iyo Hargeysa ayay Caashi ku hanaqaadday. Waxa ay Caasha Jaamac ka mid ahayd Kooxdii Walaalaha Hargeysa, halkaas oo ay isku barteen Faadumo Cabdillaahi Kaahin (Maandeeq), Cabdillaahi Qarshe iyo Xuseen Aw Faarax. Ugu horrayn waxaa ay guursatay Caashi nin la yidhaahdo Maxamuud Aadan Dheri oo ay gabadh u yeelatay, ka dibna ay kala tageen. Jabuuti ayay Caasha Jaamac Diiriye u soo wareegtey dhammaadkii 1950-naadkii, waxaana sannadkii 1959-kii ay Jabuuti ku guursatey ninka siyaasiga ah ee Cali Caarif Burhaan. Sida laga weriyey walaasheed Aamina Jaamac Diiriye oo Jabuuti joogta, waxa ay Caashi tirisay maansooyin badan oo kala duwan, waxaase ugu caansan labadeeda gabay ee Siinleyda. Caasha Jaamac Diiriye sannadkii 2004 ayay Jabuuti ku geeriyootey Alle ha naxariistee, waxaanay labadeeda gabay ee Siinleyda kula hadlaysey oo Jabuuti uga diraysey qolyihii Soomaaliya iyo Lafoole ku sugnaa. Waxa aynu eegaynaa Siinleyda Caasha Jaamac oo u taagan kartida iyo awoodda hal-abuurka haweenku leeyahay, waxaynuna ku bilaabaynaa teedii koowaad, ka dibna teeda labaad. Waxa ay tidhi:

Sa'da gabay Samaalow inaadeer maqal su'aashayda

Sannadaba waraan qarinayaan kuu sarsarayaaye
Sida sagalka ruuxaad u tahay oo kugu sureeraaya
Seedaha midaad kaga jirtuu siray jacaylkaagu
Sambabadiyo feedhaa midaad saakin ku ahaatay
Oo weliba sirtay qarin lahayd sababta sheegaysa
Oo adiga kuu soomman oo samirtay oo joogta

Subxaankaannu kugu dhaarinniyo Saatirka Ilaahe
Adaan sirin sokeeyow runtii sud iyo caad toonna
Sabaale iyo adigaan ka deyin been ku samirsiisa
Sidaad odhan lahayd ii caddee run adiga oon seegin.

Anoo hadalka saameelayoo saad u tidhi dhaadey
Ma sokeeyo dumarkuye anoo kula sifaynaaya
Waxaan ahay Samow taad rabtiyo Saxarla'daadiiye
Soo soco sinaba haw maqnaan waan ku sugayaaye
Soo soco jacayl way sitaa imana sii dayne
Nin i siray nin ii seeto dhigay nin i sabaaleeyey
Soo soco aan kuu kala sugee, sida i soo gaadhey.

Seygeygi dhoofow intaa waan ku sugayaaye
Subaxdaad dhaqaaqdaa rugtii layska saanyadaye
Sidkihii waxaa lagu lisaa dhulaan u soorrayne
Wax sidkaday nimaan kugu simayn igana soorayne
Sebigii yaraa wuu ka qaday saaka say tahaye
Soo soco sinaba haw maqnaan waan ku sugayaaye.

Sahankii la ii diray markuu sooba noqon waayey
Uu sooba degi waayey ee bad u sullaacaayo
Aan saadiyey ee dhawrayee waayo badan soomay
Maruun bay siyaabaha dhacaa ii samaan noqone
Saacadaha Eebbaa hayoo waan ka sugayaaye
Aniguna Ilaah aan ka sugo suu ka dhigi doono.

Haddiise si xun sheeg sixir ka darane hadallo soo saydhay
Saxarlaa warkaas tidhi hadday subax ku soo gaadhey
Sinaba haw maqline waxaad ogaan sacabbo saarkeenna
Iyo wacadkaynu seeranniyo saynu leennahaye.

Sheekadu maaha jacayl ee waa sarbeeb qaddiyad waddani ah salka ku haysa, waxaanay Caasha Jaamac Diiriye weerar ku qaadday Jawaabtii Cabdi Qays ee ahayd: Waxay Saxarli kugu tidhi, ninka soo socdow joog, waxaad soo siddana celi, waxaanay u gacan haadisey Hadraawi iyo heestiisii Saxarla'. Caasha Siinleydeedu waa gabay labada jeerba, halka qolyaha kale adeegsanayeen maansada nooceeda Jiiftada loo yaqaan, marka laga reebo Alle ha u naxariistee X. Adan Axmed Af qallooc oo ku lahaa Masafo aad u qurux badan oo macaan.

Maansadeeda labaad ee Siinleyda waxa ay Caashi toos ugu diraysaa qolyihii reer Lafoole, gaar ahaan Hadraawi, waxanay raacisay subeeciyad, calankii shan geesta lahaa ee cirka u ekaa ee soomaalida iyo seef. Waxay Caasha Jaamac Diiriye hadiyaddaas u hibaysey Hadraawi oo loogu geeyey Lafoole, hase yeeshee waa laga qaaday markiiba oo waxaa la geeyey madaxtooyadii Maxamed Siyaad Barre, Hadraawina waxaa loo taxaabay Xabsiga. Cabdi Qaysna waxaa ka xidhmay albaabkii Siinleyda markii ay silsiladda soo gashay Caasha oo Saxarla' metelaysa, Cabdi Qaysna ay Jabuuti wada joogaan. Waxa ay Caashi gabaygeedan dambe ku binaynaysaa baddii heesta carruurta ee Calow wa Calow Calow wa. Siciid Salaaxa gabaygan ku jiraa waa Siciid Saalax Axmed oo ka mid ahaa rukunnadii waaweynaa ee Siinleyda ka qayb qaatay. Waxa ay Caasha mar labaadkii tidhi:

Salaamaadka Yaasiinka iyo suuradaha weyn wa
Safka deggan Lafooloo dhanow idin salaannee wa
Waa lagu samraa meel haddii sagabtu ku taal wa
Saamiga midkii igu helaa sabo la taallaan wa
Aniguna sidaad u dhan tihiin idin siyaartee wa.

Sokeeyow Samaalow Wacnow igu samaysnow wa
Sagaaloodka ii dhaha rabbiyo seben barwaaqow wa
Same Maxamadow Abu Hadrow Samatarow heedhe
Sookara u sheeg gacaliyow Saxarla' xaalkeeda
Sarreeyaha u weri luuqdu way sino shishaysaaye.

Afartaa sa'da intaan ka dayey sadar kalaan baanay
Soomaali anigoo ah oon sogordoh yeelaynin
Oo Saxarla' magacaygu yahay sadar kalaan baanay,
Seeftana guddoon waxaan rabaa inaan samaannaaye
Subeeciyaddan laalaaban qabo way la socotaaye
Siciid Saalax waw marag ninkii tiriyey Sooraha'e
Soodhkana u xidho wiilashii ina sadhaynaayey
Hana ka seexan hawlaha nin ragi waa sal diriraaye,

Afartaa sa'da intaan ka dayey sadar kalaan baanay
Allow siman sabool caydha iyo sabo nin yaallaaye
Allow siman nin seetaysan iyo socoto dheeruhuye
Allow siman sedkii nimuu lumiyo sidig nin maalaaye
Allow siman jacayl nimuu sitiyo nimuu sugaayaaye.

Afartaa sa'da intaan ka dayey sadar kalaan baanay
Saddex ina-rag waw siman yahee sadar kalaan baanay
Midi waa saddexanyaa ku yaal sine hub qaadkooda
Magta ina-rag waw siman yahee sadar kalaan baanay
Haddiise saawasaawiyo la galo suluf colaadeedka
Ay soo rogaay iyo ceshaay siigo kor u duusho
Lama simo sarbeeb u halgamaa iyo dib u saqleeyaha'e

Raggii Saxarla' faalleeyey ee siinka ka hadlaayey
Aniguna iskuma soorayoo kala sed weeyaane
Sarise maayo boogta'e waxaan hadal ku saameelay
Waa wada sokeeyiyo rag aan sumad wadaagnaaye
Intiinnana sedkiin wuxu noqdaan idinku sooryeeyey
Saddex hadal-xidhaaloo jirana siinka ka higgaadsha
Siday tahay u soo qora ma rabo inaydun seegtaane,

Saxan hooyadaa nimay dhashayo saaka kula jooga
Aad sal iyo maadhe u taqaan soorna kula quutay
Sina aan walaal kuugu noqon siinka ka higgaadsha
Midi waa sagaal iyo tobnaad sagal gu' oo baaqday
Midina waa sandalad geelu yahay sidig dhashoo raacda.

Sarise maayo boogta'e waxaan hadal ku saameelay
Raggii Saxarla' waan kulannay yidhi subaxna waan gaadhney
Sina uma arkine wiilashani wayska seleleene
Sawir beena iyo bay arkeen sogoble shaydaane.

Sarise mayo boogta'e waxaan hadal ku samaalay
Ninkii Saxarla' waa been yidhow soo bax waa duhure
Sacab beena kii ii tumow sebi ahaantaada
Seygeyga kii igu dirow saaka waa nabad.

Lix sannadood ka dib curashadii Silsiladda Siinley waxaa oodaha jabsatay silsilad kale oo la magac baxday Deelley. Silsiladdan kale ee maansada Deelley way ka ballaadhnayd ta hore ee Siinleyda marka la eego tirada hal-abuurka ka qayb qaatay oo cagacagaynayey 50 maansoole oo kala duwan. Bilowgii hore waxa ay Deelleydu ka hadlaysey ku dhaqanka qabyaaladda iyo ayaatiin la'aanteeda, markii dambese waa la siyaasadeeyey oo hal-abuurkii ka qayb qaadanayey waxa ay u kala jabeen laba qolo oo midi difaacayso maamulkii Maxamed Siyaad Barre, ta kalena ay qoladaas hore iyo aragtideeda ka hor jeeddey oo ku duraysey waddada ay raaceen. Qolada xagga dawladda isu barbarisay waxaa hormuud u ahaa Maxamed Nuur Shareeco, Cali Cilmi Afyare, Cabdilqaadir Xirsi Yamyam iyo rag kale. Qolada labaad ee duraysey la safashada dawladda ee qoladaasi hore, waxaa horseed u ahaa Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), Cabdi Iidaan Faarax iyo rag kale. Sannadkii 1979-kii ayaa Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) oogtaas maanseed ku ibo-furaya maansadiisa '*Dugsi ma leh Qabyaaladi'*. Halkaas ayayna Deelleydu ka sii socotey ilaa dawladdii jirtey ka joojinaysey 1980-kii. Haddaba sida Siinleyda oo kale waxaa raggaas badan silsiladda Deelley ku wehelinaysey faannanadda caanka ah ee hal-abuurka ah Saado Cali Warsame oo silsiladda ku lahayd laba maanso oo dab iyo naar ka kulul. Saado waxa ay si badheedhaheedu cad yahay maansadeeda ugu hujuumaysaa qolyihii dhinaca dawladda isu janjeedhiyey, kuna duraysaa in ay u xaglinaynayaan xusul-duub qabyaaladeed, dawladdana ka xigsanayaan dadka intiisa kale.

Saado Cali Warsame waxa ay ku dhalatay degmada Buuhoodle dhammaadkii 1950-naadkii. Waxa ay ku barbaartay degaankaas, iyada oo dhallinyarna waxa ay caan ka noqotay oo luuqda codkeeda wanaagsan iyo hibada hal-abuurkeeduba ka soo baxeen golayaasha ciyaarta hiddaha iyo dhaqanka soomaalida. Horraantii 1970-naadkii ayay Saado ku biirtay kooxdii Hobollada Waaberi. Fanka Saado Cali waxa uu markiiba u hanaqaaday si la-yaab leh oo deg deg ah. Hablaha foolaadka ah ee codkooda loogu jecel yahay ayay Saado markiiba ka mid noqotay. Riwaayado badan ayay wax ka meteshey, iyada oo riwaayadaha qaarna ka ahayd xiddigta (qalanjada) ama inanta 1-aad ee riwaayadda, waxaanay codkeeda soo jiidashada leh ku qaadday heeso badan oo ay iyadu qaar hal-abuurkooda leedahay. Saado Cali Warsame hadda waxa ay ku nooshahay waddanka Maraykanka. Halkan waxa aynu ku soo qaadi doonnaa maansooyinkeedii Deelleyda oo sida ay iyaduba sheegtay u taagan kaalintii haweenka ee silsiladdaas. Sida maansadeeda koowaad ka muuqata Saado hore uma gabyi jirin, waxaana raggii ay is hayeen dareen ka bixiyeen tuhun ku saabsan in Saado loo soo dhiibey maansada oo ay soo toobal caaraysatay, iyaga oo taas u cuskanaya keliya in aanay Saado hore u gabyin, hayeeshee waxaa tuhunkaas burinaya xaqiiqooyin hoosta ka xarriiqaya in ay Saado maansooyinkeeda hal-abuuratay oo aanay cidina u soo dhiibin, taasina (eedayntaasina) tahay meel-ka-dhac iyo u-quudhiwaa’ ka soo jeedi kara mawqifkii yoolkeedu ku abbaarnaa oo ahaa mid aan gorgortan gelin. Si kastaba ha ahaatee bal aynu isla eegno sarbeebta, quruxda iyo farshaxannimada maansooyinkeeda, aynuna ku bilowno maansada hore ee Deelleyda Saado Cali Warsame oo markaas Hargeysa uga tebinaysey qolyihii Muqdisho joogey, waxanay tidhi:

Weli gabay iskuma deyin
Dulucana umaan xidhan
Dannigana kumaan hayn
Waxse maanta igu diray
Duqowdaa habawdee
Docda ay qibladu tahay
Duudkii u jeedshee
Masallaha durba u dhigay
Meelaan diintu yeelayn
Iyo koonfur dabadeed.

Aan ka digo rogtee qabo
Daw daran afkaagaad
Ka dabbaalataayoo
Didibsiyo xishood baad
Damiirkaaga siisaa
Diq hadduu ku geliyee
Illayn dabar laguma xidho
Dibnihii aan kugu ool
Digta nabarka ii daran
I dishaye ha ii celin
Inta uu damqado hadal
Illayn kulama doodoo
I daa’ kuma yidhaahdee
Ninkiisaa ka jira deri
Iyo daan ka gogashada.

Waxaan uga dan leeyahay
Doorroonayaashii
Diirdiirranaantiyo
Diricnimada muujoow
Darka hadalka geel baa
La durduuranaayee
Yay dar jiidhin gorayadu
Dacwad noogu sheegtee
Docaan loo fadhiyin iyo
Dullinnimo ka dhaaf iyo
Dalabtaan joogga ka arkiyo
Is daryeyntu waa maxay?

Aan ka digo rogtee qabo
Dago xaawaleeyeey
Kaalayoo bal daawada
Nafta aad u dudaysaan

Raggan deelka tiriyee
Intay daar huluusheen
Miirooga diirteen
Maskaxdoodi daasheen
Duxiyo miidda soo qubay
Aqoontii dul iyo hoos
Cilmigii ku duugnaa
Intay dibadda keeneen
Isku duubni garashada
Wada maray dariiqee
Diiwaan ma baadhine
Dirri intay ka eegteen
Midba dacal u jeestee
Garan waayey dawgii
Aan ka qaado diirkee
Daafacaaya qolo qolo.

Aan ka diga rogtee qabo
Daa'imo carruuraba
Ka dib daaddah socod baro
Waxaa loo daliishaa
Maahmaaho dooroo
Uu dalkoodu leeyahay
Da' markii la gaadhana
Kaan daaqsin dheer garan
Dugsigeeda Soomaal
Dun xariira weeyoo
Iyagoon ku diganayn
Dushiisay u mariyaan
Ee bal aan ku soo dego
Derintay ku jiifaan
Afartii dambeeyoow
Idinkaygu soo daray
Deelleydan maantee
Dixda weyne Herereed
Ay Dumbuluq is eegaan
Buundada dusheeda ah
Intuu toosay duhurkii
Dadkoo maalin soo baxay
Bahalkii durduriyee
Iska tuuray dalawgii
Yaad la derejo joogtaan.

Adhiyahow duryamayaa
Doodaha abwaannadu
Docda ay u jeedaan
Durba saad u fahantaan
Anoo qaybta dumarka ah
Aan idiin dayaanshee
Dugsi baannu idin geyn
Dersi baannu idin siin
Danta ay ka leeyiin
Dariiqaannu idin bari
Duur jibaaxiddiinniyo
Dalambaabi socodkiyo
Daalaa-dhacaa weyn
Bal inaad ka durugtaan
Casharkaa dabiibka ah
Miiraalahaa da'ay
Dawo inaad ka dhigataan
Iyo inay dinnaahadu
Tahay daacaddiinnood
Joogtaan daleel madhan
Dib ha laga ogaadee
Shirka dumarka kaalaya!

Durba waa kuwaa yimid
Waysa soo diyaarsheen
Iyagoo direys xidhan
Kuwii daw habaabow
Aan idiin dedaalee
Docdan bal isa soo tuba
Derbiga boodhka ii sudha
Ii doon tamaashiir
Ka Digtoorka sheegtoow
Da'diyo caynka kala saar
Duu daa dii doo dee
Lagaa dooni maayee
Da'da cayn miyaad tidhi?
Caynkuna ma daad baa?
Daalaco hortaadoo
Waxaad tahay dammiin moog
Runtii daafta uu yaal.

Waxse kaa ka sii daran
Kuwa kaa dambeeyee
Dirindiirta booddiyo
Qudhun kuu dareershee
Ku durduurshey beentee
Is dacaayadeeyoow
Mindidii ku dili layd
Kuu dhiibey daabkee

Gaashaan-digriiliyo
Ma-abwaan-digtooroow
Kii tiriyey Deel-dila
Kaa da' weyn aqoontuye
Dib u joogso oo noqo.

Duqii idinka weynaa
Doonnida ninkii wadey
Kii darawal ka ahaa
Mee daajihiinnii
Dood yar aan su'aalee?
Dabka anigu aan sido
Deriskayga kuma gubo
Doofaarka ficillaa
Naarta loogu gubayaa
Dushaan anigu kugu sidey
Iyo hadalki daahnaa
Kugu dhaarshey Diintee
Maadaa dareen qoray
Labadii is diidee?
Dibnahaaga eersoo
Durka delebka daabaca
Duubkii aad xidhatiyo
Darajadi ku saarnayd
Kaa qaad dadweynuhu
Ee daba gal oo raac
Kii aan horaw diray

Waxaa igaga sii daran
Dalka cadowga weerara
Kaan lahaa ha daafaco
Ugu diray dhufaysyada
Isku duubni wadajir ah
Een dardaaran ugu idhi
Danta guud hubkaw qaad
Ka dar dibi dhal weeye
Dugsi iyo gabbood iyo
Wax daryeel ha joogtee

Sawkan dayrta-dhaladkii
Dib-ka-naaxyada ahaa
Ku dacaarsanaayee
Soo daf yidhi Kornaylkii
Dunuub iyo ninkeedee
Daayee aan ka digo rogo
Berigii dagaalkii
Gabaygaygu daaraha
Waatuu daleeyee
Uunkuna daruurtiyo
Dayax uu ku saaree
Ahe maxaa dib kuu dhigay?
Dorraad kii halkuu maray
Sawdigan ka daba galay
Godka ama deg ama durug
Dushiisaad ku ciirtaye.

Malaa wayla durugtaye
Waxaan doodda uga baxay
Kay didisayoow maqal
Demmanoow hurdada jiif
Geesiyoow dantaa bogo
Doqonoow ha sheekayn
Diidayowna yeelkaa
Deyran beladu oo dilan
Dulin bayna soo galay
Duqdii adhaxda weyneyd
Dalka intaanay saamayn
Aan ku duullo ee kaca
Ninka ay damqaysee
Meeli ay dalooshow
Waannu kaa digtoonnahay
Siduu Daayinkeen yidhi
Kugu soo degee qabo
Alamtara'di deyrkiyo
Aayaadka diintiyo
Shimbiraa ku dilayee
Ha derderine naga joog!

Afarta maansoole ee ay Saado tilmaamayso, maansadeedana ay ku weerartay waxa ay kala ahaayeen Maxamed Nuur Shareeco, Cali Cilmi Afyare, Cabdulqaadir Xirsi Yamyam iyo Siyaad Daa'uud oo ahaa sarkaal ka tirsan ciidamada. Maansoolayaasha ay la safnaydna waxaa horyaal u ahaa Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) iyo Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Markii ay Saado Cali soo riddaysey warankeedii hore ee Deelley, waxaa dib ugu soo noqday riddooyin darandoorri ah oo ay soo celiyeen

maansoolayaashii ay gulufka kula jirtey, gaar ahaan Cali Cilmi Afyare iyo Maxamed Nuur Shareeco oo ku dooday sidii aynu soo xusnay in Saado maansada loo soo dhiibey. Saado Cali Warsame mar labaad ayay Togga Herer 'Hargeysa' ka soo ganaysaa waran labaad oo ay ku halgaadayso tumaati ahaan nimankaas odayaasha ah ee dabka ku kulaalayey xaruntii madaxtooyada ee magaala madaxda Muqdisho, gaar ahaan waxa ay daabaqadinaysaa oo daaqadda kala baxaysaa Cali Cilmi Afyare iyo Maxamed Nuur Shareeco. Saado Cali waa lagu xidhay mawqifkeeda, iyada oo xaamilo ah, xabsiga ayaanay ku ummushay. Maansadu iyada ayaa is macnaynaysa oo far waaweyn ku qayaxaysa nuxurkeeda, waxaanay tidhi:

Dawo caafimaad iyo
Danyartaa saboolkee
Da'du ay u curataay
Dib-ka-fuurka naaxee
Ka dibbiray xaqaygii
Kuwa daafacaayoow
Iyo kuwa dib iyo hore
Docna aan ahaynee
Is dulundulceeyiyo
Duqeydii gobeedoow
Damalkaan hadhsanaynee
Daalku nagaga ba'ayoow
Doorroonayaashii
Dabiibaayey cudurkoow
Kuwuu Daayinkoodii
Dello gaar ah siiyoow
Diricyada afmaalkoow
Indheergaradka doodoow
Salaan diirran oo wacan
Hargeysa aan ka soo diray
Yaan idiinku deeqee
Dul ahaan guddoomoo
Murti duuban weeyee
Durbadii labaad iyo
Iga hooya dulucdii.

Dabuubtaydi koowaad
Gabaygaygi aan diray
Darkii aan dhalliilaan
Yarehe is dul taagoo
Diillimahaan aqaannaa
Barta socodka Daa'uus
Hadal ugu dayaanshee
Tu kalena ka daba timi
Waa dogob qalloocoo
Didib weeye qaraxoo
Lugahaa deldelanoo
Maskaxdaa dayaantoo
Waxa aynu diidnaa
Waw malabki Doocaan
Door waxaynu moodnana
Dulmi bay u haystaan
Wax ma daaddegaayaan!

Afartaba dab laga saar
Labadii dammiineen
U danee lahaa baa
Doc kale iska taago
Waanadaydu deeqine
Immikaanse ugu dari
Runta diirka ka caddayn!
Dibnihiisu kay shalay
Foolxumada doorteen
Daafkuu firdhinayiyo
Duufaanki uu wadey
Intaan laba-diblaw xidhay
Aan ka dhigay direyskii
Duhur seexdihii kacay
Dar Allee wuxuu yidhi
Darmaan Saado Ina-Cali
Yaa rag soo duggaashadey
Kuse diiri maayee
Gaarriyaa dorraad yidhi
'Dood wali tixraaceed
Daad waliba taagtii
Sabo waliba daaqeed
Duddo wali yagleesheed
Damiir wali canaantii

Dawan waliba yeedhii
Dacar wali hulaaqeed'.

Anna waxan ku sii dari
Ninba aragtidii direy
Ruuxba dabaqaddii aad
Qofba garashadii daaq
Mid kastaa dareenkii
Darka soo dhigyoo keen
Maansadaydi duub rida
Markaan saani ugu diray
Een ku duray halkaan rabey
Digtu nabarka xooggii
Dubbaa qayladiisii
Miisaanka dakharkii
Daryaankii ka soo baxay
Caligii is duubee
Intuu saa u sii dayey
Magacayga daba yaal
Nabarradi dalooliyo
Danqashadi xanuunkii
Ay uga dareenoo
Saado waa la soo diray
Duqow baa warkaa yidhi
Dabkan kugu baxaayiyo
Daakhilkii aan kugu ridey
Inay kaa daweysaa
Waa habeen tegaye daa
Runtu yay ku didinnine
Ha ka didin ku soo durug
Gabaygayga daalaco
Ha dafirine waa gabadh
Fallaadhahan ku dilayaa!

Ku day deelka maansada
Dejiyoo ka laba qaad
Soo dar ceelka doogga leh
Durkiyoo ku sii laad
Durrujaaga hoosiyo
Doqonku yaanu kaa garan
Waa danab labaadkii
Da'da baaqsataay maqal
Cirro duugantaay hoo
Daaman ka hadlintaadii
Carrab daalis mooyee
Dux dhadhamiba kuma arag
Dhawr dub oo is daba yaal
Dabbaal joogto iyo siriq
Danab ceebsan maayoo
Dedaal caadadaada ah
Ood diirtay weeyaan.

Waxaan kuugu sii daray
Weligey la ima dirin
Daba-dhilif cid uma noqon
Adigoo wax dooniyo
Digtoor-faalso mooyee
Sida daabac waaweyn
Damiir suuqa lagu qado
Wax dunuubahaa qira
Dunidaba kumaan maqal!
Marti lagu dukaansado
Adigaa dugsi u galay
Ooy dabeecaddaa tahay
Damac ruux kaleetaa
Inta uu ku soo diro
Dookhaaga iibsado
Dillaal maanso dhaafsada!

Weli waxaad dul joogtaa
Dac gudhiyo qallalantii
Ee aan dawaad rib ah
Farta kuugu duugoo
Kuu saafo daribtee
Daalaco waxaan ahay
Dahrigaaga maarta ah
Dabayl caafimaadoo
Daxal tiraysa baan ahay
Daasaddaada boogta ah
Inaan kaa dalooshaa
Gabaygu iigu soo degey.

Dawo baajisaan ahay
Cudurrada aad daaddihin
Danyartaan shimbir u ahay
Waana layga daahiray
Kaamana debcinayoo
Dooggaad ka daaqdiyo
Dakhalkaad bacraysiyo
Waxaan duugi maashaad
Reerka degelladiisiyo
Duddada noogu seetayn

Ha ku dego ha kugu duxo
Dul iyo hoos ha kuu galo
Waa dabar jabkaagee
Duudduubo oo samir
Daa fintiligtu duushaye
Adaa dabinka qoolaye
Dul u yeelo maansada
Ka durduuro waa sede
Waa dubaaxe iga qabo
Weli kaama daba hadhin.

Damalka layska shiishoo
Cilmiluhu ku duuliyo
Shaxda inaga daayoo
Jagidu yaanay kaa dugin
Adigiyo damiirkaa
Horta wada dagaallama
Jilbahaaga soo duub
Didib aan qodnayn iyo
Ku dalooli naannida
Duurka cobolka laga cuno
Waa duluc ujeeddo leh!
Deji midigta oo daa
Waa maanso dahab xidhan
Murti weeye deeddana
Daajiyay u naaxdaa
Waa hadal dulqaad badan
Dumar baana soo qoray
Degganaan asluub sudhan
Bay kugula dooddee
Car adoo aan daba gurin
Dariiqeeda soo mari
Weli kaama daba hadhin!

Dad waxgarada baa yidhi
Waxa lagu ducaystaa
Daayinoow mayiyo haa
Aan wax nagu dirqiyey jirin
Dood ha nooga yeedhsiin!

Dubbe aad ku samirtoo
Hadal aad ku deysiyo
Dalab aan ka soo helay
Deelkaagi Cali hoo
Diiddey hee qabyaalade
Da'da kalena nagu yidhi

'Dooggiyo caleentiyo
Hay daaqdo geedaha
Duudaha magooliyo
Waxay duurka mirataba
Mar bay dabarka soo goyn
Soo raaci degelkiyo
Darwiishkiyo ninkii dhalay
Iyadoo dakaankiyo
Dafaciiba laga dhayey
Dawankiina laga lulay
Dooxadii Taleex iyo
Didibkiyo Nugaashiyo
Damalkiyo berdaha baxay
Iyo dadabti way tegi'.

Deelkaagu yaab lehe
Danta guud ka taliyiyo
Haddii daacad aad tahay
Dadkee iga xigsanaysaa?
Yaan daaqa la cunaa?
Xaggee iga daweraysaa?
Duurkeen ku noolahay?
Duulkee i haystoo
Dabarka aan ka goostaa?!
Bartaa waad ku dilan tahay
Malaa hoos umaad deyin
Gabaygii aad duubtee
Giraantii dib ugu noqo
Isa soo sax dabadeed!
Da'da kalena waa hee
Jawaab diirran iga hoo
Dar Allee adaa qaba
Dafac iyo dhukaanoo
Dunida yaad sadhaynine
Dibad ku xidh ku fiicnaa
Dawiyo dhaymo weyn raba!
Hadba dhan u dillaamoow
Kama tegin dalkaygii
Amxaar daafi uma karin
Ruushku iguma doontaan
Dan kalay ka leeyiin
Xayle Soodaf uma noqon
Sidaadana ma damacsani.

Daratoole iyo Hawd
Doolliyo Nugaal godan

Ilaa Diimis iyo xeeb
Saylac dacalladeedii
Deyrka degelka Soomaal
Afartiisa daamood
Dul ahaanna ii siman
Duud la kala qalona ma leh!

Mid sidaada daallin ah
Oo dan kale ku haystoo
Shuux ku daatay mooyee
Waa wada ul iyo diir
Darmaan godob la' baan ahay
Halkaan doono waan mari
Anoo darayamuus xidhan
Diibna madaxa ku af jaray
Yaan samaan dangiigaa
Oo doobi qurux badan
Daawad iyo Maandeeq
Laygu dawdabaayaa
Caanaha durduurtaa
Kobtan dakhar ma kaa helay?
Danab culus ma kugu dhacay?
Weli kaama daba hadhin.

Bir anoo aan kugu deyin
Yaan Caloow ku dooxoo
Bedenkaaga daawadey
Oo wixii ku duugnaa
Dibadda ula soo baxay
Dersey cilmiyadaadii
Danyartaad hodaysiyo
Dadka adiga kuu qaba
Inaad samo u daaddihin
Waxaad deydeyeysiyo
Digta adiga kuu daran
Aan kaa daaddejee qabo!

Qaran inaadan doonayn
Isku duubni wadareed
Dan inaadan ka lahayn
Waxa taa daliil u ah
Ra'yigaagan daabacan
Odhaahdaadan deebta leh
Adigaa durduriyoo
Dalawga iska tuuree
Ceebtaa dayaantaye
Dalka madaxda haysiyo
Dawladdeenan maanta ah
Ragga diiraddaw sida
Badankoodu daadduun
Dugsiyaday ka fowseen
Waa kuwaad dacaayadin
Daaraha Cammuud iyo
Sheekh iyo Dayaxa weyn
Waxa doqonow soo maray
Aan dammiinna soo noqon
Musuqmaasuq lagu dirin
U aflaxay si daahir ah
Ragga calanka daafaca
Ciiddu ay ku dihin tahay
Intuu Daaha kugu yimi
Duhur lagugu eedaan
Daalo maxaad ku geleysaa
Wakhtigaa ku dilayee?!

Ha ku dego ha kugu duxo
Dul iyo hoos ha kuu galo
Waa dabar go'aagee
Duudduubo oo samir
Daa fitiligtu duushaye
Adaa dabinka qoolee
Dul u yeelo maansada
Weli kaama daba hadhin.

Kuu dawaarshey geeskee
Dejiyee aan ka dheelmado
Da'da kalena waa hee
Wakhtigaa ku diiddane
Markuu sharafki kaa degey
Ha dandaamo dhabannine
Doorkaasi kaa gudub
Inuu soo noqdana daa
Waxan kaaga digayaa
Dacwaddaadu yay noqon
Ka yar iga dabbaaloo
Soo daa ka iga weyn!

Waxan uga dan leeyahay
Raggan aad u doobidey
Dambas-xaab ma qaataan
Dalab wax uma tiriyaan
Daandaansi ma oggola

Way kuu kitaab deyi
Yaanay samada kugu duban
Yaan daanka lagu dhigin
Taasi waa mid kuu dan ah
mid kuu daranna iga hoo.

Duraan kaaga sheekayn
Dembigaad samaysee
Laba garab ku daaqoow
Dagaalkaad gashaa mee?
Taariikhda dib u raac
Dorraad calanka keenna ah
Dadku markay halgamayeen
Gobannimo-u-dirirkii
Waadigii dabraayee
Gumaystaha la duubnaa
Shalay dawladdii timi
Waadigii durbaan weyn
Iyo darammal qaadee
Dariiqyada magaalada
Ammaan daadinaayee
Uunka daaya ku lahaa
Waa daacaddiiyoo
Midi kama dambaysee
Maantana dan guud iyo
Samo dooni mayside
Waxad deydeyeysaa
Runta-diide Been-doon
Waxan jirin ku dararaha
Dhiig walaalki dawdabey
Isku dabaqad joogtaan!

Wuxu soo dillaacsaday
Danyar uu ka soo xaday
Aan laguse deyneyn
Deyn ku ah wakhtigu qoray
Aakhiriyo ifkaw daran
Inuu kuugu rido digo
Illayn kama diqootide
Dux waxaan ku gelinayn
Dufnis aan macne lahayn
Berri aan dib iyo hore
San-dareerto iyo duuf
Damacaagu waa shilin
Qalbigaa daciif ka ah
Raggannimo ku doodeyn
Niyaddaada dalaska ah
Danba aan wax ka lahayn
Indhahaaga diiqa ah
Daaha dhaafin araggood
Dhegahaaga daarta ah
Aan wax dibed-ka-maqal layn
Daloolkood hunguri yahay
Dareenkaaga lacagta ah
Aan wax kaleba deeqayn
Darammalkaaga buurta ah
Midabkaaga dahabka ah
Miinadu ku daban tahay
Aayadaa ka soo degey
Dawraad iyo Injiil iyo
Dul ahaan Sabuur iyo
Furqaan diiddey caynkaa!
Dariiqaa wixii mara
Ma ammaanin Daayine
Diintee ku dhaqantaa?!

Dhankaa daahyada u xidhay
Dejee aan ka dheelmado
Da'da kalena waa hee
Horaan ula dardaarmoo
Ku sii daahi maayee
Digtoorkii wakhtigu dabay
Bal aan daymo ku hakado
Tidhi kaalay ila doon
Danyartiyo saboolkiyo
Ninka xaday dadweynaha
Ku taabsiiyey daafaha
Ha ka doonin meel kale
Kow daallin waa adi
Aan ku laba-dibleynnee
Dalaq soo dheh adigaa
Dacwadda isku qaadee
In dooraad cunaysee
Waxad dagamsanaataba
Dildilhii ma kugu dhigay?
Diiraddaa ku haysoo
Deel la kor dhebey
Deel la hoos dhebey
Deel laa godey
Dushaaday ku yaalliin!

Dhankaa daahyada u xidhay

Da' kalena waa hee
Waxan dooddi uga baxay
Bulsha yahay digtoonow
Xagal-daac iska ogoow
Ka dannaahiyaayee
Diintiisu lacag tahay
Debecsane dheg haw dhigin
Maan-diciif ka kaashaday
Adaa dunida joogiyo
Ha durduuro maxastoo
Duudduubtay aramida
Sun duddubiyahaa jira
Dix ku dhuunte ii qora
Diiwaanku hay dhigo!

Qaladdadan is daba yaal
Dibka jeeni dhaafshaha
Dun ku soo xidhaha jabay
Dawlis xadhig ah qaataha
Dadka madaxda ka xigsada
Diiwaanku hay dhigo!

Dablahan siiyey Janan amar
Diiwaanku hay dhigo!

Daabacyadan iska hor yimi
Is derderey is wada dabay
Diiwaanku hay dhigo!

Daacad iyo dembiilaha
Deje iyo dagaallame
Dire iyo ku-daba-joog
Dafiriyo ka-daabaqe
Ka dediyo ka deydeyey
Waxay dool ahaataba
Maanta ways dul joogaan
Dayax way shan iyo toban
Dirirkiina waa kaa
Deelleyna way socon!!

Labada Silsiladood ee Siinley iyo Deelley, iyo labada gabdhood ee ragga ku tarraxayey waa Caasha Jaamac Diiriye (Siinley) iyo Saado Cali Warsame (Deelley), waxa ay maansooyinkoodu leeyihiin la-yaab hoosta ka xarriiqaya qaninnimada iyo qayuurinnimada hal-abuurka haweenka soomaalida oo ka badheedha xaalad kasta oo murugsan, kana qaata mawqif aan gorgortan gelin oo duug ka hadha yeesha.

Canab Maxamed Guuleed waxa ay ku dhalatay sannadkii 1967-kii Tuulada Laan-Mullaaxo ee Degmada Oodweyne, Gobolka Togdheer. Canab waxa ay sheeko guur wada yeesheen barbaar barasho ka dhexaysey. Magaalada Jabuuti ayay Canab iyo barbaarka oo dibadda ka soo degeyi ku kulmeen. Waa la isku af gartay arrinta guurka. Hayeeshee Canab Maxamed Guuleed waxa uu hadalkeedu lahaa baadi sooc sumad u ah aayatiinka guurkeeda iyo ninkfa ay la wadaagayso. Ma doonayso in ay guursato nin balwed leh noocay doontaba. Inanka dhiggeeda ah waxa ay si foolaad ah wax uga weydiisey arrintaas, waxaanu u sheegay in aanu wax belwed ah lahayn. Sidaas ayaa guur in lagu mataanoobo qalinka loogu duugey, loona wada qalqaalo gelayaa. *Sir-ma-qabe Allow sahana, sakaarana saalo muuqan doonta ayay aasaastaa!* Muddo ka dib waxaa isa soo maqiiqay tuhun horseed u ah in aanu inanku Canab run u sheegin, balwedna leeyahay oo weliba tiisu tahay mid ka mid ah kuwa ugu halista badan! Muddo yar ka dib markii arrintaasi wax la iska weydiiyeyna barbaarkii wuu u qirtay Canab cudurka iyo cilladdiisa. Markii ay Canab taas ogaateyna isbeddel weyn baa ku yimi, waxaanay dib uga faagatey ama guratay gurigii ay is lahayd wax ka yagleel.

Canab Maxamed Guuleed waxa ay arrintaas ka tirisay gabay halis ah oo lagu tirin karo gabayada ugu culculus ee hal-abuurka haweenka soomaalida. Qaybta Nolosha ayay

Canab u bixisay gabaygeeda, waxaanay kaga hadlaysaa toban nin oo ay ragga u qaybinayso. Sagaal ka mid ah waxa ay ku takooraysaa sifooyinka hab-dhaqanka iyo macaamilkooda oo dooni mayso in ay nolol la qaybsato. Ninka soo hadhay ee tobnaadna way caleemo saaranaysaa. '*Boqolkii mid baa dahab ah*! Canab Maxamed Guuleed gabaygeedu waa halis wada murti iyo xigmad ku fadhiya, haddana waxa ay Canab ku nooshahay magaalada Hargeysa, waanay reeraysatay. Gabaygu waxa uu ka curtay Jabuuti 10/07/1989, waxaanu yidhi:

Adduunyada qisiyo yaab quusayoon gudhine
Marna waa qaflado iyo naxdino qaawan abidkoode
Qorraxdii dhacdiyo waagu way kala qalloocaane
Qosolkiyo farxadaheedu waa qaabaan soconeyne,
Marna waa qabow iyo nimcada laysku qoofalaye
Qof waliba wixii loo qoruu qayb u helayaaye.

Qasdigiyo ujeeddada haddaan qodobka sii taabto
Arrintii la qaataba haddii laysla qaban waayo
Qardoofiyo haddaan laga jireyn camal qiyaanoo dhan
Oon qodaxda laga goyn illayn way qallibantaaye
Qiyaastii qorshaa aadmigaa taas la qaabada'e.

Qiimo malaha barashadu haddaan lays qadderineyne
Qalbigaan la dhawrini dhakhsuu qanac u gaadhaaye
Qayrkaa haddaan kuu jeclaa waan ku qoonsadaye
Ka qawadeyna qoyskaan lahaa aysla qabataane
Qormadaan yagleelaayey een qiimo gelinaayey
Qabanqaabadii aan watiyo qaradkii beenowye,

Inkastoo sed aan qaayibiyo qarash la ii sheego
Ama quruxda aad leedihiyo qalin la faalleeyo
Qalbigaygu wuu jabay sidii shay quraarada'e.

Qosolkiyo sasabadaad waddaa ka qoto dheer xaale
Qof liitaa illayn lagu hodaa qaladka ii dhaafe
Haddaad qaafil ii haysatana dhawr qarnaan jireye.

Sharaftaydii anigoo qaboon qooni igu oollin
Oo aan qalqaallina ahayn qawlna fududaannin
Qalqalloocna weligey u socon qubinna Diintayda
Nafta inaan qisaasaa waa midaan meesha qabanayne,

Quudhsigu ma fiicnee runtaan kuu qayaxayaaye
Qawlkaan ku leeyahay ma aha beenaan kuu qoraye
Qiyaas iiga maqal oo dhegaha qun ugu sii dayso.

Sheekada markaan qaadanniyo quruxda haasaawe

In qallooca laga dhawrayuu qodobku taagnaaye
Cilladdii la qariyaa dibbay kuugu qaraxdaaye
Qunyar socodka waataan ahaa een ku qaabbilaye
Qiyaaniyo adaa been watoo qubay wanaaggiiye
Ma qayiro Ilaahay illayn qoonkii daacada'e.

Qofkii qool sameeyaa mar buu qalam yidhaahdaaye
Dabinkii aad igu qabo lahayd qoobka kugu roorye
Adaa qoday dalluuntee ayay kula qadhaadhaane
Waxa qalanja soomaaliyeed inanyow qayrkaaya
Adigaan ku qoondaystay waa qisiyo yaabe
Qufulkaan naftaydii ku xidhay waa qaraar go'ane
Iga quuso adiguna ninyahow qiil kalaad sugiye.

Qayliyo sawaxan iyo ma karo ciil qarracankiiye
Qoommamadan hadhow qarin lahaa qaladka aan geystey
Ka qad baa runtii igala roon ina-rag qaarkiiye
Qiyaas kooban tiro go'an haddaan toban ka soo qaado
Sagaal buu qalbigu diidey oon qaaddacoon jaraye
Bal aan qeexo kuwaan quudhsadeen qaadan kari waayey.

Qaaddirkeen wixii uu xarrimay kuwaa quud la geyo moodey
Qamradiyo Alkoollada kuwaa sii qudhqudhinaaya
Qaad iyo hadduu buuri cuno amase qiiq nuugo
Qalbigii inuu qoomman yahay waa mid loo qiraye
Qudhun iyo illayn lagama karo qoon-xun daba roore
Gabdho aan Qaaddi loo geynin buu qolal la seexdaaye
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Gar ma qaate keligii qummanoon garannin qaynuunka
Qallafsane midaan nolosha qirin abidna qiimaynin
Oo qallooca oon lala heshiin dabacu waa qaybe
Oo aan qadderintana aqoon qawlna kugu deeqin
Oo haddana qab weyn iyo kas xumo kibir is qaadqaada
Qoys inan-gumeed buu ka yimid oon qorsha lahayne
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Qalbigii aan daacadi ku jirin qoon jinnaa gala'e
Qiyaaniyo midkii been yaqaan ama qudh soo gooyey
Qabri inuu gelaayiyo marnaba dhimasho qoondaysan
Qaaddirkii abuuriyo midaan qirin Rasuulkeenna
Oon qawl Ilaahayna baran Diinta waa lagu qaboobaaye
Oo quruxdii dhaqankeenna iyo qodobbadii tuuray
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Qaab miskiin midkii lagu xantee qabow ee sii liita

Qorigiisa uun baa rag kale dhayal u qaataaye
Qarandida sideeduu ka yahay dood rag qaybsado'e
Inkastood qotomisood rabtana qayrkii inuu gaadho
Ama aad xil qarisood ammaan qiimo ku hagoogto
Meel uun baa qalloocdoo illayn waad ka qanacdaaye
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Qorqodiyo midkii kugu qabsada qofaf ku soo booqday
Quudkii aad siisiyo hadduu qadada faalleeyo
Quudaad iyo hadduu kugula kaco qaabka saqajaanka
Adoo qiimo luu kugu yidhaa qoyska yaa yimide
Adoo dakharro sii qabey hadduu qolofta kaa qaado
Qolqollada markuu raad ka dayo waad qumbacataaye
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Qiyaas buu dadkuba leeyihiyo qaab u gooniya'e
Qof waliba siduu kugu yahaa loo qadderiyaaye
Mid qafiifa oo lagu metelo qodobka ruux waalan
Qasnad iyo midaan lagu ogeyn qoob wax lagu kaydsho
Oo hadallo aan kala qorrayn qubaya oo daadsha
Qarda-jeexa sheekada mar buu qalad rumeeyaaye
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Qalbigaa tijaar laga noqdaa qarashka maahaane
Quudkiyo midkaan hoo aqoon ee lagu qadoodaayo
Midda uu qabiyo uma damqado qoonka uu dhalaye
Ehelkiyo qaraabadu hadday maruun qof soo mooddo
'Qarshi maba hayuu' dhaar qayaxan qac uga siiyaaye
I qarshuu dabeed kugu yidhaa qoon siduu dhacaye
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Ishu waxay u qabataba midkii kelidii qoondaysta
Een quud xalaaliyo kala jeclayn qurubka xaaraana
Ma qasoobo oo kama cabsado qool inuu galo'e
Qaadaa-dhigyaa iyo badhkeed qayd ku shubayaaba
Qani kuma noqdoo maalin dhow way ka qubataaye
Qaan iyo intaan cuni lahaa waxaan ku qaaxoobo
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Qacda hore arooskii la galo quruxi weeyaane
Qaar-dambeed hadduu kaaga dhaco qiime laga waaye
Qalbigaad ka raaxaysataa nolosha qaarkeede
Qarjajaas sedkiisii qaboo qoysas badan yeeshay
Qufac buu illayn kugu dilaa quuro iyo taahe
Qotadiisa lama gaadhi karo oo qorshow go'ane
Quwaalow Allahayow midkaas nolol hannoo qaybin.

Allahayow adaa qaaddiroo qaybshey dunidaase
Adigaa quruumaha ku nool quudshey keligaaye
Qalbiyada adaa daalacdoon qodob ku seegayne
Geesi qiimo weyn lagu ogyoo qayrkiba u haysta
Soddonkii Qur'aankiina ay qabatay laabtiisu
Oon qallayn salaaddana siduu Caaddil ugu qeexay
Qaxar iyo dhibaatiyo midaan qaladba ii geysan
Qarkii aad ka eegtaba midaan meella laga qoonsan
Kaasuu qalbigu doortay oon qaadan kari laaye
Qaaddirow Allahayow i sii ways qadderin layne.

Berigii hore markii Yurub la soo gelayey dumarkii ugu horreeyey England ayay kooxo ahaan u soo degeen. Inkasta oo raggu hore u joogeen, sida Bad-maaxyadii oo kale, haddana waxaa mar walba soo kordhayey tiradooda. Markii rag iyo haweenba lagu soo yara gurmay horraantii 70-naadkii waxa qurba-jooggaas ka dhex bilaabmay isku dhacyo dhinaca fikirka iyo aragtida dhaqanka, siiba arrimaha qoyska la xidhiidha. Bad-mareennadu waxa ay u qaybsanaan jireen xagga guurka saddex. Qolo waxa ay guursadeen ama la noolaadeen haween ajanebi ah oo waxa ay isku tirin jireen in ay ka horreeyaan labada qolo ee kale. Qolada labaad oo iyana iska burin jirtey ta saddexaad, ayaa ahaa kuwa guursada haweenka soomaalida ee England kula nool. Qolyaha u dambeeya ee saddexaad oo iyaga la iska bidi jirey waxba dhulka kama oolli jirin oo marka ay badda ka soo baxaan, ayay dib u dhoofi jireen. Geel bay iibsan jireen, berkedna way qodan jireen ama daar bay dhisi jireen, gabadhna way guursan jireen. Maanta iyagii baa dhaqan dad iyo duunyaba oo iska bida labadaas qolo ee awel hore iyaga iska burin jirey.

Xilli ku beegnaa 1975-kii ayay haddaba laba barbaar oo ka mid ahaa dhallinyaradii il-qabatinka lahayd oo guur-doon ahaa England ka baxeen oo waddankii u dhoofeen si ay uga soo guursadaan. Hablo ka mid ahaa haweenkii England joogey ayaa ku dhaleeceeyey arrinta labadaas barbaar ku tallaabsadeen.

Khadiija Maxamed Qoodaaf oo ka mid ahayd haweenkii maalintaas goob joogga ahaa ayaa arrintaas ka hadlaysa: '*Habluhu waxa ay aflagaaddeeyeen inammadaas waddankii u guurka doontay. Waxa ay yidhaahdeen waxa ay soo guursanayaan 'Wasakhal Baadiye'-Gabdho reer miyi ah oo uskag badan!'* Khadiiji waa hal-abuur qayuuri ah. Way gabyi jirtey, haddeerse ma gabaydo oo way ka fadhiisatay. Berigaas ayay Khadiiji gabaygan soo socda arrintaas ka tirisay. Khadiija Maxamed Qoodaaf oo ka hadlaysa sidii gabaygu ugu dhashay, ayaa tidhi: '*Hablaha inammada ku af xumooday waxa ay gashan jireen dhar gaagaaban oo jilbaha u jooga, waxanay la dhacsanaayeen oo soo jiidan jirey daawashada Tv-ga iyo aflaamta oo ay la socon jireen.'*

Gabayga Khadiija halkaas ayuu ka ambabaxsan yahay, waxaanu ku dacal dhebayaa nolosha qoyska soomaalida ee magaalada iyo is-diiddooyinka ka dhex hulaaqa xidhiidhka labada lammaane ee ninka iyo haweeneydiisa. Waxaa kale oo Khadiiji is barbar dhigaysaa kartida hablahaas benderka iyo kuwa miyiga. Gabayga waxaa ku jira ereyo af

ingiriisi ah, sida dance = dhenishka, darling = dhaaliyow, danger = dhiinjar, telling = teelliga iwm. Waa xigmad, duur-xul, haasaawe, maagis iyo kaftanba xambaarsan, waxanay Khadiiji tidhi:

Hablahaa dhulkoodii nacaye diinti wada dhaafay
Hablahaa dhalashadoodii huree dhiigga kale raacay
Dhudhummada hablaha qaawiyaye kabaha dheer qaatay
Hablaha dhenishay leyl galaan dhaafshey magacooda
Hablaha dhaalingtaa hayee dhiinjarnimo dhaafay
Dhunkashada Nasaarada hablaa dheemman dahab moodey
Iyo dhaankii hawd dumarkii wadey laysu dhigi waaye.

Ma og tahay galaas dhoobo ahi dhawris huri waaye
Eeriga hadduu dheehu jabo ma leh dhalaalkiiye
Wax ka dhigan haweenka isu dhigay dhool la daawado'e
Dheri uu ninkii karinayaa dhimasho weeyaane
Rag dhallaanka soo seexiyaa waa dheg xumo weyne
Mar haddii dhaqaalaha dalkiyo caado laga dhaartay
Dhalanteedka teelligu hadduu dhaqan wareeg keenay
Dheddig aan labood waabinayn dhiirri badan yeelye
Maad na dhoofisaan waxannu tegi dhinicii Beereede!

Gabaygaas waxa ay Khadiiji hal-abuurtay 1975-kii. Khadiiji ilaa hadda waxa ay ku nooshahay London. Waxa ay u aragtaa in marka xaaladdu deggan tahay ee caadi la yahay ee aanay dhibaato kale jirin ay dheriga iyo dhallaan seexintu tahay shaqo laga doonayo in ay haweeneydu ka soo dhalaasho, ninkana looga fadhiyo inuu ka jibbo keeno arrimaha xoogsiga iyo xammaalashada iwm, si uu u soo saaro marriinka iyo masruufka reerka. Haddii taas la waayo oo xilkiisa uu ka gaabiyo amaba gabo sida dhacda in badan maanta, waa arrin kale ayay khadiija leedahay oo waa inuu hawsha guriga meel kaga hagaagaa. Arrintan waxa aynu si qota dheer ugu fara gelin doonnaa qaybta 3aad ee buuggan ee ku saabsan haweenka iyo nolosha casriga ah. Halkan waxa aynu uga gol leennahay in aynu muujinno xeel-dheerida iyo miidda hal-abuurka haweenka soomaalida.

Idil Jaamac Aadan waxa ay ku dhalatay magaalada Jabuuti 10/10/1977. Laga soo bilaabo tan iyo 1999-kii waxa ay ku nooshahay waddanka Canada. Idil markii ay waxbarashadeeda qabyo tiratay ayay hindise guur u kohatay in ay ku dhaqaaqdo. Wiil soomaaliyeed oo ay is caashaqeen, ayay sheeko guur wada guntadeen. Idil Jaamac waxa ay ku tallaabsatay arrin qurux badan oo casriyeysan. Dhaqanka soomaalida marka inantu u hawooto guur, wiil dhiggeeda ah oo ay is calmadeenna la soo heshiiso, waxaa dhacda in inanku reerka inanta la xidhiidho oo hibeynteeda weydiisto ama odayaal ka dhex shaqeeyaan oo arrinta dhammeeyaan. Idil iyada ayaa aabbaheed oo Jabuuti jooga abbaaraysa oo maanso qurux badan ugaga warramaysa xaalka ku soo kordhay iyo waxa ay aabbaheed ka doonayso oo ah inuu soo hibeeyo. Waxaa iyana quruxda sheekadan sii bilaysa Jaamac Aadan oo ah Idil aabbaheed oo isna maanso kale ugu soo jawaabaya inantiisa. Aan ku horraynno maansada Idil Jaamac, waxanay tidhi:

Aabbahay halyeeyoow
Ragga ugu horreeyoow
Sida hagar la'aanta ah
Haybadda iyo sharafta leh
Kii noo habaayee
Nagu soo hagaayee
Ifka noo horseedoow
Anigaan hankaagiyo
Haybaddaadii jebinayn
Kolley waan hubaayoo
Kaa hungoobi maayee
Himiladan kalgacalka leh
Haybadda iyo sharafta leh
Yaan soo habeeyoo
Caawa kuu hayaaye
Adna heeda ii badi.

Aabbahay hankaygoow
Hadda waan hawoodoo
Hiyi baa i galayoo
Guur baan habeeyoo
Inan baan heshinnee
May hibeyn karaysaa?!

Idil aabbaheed Jaamac Aadan isaga oo ku faraxsan geesinnimada inantiisa iyo codsigeeda qiimaha leh, ayuu maansadan ugu soo jawaab celinayaa. Wuu ku dhaadanayaa inantiisa, wuu dhiirri gelinayaa, wuu la talinayaa oo wax buu hoga-tusayaa, una sheegayaa inuu horeba u bixiyey walaasheed oo ka weyn oo meel (Canada) la joogtaba, iyana (Idilna) uu sidaas oo kale u hibeynayo. Waxa uu yidhi:

Hankaygaay hankaygaay
Hawo iyo kalgacaleey
Habeenkoo badh iga tegey
Haatufkaagi ii yimi
Himiladu ahaydee
Aabbo waan hawoodoo
Hiyi baa i galayoo
Guur baan habeeyoo
Inan baan heshinnee
May hibeyn karaysaa?

Bal ha ii horraysee
Inantii hawootee
Hiyigeeda guur galo
Aabbaheed hibeeyaa
Dumar ugu hagaagsane,
Anna kula hilooboo
Haye baan ku idhiyoo
Waan kuu hanneeyee,

Bal ha ii horraysee
Guri waa haweenkoo
Geed hadhaca weeyoo
Habacoo la seexdoo
Waxa lagu hirgeliyaa
Hiddo iyo kalgacal iyo
Jacayl aan habaabayn
Qaar baa hungooboo
Hiyigooda raacoo
Haybaddoodi jebiyee,
Tii loo han weynyee
Loo wada hiloobee
Lagu soo hirtuun noqo.

Iyagaan hunguri qabin
Qaar baa hagaasoo
Gurigoodi heeree
Tii loo han weynyee
Saygeeda hanatee
Ubadkeeda haysee
Hiddo iyo kalgacal wacan
La hareero joogtee
Lagu soo hirtuun noqo.

Inanka hooyadii iyo
Hablahooda oo idil
Tii u wada hagoogtee
Lagu soo hirtuun noqo.

Walaashaa Hormuud baan
Iyadaba hanneeyoo
Ku hareero joogtoo
Kuu hagar baxaysee
Ducaalaa hankaagiyo
Haybaddaada jecloo
Isna kuu halgamayee,

Bal ha ii horraysee
Inanka himiladi noqo
Anna haybadday noqo
Kolley waan hubayoo
Ku hungoobi mayside
Tii loo han weynyee
Loo wada hiloobee
Lagu soo hirtuun noqo.

Idil way aqal gashay si milge iyo maamuus leh, maantana waa hooyo leh laba carruur ah, kuna nool dalka Canada.

Waxyaalaha ay maansada soomaalidu xoog uga hadasho waxaa ka mid ah hooyada iyo qiimaheeda, xaqeeda iyo xurmadeeda, milgaheeda iyo haybaddeeda, kaalinteeda iyo doorarkeeda, kartideeda iyo lama huraannimadeeda. Rag badan ayaa gun iyo baar gabayo iyo heeso dhiiggu da'ayo ka tiriyey Hooyada wakhtiyo kala duwan iyo munaasibado kala geddisan. Waxa aan la kulmay maansooyinka dhawr abwaan, kuna saabsan kaalintaas lama huraannimo ee hooyada iyo kartideeda. Sida meelo kale oo buuggan ka mid ah aynu ugu tegi doonno, waxaan anigu is dul taagey gabayo iyo maansooyin qiime leh hooyada u tiriyey hal-abuurrada ay ka mid yihiin Cadhays Ciise Kaarshe, Cumar Cali Cakaal (Oday), Maxamed Cali Walash iyo Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Hayeeshee dhowaan ka hor lama kulmin maanso halis ah oo ay haweeney ku soo bandhigayso qiimayaasha iyo qaalinnimada aan wax lala simi karaa jirin ee Hooyada. Ifraax Maxamed Cabdillaahi (Ifraax Cirro) waa gabadh dhallinyaro ah oo ka mid ah soomaalida qurba-joogga ah, waxaanay ku nooshahay waddanka Finland. Waa hal-abuur haween ah oo farshaxan ah, waxanay tirisay maanso badan oo kala ujeeddo iyo abbaar duwan, murti, aftahannimo, cod karnimo iyo karti haweeneedba ka soo ifayaan. Suugaanta Ifraax Cirro ee aan la kulmay waxaa ka mid ah heesteeda Hooyo oo soo baxday 10/05/1999. Waa maanso murti iyo macne weyn xambaarsan, baadi sooc iyo tilmaanna u ah xeeldheerida iyo hal-muceednimada hal-abuurka haweenka soomaalida iyo mahadhooyinkiisa. Waxa ay tidhi:

Ogooweey bal hooyadu
Waa hoyga noloshoo
Waa hurinta nabaddee
Loo wada hamuumee
Loo wada hiloobee
Lagu wada halmaalee
Loo wada hanweynyoo
Allaa hibada siiyoo
Ifkay lama huraan tahay.

Inuu hooyga aakhiro
U hagaajo Mawluhu

Hadow laga ilaashoo
Hadh qabow la geeyooy
Jannadii u hoyatooy
Hoobaan ka gurataan
Haybadlaha ka tuugee
Aamiinta hagar li'i
Hor Ilaahay ii dhaha.

Hooyo kuma halmaantoo
Marna kuma huraysoo
Hurdo kaama gama'doo
Habeenkoo nus tegey bay

Soo hambabartaayooy
Himbiriirsataayooy
Haahaabataayooy
Haylaha ku saartaa
Hadba kugu hubsanaysaa.

Inuu hooyga aakhiro
U hagaajo Mawluhu
Hadow laga ilaashoo
Hadh qabow la geeyooy
Jannadii u hoyatooy
Hoobaan ka guratаan
Haybadlaha ka tuugee
Aamiinta hagarli'i
Hor Ilaahay ii dhaha.

Hooyo waa halbawliyo
Halis lama huraaniyo
Hanaqa iyo laabtoo
Iyadoo harraad iyo
Hanfi iyo kulayliyo
Hadow uu ka baxayay
Hawshaada haysaa
Nafteedii halmaantaa
Adi kuu halgamaysaa
Horaaddada ku siisaa.

Inuu hoyga aakhiro
U hagaajo Mawluhu
Hadow laga ilaashoo
Hadh qabow la geeyooy
Jannadii u hoyatooy
Hoobaan ka gurataan
Haybadlaha ka tuugee
Aamiinta hagar li'i
Hor Ilaahay ii dhaha.

Haacoo haddaad tahay
Iyadaa hagniinkiyo
Ku hanuuninaysoo
Haybaddaada haysoo
Hu'ga kuu xidhaysoo
Inta inan hormuudiyo
Halyeeyada kaloo idil
Uga haab sarraysee
Heerkaad ka joogtoo
Adigaa u hanadoo
Adigow halyeeyee,

Inuu hoyga aakhiro
U hagaajo Mawluhu
Hadow laga ilaashoo
Hadh qabow la geeyooy
Jannadii u hoyatooy
Hoobaan ka gurataan
Haybadlaha ka tuugee
Aamiinta hagarli'i
Hor Ilaahay ii dhaha.

Dheeggan ku saabsan maansada haweenka ee buuggani uu soo qaatay, waxa aan uga maarmi waayey in aan wax kaga xuso tusaaleyaal ka mid ah suugaanta ragga ee ka hadlaysa kaalinta iyo kartida haweenka soomaalida. Suugaantaas iyo buuggani waxa ay wadaagayaan dareenka hoosta ka xarriiqaya soo bandhigidda iyo kaalin gelinta kartida aan saluugga lahayn ee haweenka soomaalida. Hiilka ay haweenka u wada hayaan iyo garowshiinyaha ay siinayaan, ayaa iyana muhiim ah oo khasbaysa in wax laga soo qaato suugaantaas ragga ee ku taxmaysa haweenka, gaar ahaan doorkooda iyo kaalintooda gaashaan qaadka ah, quruxdooda iyo lagama maarmaannimadooda ee ina-rag u dhugtamo, una cugtamo mid qira iyo mid qariya labadaba. Dhawr nin maansadooda arrintaas ka hadlaysa ayaynu halkan ku soo qaadi doonnaa, aynu ku horrayno Raage Ugaas.

Raage Ugaas Warfaa wuxuu ka mid yahay ruug-caddaaga loogu horraysiiyo ragga gaawaha gabayga u haya. Raage waxa uu ka mid ahaa xoolo raacatadii qarnigii 19aad saddexdiisii waaxood ee dambe ku dhaqnaan jirtey degaanka Faafan iyo Fiiq ee maanta

ka mid ah Killalka 5aad ee soomaalida hoos tagta dal weynaha Itoobiya. Arladu waxa ay ahayd dhul qaxar iyo lur badan oo surmi iyo abaaro oodo lul ah iyo colaado lagu riiqdaa u kala dambeeyaan. Waxaa kale oo arlada lagu yiqiin libaax halis ah oo dad-qaad ah. Cabban Cilmi waxa ay ka mid ahayd dhawr dumar ah oo Raage u dhaxay. Dhibaaddu ama diiqadu, waxa ay ka mid tahay dhaqanka soomaalida. Haweeneyda marka la guursado xoolo yarad loo yaqaan ayaa ninku ka bixiyaa oo reerka ay ka dhalatay la siiyaa. Muddo ka dib aqal galka ayay haddaba haweeneydu u socdaashaa dhanka reerka ay ka dhalatay, si loo soo dhibaadiyo ama xoolo diiqo ah loogu soo raro. Sida la tilmaamay Cabban Cilmi reerkoodii ayay u dhibaad doonatay. Awr badan oo rar ah iyo xoolo kale ayaa Cabban la soo raaciyey. Rag xoolaha la sii jid mariya ayaa loo saaray oo lagu soo daray.

Goor cilcillow ah (fiidaddow ah) ayaa tibaax lagu hayaa in xoolihii dhibaadda ahaa ee Raage Ugaas gurigiisa lagu wadey ku soo beegmeen degaankii beesha Raage Ugaas. Raggii dhibaadda (diiqada) la socdey, waxa ay dhaqan ahaan ka wayiigeen oo diideen in xilligan xun laga dul dhaco ninka ay xididka la yihiin ee ay xoolaha u wadaan. In loo arko marti goor xun socota ayay ka yaabeen, waxanay go'aansadeen in ay awrta furaan oo caawa halkaas ku dhaxaan, berrina xilli iftin ah beesha u tagaan.

Cabban Cilmi waxa ay ahayd baa la yidhi gaari garasho dheer oo karti iyo ragannimo leh. Waxa ay saluugaysaa go'aankii raggu gaadheen, waxaana u cuntami waayeysa in ay Raage Ugaas ka dhaxdo, iyada oo maqlaysa sanqadha koorta iyo aleenka geelii reerka. Waxa kale oo maankeedu diidayaa martida qadoodiga ku noqonaysa duleedka reerkeeda. Way is-hayn kari waydey oo fool xumo ayay u aragtay in iyada oo halkaas u dhow joogta ay Raage ka dhaxdo, martida la socotaana gaajo ku seexato. Cidhibta ayay Cabban ku dhufanaysaa oo jaanta u rogeysaa dhankii Raage Ugaas ka xigey. Ayaan darro Cabban Cilmi ka tagtay halkii ay joogtey, gaadhina waydey halkii ay ku socotey. Dhexdaa libaax dad cun ahi ka helayaa oo laba ugu kala goynayaa!

Raage Ugaas aroornimadkiiba ogaa oo ka war helyey waxa dhacay! Waxaa la yidhi Raage aad buu Cabban Cilmi u jeclaa. Waxa uu halkaas ka tirinayaa gabay duul duulkiisa iyo hadal hayntiisu soomaalida degaannadeeda wada gaadhey oo qiimo iyo murti ma guuraan ah ku fadhiya. Waa gabay wada sanqadh ah oo calaacal, tiiraanyo iyo uur ku taallo miidhan ah. Waxa uu Raage gabaygaas ugu baroor diiqayaa ooridiisaa uu jeclaa ee wedku kala qariyey. Waxa uu ku muujinayaa halka ay geeridaasi ku bannaysay iyo sida aanu u haysan cid kale oo u buuxisa. Waxaa gabaygani tix-raac iyo markhaati u noqonayaa kartida haweenka soomaalida, il-buuxinteeda iyo biliddeeda nolosha oo dhan iyo sida jiritaanka ninka iyo noloshiisuba ugu tiirsan yihiin guud ahaan jiritaanka iyo nolosha haweeneydiisa, gaar ahaanna marka ay tahay gaari uu aad jecel yahay. Raage Ugaas oo ina-rag ka mid ah oo xilligaas noolaa (qarnigii 19aad), ayaa baguugaha ka dhigay oo jebiyey hab dhaqanka ragga soomaalida ee kelyo-adaygga iyo naxdin la'aanta ku salaysan. Oohinta, calaacalka, catawga iyo calool jileecu waa ku ceeb ragga soomaalida. Raage Ugaas waxa uu ku guulaystey in isaga oo taas og, kana dheregsan haddana uu gidaarkaas jiidho oo ka gudbo, murti mug weynna dareenkiisa gudaha ku cabbiro oo uumiyaha kale ku sooro. Raage Ugaas waxa uu yidhi:

Sida koorta yucuboo la sudhay korommo buubaal ah
shinni kaaluf galay iyo sidii koronkorkoo oomay
Ama koox ardo ah oo qur'aan kaatibka u toosay
Ama beelo kaynaan ahoo kor u hayaamaaya
Ama geel ka-reeboo nirgaha laga kaxaynaayo
Ama ceel karkaarrada jebshiyo webi karaar dhaafay
Ama kaal danley qaybsatiyo kur iyo dhal yaabis
Ama habar kurkii iyo wadnii lagaga kaw siiyey
Xalay kolola'aygii ma ledin kaamil reeruhuye.

Kambalkiyo ardaagii miyaa laygu keliyeeyey
Kob abaara oo dhexe miyaa koore ila meeray
Kub miyaan ka jabay biixi aan kabayo loo haynin
Wixii laygu kuunyaayey miyaa igu karaamoobey
Kumbiskii miyaa layga qubay kolaygi ii buuxey
Maantana kataantii miyaa layga kala tuuray.

Caashaqa haween inta la og yahay ina-rag soomaalida Cilmi Ismaaciil Liibaan (Cilmi Boodheri) ayaa u god galay. Jacaylkii ay Hodan Cabdi Walanwal bariisada hore ku saaqday goobtii Furinlihii Berbera ee uu ka shaqayn jirey iyo sheekadiisu waa ka caan carrada soomaalida gees ilaa geesta kale. Cilmi Ismaaciil Liibaan (Boodheri) waxaa uu ku barbaaray miyiga Hawdka sare ee Hargeysa iyo Gaaroodi. Magaalada Berbera ayuu intii dambe ku noolaan jirey, noloshiisana ku idlaystay dagaal weynihii 2aad ee dunidu xilligii uu socdey (1940-naadka hortoodii). Batallaale oo duleedka Berbera ah ayuu qabriga Boodheri ku yaallaa. Cilmi waxa uu ahaa nin gabya oo dareenkiisa dookh raaca iyo jacaylkiisa dhuuxa iyo lafaha fadhiya ku soo gudbiya maanso xigmadi ka buuxdo iyo ereyo faneed miisaaman oo weliba soo jiidasho leh. Halkan waxa aan ku soo qaadanaynaa gabay uu kaga hadlayo caashaqaas haleelay, dhabnimada jiritaankiisa iyo soo jireennimadiisa da'da weyn, iyo sidii tabnayd ee soomaalidu ugu cayday xaqiiqada dookhiisu salka ku hayo ee caashaqa haween ku saabsan.

Waxaa kale oo Cilmi Boodheri gabaygiisa ku tilmaamayaa sida uu caashaqa dartii caatada ula togmey (weydoobey), sida casharkii wadaaddadu dhigeen iyo wixii lagu dabiibaayey oo dhami cilinkiisa u saari waayeen. Dawada iyo baxnaanada keliya ee Cilmi ku caafimaadi lahaa wuxuu u arkaa helitaanka Canab (Hodan Cabdi), iyadiina loo waayey, waxaanu aakhirka odhanayaa: '*aniga oo caag ama caad noqdaa ka roon caynkanaan ahay!'*. Waana kii u geeriyoodey caashaqaas laftiisa. Waxa uu yidhi:

Caashaqa haween waa horaa Caaddil soo rogaye
Seyidkii carshiga fuulay iyo Caliba soo gaadhye
Carruurtay sideen meesha iyo Ciise Nebigiiye

Cidla' lagama Beermeen dadkoo cuuddi waaxida' e
Waxa caynba cayn looga dhigay hays cajabiyeene
Soomaalidaa caado xune iguma caydeene

Oo ima canaanteen sidaan cuud ka iibsadaye
Kuwii ii calaacalayey baan camal tusaalayne
Sida weelka caanaha haddii laabta loo culayo
Bal aan soo cidaadee maxaa cunaha dhaafaaya
Curuuqdiyo maxaa kala dhex geli cadaha hoostooda
Ma cidaamkanaan jabinayaa cunaya dhuuxooda

Inaan cadaydo mooyee waxaan calalsho lay diidye
Caqliga yaa ka bi'in kara tanuu Illaah ku cir-caddaaleeyey
Cimrigayga oon jirin intii lagu cirroobaayey
Mugga inaan caddaadaan ka biqi Canab daraadeede
Cududuhu ma naaxaan ninkay talo ku ciirtaaye
Casharkay wadaaddadu qoreen cudurkan goyn waaye
Cilmi iyo dawoba doontayoo waayey cilinkiiye
Jeeroonse Canabeey ku helo caafimaad dhimaye
Inaan caad noqdaa baa ka roon caawa saan ahaye
Illayn caashaq lama maydhi karo kugu cirrooloobey.

Maxamed Nuur Fadal waxa uu dabayaaqadii qarnigii 19aad ku dhashay Degmada Xagal ee Gobolka Saaxil, waxaanu dhammaadkii 1940-naadkii ku geeriyoodey dalka Kenya. Waxa uu ka mid yahay ruug-caddaaga gabayga soomaalida. Waxa uu ahaa nin af-maalnimadiisa ku darsaday maal qabeennimo. Xilli ku beegan dhammaadkii dagaal weynihii 1aad ee dunida, ayaa Maxamed ka tegey askartii Ingiriiska ee Bariga Afrika oo u wareegey dhinaca ka ganacsiga macdanta dheemmanta loo yaqaan. Magaalada Thika oo Nairobi u dhow ayuu Maxamed Nuur ka hirgeliyey ganacsi weyn oo caan u noqday sidii uu isba caanka u ahaa. Isaga oo aan weli guursan, xoogna u xoolaysan, ayaa waxa maankiisu raacay gabadh ka mid ah dadkii soomaalida ahaa ee Sawaaxil kula noolaa. Dhudi ayuu Maxamed inantaas ula baxayaa, Saaqa iyo Dawlina wuu ugu yeedhi jirey. Suugaan mug leh ayuu Maxamed Nuur Fadal ku faalleeyey quruxda gabadhaas. Sida gabyaaga kaleba adeegsado marka laga hadlayo quruxda haweenka waxaa la soo qaataa qaab dhismeedka jidhka, socodka iyo laafyaha iwm. Hayeeshee Maxamed waxa uu halkaas uga sii gudbayaa hannaanka lebbiska iyo dhar xidhashada, waana taas arrinta gabaygan sii qurxinaysaa, waayo hu'gu waa ka badh quruxda haweenka.

Jacaylka Gabadhaas Maxamed dookhiisu raacay, wuu la fogaanayaa, waxaanu kula sinmayaa in xitaa haddii la guursado oo ay ubad yeelato, uu weli ka dhursugayo oo jacaylkeedu dhuuxiisa iyo lafaha xulay, hase yeeshee Maxamed gabadhaasi isma aanay guursan oo calaf ayaa ka adeegey. Gabayo badan ayuu jacaylkeeda ka tiriyey, waxaana ka mid ah kan soo beegan. Waa gabay ammaan dumar tin iyo cidhib, dhar iyo dhabanba ku fara yaraysanaya, tusaalena u ah quruxda lagu majeerto haweenka soomaalida, waxaanu yidhi:

Xasanow dhawaaq gabay haddaad iga dhaguugayso
Hadduu guur qalbiga kaaga dhaco dheellin baad tahaye

Dhadhan ma laha naagaha middii dhoocil noqotaaye
Dhulka jiifto lama guursadiyo dhererka qaarkiise
Hadday dhuubo weyd tahayna waa raaxo kaa dhimane
Meesha iyo dhallaannimo middaan anigu dhawraayey

Dhildhilada gacmihiyo shanshada dhumucda loo yeelay
Dhexda madaga dhaayaha indhaha dhaban wanaaggeeda
Dhudda qoorta iyo faayahay Dhudi la soo jeeddo

Dhubbad qaadka timahaad haldhaa dhalanki moodayso
Cirrid dhuxla' iyo suunniyaha dhibic dawaadeeda
Dhumbal wada cad dhoollaa ilkuhu dhaygag noo dile'e

Saddex dhudaley dhaclaha iyo dawali dhixir wanaaggeeda
Sindi dheehan qoolow sidii lagu dhex taalleeyay
Jinjimaha gacmaha lagu dhuftee saayaq lagu dhaabay

Dhammideedba maantay direys dheeg iskaga yeesho
Ee ay dhabeelnimiyo qurux dhuuxa ka iftiinto
Dhugta lugaha laafyaha markay dhebel u sii deyso

Kolkay socodka dhiif uma waddee dhebi sidii liicdo
Maantaa ninkay dhinac martaa dheelmitaan galaba
Dhaqan iyo adduun lama hadheen dhogorta xoolaade

Inta dahabku lacag dheer yahay dumarka dhaantaaye
Dhadhab igula looshiyo hurdada dhool anoo ledaye
Dhuuxayga iyo feedhahay Dhudi ku laaqnayde

Sidii malagga ruuxayga dhigay laygu kaa dhererye
Inkastay dhallaan yeelatiyo ubad dhawaaqaaya
Dhimashadu ha joogtee si kale waw dhur sugayaaye
Dhufsataye qalbiga maanigaa Dhudi ka reebaaya!

Cumar Cali Cakaal (Cumar Oday) waa abwaan ka mid ah hal-abuurka Jamhuuriyadda Jabuuti. Cumar waxa uu ku dhashay Degmada Cali Sabiix sannadkii 1955-kii, intii uu yaraana waxa uu ku noolaa dhulka miyiga ah ee degaankaas. Sannadkii 1966-kii ayuu Cumar Cali Oday yimid caasimadda Jabuuti. Maqaaxiyaha iyo suuqa magaalada Jabuuti ayuu kureynimadiisii Cumar ka xoogsan jirey, waxaanu xilliyadaas bilaabay hal-abuurka maansooyin gaaggaaban oo uu ku weerarayo gumaysigii waddanka haystey. Waxa uu Cumar Cali Oday 1970-naadkii ku biiray ciidamada booliiska ee Jabuuti oo ilaa maantana uu ka mid yahay. Cumar Oday waxa uu qayb libaax ka qaataa barnaamijyada suugaanta ee ka baxa golaha warbaahinta Jamhuuriyadda Jabuuti ee RTD, sida barnaamijyadii Sirta Ereyga iyo Tixmaal. Cumar waxa uu leeyahay suugaan badan oo kala duwan, waxaana ugu caansan gabaygiisa Xubbi Hooyo. 1994 ayay Cumar Cali hooyadii ka timid miyi oo

inankeeda ku soo booqatay magaalada Jabuuti. Gabayga Xubbi Hooyo waxa uu dhab ahaantii ahaa sooryadii Cumar maanlintaas hooyadii u hibeeyey. Waa gabay qiimo iyo murti mug weyn xambaarsan oo tibaax habboon oo waafi ah ka bixinaya kaalinta iyo doorka hooyadu ay bulshada ku leedahay, gaar ahaan ababinta ubadka. Waxa uu ku bilaabayaa in docda hooyadii ka dugsoon tahay doc kale oo kasta, ugana qaayo badan tahay meel kale oo kasta, agteeduna uga dhigan tahay sida Xaramka loogu xiiso marka ay xujaajtu u dawaaf tegeyso.

Sida ruux xashkii gudanayoo xagasha weyseystey
Oo xidhashadii buuxsadoo xor u dawaaf qaatay
Xundhurtii Rasuulkeennu yiil ula xidhiidh guurey
Oo inuu xarmado doonayoo xumo ka soo maydho
Xeraad inaan ka cuno reero kale adiga oo xay ah
Ama xudhuq la ii dhigo doc kale xiiso iga qaadye
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Mar kale waxaa uu abwaanku iftiiminayaa sida markii la abuurayey jidhka hooyadii loogu dhex beeray, makaankeeda loogu xafiday, wallacii iyo madax wareerkii iyo sidii uu mar kasta caloosha hooyadii isagu ugu xasilloonaa sagaalkii bilood ee ay uurkeeda ku siddey.

Xamdi mahad waxaa iska leh Allihii Xaakimka ahaaye
Xaliim bay abuuraye kolkaan xidid ka soo baydhay
Xintif dhibic ah oo la xafiday xeel qof baan ahaye
Xarun laygu aamminey makaan xidhan ammaankiisu
Oo ruux xilqaad lihi sidoo xeeshanoon aalley
Xummad madax wareeriyo intuu xaalku weli muuqan
Xinjir iyo intii aan ahaa hilib yaroo xooga
Xanjaadkiyo calooshaadan baan ku xasilloonaaye
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Naftan laygu soo xaadirshiyo xoogga la i saaray
Adduunyada intaan xaabayee jiri xisaabteeda
Amaan xaawaley guursaneen ubad u xiiraayo
Iyo goorta aan xaadiriye geli xabaashayda
Xawlkii jannada midaan ihiyo xulufadii naarta
Xogogaal Allee waxa ku qoran xarafyo looxayga
Xadka aanan dhaafayn intii lagu xammuuraayey
Xanjaadkiyo calooshaadan baan ku xasilloonaaye
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Haddeertana waxa uu tilmaamayaa hawshii sagaalka bilood ahayd ee xaamilnimada hooyadii iyo xilligii ay uurkiisa lahayd inta ay dumar u Taraare samaysay. Taraaraagu waa raashin ay haweeneyda uurka lihi samayso marka ay toddobada bilood ka sii baxayso, uguna yeedho haweenka kale, dhaqan ahaanna waa Alla-bari iyo duco looga gol leeyahay in Alle foosha u fududeeyo haweeneyda xaammilada ah, nabadna iyada iyo ilmaha uu ku kala keeno. Dabadeed waxa uu Cumar ka sii hadlayaa xubladii foosha iyo

xanuunkeedii, sida markii uu dhashay isla il bidhiqsigiiba ugu hagaagey ee u haahaabtay naaskeeda, ugana gartay hooyadii haweenkii kale ee ka ummulinayey.

Sagaalkii aad xaammilo ahayd bilo xanuunkooda
Xaawo iyo Faadumo intaad dumar u xeedhaysay
Xarbiga iyo fooshii hurdada aad xammili waydey
Xanjaadkiyo calooshaadan baan ku xasilloonaaye
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Xilli dhalashadaydii kolkaan madaxa soo xooray
Ee gacan xannaanada taqaan la igu xeel xeelay
Ee xagasha anigoon lahayn la igu soo xuurshey
Xundhurtii kolkii layga jaray ee xabka aan dhaafay
Xirribaha kolkii layga tiray xoboggii guud yaalley
Indhahoo xawaawiya kolkaan xeel walbow jeestey
Xaddi way badnaayeen dadkii igu xarxeernaaye
Wixii xaawaley dumar fadhiyey uma xaraaroone
Xaggoodana ma eegine adaan kugu xasheeraaye
Naaskaagi baan xoox ka dhamay xaaliga ahaaye
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Tuducyadan soo socdana, waxa abwaanku wax kaga tibaaxayaa sida hooyadu u xannaanayso ilmaheeda, u koolkooliso ee isaga oo aan weli af baran haddana ugu sheekayso, sida ay naaska iyo laabta ugu hayso, sida aanay dhulka ugu oggolaan iyo sida qalbigeedu ugu soo jeedo ilaalintiisa.

Kolkii xurug la ii dhigay halkaad adigu ii xaadhey
Xabiibaay haddaad ii xin timi kuma xasuusteene
Sida xuun godkiisii ku jira igu dul xoonkeeda
Goortaan xamaartaba qalbiga igu xansheerkeeda
Xariirowga heesaha xulkiyo xiidda ku cabsiinta
Xogogaalsan way kaa taqaan waxaad u xiisoone
Sidii xamar u laylsamo kolkaad xeebta kala jiiddo
Xamatuudhintii naasihiyo xig iyo nuugsiinta
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Xaddiyaay intuu aabbahay ii xiddiginaayey
Oo xooluhuu ii dhaqiyo xoor i garab yaalley
Oo ii xabkayn jirey waxaad igu xareedsiiso
Xaynkaaga adigaan ku jirey ina xambaarnaaye
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Xambabooradaydii kolkaan socodka xaanxaantay
Waa waxaan xayaad ubad lahayn xad iyo dhawrsoone
Xagal daaca goortay cidlada ugu xambaarooto
Xirfaddeeda kale waa inay xag u gurguurtaane

Xaraar laga shalwado meel xasiyo xudiyo booraamo
Xaddiyaay adaa iga xasladey meel xajiin badane
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Gabagabada gabayga waxa uu hal-abuurku kaga hadlayaa kaalinta tarbiyadda iyo macallinnimada hooyada, xishood iyo xurmo bariddeeda, anshax iyo asluub gunudkeeda, aqoon iyo xirfad gudbinteeda iwm. Intaas oo u dhiganta inta ay ardaydooda u dhigaan ee ay baraan Shuyuukhda qur'aanka xafidda ee diinta beyaamisaa, xaqa iyo baaddilkana kala saarta ama xalaasha iyo xaaraanta kala caddaysaa. Dhanka kale sida gabaygu ku dacal dhebayo doorka hooyada ee ababinta iyo aqoon gudbintu waxa uu ka xoog badan yahay saamaynta ay maanta dunida guudkeeda ku yeeshaan Culimada Sayniska, kuwa xiddigiska iyo kuwa aqoonta farsamada *technology-gu*. Arrintan uu maansayahanku ka hadlayo ee kaalinta macallinnimada hooyada, waxaa buuggeeda *Out of Africa* kaga faallootay 1937 Karen Blixen oo aynu wax kaga soo xusnay qaybta 1aad ee buuggan. Karen Blixen waxa ay tilmaantay kartida iyo kaalinta aqoon gudbinta hooyada soomaalida. Karen Blixen waxa ay qortay: '*Aqoonta gacanteeda ku jirtaa maaha mid khasab lagu gudbinayo ee waa mid dhaxaltooyo ahaan looga qaadanayo. Guriga yar ee aan looxaanta uga sameeyey ee beerta dhexdeedu wuxuu u dhigmaa dugsi sare oo yar oo ay maamusho Faarax soddohdii. Khibraddeeda iyo aqoonteeda sida ay u gudbinayso ee looga qaadanayo haddii ay ogaan lahaayeen way ku hinaasi lahaayeen macallimiinta waddamada Yurub wax ka dhigaa. Weligey ma dhaadin iyada oo cadhaysan. Nolosha oo dhan ayay carruurta, gaar ahaan hablaha wax ka bartaa, kuna guulaysataa in ay tababarto oo maankooda degto oo jihayso*'. Waa kaalintaas tan uu Cumar Cali Cakaalna soo gudbinayaa. Karen Blixen, gabaygan Xubbi Hooyo ee Cali Cumar Cakaal iyo dhawr maanso oo kale oo aynu buuggan qaar ka mid ah ku soo qaadan doonnaaba waxa ay ka wada markhaati kacayaan kartida iyo doorarka hooyada soomaalidu bulshada dhexdeeda ku leedahay.

Sidii sheekh ah xaafidul Qur'aan xoojintiyo diinta
Oo xeri ku soo tuurantoo lagu dul xooraamay
Oo wuxuu Ilaahay xarrimay uga xadiisaaya
Oo wixii xalaal loo hubiyo xaq u tilmaamaaya
Adaab barid xishood ababintiyo xumo ka baydhsiinta
Xigmaddiyo xaq dhawr waalidkiyo xidid aroorsiinta
Xil guubaabin xaadda u fidhkiyo ka xarragaysiinta
Xirfaddiyo aqoonyahannimiyo xeelad lagu dhaafshey
Oo lagu xafiiltamo kolkaan dunida xiisaynno
Xulufada Cilmiga Sayniska ah xarakadaynaaya
Ee xadhigga hoos mara baddiyo dhiga Tareen xiima
Xiddigahaasi qaar sahamiyoo xero ka soo waabay
Ee ha loo Xagaa baxo lahaa xaraf ha sheegaane
Xubbigaaga hooyooy miyaan xero kaloow diidey.

Aakhirkii waxa uu abwaanku qalinka ku duugayaa oo far waaweyn ku xardhayaa xaqa iyo xuquuqda hooyannimo, iyo sida aanu weligii u gudi karayn xaqaas hooyada ee buuraha ka miisaanka culus. Abaal aan duugoobin, ammaan qalbiga ka soo go'aysa iyo

duco dhab ah, ayuu xarafka gabaygiisa ugu meerinayaa hooyadii, kuna gunnaynayaa oo la wadaajinayaa haween oo dhan, kagana xoraynayaa intii dhib ku haysa oo dhan. Sidii Cadhays Ciise, Ifraax Cirro, Maxamed Cali Walash iyo Hadraawi ay maansooyinkooda Hooyo ku dhaabadeeyeen, ayuu Cumar Odayna gabaygiisa Xubbi Hooyo ku soo xoorinayaa ereyo bogaadin iyo hibeyn u ah idil haween, gaar ahaanna Hooyadiis: Ifkana sareedo iyo nolol sareecan ah, aakhirana halkii roon iyo Janno Fardawsa. Waa Gabay runtii xusuus-reeb ah.

Habagteedu waa xab iyo dheel xiiso kuu dhalaye
Xisaab aakhiriyo maalintaa xaadir la is yeedhsho
Qofna aabbihii laguma xidho mana xidhiidhaane
Xudduntaadu waa Ina-heblaad Xaakinkaa yidhiye
Xadiiskuna wax ii sheeg inaad sii xurmoon tahaye
Xaqaagii haddaan gudi karayn xubin la miisaamey
Ammaan inaan kugu xaddido waa xil ii mudane
Gabay aan xardhay oo xidid ka dega xubinta taariikhda
Oo xaashi sare lagu qoroo xaraf ducoo weyn leh
Oo adigiyo wixii xaawaley dumar xusuustooda
Ood kaga xorowdaan wixii xumo dhammaantooda
Ood kula xidhiidhaan intii Xawdkii Nebigiiya
Jannadana xisaab li'i gashaan xero wanaaggeeda
Oo xuural-cayntii la dega lana xidhiidh yeesha
Xaakimul-wudduudkuna aqbalo oon xisti lahayna
Xubbigaagu hooyooy miyaan qoray xusuus Reebta!

Cadhays Ciise Kaarshe waxa uu ahaa hal-abuur waddani ah oo casri ah, kuna caan baxay heesaha iyo maansada Saarka loo yaqaan. Waxaa saarkiisu ku soo shaac baxay bulshada dhexdeeda nuskii dambe ee tobanlihii 1960-kii iyo nuskii hore ee tobanlihii 1970-kii. Idaacadda ayaa qayb libaax ka qaadatay soo shaac bixiisa iyo xilligaas oo ku beegnaa xilligii berisamaadka Fanka Soomaalida. Horraantii 1970-naadkii ayuu Cadhays Ciise Alle ha u naxariistee ku geeriyoodey magaalada Muqdisho.

Saarkan Hooyo ee Cadhays Ciise waxa uu ka hadlayaa hawsha ballaadhan ee ay hooyadu kala kulanto ilmaheeda min maalinta uu calool galo ilaa iyo inta uu ka hanaqaadayo ee wax ka noqonayo. Waa xil ballaadhan oo leh rafaad iyo silic badan. Maxaa wallac iyo oomaati ka go'a, maxaa culays ah oo joog iyo jiif diidba leh, maxaa fool iyo xanaf xanuun ah, maxaa soo jeed iyo dhafar ah habeen iyo maalinba, maxaa daal iyo dekaan ah. Qayuurinnimada ereyo suugaaneedkiisa iyo miigganaanta qofnimadiisu, waxa ay Cadhays Ciise dhaxal u siisay garasho ku siman inuu si kalsooni leh u tilmaamo in adduunyadu tahay haween, hooyaduna tahay ta ugu horraysa. Cod iyo luuq naaxiyad macaan, ayuu Cadhays Ciise Kaarshe saarkiisu lahaa, hablana mararka qaar way la jiibin jireen. Waxa uu yidhi:

Ha' looxaa lagu dhigaa **Higgaad waa la akhriyaa**

Hagaag waa loo socdaa
Hor waa loo sii hoydaa
Hadal waa la hindisaa.

Ha'dii kale waxaan lahaa,

Muddaan uurka hurudnayoo
Culays bay hayn jirtoo
Xanuun bay la hinqatee
Hooyadu waa lama huraan.

Habeen gooruu badh tegey
Caanihii bay nagu habtoo
Horaadkay noo dhigtoo
Dharkii bay na huwisee
Hooyadu waa lama huraan.

Calooshaadoon hig odhan
Adoon ka haqab tiran
Hunguri ma haweysatee
Hooyadu waa lama huraan.

Hadaaq gooraad tahoo
Adoo ciiddii hanbadey
Dhakhsaba waa ku hinjisaa
Hooyadu waa lama huraan.

Afkaan ku hadlayno iyo
Hannaankeenniyo hubqaad
Hagaag bay noo bartee
Hooyadu waa lama huraan.

Innaga oon haybad qabin
Hal beeso ah suubsan karin
Habaaskay naga huftoo
Waa tii noo hiilisee
Hooyadu waa lama huraan.

Si aannaan halis u gelin
Hungurigey suubbisaa
Dhakhsaba hoo kuma dhahdee
Intii ay ka hubsataa
Iyadaa kaaga hor martee
Hooyadu waa lama huraan.

Reerku hadduu yahay hayaan
Hayinka aad saaran tahay
Hoggaankay haysataa
Hoos bay kaala hadashoo
Intii aad ka huruddaa
Waa kuu heestaa haddana
Hooyadu waa lama huraan.

Cilmiga shiikh ku hormariyo
Nin haamaana iyo hanad
Iyadaa soo hayn jirtee
Hooyadu waa lama huraan.

Haddii loo baahdo hiil
Geesiga loo habar wacdiyo
Fuleyga aan haadka hubin
Iyadaa soo hayn jirtee
Hooyadu waa lama huraan.

Deeqsi aad soo haybsatoo
Hamuuntii kaa ba'shiyo
Bakhaylkaan kula hadlayn
Iyadaa soo hayn jirtee
Hooyadu waa lama huraan.

Aabbuhu waa hawsha guud
Iyana hoos bay hayaan
Habayntii guriga iyo
Hoygii bay noo huftaye
Hooyadu waa lama huraan.

Geed yaroo kaa haysta meel
Haddii aad haas dhahdaa
Hubkii bay ku handaddoo
Iyada oon hagar lahayn
Waa tii haw soo dhahdee
Hooyadu waa lama huraan.

Odaygu waa haajiraa
Hawuu meel ugu kacaa
Haddii aan mawdku helin
Hortaaday taagantee
Hooyadu waa lama huraan.

Habeenkaad soo dhaxdana
Hurdada aad uma heshoo
Qalbiga waa ka hammidoo

Hilow bay kuu qabtee
Hooyadu waa lama huraan.

Horey adigoon ahayn
Dadkii bay u hanjabtoo
Halyey bay kaa dhigtoo
Ammaan bay ku huwisee
Hooyadu waa lama huraan.

Abaarta hawaarsatoo
Harraad meel loogu go'ay
Hayhaato uu dhaanku yahay
Cirkuna haawanayahayoo
Halihi ay soo heshana
Hadday hoo ina dhahdaa
Innaga oonan u hanbayn
Waa tii aan heensannee
Hamuunteedii horiyo
Dhib bay la hagoogatee
Hooyadu waa lama huraan.

Sidii awr haamo wada
Dusheedaan halabsannoo
Hah! goortaas nama dhahdee
Waa noo sii hoorsatee
Hooyadu waa lama huraan.

Maradi ay nagu hantiday
Haddaan hoos uga dhacnaa
Wadnihii bay ka hinqatoo
Calooshay ka halacdee
Hooyadu waa lama huraan.

Alaabta horteeda taal
Haddaad laad ku hurguftaa
Habaar weyn kuma dhahdee
Inyar bay ka hifataye
Hooyadu waa lama huraan.

Hilowlaha ay dhashaa
Haddii meel laga hayaa
Asuu kaaraa habeen
Waa tii hoogaysatee
Ilmadu soo hibitiqdee
Hooyadu waa lama huraan.

Haddaan been lagu hadlayn
Wadnaha hawdiisa iyo
Halbowlaha dhiigga wada
Hareer baa laga dhigoo
Halkay joogaan iyagu
Yaa loo soo wada hoydee
Hooyadu waa lama huraan.

Hantida aad leedihiyo
Wixii aad haabataba
Haddii loo siiyo hibo
Abaalkeed lama helee
Hooyadu waa lama huraan.

Heddaadu hadday gashaa
Hog goortii lagu geshaa
Wadaaddadu kula hadlaan
Aabbaha lama habar wacee
Waxaad tahay ina-heblee
Hooyadu waa lama huraan.

Ha'dii kale waxaan lahaa

Adduunyadu waa haween
Halkaas layskuma hayee
Nin doonaba ha hadlo'e
Hooyadu waa lama huraan.

Hirarka gaagaaban iyo
Hawada yaan ka hadlayaa
Waxba anigoon hanbayn
Hubaashiina aan hayaa
Hooyadu waa lama huraan.

Ha'dii kale waxaan lahaa

Hanfade ruuxii noqdaa
Waxbana kaama hantiyee
Hubaashii baan hayaa
Hooyadu waa lama huraan
H O O Y O !!!!
Hooyadu waa lama huraan.

Maxamed Yuusuf Cabdi (Keyse) waa curshaa (hal-abuur) leh suugaan mug weyn oo hal-muceed ah, casrina ah. Keyse waa qoraa qalinkiisu awood leeyahay, ereygiisuna uu dad badan saamayn ku yeesho. Maxamed-keyse waa nin dhallinyaro ah, waxaanu ku nool yahay waddanka Holland. Tuducyada xagga hoose aynu ugu tegi doonnaa waxa ay ka mid yihiin maansadiisa Unug oo si la-yaab leh oo farshaxan ah uga hadlaysa qiimaha iyo kaalinta haweenku nolosha ku leeyihiin, gaar ahaan hooyada iyo doorarkeeda. Unug waxa ay curatay 24/04/1994. Waxa ay tidhi:

Haddaan ayro haween
Oori loo xulanayn
Haddii aan aqal weyn
Arbe loogu dhisayn
Haddaan oogta hablaha
Lagu soo irkanayn
Ugubkooda haddaan
Lagu soo ururayn
Agabkooda haddaan
Isirkeennu dhaxlayn
Haddii aan Ardo iyo
Asli loo wacanayn
Haddii aanay Ugaas
Iyo Aarar dhalayn
Haddaan hooyo irmaan
Lagu soo ababayn
Adhaxdeeda haddaan
Ammaan loogu ledayn
Yaa itaashan lahaa?
Yaa abqaalmi lahaa?
Tolow yaa udub reer
U aasaas dhigilaa?
Tolow yaaba aroos
Ololaysan lahaa?

Tolow yaa ilmo hooy
Edeb loo koriyoo
Amran yaa fililaa?
Ubad yaa dhalilaa?
Aabbo yaa odhanlaa?
Yaa Ayey helilaa?
Yaa Awow noqonlaa?
Yaa Adeer wacaniyo
Abti yeelan lahaa?

Ehel yaa tirsanlaa?
Arxan yeys bidilaa?
Yeysu ooyi lahaa?
Tolow yaa il jacayl
Isku eegi lahaa?
Yeys abbaansan lahaa?
Tolow yaa ifkan hee
Is ammaanan lahaa?

Yaa isu oomi lahaa?
Is ooyoonba lahaa?
Yaa is aammini laa?

Aqoontaa ugu weyn
Arrad aad ka baqdee
Eray yaa is farilaa?

Maxamed Ismaaciil Maxamuud ‘Baasarce’ oo ‘Belaayo Casna’ loo yaqaanney, markii dambena ‘Barkhad Cas’ loo bixiyey, waxa uu ka mid ahaa bud dhigeennadii ama aasaasayaashii hormuudka u ahaa fanka iyo suugaanta soomaalida ee casriga ah, gaar ahaan suugaantii halgankii gobanimo-doonkii iyo dardarihii jacaylka. Baasarce waxa uu Alle ha u naxariistee isna ahaa waddani qayuuri ah oo miiggan. Waxa uu ahaa nin fannaan ah oo xigmaawi ama Curshaa ah, xarragaawi ah oo bulshaawi ah. Magaalooyinka Hargeysa iyo Cadan ayuu ku kala noolaan jirey Maxamed Ismaaciil. Nuskii dambe ee tobanlihii 1950-kii Barkhad Cas waxaa si ba’an u haleelay xanuunkii geeridiisa horseeday sannadkii 1963. Galab isaga oo gidaar fadhiya oo cadceedsanaya, ayay gabdho aqoon hore u lahaa Maxamed soo ag mareen. Gabdhihii waxa ay isku qabteen inuu ninka derbiga fadhiyaa yahay Maxamed Ismaaciil Belaaya cas iyo in kale. ‘Naa waa isagii iyo maaha ee waa nin kale’ iyaga oo isku leh, ayuu maqlay. Wuu joojiyey oo u gacan haadiyey, una bilaabay jiiftadan quruxda badan ee soo socota. Tixdu waa waddani dareen fog xambaarsan oo halis ah, waxaanu ku hal qabsanayaa hooyadii gacalo iyo in ay tahay cidda keliya ee ilmaheeda si shishe u garan karta, aqoonsan karta ama garan karta isbeddel kasta oo ku yimaadda, afna taqaan iyada oo aan la hadlin, waxna waydiinin.

Adigaa gabadh yahay habeen gudayee
Anigoon guunyo waayin geel dhalay
Gasiinka la cuno afkaa ma geshee
Gaajiyo cudur gaanka iima sudhnee
Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Waxa i goday waa gumaysiga!

Sidii garanuug abaareed
Amase geri laacay geed sare
Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Gurucaa dheeri waa gumaysiga!

Sidii geesi uu tolkii gacmo jaray
Garowshiinyo waayey oon gardarrayn
Ilmadan go’i weydey ee gobo’liyo
Gama’aan diidey waa gumeysiga!

Waanigii gabannimo aroos ku galay
Waanigii gaari helay garaaro leh
Gaasira isagaa na kala geeyoo
Carruur ma gargaarsadoo ma gartee
Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Goblankaan ahay waa gumeysiga!

Ma gaadhin geddaad i moodaysoo
Gu’gaygu soddonkii labuu ka gudbee
Guudkaa i caddaaday ee i gudhiyo
Gabaxdaan idhi waa gumaysiga!

Wax ii gooniyiyo guhaad ma qabee
Soomaalaa giddigeed is gaadaysoo
Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Cadhadaan gubnay waa gumaysiga!

Gambadii dumarkaa la ii guntiyoo
Gabbalbaa iigu dhacay gasiirad cidlee
Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Gabaahiiri waa gumaysiga!

Rag baa gacalkay na kala geeyoo
Gaadiyo nacab baa sir geesa wadoo
Afgaran-waagu waa gumaysiga!

Garaadnimo iyo gobbaan u dhashoo
Gibirbaan ka baxshaa haddaan wax gatoo
Nin Gini qaatay baa i gacan geliyoo
Hooyaday gacalaa afkuun garatee
Gartaydaan waayey waa gumaysiga!

GUULLOOW adigaa gargaare ahoo
Ninkii la gumeysto u gacan celiyee
Anigoon afar gaal gabbaad u ahayn
Anigoo geesiyoon gabloonnayn
Inaan calan gaara guudka sudhiyo
Lixdanka gabannimo i gaadhsii.

Ducadaas Alle wuu ka aqbalay oo Maxamed Ismaaciil Maxamuud (Barkhad Cas) waxa uu goob joog ahaa 26-kii Juun 1960 maalintii calan saarka ee Beerta Xorriyadda ee Magaalada Hargeysa, dhawr sannadood ka dibna wuu geeriyoodey. Alle ha u naxariisto.

Yaasmiin Saxardiid Maxamed Cadduur; waxay ahayd gabadh aad iyo aad u dadnimo wanaagsan, oo karti badan. Si gaar ah, waxay caan ugu ahayd; deeqsinnimo, firfircoonaan, taakulaynta dadka jilicsan, qabanqaabinta ama abaabulka arrimaha soo kordha, Naxariis iyo hadal qabow oo macaan iwm. Yaasmiin waxaa ku yimid oo ku soo boodey xanuun lama-filaan ah.

Maaddaaba ay qof wanaagsan ahayd, dhammaan dadkii ay is-yaqaanneen, eheladii iyo asxaabteedii ayaa Yaasmiin la wada xanuunsaday. Dhuux Digaale Ducaale waa hal-abuur da’ yar oo ku nool magaalada London, waxaanu ka mid ahaa dadkaa ay macaariifta ahaayeen ee la murugeysnaa xanuunka helay Yaasmiin. Sidaas bay heestani ku soo baxday, waxaanu Yaasmiin Eebbe ugu baryayey inuu siica ka kor qaado. Maansadu waxa ay soo baxday 12/6/03. Heestu waxay tidhi:

Caalamkaba dhammaan
Cirrooliyo carruur
Qosol lama cugtoo
Dhallin iyo caweys
Kala caaridoo
Adigaa Cawooy
Cadceed soo baxdiyo
Caddo noo ahoo,
Cashiiradaadi iyo
Caarkaagi baa
Carta kula qaboo
Inaad caafidaan
Cabasiyo walleyl
Camma iyo watiin
Ugu celcelinayaa,
Inaad caafidaan
Cawo iyo ayaan
Casiis tuugayaa.

Adigaan Cawooy
Caaddil kuu baryee
Mar labaad cagaa
Walaal ciidansoo
Rabbi caafimaad
Dhakhso kuu cabsii

Caafimaadka iyo
Cudurkaba illayn
Caaddil baa baxshee,
Isagaan Cawooy
Caabuqaa ku helay

Ula cabanaynaa.

Curuuqdiyo dhammaan
Jidhka intii cakiran
Calooshiyo wadnaha
Carrabkaaga iyo
Tin ilaa cidhbaha
Ciriq wixii ku jira
Rabbi kaa culyoo
Catir kaaga bi'i.
Caafimaad sareecana
Oo ka cad daruurtiyo
Cadceeddoo ifaysoon
Casuus iyo guduud iyo
Inna caad lahaynbaan
Rabbigeenna culus iyo
Caaddil inuu ku siiyoo
Siicaad la ciirtiyo
Kaa siibo cudurkoo
Kulli kaa cidaadaan
Calaacalaa u wadhayaa
Eebbe kuu codsanayaa.

Ilaahii cirkiyo
Samadiyo carshiga
Cayn-cayn ka dhigay,
Carradana baddiyo
Buuraha cammiran
Ku culaysiyee
Geedaha caleen
Cosob iyo ugbaad
Ku cigaalayee
Ciidda noo goglee,
Gudcurkiyo caddada
Kala caynadshee,
Coofleeyda haad
Cuud iyo dugaag
Waxa cuun ku jira
Kala cida ka dhigay,
Ee carsaanyadiyo
Caasha-badhida iyo
Caaro kol ay ku tahay
Midba ceesh u qoray.
Adaan caawiyow
Adaan caaddilow
Baryo kaa cugtee
Faya caafimaad
Yaasmiin u celi .

‘Nin rooni ma raagaa la yidhiye’ Muddo 9 bilood ku dhowdhow markay Yaasmiin xanuunsaneysey, ayay maalin Axad ah 18kii Jannaayo 2004 - 2:15 maalinnimo ku Allaysatay Cusbitaal ku yaalla xaafadda Wembley ee magaalada London galbeedkeeda. Aaskeediina wuxuu u ekaaba aaskii ugu dadka badnaa, ee ka dhaca magaaladan London. Eebbe naxariistii janno ha ka waraabiye’e Yaasmiin dhawr wiil oo carruur ah ayay ka tagtay.

CIYAARAHA HIDDAHA IYO DHAQANKA

Gu´ hagaagey oo da´ay
Dhulka geedo jiifaan
Gurya-samo barwaaqa ah
Haddii geeddi lagu furo
Dhallinyaro is guratаа
Gurdan raaca fiidkii
Gole weyn ku kulantoo
Cagta garan-garteediyo
Isu geysa jiibkoo
Googooska luuqdiyo
Gedda sacabka loo jaro
Hablahaa u gaaroo
Garashada codkoodaa
Qof gaboobay kicisoo
Gelbiskiyo mashxaraddaa
Gama’ kaa ilaashee
Haddaan gabadhi boodeyn
Illayn gegi ciyaareed
Wax ma dhaanto geriyaad.

Hees-ciyaareedda dhaqanka iyo hidduhu waa isir weyn oo rukun adag ku dhex turqaday oo ku haya suugaanta iyo hiddaha soomaalida. Waa ciyaar leh luuq, sacab, jaan iyo jiib wada socda. Waxa ay ka mid tahay suugaanta isla casriyaysay waayaha iyo wacaasha ummadda ee magaalada soo gashay, dadkana saamaynta ku yeelatay. Qalabyada fanka casriga ah lagu garaaco ayay hees-ciyaareedda dhaqanku la fal gashay oo lagu tumaa. Jaanta iyo jiibkeedu kama maarmaan isku dhafka ragga iyo dumarka, waase la arkaa dumar goonidood fagaare isugu habar wacda oo ku tunta ama ciyaaro u gaar ah leh. Sida loo ciyaaro iyo magacyadooduba waa u kala geddisan yihiin oo waa u kala gaar gobollada iyo degmooyinka soomaalidu ku dhaqan tahay. Kuwa ugu caansan ee fagaareyaasha murtida iyo madadaalada ka dhex muuqday, arladana isku wada gadaamey

ama ugu yaraan magacyadooda la wada yaqaan waxa ka mid ah Dhaantada, Saylicida, Jaan-dheerta, Batarka, Hanna haybsanta, Bariyada, Baarcaddaha, Hirwada, Wiglada, Saarka, Beerreyda, Haanta, Walasaqada, Gableyshimbirta, Shirribka iwm. In kasta oo is dhexgalkii dadka soomaalida ee gobannimada ka dib iyo berisamaadkii fanku (1965-1975) isu soo dhoweeyeen ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka, haddana ciyaar kastaa waxa ay xoog iyo tis-qaad ku leedahay gurigii ay ku dhalatay, kuna socod baratay ee ay ka soo jeeddo asal ahaan.

Tusaale ahaan Saylicidu waxa ay jirridda ku haysaa Gobolka Awdal ee xaruntiisu tahay magaalada Boorame oo laga ciyaaro wilwilada, Shaxleyda iyo Billaawaleyda. Jaan-dheerta iyo Batarku waxa ay ku baahdaa oo laga ciyaaraa gobollo dhawr ah, sida Gobolka Hargeysa oo caasimaddiisu tahay magaalada Hargeysa iyo Gobolka Togdheer oo xaruntiisu tahay magaalada Burco. Jaan-dheerta waxaa kaloo laga ciyaaraa Gobolka Sool oo xaruntiisu tahay Laascaanood. Hanna-haybsan iyo Bariyo waxaa laga ciyaaraa Gobolka Sanaag oo xaruntiisu tahay Ceerigaabo. Bariyo iyo Baarcaddaha waxaa kaloo laga ciyaaraa Gobolka Togdheer, Xoog weynta iyo Saddexleydana waxaa kaloo laga ciyaaraa agagaarka Hargeysa. Jamhuuriyadda jabuutina waxaa laga ciyaaraa Saylicida, Wilwilaha, Bogcadda, Saddexleyda, Xoog weynta iyo qaar kale. Dhaantada, Jaan-dheerta, Batarka, Hirwada, Wiglada, Saarka iyo qaar kalena waxaa laga ciyaaraa Gobollada kala duwan ee Soomaalida ee Itoobiya hoos taga iyo meelo kale. Haanta, Walasaqada iyo Jaan-dheertana waxaa laga ciyaaraa Gobolka Nugaal oo xaruntiisu tahay Garoowe. Gobolka Bari oo ay xarun u tahay Boosaaso waxaa laga ciyaaraa Mingiska iyo Fadhi Ku Ciyaarka. Gobolka Mudug oo magaala madaxdiisu tahay Gaalkacayo waxaa laga dheelaa Haanta, Dhaantada iyo Walasaqada. Galguduud oo ay xarun u tahay magaalada Dhuusa-marreebna, waxaa laga ciyaaraa Dhaantada iyo Walasaqada. Hiiraan oo ay magaalo madax u tahay Beledweyne waxaa laga ciyaaraa Beerreyda, Bullada, Walasaqada, Caweys iyo Gabley shimbirta. Gobolka Banaadir oo xaruntiisu tahay Muqdishana waxaa laga yaqaan ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka ee Shirribka, Kabeebida, Wareegtada, Shoobada iwm. Gobolka Shabeellada Dhexe oo ay xarun u tahay Jawharna waa Shirribka, Kabeebida, Luunbida iyo qaar kale. Gobolka Shabeellada Hoose iyo xaruntiisa Markana waa Shab-beerreeyda iyo Hunbaalleeyda. Gobolka Jubbada Dhexe oo xaruntiisu tahay Bu'aalena waxaa laga ciyaaraa Waalada, Shuuleeyda, Saar-lugeedda, Beerreeyda iwm. Jubbada Hoose iyo Kismaanyana waxaa ka mid ah ciyaaraha lagu yaqaan ee laga ciyaaro Gabley shimbirta, Shabka iyo Diisowda. Gobolka Bay iyo caasimaddiisa Baydhabana waa Beerreeyda, Waaleeyda, Dhiiribada, Shoobada iyo qaar kale. Bakool iyo xaruntiisa Xuddurna waxaa laga ciyaaraa Saarka, Waalada, Dhiribada iwm. Gobolka Gedo iyo caasimaddiisa Garba-haarreyna waxaa ka mid ciyaaraha ay caanka ku tahay Saarka, Gaalaysada, Jiibka iyo qaar kale. Gobolka NFD ee soomaalida Kenyana waxaa laga dheelaa ciyaaraha ay ka mid yihiin Saarka, Gaalaysada iwm

Ciyaarahan hiddaha iyo dhaqanka soomaalidu waxaa la ciyaaraa xilliga arooska, munaasabadaha Iidda iyo farxadda xafladaha, iyo amminta cawaysinka iyo haasaawaha ee xilliyada barwaaqada iyo berisamaadka marka roobku da'o, xooluhuna dhalaan, waana heeso tixaysan. Qaafiyad iyo dhacdo ayay leeyihiin. Xeerar iyo qawaaniin ayay leeyihiin. Waxaa lagu curiyaa habka gole ka fuulka oo goobta ciyaarta ayaa lagu sameeyaa. Lama oggola in sida maansada kale maskaxda la soo tuujiyo oo wakhti la siiyo ka soo baaraan-

deggooda. Waa wada xujooyin iyo hal-xidhaalayaal ay ka buuxaan xidhmooyin geedaysan oo wada kaftan ah, haasaawe ah, af gobaadsi ah, duur xul ah, daandaansi iyo maagis ah iwm. Intaas oo dhami kuma xad-gudbaan xeerarka iyo qawaaniinta nolosha ka dhex jirta oo way xurmeeyaan anshaxa iyo asluubta dhaqan, hidde iyo diineed intaba. Waa la isku reebaa golaha oo waa lagu kala adkaadaa isu baanidda iyo dhoolla-tusyada ciyaarta dhaqanka iyo hiddaha, waxana la iska ilaaliyaa deel-qaafka iyo meel-k-dhacyada oo ka mid ah waxyaalaha ay ku kala hadhaan dadka golaha ciyaarta ka qayb qaadanayaa. Tusmooyinkan soo socdaa waxa ay ka mid yihiin ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka, gaar ahaan Batarka, Bariyada, Hanna-haybsanta, Baarcaddaha, Jaan-dheerta, Dhaantada, Shirribka iwm.

Gabadh ayaa hiyigeedu galay in ay habeen ciyaar guddo. Hooyadeed oo ahayd haweeney garasho dheer ayaa dareentay in gabadheedu caawa ciyaar gud isu xidh xidhayso. Waxa ay inantii ku tidhi: ‘waa hawraarsan’ ee iska ciyaar gud, hayeeshee inta aanad caweys raacin horta weylaha lo’da ka xaree oo dhacanta u dheeree, naylahana qalwada ku gur oo qoolashana u raaci, dhakhsana u soo noqo oo ha soo raagin. Inantu ballantii hooyadeed kama soo bixin oo way ka qabyo tagtay, waxaana ka taag roonaaday deg deggii dhallinyaronnimo, horena uma soo laaban oo waxaa jiitey jugtii, jaantii iyo jiibkii ciyaarta. Fariid ayay inantu ahayd oo way ogaatey khaladkeeda ka dib markii xaraaraddii saarka ciyaartu ka soo degtey xilli ay caweysin dambe tahay oo xiddigihiina sii daadanayeen. Waxa ay ka werweraysaa waxa canaan iyo dagaal kaga iman doona hadhowto hooyadeed oo ay kulayl ku og tahay.Way heestay oo waxa ay tidhi:

Waagii ma daalacay
Diriradii ma daateen
Dabran dibigi maw dhacay
Daylo nayshi may ciday
Hooyaday dagaal badan
Berrito may dilaysaa.

Haddeerna wiil iyo gabadh ayaa fagaare jaan-dheer ka socoto isku laba rogaya, ereyana is dhaafsanaya. Waa la is xifaalaynayaa, xod-xodashana meesha kama madhna. Inantaa daandaansiga iyo faduulinta ku horraynasa oo odhaynaysa:

Ninku inuu rujuun yahay
Raggana uu ka weyn yahay
Sacabka raaba qaadkiisiyo
Reenkaad ka garataa.

Inankii fallaadhaasi ku dhacday wuu ka jawaabayaa oo inanta ayuu ku sakaaro tuurayaa in hadduu guun yahay ay iyana guumeys tahay, waxaanu yidhi:

Dhaanaad rogaal celisiyo
Adhi baad ku raxan-raagtoo
Rag la’aan baad la dhali weydee
Naa ruuxaagu maad yarid.

Inan (wiil) kale ayaa isna inan (gabadh) gole ciyaareed kula haasaawaya. Waxa uu yidhi:

Sida qoodhtankii bariyoo
Qoor meelo ka onkodey
Aad baad u qurux badantee
Aadyar maysku qabannaa?

Aan is guursannuu yidhi, hayeeshee waxa ay inantii ugu jawaabaysaa in quruxdeeda uu guur-doonku tilmaamay ay ka sokayso carmalnimadeedu iyo inuu taas ku gelayo, kuna qaadanayo, waxanay tidhi:

Waar qori rayfalaan ahayoo
Qashar-tuurtii ka maqan tahay
Ee maygu qaadanaysaa?

Mar haddii uu isagu inanta faduusha kaga horreeyey, wixii uu doonayeyna loo tibaaxay in laga yeelayo, xaqiiqo kalena loogu sii lifaaqay, waa inuu inanku kelyo-adaygaa oo inanta isu dhiibaa. Dariiq kale uma bannaana, waxanu odhanayaa:

Qumman qaayo badaneey
Quruxdaa ma deyn karayee
Qolqolkay ku soo hoyo.

Ma hadhin hadal lays yidhaahdaa. Inantii waxa ay tidhi hawraarsan iyo haye:

Mar haddaad i qaayibtayoo
Qancisna xaalku kaa yahay
Waar aniguna qabuul idhi.

Wax weydiin ogaal iyo kaftan ayay haatanna laba lammaane isugu rogaal celinayaan heestan soo socota, inanta ayaana ciyaarta hor gelaysa:

Inammo caato joogsadey
Haddana cawaandi kala rogey
Waar cilmigooda noo sheeg?

Inankii:

Naa cilmigooda sheegaye
Cunug yaroon adkaan weli
Cuud badanna foofsaday
Caaqilna aabbihiis yahay
Caashaqna looga yaabee
Ee cadradaan cidnabow dhixin
Cadarna kaaga soo uray

Adigu cilmigeeda noo sheeg?

Ceeb bay ahaan jirtey dhaqanka soomaalida in habluhu inta aanay reeraysan ka hor isticmaalaan oo laga uriyo cadar iwm. Tolow xaggay haddaba inantu isku taari doontaa? Si ay xujadan foodda meel ugu saarto waa inay jawaabtaa oo weliba sheekada soo gun xaadhaa si aan hadalku u daaq tegin, haddii kale is dhiibtaa.Waayo waxaa meesha yaalla xeerkii ahaa: *Hadalna sii dheh baa diley, hambana sii hudh baa diley iwm*. Si geesinnimo leh ayay u jawaabaysaa, sheekadana u xidhaysaa, waxanay odhanaysaa:

Waaryaa cilmigooda sheegaye
Cirshigiyo Qura'aankuba
Ceeb bay ku sheegeen
Anigiyo ciddaan ahay
Caariyaannu ka nahoo
Ceelkiinnaanu ugu nimi!

Nacas xoolo badan iyo wiil fariid ah oo caydh ah, ayaa gabadh ku kulmay. Inantii baa ogaatey sida ay wax u jiraan. Gole ciyaareed oo ay labadii barbaarba joogaan, ayay ka heestay, iyada oo ina adeerteed ku soo goosanaysa, waxanay tidhi:

Nin raga iyo nacaskii reer badan
Iyamaa la raacaa?

Ina adeerteed oo xaajada wax kala socota, ayaa u jawaabaysa oo tidhi:

Naa isaguba rogrogi dooneeye
Ninka ragaa la raacaa.

Jaan-dheertu waxa ay ka mid tahay ciyaaraha dhaqanka ee hore u tisqaaday, lagana ciyaaro meelo badan oo ka mid ah dhulalka soomaalidu degto.

Inankaa odhanaya:

Hobeey gabbal dhacay gadaashiis, hobeeyooy!
Ganaane ma loo arooraayeey, hobeeyooy!

Inantii:

Ganaanaha Gaanihii baa joogee, hobeeyooy!
Guud weyn haw aroorin galabtiiyeey, hobeeyooy!

Inankii:

Wanaag badaneey aan wada hadallee
Wajeer iyo Waamo ii raaceey

Inantii:

Wajeer iyo Waamo waa wax fogeey
Wiiloow iska keen walaayadda'eey
Abkay waa Dir iyo Daaroodeey
Adoo kale aadmi laga waayeey.

Inankii baa ku xidhaya heesta:

Abtirsiimiyo adeerro saneey
Ammaan abtir baad u leedahayeey

Baarcaddaha oo dadka qaarna Baahilowlaha u yaqaan waxa uu ka mid yahay ciyaaraha dhaqanka iyo hiddaha kuwa ugu caansan ee faca weyn, waana ciyaaraha loogu tala galay dadka dhiman. Tusaale ahaan nin dhiman ayaa kacaya, una baahanaya in loo tumo, laga cuudiyo oo saarka laga soo rido. Guryaha ayuu ninkaasi ku wareegaa marka lagu kaco oo hablaha ka soo ururiyaa, 'baarcaddena tuma' ku yidhaahdaa. Waa la yaqaan ninkaas oo lagama tagee waa laga tumaa ilaa uu ka miyirsanayo. Tumidda ciyaartu waxa ay ninkaas dhiman ugu jirtaa halka iraabka iyo dawada laga siiyo ee lagaga dejiyo dadka dareenkoodu kacsan yahay ee maskaxda wax ka qaba.

Baarcadduhu waxa uu leeyahay luuq, jiib iyo cod u gaar ah iyo dhawaqyo lagu bineeyo, dhextaalna u noqda jiibtiisa sida hoos ka muuqata. Baarcaddahan soo socda oo hablo iyo nin is dhaafsanayaan waxaa loo tumayaa nin kacsan oo doonaya in sangaallaha laga soo rido, dhinaca kalena waxaa lagu xifaalaynayaa ragga reer magaalka ah iyo dumarkoodaba, waxaana la sii oddorosayaa ifafaalayaal ku saabsan dhalliilo taban oo dhinaca magaalada ifkoodu ka soo bidhiiqayo. Hablaha soomaalidu ma cabbi jirin shaaha oo ceeb buu ahaa, hilibkana misigta ayay ku lahaan jireen. Marka la eego dhaqanka soomaalida ee reer guuraaga ah waxaa hablaha looga tudhaa in la siiyo cuntada duxda iyo dufanka badan leh. qaabka dhismaha jidhkooda iyo quruxdiisa ayaa la ilaalinayaa, waxaana la doonayaa inuu jidhkoodu soohnaado, dhexdu madagta ama taako ahaato, afkuna qalin madow ahaado! In jidhkoodu debco oo isku daato ayaa laga feejignaan jirey, shaaha iyo cuntada duxda iyo subagga badan lihina waxa ay ka qayb qaataan arrimahaas hablaha loo diidayo. Ilmaha aan si sharciga waafaqsan u dhalan ee uu gogol dhaafka iwm sababaan ayaa ilaa imminkaba iyana ceeb ku ah soomaalida dhexdeeda. Baarcaddahan soo socdaa waxa uu durayaa Cismaan Yare Caga-dabayl nin loogu yeedhay oo Cadan dhowaan ka yimi oo wata shan dumar ah oo shantuba wada shaahya cab ah, shan carruur ah oo aan meher ku dhalanna haysta!

Ninkii:

Helleelooy iyo helleelooy yaa, heey haa!
Haddaan casarkii carraabooy yaa, heey haa!
Haddaan dawga cagta saarooy yaa, heey haa!

Haddaan Cumar Daahir sheegtooy yaa, heey haa!

Ciduun baan heli lahaayeey yaa, heey haa!
Casaankiinnaa i hodayeey yaa, heey haa!
Helleelooy iyo helleelooy yaa, heey haa!

Hablihii:

Cismaan yare caga dabayloow waa, heey haa!
Shalay buu Cadan ka yimideey yaa, heey haa!
Shan naagood buu wataayeey yaa, heey haa!
Shantuba shaahaay cabbaaneey yaa, heey haa!
Shan garac bay kala sitaaneey yaa, heey haa!
Helleelooy iyo helleelooy yaa, heey haa!

Shimbiro geed dheer ka ciyeyeey yaa, heey haa!
Midiba cayn bay cidaayeey yaa, heey haa!
Carraba waa camaladeedeey yaa, heey haa!
Helleelooy iyo helleelooy yaa, heey haa!

Inankii:

Alla gabdhuu gaagaabanaayeey, heey haa!
Alla ma galab bay wada dhasheeneey, heey haa!
Alla ma gudimaa lagu sar jarayeey, heey haa!

Alla gabadha gabdhaha ugu dheereey yaa, heey haa!
Alla ugu dheeree dhababka rooneey yaa, heey haa!
Alla dhenkeedaa lay hayeeyeey yaa, heey haa!
Alla maruun yaa igu dhoweeyaay yaa, heey haa!
Helleelooy iyo helleelooy yaa, heey haa!

Hablihii:

Ninkii waallaa la waayeey yaa, heey haa!
La waa' oo la heli waayeey yaa, heey haa!
Alla daaraa lagu qafilayeey yaa, heey haa!
Helleelooy iyo helleelooy yaa, heey haa!

Dhaantadu waa mid ka mid ah ciyaaraha dhaqanka iyo hiddaha kuwa ugu magaca dheer, kuna fiday dhulalka soomaalidu degto intooda ugu badan, waa ciyaaraha hiddaha ee is casriyeeyey, magaaladana u soo raacay dadka ee lagu tumo qalabyada casriga ah ee muusigga. Dhawrkan tusaale ayaynu iyana ka soo qaadanaynaa.

Inanka ayaa ku ibo-furaya:

La jecel gacmo jeedalley jalanqooy
Ha jiifine oodda soo jebiyeey.

Inantii ayaa ugu jawaabaysa:

Wiil qalaadow wiil qalaadoow
Qoladaada wiil qalaadoow
Qoladaada noo sheegeey!

Inankii:

Ma degdegee ma degdegee ma duule
Jigjigiyo Jabuuti xukume, Jigjigiyo!

Galbeedka iyo dhinaca Jabuuti marka ay dhaantadu sii qabatana waatan:

Helleeyooy, helleeleheyooy
Allaalay huunnooy!
Helleyoo, helleeleheyooy
Allaalay huunnoy!
Dhahaay huunnoy, helleeyo dhaha

Gabadh iyo gambooleeyeey
Allaalay huunnooy!
Waxa guriga joogiyo'eey
Allaalay huunnooy!
Ka gashtiyo ka geystiyo'eey
Allaalay huunnooy!
Ka gadoodiyoow dhaha'eey
Dhahaay ka gadoodiyoow dhaha'eey
Allaalay huunnooy*!*

Shirribku waa ciyaar ka mid ah kuwa ugu duur-xulka iyo majaajillada badan ciyaaraha dhaqanka iyo hiddaha soomaalida. Maaha ciyaar ka tallowday degaankii ay ku dhalatay oo ah magaalada Muqdisho iyo nawaaxigeeda. Bal iyana aynu isla dhuganno tusmooyinkeedan.

Dhulku dadkoo dhan waw dhaxays
Dhiishaase ninba meel dhigtaa

Dhaxalka hidde waa dhigaal
Wax noo dhimmanna waa dhacaan

Dhicis lagama dhursugooy
Wixii isku dhiigi ways dhalaan
Dhaan raac dhaqan ka dhursugoo

Dhashaa ka leexataan dhahnaa

Abeeso uunka Eebbahay
Uma ekee waa astaan ku taal

Kursho ma dhaafto kurus geel
Korowna meel kurtin ku yaal
Hal godlatoo ganuun horyaal
Aan gaad marshaa ha gaagaxdee.

HEES BADEED

Hees badeeddu waa nooc ka mid ah heesaha dhaqanka iyo hiddaha kuwooda ugu casrisan. In badda lagu safraa waa dabeecad soo tiil carrada soomaalida boqollaal sannadood. Xeebaha dhererka iyo ballacaba leh ee arlada soomaalidu ka sakow dhererkooda la yaabka leh, waa bogcado ahmiyad weyn ku leh juqraafi ahaan marinnada Bad weynta Hindiya iyo Badda Cas. Xidhiidh fog oo ganacsi ayay dhanka badda soomaalidu kala lahaan jirtey ilbaxnimooyinkii hore, sida tii Masar, Finniiqiyiintii Shaam iyo Hindiya. Heesaha haddaba badda waxa ka mid ah:

Baddu daw la maro maleh
Duur lagu tilmaansado
Sida dalagyadii hawd.

Sawaaxil nin tegey
Sahal ugama iman
Hindiya nin tegey
Hammi waa qabaa
Cadan nin tegeyna
Cayn noolba arag.

Rabbigayoow shiraac jeexmiyo
Sharad go’aya kaa magan.

Saddex baa dillaalo leh
Naakhuude doonni leh
Naag dooroo nin deyra leh
Geelayagaa dillaalo leh.

Saddexna xiiso weynaa
Xaryanta raaciddeedii

Xamaro fuuliddeedii
Barbar seexadkii dumar.

Haddeerna waxaa isu baacinaya oo kala roganaya hees badeeddan soo socota haween iyo rag, waxaana ku horraynaya dumarka oo xeebta xeelligeeda kaga dhursugaya doonyihii Bombey, lana yaabban waxa ay la raageen, waayo waxaa soo xidhay oo marsada taagan kuwii Suuriya iyo Saaxil:

Hadba waan kacaa
Banka joogsadaa
Oo aan idhaah
Shamshamloow shammaalkii
Maxaa la tegeyeey
Reer Suuriyiyo
Reer Saaxil yimiyeey
Doonyihii Bombeey
Ma bir baa ku jabaneey.

Raggii baa soo jawaabaya:

Amba waan jeclaa inaan soo dhakhsado'eey
Jiilaashinkii baa
Jidka igu xayirayeey.

Haweenkii baa mar kalena lahaa:

Doonnideer shaxshaxlihi
Sow i sheegteeyoo
Ninka shukaanta u hayaa
Shaadir igu rogee.

RIGO (Hees dagaal)

Tanina dhaqan ahaan waa heesaha xilliga goolaaftanka dirirta iyo dagaalka la qaadi doono maanta ama berrito oo kale ama ifafaale dagaal uu soo af yeesho, ayaa guubaabo ahaan loo adeegsadaa.

Rigeeya rigeeya
Gabdhow soo rigeeya
Rigeeya rigeeya
Cagtana ku rabbaasa

Intay raamaleydu
Rasaasta ridayso

Rifane roori doonaa
Ri'diisa ha maalo.

Allahay Alle weeye
Islaamka ma diido
Anaa ku amraaya
Ahaan kari mayso.

Geeleenna nin qaaday
Gafuurku ha dhiigo
Gar iyo gar la'aanba
Gafuurku ha dhiigo.

MAAHMAAHDA, HAL-KU-DHIGGA IYO HAL-HAYSKA

Hal-abuurka haweenku waa halis. Maad iyo murti miidhan weeyaan. Inta aynu ilaa haddeerto wax ka soo tibaaxnay waxaa soo raacaya intan iyo in kale oo wada miid, maad iyo murtiyi ka cammiran tahay, kuna duugan tahay. Ragga ayuun baa loo haystaa in ay curiyeen maahmaahda soomaalida. Way jiraan maahmaahyo dumarku isticmaalaan oo aanay raggu la wadaagin, hayeeshee in badani kuma baraarugsana oo ma oga in haweenku hal-abuureen maahmaahyo halis ah oo xitaa raggu u adeegsadaan kacaa-kufka nolol maalmeedkooda. Waxaa kale oo hodan ah Hal-ku-dhigyada iyo Hal-haysyada hantida haweenka ka midka ah. Maahmaahda ayaynu ku horrayn doonnaa, kana soo qaadanaynnaa dhawr tusaale:

Ninba intuu cunuu ciidanshaa

Tani waa maahmaah ka mid ah kuwa xigmadda ku fadhiya ee sida maalinlaha ah rag iyo dumarba loo cuskado. Islaan ama habar baa hal-abuurkeeda lahayd ee bal ka warrama! Laga yaabee in laguba murmo oo lagaga masuugo ama dhabcaalo in loo hibeeyo haweeneydaas hal-abuurkan qiimaha iyo xigmadda ku astaysan.

Islaanta inanteeda weyn ninka qabaa waxa uu ahaa inan-la-yaal oo reerka uu xididka la yahay dhib iyo dheefba la wadaaga. Inantii ta weyn ka yarayd, ayaa waxa ka guursadey nin kale oo isna ku soo biiraya rugtii inan-la-yaalnimada. Hase yeeshee ninkan cusubi sheeko cusub ayuu la gole yimid! Waxa uu noqday 'nin cir weyn'! Neef adhi ahi ma deeqo! Cir weynidu waa ku ceeb carrada soomaalida. Ninkii cusbaa ayaa isha la isugu sheegay. Dareen xidid baa jira oo cidina waxba kuma caddayn karto. Xitaa xaaskiisu arrintaas kalama sheekaysan karto, waayo waa la isku cusub yahay. Warkii baa degmada galaa baxay oo dhex xulaya. Soddohdii baa dhegteeda laga badiyey. Ma hadli karto. In deg deg wax uga baxaanna ma doonayso. Ma hayso wax ay ku difaacdo inanka inanteeda qaba. Inan-la-yaalka cusub laftiisu doqon maaha oo ma mooga xantiisa. Tab ayuuse la maaggan yahay, ragannimana way u qarsoonayd.

Waxaa soo dhowaadey xilligii la guuri jirey. Waa in geeddiga hortii la sahan tagaa. Inan-la-yaalkii cusbaa ayaa in uu sahamiyo guntiga lowga u geysanaya. Wuu sahan tegeyaa isaga oo aan sahay iyo kayd midna sii qaadan. Yiddidiilo cusub baa curatay, gaar ahaanna u soo korodhay soddohdii yaabbanayd. Inan-la-yaalkii soo sahami, soona laabey.

Caynka ayaa awrtii hoosta laga geliyey oo la guur. Inan-la-yaalkii soo sahamiyey waa inuu noqdaa horseed reerka hor kaca. Marba gol ayuu uga soo baaqaa: Geeddiga soo wadaay! Wax la sii maqiiqnaado oo kuro iyo tuuro laga sii daadegoba, wax taagooyin iyo hirar soo muuqday la is dabo mariyo oo la dhaafaba, waxaa loo baxay dhul bannaan kax ah oo geed ku qariya aan lagu ogeyn. Badhtamihii ban weynahaas, ayuu goor gaaban inan-la-yaalkii cusbaa amray in awrta rarka lagaga daadiyo oo la dego. Waa la wada yaabay oo dhabanka iyo dhafoorka gacmaha la wada saaray! Habeen baa soo hor yeeshay. Arladu waa wada habar dugaag. Dadka iyo duunyaba waa u halis. Meeshu waa bannaan aan geed ood laga goosto lahayn. Waa ban weyne banan quusiyey oo bannaan oo dhan u faanaya!

Soddohdu way garasho dheerayd oo fahamtey in sheekada wax ku lammaan yihiin. Timir laf baa ku jirta. Goor dambe oo la fajacsan yahay oo la is wada eeg eegayo amankaag dartiis, ayuu inan-la-yaalkii cusbaa qaatay gudin, hangool iyo garab qaadkii oodda la iska xejin jirey marka meel laga soo qaadayo. Wuu tegey oo meel fog ka soo jaray ood weyn oo ka soo walwaaley. Laba jeer oo dambena isaga daba noqday. Oodi waxa ay ugu fillaatay xeradii adhyaha, midina tii geela, tii kale musareedkii reerka. Ood-rogooyinkii iyo afsaarihiina mar buu u noqday! Intii aan shaacuba madoobaan ayay ooddii reerku soo dhammaystirantay.

Adhigii baa soo xerooday oo la maalay. Afsaar weyn buu ku gooyey. Geelii baa soo xero galay oo la lisay. Af saar weyn buu isna caasha u geliyey oo afka ka saaray. Musareedkii reerkana ood- rogo ayuu afka kaga jaray. Habeenkaas la iska gataati dhac, iyada oo lala wareersan yahay wacdaraha ka soo jiijii leh inan-la-yaalkii cusbaa ee cirka weynaa! Cir weynidiisii caawa lagama sheekaysanayo, waxase carrabka lagu hayaa xoog weynidiisa isa soo mudh bixisay! Soddohdii imminka way ‘calan wallaynaysaa’ oo agteeda laguma soo qaadi karayo inanka inanteeda qaba iyo cir weynidiisii la qaadaa dhigi jirey.

La kaakac subaxdii, nabadna lagu loxos beri. Inan-la-yaalkii cusbaa barkimada ayuu dheeraystay oo xalaytoba, waxa uu xaaskiisa ku sii af geliyey in aan berrito aroornimadii la kicin. Haweenkii waxa ay damceen in ay ood-rogada iska qaadaan. Way dhaqaajin kari waayeen. Inammadii reerka ayaa loogu yeedhay. Waxba way soo kordhin waayeen. Inan-la-yaalkii horena loo yeedh oo isna goobta ku foos burburyey! Soddohdii way la socotaa sida wacdaruhu u dhacayaan. Waa maalinteedii. Waa halkii ay wax ka odhan lahayd. Waa halkii ay sannadkaba ereygeeda la beegsanaysey. Dad hortiiba ogaatey in ‘jinni ninkii keenaa, saari karo’! In ninkii oodda keenay joogo, qaadina karo. Waxayse ka fekeraysaa mahadhadii ay maanta ka odhan lahayd! Gacalkii oo dhami xidid iyo xigaalba goobta yimaadde oo way wada joogaan, waxse ka maqan oo hurdo ula kac ah oo qarad iyo muraad leh ku laalan inan-la-yaalkii cusbaa ee oodda dhigay. Waa in isagii loo yeedhaa. Waa in la soo toosiyaa. Soo kacyey oo yimid. Jimicsey oo far iyo suul ku qaad ood-rogadii. Mashxarad iyo dammaashaad ka dib, soddohdii baa isugu yeedhay gacalkii

oo iyada oo soo af jaraysa xamxamtii ku saabsanayd cir weynida inanka inanteeda qaba tidhi: Ninba intuu cunuu ciidanshaa! Warkaas loo wada guux, garowshiinyana laga wada keen cir weynidii inan-la-yaalka. Maalintaas ayaanay baxday maahmaahdan qiimaha iyo xigmadda ku lifaaqan tahay.

Baroortu orgiga ka weyn

Gabadh baa beri la sheekaysan jirtey wiil ay ilma-abti yihiin. Heshiis guur ayay wada dhigteen, waxaanay ku ballameen in aqal galkoodu dhaco marka roobku da'o. Naqii u horreeyey oo aan weli la goosan ayaa dagaal sokeeye ka dhex qarxay labadii qabiil ee inanka iyo inantu ka soo kala jeedeen. Waa la kala qaxay, dhimbiishii fidmaduna way sii hulaaqday. Waxaa dagaalkii lagu diley wiilkii ay gabadha ballansanaayeen. Warkii dhiilladaas sidey ayaa soo gaadhey qolqolkii inanta reerkooda. Inanta hooyadeed waa u eeddo rumaad inanka la diley. Baroor iyo murugo ayaa inantii iyo hooyadeedba ku soo korodhay. Orgi yar oo inanka lagu axmayo ayaa dhegta dhiigga loo daray. Inantii ayaa ku dheeraatay baroortii iyo murugadii oo hore uga maydhmi waydey. Haween reerka u soo wareegey ayaa inanta hooyadeed wax ka weydiinaya sababta inanteedu inanka uga samri la'dahay ee ay weli u sii ooyayso. Hooyadu way iska af gobaadsanaysaa oo inanteeda ayay doonaysaa in ay asturto, waxanay odhanaysaa: *'Geerida inanka ee nagu timid waxaa inanta u raacay oo u dheer qalitaanka orgiga yar oo ay adhiga ugu jeclayd, kana soo jeeda isir ahaan ri'dii inanta aan ugu xuddun xidhay markii ay dhalatay'.* Islaan khabiirad ah oo ka mid ah haweenkii goobta ku sugnaa, ayaa dareemaysa in sheekada inantu ay ka shishayso qalitaanka orgiga iyo ilma-abtinnimada inanka la diley. '*Timir laf baa ku jirta*' In meesha caashaq ku halligmey ayay tibaaxaysaa, halkaas baanay ku bixinaysaa maahmaahda mugga iyo xigmadda leh ee *'Baroortu orgiga ka weyn'.*

Lugtaneey kolba nin ku qaad

Dumaashu dhaqanka soomaalida waa ka mid. Qof dumar ah ayaa ninkeedii mawd ka qaadayaa. Gambada cad ama asayda maalintay dhigto ayaa waxaa guriga soo huluulanaya nin ay walaalo yihiin marxuunkeedii, ama uu adeer u ahaa ama ay ilmaadeer ahaayeen. Doorasho ma jirto oo waa qab ama ha qabin iyo amba waan ku qaadsiin! Dumaasha iyo xejinteeda waxaa xoojiya laba arrimood oo kala ah maalka qoyska iyo ubadka oo loo diidayo inuu abtirisiimo ahaan nin durugsani u yimaaddo.

Beri baa haddaba haweeney waxgarad ahi ninkeedii oo ay jeclayd Mawluhu ka qaaday. '*Uur hooyaa eex laga bartay*!' Nin dumaashigeed ahaa oo ay si fiican u taqaanno, nacasnimana loo qarin jirey, ayaa u soo miliqsaday dumaasheeda. *'Isma oga agoon iyo ninkii aabbihii diley!' 'Waa kaaf iyo kala dheeri!'* Hebel iyo dumaashiisu kaga xun wedkii dili lahaa! Wax la isla guurguuro oo la isla gebi dhacleeyaba, waxa ay talo ku soo ururtay in ninkaasi dumaasheeda leeyahay, ayna oggolaato. Habeenkaas ayay afkeeda laga qaadayaa haweeneydaas maahmaahdan: Lugtaneey kolba nin ku qaadyey!

Dumaasha waxaa soo raaca gabadha Xigsiisanka ah iyo ta Godob reebta loo yaqaan. Xigsiisanku waa marka ninka haweeneydu ka geeriyooto la siiyo haweeneydaas baxday

walaasheed si xidhiidhkii xididnimo u sii waaro, carruurtuna aanay ku raagin rajannimada ama laga hor tago in loo keeno haweeney ka fog habaryartood. Godob reebta iyada waxaa la siiya oo lagu samir siiyaa nin walaalkii la diley, waxaa bixiya cidda aanada geysatey, gaar ahaan waa ninka wax diley walaashiis ama inantiisa oo magta ayaa la raaciyaa gabadh godob reeb ah, faras xaal ah iwm. Si cadaawaddu u gamaarto ayaa halkii dhiiggu ku daatay xab la bururinayaa oo ubad dhasha iyo xididnimo lagu beeraa oo godobtii raagi lahayd lagu beddelayaa, sida magacaba ka muuqata – Godob reeb.

Gaari nin wanaagsani ka dhintay ayaa laga reebay murtidan hoos ku xusan:

Saddex goor bay gaari ooydaa!

Marka geesi qabi jirey
Guullaheed ka qaado'e
Gocor uga dambeeyo'e
Marba gogosha eegto'e
Ilmo gabax ka siisaa!

Maahmaahda loo nisbeeyo in ay ka mid tahay hal-abuurka haweenku ka badan inta halkan ku urursan oo tusaale ahaan uun loo adeegsanayo, waxaa kale oo jira tobannaan iyo tobannaan kale oo ka mid ah maahmaahda haweenka ku saabsan ee raggu adeegsadaan, kana mid ah hantidooda. Waxa aynu iyana ka soo qaadan doonnaa tusaaleyaal, hayeeshee aan ku horraynno tusmooyin ka mid ah kuwa haweenku isticmaalaan, kana mid ah hal-abuurkooda.

1) **Basari buulkeeda kaa og**
2) **Ciirtaa dhamaa ceebtaa yaqaan**
3) **Saaxiibtinnimo dumar waa bil saddex**
4) **Gambo dumar garasho isma dheera**
5) **Koore la qaadyaaba shalmadi raacday**
6) **Kor biliseed kabbo isma dheera**
7) **Maantana far baa maydh la'**
8) **Waa lay qabaa; waa qaan**
9) **Wax la raajaa rag kuma sama**
10) **Wixii xunba Xaawaa leh**

Waxaa ciidda iyo camaarkaas (carradaas) ka badan maahmaahda raggu adeegsado ee arrimaha haweenka ku taxmaysa. Buug iyo buugaag ayaa iyaga oo keliya laga allifi karaa, halkanse waxa aynu ku soo qaadan doonnaa tusmooyin ka mid ah. Sideedaba maahmaahdu waa isir run ah oo ka soo jeeda nolol run ah. Waxaa maahmaahda loo adeegsadaa doc kasta oo nolosha ka mid ah. Dhacdo kasta iyo xaalad kasta waxaa loo heli karaa marka la eego dhaqanka soomaalida maahmaah ku habboon oo qabaynaysa, soona dhoweynaysa oo sahlaysa fahamka dhacdada ama xaaladdaas laga hadlayo ama lagu foogan yahay ee lagu dhex jiro. Maahmaahda haweenku waxa ay ka hadashaa qiimahooda, haybaddooda, sharaftooda, milgahooda, xayadooda, xishoodkooda, kartidooda, kaalintooda, doorarkooda, quruxdooda, dhabeelnimadooda, gaarinimadooda,

goonbaarnimadooda, basarinnimadooda, baalinnimadooda, ragannimadooda, doqonnimadooda, degganaantooda, sal fudaydkooda, garashoodooda iyo kas xumadooda, xidhiidhka ay la leeyihiin nolosha oo dhan, raggooda, ubadkooda, xoolahooda, gurigooda iwm.

Naftu inay macaan tahay ninkii laga maljiidaa og
Geel inuu magool yahay ninkii maali jirey baa og
Walaal inuu mar-kaab yahay ninkii madi ahaa baa og
Marwo inay miciin tahay ninkii maato koriyaa og!

Geeelu Qalaanqal iyo duqow qadhin meel leh kama tago
Qalinlow biciidkuna meel qoor ah kama tago
Anna Qaafo iyo Dheeg qosolkooda kama tago.

Makaa sharaf leh
Malab baa cunto leh
Muxubbo diintaa leh
Marwo aan la quudhaynin
Iyo macango naagaa leh.

Marwo hadal xun maangaab ninkeed maqasha baa dhaanta.

Dumarku waa butuco ladan
Farasna waa baroor godan.

Bal haddeertana aynu hoos u dhuganno tusmooyinkan ka soo jeeda maahmaahda raggu u adeegsadaan arrimaha haweenka:

1) **Ayaanley aqal ma weydo**
2) **Ilmo hooyadood bay u ooyaan**
3) **Inani waa hooyadeed**
4) **Dumar badhaadhahooday ka sheekeeyaan ragna ba'ooda**
5) **Dumaal nin ka xishooday kama ilmo dhalo**
6) **Rag haween baa is dhaafsha**
7) **Dhabeel iyo naag dhaliil leh si looma wada dheehdo**
8) **Habar dhali weydey aleelo ku waalatay**
9) **Habar fadhida legdini wax uga fudud**
10) **Haween u samir ama ka samir**
11) **Haweeni waa kabane kabto iyo kabane jebiso**
12) **Karis xun iyana wax ku la'**
13) **Kas dumar oo kadaloob rag kaaga dambeeyey kiiba maaha**
14) **Naagina ninkeeda ma dhinto**
15) **Naagi waa tii hadalkaaga maqasha, hantidaadana dhawrta**
16) **Naag walba gurigeeda laga gartaa**
17) **Naag ninna waa dhalaa ninna waa dhaqdaa**

18) **Naag tol baa guursada, ninna waa la guri galaa**
19) **Naago ninkay legdaan kama kacaan**
20) **Naago waa dhaxdin**
21) **Naago yaryaraysi ma leh**
22) **Nin kaa naag wanaagsan weligaa ma gaadhid**
23) **Wiilkaagu habeenkaad hooyadii guursanayso ayuu hiil kaaga baahan yahay**

Tusmooyinkanna waxa aynu ku milicsan doonnaa hal-ku-dhigyada iyo hal-haysyada haweenku u qabbaansadaan la macaamilka nolosha iyo noolayaasha. Hal-ku-dhigga iyo hal-haysku waa hal-qabsiyo ku saabsan humaagyo maskaxeed oo hadalka lagu qurxiyo.

***Hal-Haysyada*:**

Adduun caaryaale!
Alla yay la qosla!
Alla yaan gujiyaa; gacal iigu dhow!
Alle yaw sheega!
Isma og aqalkii bay aslaysaa
Siddi qabax Khadiija Warsame, qaalin laba jir ah
Habaar waa dibad
Hadday weyntoo Warsame yimid!
Weger iyo ka waaweyn!

***Hal-ku-dhigyada*:**

Reer aan doonayey, roob maygu eryey
Soo bax baa la leeyahay ooy sacabka leefaysaa
Caddo niidhiya, alla aabbe Calow yaa caawa nin raaca
Gabadh gabadh ka yari dhaaftiyo, geel yareba wuu hadhi
Fartayda yaa subagga ku dhuugey
Nabsi xaabo ku day!
Ninkii ku ladnaa ha leeleelee, ilaa lixdankaan laxaamadey
Haddii lay furay; raxmadi furan
Haddii lay furo ma feedh bay jabi

Kaalin lama dhayalsadaan ah ayay haweenku ku laahaayeen halgankii gobannimo doonka soomaalida ee lagu xoreeyey Hargeysa, Muqdisho iyo Jabuutiba. Markii Talyaaniga iyo Ingiriisku muujiyeen in ay soomaalidii ay haysteen xorriyadda siinayaa sannadka 1960, haweenka ayay ahaayeen kuwii ku cabbirayey dareenkaas hal ku ku dhigga *'Ninkii ku ladnaa halleeleelee ilaa lixdaankaan laxaamadey',* taasoo ay uga gol laahaayeen guursanba maynno ilaa lixdanka laga gaadho. Goobtii Dhagaxtuur ee Muqdisho iyo geeridii Xaawo Cismaan (Xaawo Taako) Jenaweri 11-keedii 1948-kii, waa astaan u taagan kaalintaas haweenka soomaalida iyo xornimo u dagaallankii.

KAFTANKA, HAASAAWAHA IYO HAL-XIDHAALAHA

Hal-xidhaalaha, haasaawaha iyo kaftanku waxa ay ahaan jireen isirro nool nool oo dhaqanka iyo noloshu ku bilan yihiin, dadka dhexdiisana uga dhaqan gala, ugana ciidamiya sida laamaha kale ee suugaanta soomaalida ee qaniga ah. Fagaare ama gole la isugu yimaaddo oo aanay wada sheekaysigiisa ka buuxin kaftan iyo haasaawe ama hal xidhaaleyaal, waxaa uu ka dhignaan jirey soor ama ceesh aan milix lahayn.

Hal-xidhaalaha, haasaawaha iyo kaftanku waa qalabyo lagu biyo dhiijiyo shakhsiyadda qofka rag iyo dumarba, carruur iyo cirrooleba. Waxaa lagu hal-beegaa dabeecadda iyo dabciga qofka duntiisu ka samaysan tahay, dulqaadkiisa, aftahannimadiisa, aqoontiisa, garashadiisa, in-araggiisa, damiirkiisa, dareen ogaalnimadiisa iyo shucuurtiisa gudaha waxyaalaha ka ilmo roganaya ee aan dusha sare laga arki karin iwm. Dhinaca kale waxa ay ahaan jireen casharro iyo duruus lagu gudbiyo waayo aragnimada, aqoonta iyo wacaasha dhaqanka iyo nolosha. Kaftanka , haasaawaha iyo hal-xidhkuba maaha hadallo la iska yidh yidhaahdo oo sida ay kuugu soo dhacaan la isaga haloosiyo, meeshii la doonana la iska hulluuqsiiyo. Waxa ay leeyihiin xeerar iyo soohdimo aanay dhaafi karin iyo xadhko xannibaya. Waxa ay ku wada sar go'an yihiin oo lagu ilaaliyaa qawaaniinta iyo xeerarka guud ee nolosha iyo dhaqanka ka dhex jirta.

Waa wada sarbeebo, duur xul, af gobaadsi, weedho wada maldahan, badheedhayaal iyo isa sudhan wada mahadhooyin leh oo miid, maad iyo murti miidhan ah. Haweenka soomaalidu doc kasta way iska dhigaan adeegsiga qalabyada hal-xidhka, hasaawaha iyo kaftanka. Tusaaleyaasha sadarrada soo beegan ku yaalla, ayaa wax badan laga ogaan karaa.

RAG GOGOSHII, GEEL XERADII IYO GAROW IIDAANKII

Xilliga haasaawaha iyo is xifaalaynta kaftanka waxaa mahadhooyinka haweenka soomaalida laga dhex helayaa duug-yaal badan oo wada murti ah, tif iyo midhiqna aqooni ka tahay oo ka buuxdo. Hal-xidhaaluhu waxa uu ka mid yahay isirrada ugu halista iyo yaabka badan. Barbaarka guurdoonka ahi marka uu ku soo hiilo, kuna hagaago inantii uu la haasaawi lahaa wuxuu u yimaaddaa iyada oo gudanaysa mid ka mid ah xilalkeedii. Adhigii bay la joogtaa oo daajinaysaa, maadh bay guranaysaa ama maydhax bay diiranaysaa ama awrtii rareyda ahayd ayay carraabinaysaa. Marka uu barbaar shullaha joojiyey (dhudhumada, lowyada hoostooda) go'a ama macawistiisa u soo muuqdo inanta ee ay aragto inuu iyada ku soo abbaaran yahay, waxa ay diyaarsataa hubkeeda iyo qalabyadeeda. Geedkii iyada iyo isaga u dhaxayn lahaa ayay dhirta ka sii naqaysataa., ereygii ay iskaga waabin lahaydna way sii qorqorataa. Waxa kale oo ay isku dubba ridataa imtixaankii iyo xujooyinkii ay hor dhigi lahayd haddii uu noqdo barbaar talo ka go'an tahay oo guur u soo qoordiitey (timaha u soo qusaystay ama gaabsaday). Biyo dhiijinta raganimada barbaarka iyo tuujinta garaadkiisu inanta muhiim bay u tahay sida ay inankaba ahmiyadda ugu leedahay inuu sii shirrabo dhabeelnimada ama gaarinnimada iyo garashada inanta.

Dhawr tusaale ayaynu ka soo qaadan doonnaa hal-xidhaaleyaasha habluhu ragga ku xujeeyaan xilliga haasaawaha iyo guurdoonnimada. Waxaana dhacda in inani kas gaabni iyo garasho liidata oo ay ku hubsatay awgeed uga gaabsato barbaar qurux badnaa oo guur doonayey inuu la guddoonsado.

Barbaar baa beri u soo sheeko tegey gabadh ka caansan hablaha degaankeeda oo aftahannimo iyo garasho badnaan lagu majeerto. Markii uu soo gaadhey goobtii ay joogtey ee la is bariidiyey, ayay ku halgaadaysaa inuu furfuro meselooyinkan inta aanay wax kale ka sheekaysanba. Waxa ay weydiinaysaa inuu sheego:

Rag gogoshii
Geel xeradii
Garow iidaankii

Barbaarkii oo qudhiisu qayuuri ah oo aftahan ah, aqoonna leh, ayaa isku laba rogaya imtixaankii inantu soo hor dhigtay:

Rag gogoshii waa godob la'aan ha ku seexdo oo ha ku soo tooso, macnuhu waa nabad ha ku negaado. Geel xeradii waa geesi ha u joogo oo looga jeedo waa in uu rag ilaaliya oo u heeganihi jiraa, Garow iidaankiina waa u goolmoonow oo gaajo ha kuu hayso, haddii baahi xad dhaaf ahi ku hayso macmacaan iyo dhandhanaan wax kuuma aha ee maxaa cunaha dhaafi kara ayaa muhiim ah.

Marka ay ogaato inuu imtixaankii koowaad ku gudbey, ayay haddana mid kale oo kii hore ka sahlan, hayeeshee ka halis badan ku soo sakaaro tuurtaa (si fiiqan ugu dhiibtaa). Waxa ay ku tidhaahdaa: '*Waar dhulka duub ninyahow'!* Waxa uu isna ku hawl yaraystaa oo yidhaahdaa: *'Waa hagaag ee adigu ka dhaqaaq'!*

HALIHII HALLOWGA AHAA IYO HABLIHII

Laba hablood oo beri ri'yo xawawar ah meel ku haysta, ayaa waxa ku soo baxay oo u yimid laba nin oo baadi doon ah. Bariido wanaagsan ka dib waxa ay inammadu u sheegeen hablihii in ay beryahaaba raadinayeen halo ama tuldo geel ah oo ka soo hallaabay geel horweyn ah (gaane ah) oo ay taaggaas ku hayaan. Waxaa kale oo ay hablaha warsadeen in ay wax dooc iyo dareen ah ka hayaan halahaas raqdooda iyo ruuxooda midna.

Labadii hablood ayaa midkood soo booddey, iyada oo mid inammadii ka mid ah tilmaamaysa, waxanay weydiisey: *'In haluhu saddex ahaayeen,* oo mid ka mid ahi il la'ayd, mid kalena dabo la'ayd, ta saddexaadna Hays lahayd'!

Inammadii oo marna iyagu is eegaya, marna hablihii il qoodha (si xeeli ku jirto) hoos uga eegaya, neef kululina ka soo boodayso, ayaa midkood si habacsan u yidhi: *'Haa, haluhu waa kuwaas ee xaggee…?'*

Inantii baa hadalkeedii sii ambaqaadaysa oo tidhi: *'Anigu halahaas il iyo baal ma saarin oo ma arag, hayeeshee maalin dhoweyto aniga oo ri'yaha goshaas daajinaya, ayaan ku soo baxay oo arkay geed ay daaqeen saddex tuldood (saddex geel ah)!*'

'Oo tolow sidee bay qaaxo dishey ku ogaatey'! inammadii oo aan is ogeyn, inanta warkeedana xiise badan iyo dhadhan ku haya, ayaa midba gaarkiisa isula faqayaa.

Inantii oo hadalka sii wadda oo sifooyinkii saddexda tuldood iyo sida ay ku heshay ka tibaax bixinaysa, ayaa odhanaysa: *'Halaha mid ka mid ahi waxa ay iigu muuqanaysaa in ay il la'ayd, waayo mar kasta geedka doc keliya ayay ka taagnayd, laamihiisana dhinac qudha ayay ka daaqaysey, labada halaad ee kalese laan kasta oo ay daaqaanba labada dhinac doogga iyo caleenta way ka mudhxinayeen. Intaas ka dib halihii way saloodeen. Laba tuldood saaladooda way toominayeen (is dul dhigayeen), halka ta kale ay ka filqaysey (kala firdhinaysey). Sidaas darteed waxa aan aqoonsaday in hashaas saalada filqaysaa ay dabo la'ayd!*

Si la-yaab iyo amankaag ka muuqdo oo farxadi waa naxdin ah, lana wada dareemi karo, ayay haddeer inammadii isu eegeen. Inanta iyada kama qasna oo sheekadii ayay sii wadataa: *'Cabbaar yar ka dib halihii gelgelin ayay fadh fadhiisteen. Way gelgelimaysteen, waxanan daah furay in laba halaad ay caadi u gelgelimaysanayeen, ta saddexaadna ay ciidda gelgelinta xarriiq ku samaynaysey, caloosheeda dusheeduna aanay ciidda taabanayn, taas oo iigu muuqata in ay Hays lahayd'!*

Inammadii oo farxad iyo la-yaab ku kulansan yihiin, ayaa hadalkii kala hirorsanaya (boobaya) oo odhanaya: *'Wa..een.. waa… waa iyagii; oo waa halahayagii, waana sidaas aad u sheegtay ee xaggee bay mareen'!* inantii ayaa u tilmaamaysa halka uu raadkoodu ku qummanaa, iyagiina riyaaq ahaan ayay u raad gurayaan, hablihiina dhaygag ahaan u nabad gelyeynayaan!

Muddo markii ay inammadii sii raacdo ahaayeen ayay maalin labaaddii ku soo baxeen oo heleen halihii ka lumay ee ay baadi doonkooda ahaayeen. Dib ayay u soo uleeyeen (dhengedeeyeen), una soo uleen (kaxeeyeen). Habeenkii dambe, ayay ku soo beegmeen tuurtii habluhu ri'yaha ku haysteen. Xiise badan ayaa ka dhashay la-yaabkii ay hablaha midkood kala kulmeen iyo sidii xigmadda miidhan ahayd ee ay u tilmaantay. Waxa ay inammadu isku raaceen in caawa lagu sii hakado, laguna sii dhaxo oo loo hoydo hablahaas.

Hablihii ayay goor fiid ah oo dambe ka soo dul degeen, una soo hoydeen. Waa marti goor xun socota. Waa hablo haysta adhi xawawar ah oo ri'yo keliya ka kooban. Biyo waxaa u ah caanaha ri'yaha iyo moqoraysiga dhirta ee maalintii. Raashin dab la saaro iyo oomaati kale ha soo hadal qaadin. Hilibka ri'yuhu kuma wanaagsana sooryada iyo u loogidda martida, siiba ragga, gaar ahaan xaaladdan oo kale marka arrintu dhex taallo hablo

gashaantimo ah oo calaf doon ah, martina loo yahay iyo inammo barbaarro ah oo iyana guur doon ah oo iyaga (hablaha) u marti ah. Hilib idaad, siiba wan yar oo bacbac ah, ayaa maanta oo kale habboonaa! Ma hawl yara, Allaase sahli. Waxaas oo dhan ayaa hablaha hareero yaalla, dareen iyo daymo fogna ay u leeyihiin.

Ri'dii ugu macayd, ugu tayada roonayd ri'yaha, ayaa dhegta dhiigga loo darayaa. Dab ayaa la shidayaa. Dhamac ayaa ka dhacaysa. Hog ay si farshaxan ah habluhu u hannaan iyo habayn qodeen ayay dhamacdii dhigayaan, hilibkiina ku huurinayaan hogeyn ahaan. Marka uu bislaado ee uu muudh muudho, farahana kala raaco ayaa inantii labaad ee maalintii hore markii inammadu baadi doonka ahaayeen aamusnayd, waxa ay qaadaysaa hilibka waaxyihiisii, sarartii, maydhaqii, sakaarkii iyo garbihiisii oo si wanaagsan loo hogeeyey.

Nimankii martida ahaa oo ardaa guriga ka go'an diihaal iyo daal ugu kala dhacay oo hurda, ayay toosinaysaa oo ku odhanysaa salaan ka dib: *'Hilibkan goor dambaan idiin sidaa oo rag la'aan baa leh. Waa hilib ri'yaad oo ido la'aan baa leh, waana la soo hogeeyey oo biyo la'aan baa leh; ee iska cuna oo shifo ku af saara, sharna idiin ma leh'!*

Inantii bay u mahad celiyeen oo hilibkii feyl feyleen, cuneen oo dabadeedna gataati ciireen. Subaxdiina iyaga oo la yaabban wacdaraha iyo mahadhada kale ee inantii labaadna ku dhigtay ay halahoodii sii kaxaysteen.

Markii ay tuldihii guryo geeyeen ee muddo nasteen, ayay bilaabeen in ay hablihii dib u haybiyaan oo raadiyaan. Wakhti yar ka dib way soo heleen, waanay dooneen oo way kala guursadeen labadii hablood., gabbaati iyo geelna ka bixiyeen.

HABLIHII HEERINKA AHAA

Ha qaboobee qabo weyn ku rid
Koran maynne horow kala goo
Naa ha karfafee korka dhig!

Dhaqanka soomaalida waxaa ka mid ah in ay habluhu hore ama yaraan ku aqal galaan ama u guriyeystaan. Inanta calafkeedu hore u soo mudh bixi waayaa waxa ay hore uga tabaabulshaysataa in ay guumaysnimo ku dhacdo. Guumays la nacay; geel xero ka didis! Gedaha soddonkaba haddii ay inantu cagacagayso inta badan isha raggu way ka lali jirtey gu'geeda awgiis, inta badanna way guur seegi jirtey. Si haddaba aanay taasi u dhicin waxaa dhaqanka ka mid ahaa heerinka hablaha oo macnihiisu yahay in habluhu degmadooda ka dhuyaalaan, una heermaan oo u doolaalo tagaan degmo kale, u rag doontaan; dabcan rag guursada. Waxaa kale oo soo jireenka dhaqanka ka mid ahaa in hablaha soo heerma ee degmo ku soo eerta ama hirta aan hungo qaawan iyo fara madhnaan lagu dirin ee tii u qalanta la guursado, waayo ragguba waanay heermi jirine

waxa ay yeeshaan nin doobnimo ku rambasa iyo guun baadh u bixi waayo oo hablaha degaankiisu dhabarka u soo jeediyaan, kana guri waayaan oo halkaas ku guur seega laftiisu haddii aanu ka diyaar garoobin ama si uun aanu isu daba qabatayn.

Beri baa haddaba saddex hablood degmo ka soo heermeen, una soo galeen degmo kale. Safarka ay soo galeen wuu dheeraa oo dhib badnaa. Oon, surmi iyo diihaalna way ku xoonsan yihiin, daalka iyo rafaadka ay qabaanna diifta guudkooda ayaa laga arki karaa oo ay ka muuqdaan. Martisoorka iyo soo dhoweyntu waa isir weyne ku milan dhaqanka soomaalida. Ma dhacdo in lala naf qaybsan waayo qof goolmoon oo diihaali ama diilalyo hayso oo gurigaaga eerasho keentay. Loogista ama shidhaynta neef adhi ahi waa u sooryo wanaagsan martida, waana u saruurad reebis habboon reerka ay habluhu soo dul degeen. Tuhun kuma jiro in habluhu heerin yihiin, degmada ay yimaaddeenna ma doobab la’a!

Intii hilibka sooryada ahi dhardhaarrada saarnaa ayaa warka la is galaa bixiyey oo la isu tebiyey in hablo heerin ahi guryaha joogaan. Jannaa dagatay! Hablaha soo heermaa ma kharash iyo hawl badna. In yarad laga bixiyaa khasab maaha, waase laga bixiyaa marka caaqiibo reeb wacan iyo dareen xidid la madhaxsanayo. Kolleyba waxa ay ka fudud yihiin in badan hablaha la doono ee loo geed fadhiisto ama kuwa lala haasaawe baxo labadaba.

Doobkii degmadu dabkuu soo wada kulaalayaa. Dabkuu soo wada uunsanayaa. Siniintuu sanka la soo raacayaa, una soo uraysa! Sida duqsigu wedkii baa galaye uu fuudka kulul ugu dabbaasho looguma dhaco hablaha ee waa la iska shirrabaa sida geenyada fardood inta aan guudka lagaga dullaalin.

Xaaladdan oo kale naqwadu waa muhiim. Nimaanad saacad ku baran sannad kuma baratid. Waa in saacado gudahood lagu dersaa, lagu bartaa kartida iyo aqoonta saddexda hablood ee heerinka ah ee buul cawskii hablaha haweenka la jooga. Waa in hal-xidh la sameeyaa lagu kala saarayo naqaysiga iyo kala xulista hablahan durbaanka ilaaqtan walwaalaya ee heerinka ah. Waa in imtixaan la gesho loo diyaariyaa. Soorta (raashinka) iyo sida loo isticmaalaa marka la cunayo ama la sugayo cuniddeeda soohdimo iyo xeerar aan la dhaafi karin ayay ku leedahay dhaqanka soomaalida oo ka yaalla. Hamuun gorayada iyo sugid la’aantu waa astaamo la isugu gabyo, la isku xujeeyo, raad reebna ka hadho. Waa arrin u dhaxaysa rag iyo dumarba. Haddeerse xujadu waxa ay ku mudan tahay hablahan heerinka ah, waana hilbaha dheriga karkaraya ku jira iyo diihaalka gaajo ee iyaga haysa!

Guri gaar hablaha u ah, kelidoodna looga tegayo ayaa loogu geynayaa hilibkii oo xeedho ku daboolan oo kulayl la karaya, qiiquna cirka ku milaalan yahay. Xabaal iyo ninkeed loo kala teg! Hablo u kuur gala ayaase muska u gelaya oo dhegaysanaya sida ay hilibkaas kulul hablaha heerinka ah ee gaajoonayaa ula macaamilaan. Sidii filitaankuba ahaa markiiba waxaa muran ka dhex oogmayaa hablihii oo midkoodba si u arkayso sidii hilibka loo farsamaysan lahaa; loo qaboojin lahaa, loogana haagi lahaa, fara qabsan lahaa. Sida ka muuqata murtida kor ku xusan ee hablahaas laga reebay ee mahadhada ah, waxaa hablaha middood odhanaysaa: *‘Naa haantaas qabada ah ee biyaha ku rid ha inoo qaboobo’e*!’ Tii labaadna: ‘*Naa sugi kari maynnee dhakhso u kala gooya*!’ Inantii

saddexaadna: '*Naa ha qaboobee kala kor qaad qaada oo hawadu ha martee u yara coog cooga oo suga*!'

Imtixaankii la qaad, waxaana loo geeyey macallimiintii sixi lahayd oo rag iyo dumarba ka kooban. Imtixaankii la saxyey judhiiba oo qalin cas lagu boobyey. Labada hablood ee hore ta hilibka haanta ku riddey iyo ta sugi waydey ee mindida la dhacday, labaduba way ku hoobteen, waxanay kala heleen sida ay u kala horreeyaan natiijooyinka kala ah: Dheg weynnimo ama doqon ah oo micidu taako dherer le'eg tahay iyo hamuun gorayaley aan waxba sugayn, samirna lahaynoo ah ta labaad! Inanta Saddexaad ee qaboojisay, hawada marisay ee kartidii iyo hufnaantii sugitaanka yeelatay waxa ay qaadday galaas dahab ah, waxanay noqotay in raggii degmadu iyada kelideed u cugtamaan oo isku garbiyaan. Halkii baanay iyadu dookheeda ka ciyaartay, kuna reeraysatay! Guullaalaa la wada yidhi, barbaarkii guddoon yidhi, guurkeeda hananlaa! Laye guud-haldhaaley garangarisay laafyaha! Gelbiskiina waa u dhacay!

KABO CALAF

Kabo Calaf waxa uu ahaa baa la yidhi nin aan joog iyo jamaal badan lahayn. Cago balballaadhan oo gaagaaban oo kuwa geela u eg ayaa u dheeraa fool xumadiisa kale. Kabo cagba cag ah oo isaga u gaar ah oo ay geela kala beddelan karaan ayuu tolan jirey. Waxa uu gu'giisu gaadhey heerkii guunnimada. Waxa uu go'doon ka noqday oo ka takoormay golayaashii iyo ardaayadii hasaawaha iyo kaftanka ee dhallinyaradu hablo iyo inammaba ku caweeyaan. Ardaaga iyo golaha geela ayuu qabatimay, waxaanu wehel ka dhigtay raamsiga geela.

Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa wiil ay Kabo Calaf geela wada raaci jireen gashaanti uu la haasaawi jirey kula soo ballamay inay caawa raacdo oo uu la baxo, si ay isu guursadaan. Sida dhaqanka soomaalidu ahaa marka inanta lala baxayo waa in ugu yaraan laba nin inanta raacaan. Ninka guursanaya iyo nin kale oo weheliya ayay inta badan ahaan jirtey. Ceeb ayay ahayd in wiil iyo gabadh isu geyaan ahi isku keliyeystaan oo is raacaan inta aanu meher isugu dhicin. Inankii inanta doonayey inuu masaafaysto Kabo Calaf ayuu ka codsaday inuu inanta la sii kaxeeyo. Masaafaynta waxaa loola jeedaa in inanta laga fogeeyo halka uu Weligeedu joogo, loona geeyo wadaad meel kale ku meheriya. Arrintani diinta meel kuma laha, dhaqanse weeye soomaalidu ay leedahay. Waxaa kale oo dhaqan ahayd in inanta mararka qaar la khasbo oo wax Dhabar garaac la yidhaahdo lagula kaco, dhawr ninna hawshaas ka qayb qaataan.

Habeennimadkii caweys dambe markii xoolaha la maalay ee la seexday, ayay geedkii ballantu ahayd inantii isa soo malluugtey oo isa soo ag taagtey, Kabo Calaf iyo inankiina ugu yimaaddeen. Waa arrin dabiici ah in had iyo goor ninka caruuska raacaya ee kaaliyaha u ahi aanu noqon nin caruuska ka toolmoon xagga muuqa iyo ilqabatinka. Sida caruusadduba uga qurux badnaato malxiisaddeeda waa in caruuskuna uga bursanaadaa xagga aragtida isha malxiiskiisa. Sidaas darteed inanta isheedu markiiba way ka lashay Kabo Calaf oo waxa ay isku yuubtey ninkii ay sheekadu u xidhnayd. Kabo Calaf laftiisa

waxaa ku fillaatay inuu caawa gabadh la guursanayo oo lala baxay malxiis ama gacan yare ka yahay.

Fadalkaa la wada guray. Habeenkii oo dhan ayaa fool loo sii jeedey. Habeen badhkii ayaa dayax soo mir kacay sii taban taabiyey oo caddo niidhi ah ifkeeda arlada ugu wada galaalay. Toobiye hallaasi ah ayay cagta saarayaan. Sheekada ayaa la wada dhubbad qaadayaa. Si socodka dheer la isku illowsiiyo waa la kaftamayaa, la isu duur xulayaa oo irmaantaa la is qaadayaa, gabadhana waa la xifaalaynayaa si loo gun raaco dul-qaadkeeda, aqoonteeda, kartideeda iyo aftahannimadeeda. Iyadu ma hadal badna oo erey fargeeto laga soo qufay oo keliya ayaa afkeeda ka baxaya. Kabo Calaf laftiisu wuu ka hadal yar yahay, kana erey iyo odhaah urursan yahay halyeeyga inanta la soo baxay oo ah nin dal-dalan iyo yulqan badan oo hadba meel isku taaraya. Wuu faan iyo fatoosh badan yahay, lamase hubo wax ka jira wixiisa iyo wax u sii hooseeya toonna, Kabo Calafse wuu ka dareen qabaa in saaxiibkii aanu garashada ku dheerayn.

Ruux iyo geed markii la kala gartay ee waagu garays furtay ee galac yidhi ayaa laga dhammaaday dhulkii khatarta ahaa ee gabadha reerkoodu degaan ahaan soo joogey. Arladu hadda ammaan ayay u muuqataa. Xawaarihii socodka ayaa la dhimayaa. Daalka waxaa u dheer safraddii aroornimo iyo harraadka dhulka oommanaha kulul lagu yaqaan habeen iyo dharaarba. Xaaladdan oo kale marka hablaha lala baxayo oo had iyo goorna ku beegan xilliga naqa ee gu'ga ama dayreed lama sii qaato wax sahay ama kayd ah, waayo waxaa la isu muujinayaa; la iska dhigayaa dad aan socoto gelayn oo degmada tamashle ahaan iska dhex mushmushaaxaya.

Waxoogaa 'hal rabbac ah' markii la sii kallahaad rucleeyey, libdhadiina (qorraxdiina) godkeeda ka soo ruqaansi gurguuratey ee hinqasho ahaan ka soo booddey, welina aanay carcartii kulaylkeeda galka ka soo wada siibin, ayay inantii tallaabadeedii inta ay lugteeda hakiso inammadii oo fayga kabaheeda ka faana horreeya ku odhanaysaa: 'Waaryaadhaheen aynu afka wax ku dhufanno; wax safradda inaga jebiya cunno'

Inankii caruusnimada u micilisanayey ayaa hadalkii hororsanaya oo odhanaya: 'Waar naagtu maxay ku hadlaysaa! Xaggee cuntadu joogtaa hayjad gabaahiir ah ayaynu soconnaa, waana faro madhanahaye'!

Kabo Calaf oo dhoollo caddayn la muunsoonaya, ayaa ku faxaaxsanaya hadalka oo odhanaya: '*Waar waxa ay inantu u jeeddaa, aynu cadayanno'!*

Cadaygu waa muhiim dhaqanka soomaalida, waxaana laga dhigtaa oomaati marka aan wax kale lahayn ee dherigu madhan yahay. Hanka ayaa cadaygu sooraa oo nadiifintiisa ilkaha ayaa iimaanku ku kordhaa. Iimaan Allaa uur buuxsha iyo Waa la doogiye yaan la dacaroon, ayaa la weheshadaa oo dabeeto lagu qadaa.

Hadalka inantu sarbeeb iyo hal-xidhaale ayuu ahaa, waxana isha farta ka geliyey oo ishaas godankeeda hoos u sii raacay oo xadhiggiina furay ninkii Kabo Calaf ee guunka ahaa. Saddex caday dhirtii laga goosey oo si hufan loogu ilko caddaysey. Waxaa Cabbaar la sii dhex qaadayaa dhul cidla' ciirsila' ah oo wada dhir kala nooc ah oo udug,

ugbaad iyo ilwaadba leh, ugaadh kala cayn ah oo ishu gacalo daymoonayso iyo shimbiro midiba caynad gooni ah codkeedu yahay oo dhegtu ku raaxaysanayso leh. Dhulkaasi waa wada ramaas iyo rays marka maajeenta dharabku aroortii ka kaco cagtu ay sidii kabo buush ah ku raaxaysanayso macaansi darteed.

Barqo dheer oo kulul kolkii ay ahayd (hadh soo korkii) ayay hadh gelayaan geed hadhac ah oo hoostiisu xalan tahay, xareedina mulacyeysey docihiisa laba caano maal ka hor. Wax yar markii la fadhiyey ayay inantii dalab kale la hinqanaysaa. Waxa ay odhanaysaa: ‘Waar ina nasiya’!

Kabo Calaf maaha nin deg dega. Waa nin hadalka hojiya oo dalabka inanta waxaa uu ka quuddarreeyaa in uu ka jawaabo ninka uu gacan yaraha u yahay ee inanta la soo baxay. Markan waa inuu is-tiilaa ninkaasi. Waxaa uu doonayaa inuu kubbadda goolka qummaati ugu hubsado oo shebekedda ama shabaqa ku ruxo. Waxaa uu iskula faqayaa in aanay dhalinta goolku u seegin sidii tii hore oo kale. Laabta ayuu ku soo qaaday, lugtana wuu ka saaray oo inta uu ka fekerey yidhi: ‘Bal daya waxa ay ku hadlayso! Waynu Fadhinaa oo nasasho kale ma maqnee, ma waxa ay u jeeddaa aynu seex seexanno’!

Aynu seexanno! Haamadda ayaa inantii duntey! Laab dillaac iyo yalaalugo weynaa! ‘Fanto ku dishey oo furuq kaaga soo qaad’ ayay hoos u sii odhanaysaa. Kabo Calafna aragyey murugada ku meersan qalbiga inanta iyo sida uu saaxiibkii u dar-jiidhayo! Hayeeshee waa inuu mar kale jawaabaa, inantana mahadhada ka maydhaa. Kabo Calaf: ‘Aynu nasanno marka la fadhiyo waxaa looga jeedaa kabaha aan iska bixinno.’

Farxad guuli keentay iyo libin seeg la wada yaalla darteed ayay gabadhii si marna godan; marna kacsan isula gaabinaysaa neef tuur weyn oo labada dul ee sankeeda dib iyo hore galaa baxaya, iyadoo afka isku haysa, ilkahana is gelinaysa!

Casar dheer markii kulkii cadceeddu yara jabay ayaa la sara joogsadey. Kabihii baa la illaday oo cidhibtaa lagu dhufanayaa, si ay u geyoodaan oo qorraxdu marka ay godkeeda liiqa ama baallaha dhigato ugu beegmi karaan oo gaadhaan halkii ay abbaarta addinkoodu ku aaddanaa. Cabbaar markii la sii galab carraabayey, ayay inantii mar saddexaad geddeedii la soo noqotay oo nimankii la soo tegey ku odhanaysaa: ‘*Waaryaadha waa inammada bal eega beel baa ii muuqata’e ma ila aragtaan*.’

‘*Waa wadheedii, wacdaraheedii iyo waxeedii xilka lahaa*!’ ayuu naftiisa hoos ugula faqayaa aroos iyo alalag doonihii inanta la soo baxay ee labada goor ee horena goobta ‘wadhida iyo waqdu’ ka raacday ee ku foos burburay. Cidi ka neefin mayso oo waxa uu noqday waddo halaq mareen. Jawaab ayaa isaga ugu horrayn looga fadhiyaa. Ninka loo gol leeyahayna isagaa is garan kara. Wuu yara aamusay oo si durugsan u eegay halkii ay inantu bidhaanta beesha ku sheegaysey. Wuu eegey oo haddana inta uu labada suul ku cidhba taagsadey eegay oo eegay oo haddana eegay! Markii ay indhihiisu wax aragti ah iyo bidhaan gaadhi waayeen, ayuu fekerey; hoos u hogtey oo maskaxda iyo madaxiisa tuujiyey oo fekerey oo haddana fekerey! Aamus yar; af dhabaandhab iyo lix indhood oo isku soo mutuxan oo is deydeyaya!

Ninka inanta la soo baxay ee xujada la guud furay wuu ka dheer yahay hab dhis ahaan Kabo Calaf iyo inanta bidhaanta arkaysaba. Taas ayaa iyana imtixaan kale ah. Aakhirkii dambe markii uu arkay in kubbadda looga baxay, ayuu ku tiraabayaa weedho geed guudkiis saaran: 'Beesha dhan ee aniga oo labadiinnaba ka madax taagani aan arki waayey ee gabadhani bidhaanteeda sheegayso bal Kabo Calafoow wax nala tusye adiga ma kuu muuqataa?!'

'Ka daryoo dibi dhal!': inantii ayaa cindigeeda kula shawreysa inta ay quus ahaan doobi candhuuf ah qallayl dib ugu liqdo. Kabo Calaf laftiisu aqoonsey in saaxiibkii ciidda cunayo oo geriyaad jafayo, laf cadna toobin ku hayo! Hayeeshee waa inuu Kabo Calaf libinta ku geeraaraa oo guusha dhammaystirtaa. Kabo Calaf: 'inantu adeentidaas (bidhaantaas) ay aragtay oo haad ah, tukena horseed u yahay ayaa macnaheedu yahay in degaankii beeshuna bidhaantooda ku sii xigo oo uu ka yara dambeeyo uun. Haddii haad ama raad la arko, beelna la arag!'

Socod laba lugoodin ah ayay rabbaasayeen oo iyadoo aanu weli hadalkii go'in oo la sii daba gurayo, xaajadduna ka dhabaqsan tahay labadii lammaane ee abuurka iniinta cishqiga biqlinteeda bannaannada u soo guura bahalleeyey, ayay isa soo malluugaysaa oo mudh soo odhanayaa bidhaantii geela, ka dibna lo'da, adhiga, maqasha, aqalladii iyo muuqii dadku.

Muuqa iyo aragtida geelu waa muhiim dhaqanka soomaalida. Sumaddiisu waa baadi sooc tilmaanta oo hagta qofka cusub ee degaan beeleed dibadda ka soo gala, ahna qof dad, dal iyo duunyo yaqaan ah. Waa degmadii ay ku soo tala galeen ee fayga kabahoodu (cagtoodu, addinkoodu) ku toosnaayeen. Kabo Calaf markiiba waxa uu garanayaa sumadda geelii ugu soo horreeyey geelasha beesha. Kabo Calaf: 'waa geeli reer hebel, weliba waxa baadi soocdaa iska leh Ba' Ceebla'. Annaga (Kabo Calaf iyo saaxiibkii) iyo Ba' Ceebli saddex oday ayaannu kala tirsannaa'. Inanta ayuu barayaa. Waa dad is wada yaqaanna. Markiiba waxa ay ku biireen degmadii. Feedhaha iyo uurka ayaa la iska gartaa: Labada barbaar ee wada daadihinaya ama gelbinaya inanta gashaantida ah ee timaha tidcan ee marada baftada ah ee saddex qaydda ahi daba, hor iyo hareero hooshaarayso! 'Way la soo baxeen': waa dareenkii degmadu isla dhex martay markiiba yar iyo weyn; carruur iyo cirroole, rag iyo dumar.

Ardaa guriga Ba' Ceebla' ka go'an ayaa markiiba la qurxiyey; la xardhay oo la dadbay. Laba wan ayaa adhiga laga soo saaray oo dhegta dhiigga loo daray. Shiikhii degmada ayaa la war geliyey oo kutubtiisii garabka soo sudhay. Raggii degmadu waxa ay badi kulaalayaan ardaagii caruuska iyo malxiiskiisa. Bilis xaawaley oo dhami caawa waa wada aroos. Waxa ay sidii lo' geed damal ah hadh gashay wada dul gabran yihiin oo ag hoganayaan gashaantidii degmada soo gashay. '*Naa tolow kee bay wada socdaan oo la soo tegey; ma ka dheer ee jalaqsan, mise ka gaaban ee sida dameeraha u kuur kuursanaya?!*': waxa ay ka mid ahaayeen su'aalihii ku soo noqnoqonayey madaxa iyo maanka haweenkii caruusadda hareero dhoobnaa.

Sooryadii la walwaalyey oo la walaandee oo sidii waraabe neef helay lagu wada wishiirri, saarkii saruuraddu ku raagteyna rag iyo dumarba ka soo deg. Aad baa looga faa'iidaystaa

munaasibaddan oo kale xilliga loogitaanka. Hadal maxaa hadhay oo la is yidhaahdaa. Biyo iyo hadalba meel godan iyo guntay badi ku ururaan. Waa in wadaadku kutubtiisa kala qabtaa oo meher labada lammaane u guntaa. Waa heshiiskii mas'uuliyadda iyo mustaqbalka labadooda, waana inuu Shiikhu labadoodaba afti iyo erey dhab ah afkooda ka wada qadaa.

'*Giirooy dabadaa i giigii leh'*: taasi waxa ay ka turjumaysaa dareenka gudaha shishe ee caruus isu dhigaha. Xilalka cusub ee kaabiga ku soo haya ee naftiisa soo kulaalaya, waxaa kaga xajiin badan guul darrooyinkii saddexda ka koobnaa ee ilaa saaka barqadii u kala dambeeyey ee sida darandoorriga ah ay gabadhu ula dhacday. Hayeeshee kelyo adaygii ina-rag ayuu miciin bidayaa, waxaanu raagsanayaa oo la fog inta meherku ka dhacayo. Hamuuntii raashinka waxaa hadda agtiisa kaga xoog badan hamuuntaas weyn ee kale!

'*Isna soo galaydhyee, iyadana talow go'an'*: waa dareenkii docda kale iyo inanta sidii neef shidho ah caawa shillalka (kawaanka) taalla ee birtu saaran tahay. Waxaa qalbiga iyo maankeeda ku dhacay baro madmadow iyo dhalandoorsan aragtiyeed, una kala dambeeyey ilaa saaka barqadii. Saddexdii hog-seeg ee inanku ku sinbiriirixdey, Kabo Calafna ku dul leexaystay, ayaa saamayn weyn ku raadeeyey qaradkii iyo muraadkeedii ay u socotey! Waxa ay ogaatey in ninka ay guursiga ula socotaa agnaan ka yahay oo gebi bannaan ka fadhiyo dhinaca garaadka, garashada, aqoonta iyo sarbeebta, duur xulka iyo xeel dheerida nolosha oo dhan dhur iyo dhaqanba. Quruxdiisa ayaa soo hoddey, iminkase inuu ku qado ayay qabtaa! Tolow maxay samayn doontaa? Miyay iska calafsan nasiibkeeda! Miyay diidi? Haddii ay diiddo miyaanay ka yaabayn in la dhabar gaari karo oo la jujuubi karo oo bil khasab loogu naagayn karo sida in badan meelo badan ka dhacda soomaalida dhexdeeda!! Dheg weyn maaha oo waxaas oo dhan way ka dheregsan tahay; si wanaagsan ayay xaaladdan oo kale ula socotaa axmaqnimada, arxandarrada, cadowtinnimada, naxariis la'aanta, anaaninimada, xaaduqnimada iyo bahalnimada ragga tin iyo cidhib, kor iyo kal, sir iyo caad, tab iyo xeel intaba. Goblan talo adduunyooy!

Markii shiikha iyo shuhuuddii u yimaaddeen, ayaa gabadhii oo shuurinaysa, geesinnimo iyo isku kalsoonaan buuxdaana ka soo ifayaan dareen ahaan shakhsiyaddeeda, la weydiinayaa ninka la soo baxay magaciisa iyo waxa ay isla meel dhigeen ee heshiiskoodu ku xidhmayo; meher ahaan.

Waa Isma Gaba oo waxa ay shiikhii iyo shuhuuddiiba u sheegtay in ay markii hore guur ahaan u soo raacday inankaas ka soo horjeeda ee Kabo Calaf feedhiisa midig fadhiya, hase yeeshee in ay hadda taas ka noqotay oo ay tahay calaacal timo ka soo baxeen in ay gogol la seexato, gurina la wadaagto. Waxa ay sii raacisay intaas in qaradkii guursigeeda aanay isaga dib uga laabanayn! Yaab iyo amankaag, argagax iyo lama-arag! 'Waxa aan guursanayaa oo aan doonayaa in Kabo Calaf la ii meheriyo! Waa kaas go'aankaygu, waan guddoonsadey tashiga oo ka noqosho ma leh' ayay ku nuuxnuuxsanaysaa iyada oo marna kor eegaysa , marna hoos, dabadeedna labada docood baalla daymoonaysa, weedhaheedana kulayl ka muuqdo!

Inankii inanta la soo baxay ee golxobtiisa soofaysanayey cadhuu daadaamayaa. Wuu is madax iyo minjaba marayaa, xiniinyuhuna dhabarka ayay u wareegayaan! Kabo Calafna riyo dhiifi keentay iyo run buu u kala saari waayayaa waxa dhacaya. Halka saaxiibkii werwerka iyo walbahaarku gabagabaynayaan, isaga (Kabo Calaf) rayn rayn iyo riyaaq ayaa halbowlayaashiisa dhiiggu farriin ahaan wadnihiisa ugu tebinayaan! Waa ciyaar ninba cayn u tumayaa.

Aamusnaan, af-kala-qaad iyo is dhawr dhawris ka dib, Shiikhii oo dheygagsan, haddana iska afgobaadsanaya ayaa odhanaya: ‘waa hawraarsan iyo hadal wanaagsan oo taas garannay. Hayeeshee bal noo sababee halka sartu ka qudhuntay, salaadduna ka xidhmi weydey!’

Sababtu ma adka. Waxa ay dabada uga gashay oo u duddubisay sidii suurad qur’aan ah oo dusha in ay ka soo xafiddo loogu diray wixii ilaa saaka barqadii iyo ilaa galabta casarkii gaabnaa soo dhacayey ee dhex marayey iyada iyo labada nin ee hadda is xaal weydaartey. Shib iyo Shaamarreer! Sanqadh la’aan; juuq iyo jaaqla’! indho isku soo wada yuuban, isna eegaya oo keliya! Jabaqla’! Faallo la’aan. Faaqidaad la’aan. Falanqayn iyo faahfaahin la’aan. Kabo Calaf calanku u taagan. Allow naxariisey noolaa oo cosobsey, kana raysey ardaagii geela. Saaxiibkiina gabbalku u dhac oo guur seeg ku haleel, dabkiina ka gamaaryey oo ka bakhti, calankii u taagnaana ka dhacyey. Inantiina meher wanaagsan u dhacyey oo indha kuulatay. Ina-rag quruxdiisu waa raganimadiisa, ragannimaanay qurux ka raacday! Beeshiina u ciyaartay oo laga tunyey. Gari laba nin kama wada qosliso! Aroosna lagama raago, lagumana raago

ARRAWEELO IYO ODAY BIIQAY

Dumar la soo qaadyaaba Arraweelo isa soo maqiiqday. Waxa ay ahayd baa la yidhi boqorad ragga dhufaanta oo mukurisa, hal-xidhaaleyaalna dadka ku xidh xidhata. Raggii arlada xilligeedii ku noolaa xiniinyaha ayay ka wada siibtey, marka laga reebo nin oday ahaa oo Oday Biiqay la odhan jiray. Oday Biiqay waxa uu galay xidhka iyo kaymaha si uu uga nabad galo masiibada Arraweelo. Oday biiqay waxa uu noqday ninka soo furdaamiya ee soo furfura xadhkaha ay Arraweelo soo tidicdo ee hal-xidhaaleyaasheeda. Wuxuu kaloo noqday sababtii soo dedejisey jabitaankeedii iyo dalluun u raaridkeediiba; (dhimashadeedii).

Wax ubad ah gabadh ayay Arraweelo dhashay baa la yidhaahdaa. Waxa ay ahayd curaddeedii iyo guri dambaysteedii labadaba. Waxa ay ahayd baa la yidhaahdaa inantii ay Arraweelo iyo ina-rag isku seegeen markii ay uurkeeda yeelatay ee xilligii wallaceeda ragguba u soo bannafay, u soo uray ee ay nacday, colaadda aan dhammaadka lahayna u sii qaadday! Ina arraweelo inan qurux badan bay ahayd, nin la’aan ay hooyadeed u sabab tahay ayaase haleeshay. Muddo ka dib iyada oo Arraweelo ka dareen qabta in arlada nin qoodh ahi joogo, yahayna ninka soo fura masalooyinkeeda, ayay Oday Biiqay iyo Ina arraweelo is helayaan, isna guursanayaan. Wiil baa Alle ka dhex beerayaa, Arraweelana markii uurka inanteedu soo baxayba ogaatey. Ina arraweelo waxa ay inankeeda yar kala baxsanaysaa birtii dhufaanitaanka ayeeydii. Aakhirkiina waa lagu kacayaa Arraweelo oo dumarkii baa ka gadoodaya rag la’aanta ay ku garba duubayso, dabeetana kacdoon ka

dhan ah samaynaya, waxana sheeko xariirtu tibaaxdaa in inankii ay ayeeyada u ahayd uu ka takhalusay, lana wareegey dhaxaltooyadii boqortooyadeeda.

Hal-xidhaaleyaashii Arraweelo ay dadka ku xujeyn jirtey, Oday Biiqayna ka daba furi jirey, waxaa ka mid ahaa:
Arraweelo:*Ha la ii keeno awr reeryaysan oo rar saaran yahay, wax xadhko ahna aan lagu ogeyn*.

Maaha masalo fudud. Sidee loo rari karaa awr, iyada oo aan xadhig loo adeegsan!

Oday Biiqay oo ahaa rugta tix-raaca (marjaca) loogu noqdo, kayntana lagu dhaqaaleeyo waa in loo tagaa oo talo la weydiiyaa.

Oday Biiqay: *Ha la soo qabto awr rarey ah oo caddaysimo ah. Ha la geeyo balli biyo galeen ah oo biyihii markaas ka gudheen, welise ay ka buuxaan dhooqadii iyo ligiskii biyuhu. Balligaas awrka dhex fadhiisiya oo ha ku gelgelimaysto. Marka dhooqadu dushiisa sida maraboobta ugu dhegto, soo gura midhaha geedka kariireyda loo yaqaan oo ku dul nab-naba awrka dushiisa. Heeryadiisii way u dhan tahay awrka iyada oo aan xadhko lahayn ee kiciya, una geeya habarta waalan!*

Arraweelo: *Yaa yidhi arrintan rag qoodh ahi kama soo arrimin, weliba oday uma gacan gelin! Haddeer ha la ila soo gaadho harag labada dhinacba dhogor ku leh!*

Oday Biiqay: *Dheg dameereed la kaalaya oo u geeya wadaadda wareersan, iyadaa labada dhinacba dhogor ku yeelata'e*.

Arraweelo: Ciil iyo cadho cirkaas isku shareertay! Waxa aan doonayaa in la ii keeno si dhakhso ah: D*hig dhexo dhererkeedu le'eg yahay dhererka qaanso roobaadda!*

'Hadday weyntoo Warsame yimid iyo *weger iyo ka waasacan, tani waa ka waaweyn'* ayaa la yidhi. Waa in Odaygii imtixaankanna loola tagaa, waxna laga soo weydiiyaa.

Oday Biiqay: Qosol yar; '*islaan waalan weeye. Adeer waxa aad ku tidhaahdaan 'Keen adigu udub aannu dhig dhexadaas ku soo cabbirno ama mitirinno!'*

Arraweelo mar kasta oo meselo la soo furaba cadho ayay dellegmi jirtey, waxanay ku ciil belbeshaa oo tidhaahdaa: '*Yaa yidhi dunida kuma noola rag taliyaa, yaab iyo yaabka yaabkiis! Wallee oday gawsa weyne ah ayaa soo fura garkii aan xidhaba, Weger! Arraweelo la ima yidhaahdo haddii aan laga sheekayn, ma anaa halis la ii hadoodilaa!*' Shakigeedii ayaa rumoobey! Waana tii Ina Oday Biiqaygii yaraa ee ay ayeeyada u ahayd af gembiga ku sameeyey ee ka takhallusay.

MIIDOW XAGGEE KUU SOO MARAA

Nin guur la'aan ku gaboobey oo guun ah, geelna raaca ayaa la sheekaysanaya gabadh qudheedu gashaantinnimo ku raagtey oo hablo-weyn ah. Markii uu geela soo lisay ee

dhabanka dhulka la dhigay ka dib, ayuu isa soo hor malluugayaa muscirirtii buulka gabadhu ku jirtey oo lahaa mus iyo dhacan adag oo ku oodan, dhayalna aan loogu gudbi karayn. Xujooyin iyo sarbeebo ku gadaaman oo la isku xidhayo, la isna dhaafsanayo ka dib, waxaa u suurta gelaysa ninkii guur doonka ahaa in uu ooddii jebiyo, lana kulmo oo hadal wadaag la yeesho inantii dhiggiisa ahayd, waana tan sheekadii dhex martay:

Miidow makaankay
Waa mus geel
Waxaan hayaa maqaar
Nirigoo mal-dhacay
Miidow xaggee kuu soo maraa?

Muusow muskaas ii soo jibaax
Miidow billee qodaxi i muddaa
Muusow mandiil jeexdaan hayaa
Miidow billee dhiiggey dhul qabey
Muusow xareed maydhaan hayaa
Miidow billee qoyey oo qadhqadhay
Muusow goshaydaan ku huwiyaa

QORQODAHA

Hal-abuurka haweenka soomaalidu wuu dubaalad dheer yahay, xeelna fog yahay. Waxa uu gacan geliyaa doc kasta oo nolosha ka mid ah. Qorqoduhu waa nin hunguri xun oo ‘qudduuc ah’ oo dhabcaal ah. Waa ninka dheriga iyo biilka reerka u kala fadha sida findhicilka iyo ilkaha. Haweeneydiisa ayuu had iyo jeer si qalloocan oo qadaf leh ugu fara geliyaa agaasinkeeda maamulka guriga iyo shaqadeeda. Waa wada su’aal iyo yool miidhan. Waa tuhun iyo shaki miidhan.Waa wada waswaas, yuus iyo yulqan miidhan xaalkiisu! Haweenku waxa ay ninkaas arrinkiisa oo iyagu ay aad u sii gun iyo xaal og yihiin ku cabbiraan heestan xigmadda, maadda iyo miiddu ka da’ayso ee quruxda badan. Hablaha ayaa ku qaada cod debecsan oo naaxiyad macaan leh, inanta yar ayaana looga sii digayaa guurka Qorqodaha. Waxa ay yidhaahdaan:

Eeddooy qorqode wuu qayliyaa
Eeddooy qorqode wuu qalaxtamaa
Naa ri’da qal oo qari buu yidhaa
Naa dhiiggu yuu quban buu yidhaa
Naa qiiqu yuu bixin buu yidhaa
Naa qoysna haw gelin buu yidhaa
Naa eeddadaa qadi buu yidhaa

GODADLAHA

Godadluhu waa halaq toban af yeesha. God markii uu ka baxaba waxa uu galaa god kale, kaana kuma sii hakado oo wuxuu uga sii gudbaa mid kale. Ninka godadlaha

lagu magacaabaa waxaa uu u dhigmaa bahalkaas hoose ee ugu halista badan inta bogga ku socota ee xammaaratada loo yaqaan. Gedaha iyo dhaqammadiisa foosha xun waxaa ka mid ah inuu galabba guri iska dul madoobeeyo, inuu cosobsiga badsado sida geela oo hadba laac meel ka hiraya soo haabto. Hadba inan cusub oo bacdu ku taal; cadrad cuddoon ayuu ganac jebshaa, boggeeda qooyaa oo habeenka dambe cidla' ciirsila' kaga siibtaa, dibna u soo eegi waayaa, mid kalena gaaddada ku sii qadaa oo iyana si fudud u dhaafaa ilaa ay tiro beelaan inta haween ah ee uu sii jiidhaa! Cosobsigu dookh ayuu u noqdaa oo wuu waalifaa (walfaa) ama u qabatimaa si waalli ah. Isaga iyo ubad la'aan, weliba goblan, ayaa loo kala yaabaa. Haddiiba Alle si kediso ah oo lama filaan ah mid iyo laba ama saddex carruur ah uu ka kala siiyo saddex dumar ah oo midba uu beri uun habeen dhax agteeda ku ahaa, waxaa dhacda in aanu dib u soo eegin, una soo jalleecin ubadkaas, korriimaadkoodana aanu shaqo ku yeelan. Dhaqankaas liita ee fool xumadu ka buuxdo ee godadluhu leeyahay, ayay haweenka xogogaal u sii yihiin. Waxaanay ka curiyeen hees dhaqameeddan xambaarasan sanqadhaha wada farshaxanka ah. Dhawr hablood ayaa ku jiibiya cod wanaagsan, waana sarbeeb iyo duur-xul digniin ah oo u socda hablaha aan weli guriyeysan, godadlahana u baylah noqon kara. Waxa ay yidhaahdaan:

Gododle soo gelyoo guuxyeey Godadle
Gododle waa geddiisiiyeey Godadle
Gododle gogosha laallaabyeey Godadle
Gododle gacaladay eriyeey godadle
Gododle guriga baadh baadhyeey Godadle
Gododle waa gableyn jirayeey Godadle
Gododle waa gaddiisiiyeey Godadle.

Gaadhkii cadaabeed
Gabaddanada dayreed
Goblan wiil la'aaneediyo
Godadlaa la kala dhigay

Gabadano dab loo shidey
Gocondhana kab loo toley
Goblan wiil la'aaneediyo
Gododlaa la kala dhigay.

SHEEKADA IYO MAADEYSIGA

Ummad kasta oo suugaanteeda iyo afkeedu nool yihiin, qaninnimana loo og yahay, waa in laga dhex helaa maadeysyo iyo sheekooyin soo jireen ah oo lagu caano maalo, laguna dab jeexo oo ka soo jeeda, sawir weynna ka bixiya dhaqanka iyo nolosha ummaddaas. Dhaqanka iyo nolosha soomaalida waxaa ka buuxa sheekooyin iyo maadeysyo tix iyo tiraabba leh oo lagu koriyo garaadka ubadka, laguna caweysiiyo, ayna ku madadaashaan marka ay xoolaha la joogaan iwm. Asalka sheekooyinka iyo

maadeysyadu waxa ay ka soo dhambalmaan hal-abuurka haweenka. Inta badan kuwa aynu halkan ku soo qaadan doonno waxaa adeegsada hablaha, in kasta oo qaarna inammadu la wadaagaan.

SHEEKOY SHEEKO!

Waxa ay ka mid tahay kuwa sheekooyinka lagu ibo-furto ama bineeyo, si loo xigsimoodo. Carruurta ayaa adeegsata ama marka loo sheekaynayo loogu furaa hadalka.

Sheekooy sheeko
Sheeko xariir ah
Shilin baa yeedhay
Geeday sheegtay

Geedihii baa ri'yo daaqeen
Ri'yihii baa malmal dhiiqay

Malmalkii bay ummul fuudday
Ummushii baa gorgor hiigey

Gorgorkii baa bawdo reebay

Bawdadii bay duulal dhuuxeen
Duulashii baa duumo xaaqday!

BERI BAA BERI BAAN!

Waa guntimo ka soo hadhay xidhmooyin xusuus ah oo guun ah iyo gocashooyin gaboobey oo ka soo go'aya agagaarka qalbiga islaan waayeel ah (cad ah) oo hawl gab ah oo awr guradii saaran reero geeddi ah oo galab carraabaaya. Awrkii hayinka ahaa ee ay saarnayd islaantu dushiisa ayay ka dareemaysaa gelbiska iyo alalaaska aroos ka dhacaya degmo geeddigu dhex giblan yahay meel aan ka fogeyn qormadii reerka loo soo sahanshey ee lagu furi lahaa. Waxa ay maqlaysaa sheekada ku saabsan arooskaas oo hablo awrka gadhka hayaa qaadaa dhigayaan iyo ballantii caawa marka reerku dego lagaga qayb qaadan lahaa faltansiyaha iyo dammaashaadka xafladda arooskaas.

Waaya waayo; *Xoorkii laga dhamay xagaagiyo xusuus baa geela lagu xer geeyaa!* Hablaha ka qayb galka arooska caawa wax ka sii oddorosayaa lama socdaan dareenka islaanta cadka ah ee awrka ay ku wadaan iyo inuu degaanku yahay baradii aqal galkeeda iyo arooskeedu ka dhaceen galab la mid ah galabtan maanta oo kale ka hor in ka badan nus qarni wakhti haatan laga joogo. Islaantu in goobta loo guurayaa tahay goob heblaayadii berigaas xalaytaba intii aan la soo hayaamin ka dareen heshay, in haddeerto la degayo degmadan aroosku ka dhacayana waxa ay u dhaaddan tahay si wacan.

Hablihii oo sheekadoodii ku foogan, ayay islaantii soo dhex gelaysaa oo awrka dushiisa kala hadlaysaa: *'Naayaadha waa dumarka joojiya awrka oo iga soo roga aan gelbiska wax ka raacee, mashxarad! alag alalag, olo ololoo; uluu ululuug..!* hablihii ayaa rarkii awrka iyo islaanta kor u eegaya oo la yaabaya. Cayaayir iyo habar iska haw-haw leh ayay ka soo qaadayaan, waxanay markii ay ka aammusi weydey ku odhanayaan: *'Eeyaahee ayeeyo Beyddan miyaad khafiiftay mise waad kaftamaysaa ku joog guradaada aroos iyo alalagtaaba dhici weydeye!'*

Qosol qax qax ah! '*Dhallinyaroow bi'i waaya, maxay adduun iyo waaya waayihiisa kala socdaan'* inta ay tidhaahdo ayay islaantii dabada uga gelaysaa hablihii oo u guud maraysaa taariikh nololeedkeeda iyo halkii ay godolba soo joogtey, waxanay tidhi:

Beri baa; beri baan
Wax la dhaloo; dhulka jiifta ahaa

Beri baa; beri baan
bilig bilig; baraar celisa ahaa

Beri baa; beri baan
daba jeex; dabka qaadda ahaa

Beri baa; beri baan
Rukun rukun; reeraha u wareegto ahaa

Beri baa; beri baan
Raamaley; ri'yo raacda ahaa

Beri baa; beri baan
Hablo weyn; had hadaafta ahaa

Beri baa; beri baan
Aroos; indha kuulan ahaa

Beri baa; beri baan
Mar curad; marwo reerle ahaa

Beri baa; beri baan
Laba dhal; laafyoota ahaa

Beri baa; beri baan
Saddex dhal; sit sitaacda ahaa

Beri baa; beri baan
Afar dhal; afo aada ahaa

Beri baa; beri baan
Shan dhal; sheekaysa ahaa

Beri baa; beri baan
Lix dhal; liibaantey ahaa

Goglan talo adduunyooy
Ma haddaan gabooboo
Laygu qaaday guro awr!

ODAYOOW MA DOONI!

Halkanna sheeko maadeys iyo murti leh ayaa ku dhex maraysa nin oday ah oo caalwaa ah oo aan xilo dumar lahayn, cid kalena aanay u xil qabin iyo hablo ka war helay sirtiisa oo ka maadeysanaya, lana hiishanaya silica iyo saxariirka la guud furay.

Odayow ma dooni doobi xoor leh?

Waar bal duul Allow dhegaysta duumo xaaqday
Oo maxaan ku diidi waaba dahabe.

Odayow ma dooni dahabo gabadha?

Waar bal duul Allow dhegaysta duumo laysay
Oo maxaan ku diidi waaba dahabe.

AABBE IYO HOOYO MAANTA ADHIGEENNI

Hablaha ayaa heestan isku maaweeliya marka ay adhiga la joogaan. Geed ay adhiga ka bidhaamiyaan ayay guudka uga baxaan oo fuulaan, kuna qaadaan cod macaan oo naaxiyad leh heestan oo u dhiganta ama u taagan war-bixin ay taar ugu tebinayaan aabbahood iyo hooyadood, ugagana warramayaan xaaladdooda iyo ta adhigooda.

Aabbe iyo hooyo
Maanta adhigeenni
Waxaan la soo joogey
Buulashii gorayo
Iyo bankii galayax,

Waxaan ka soo qaaday
Laba qumboo subag ah,

Waxaan isaga dhiibey
Laba tukoo sahan ah
Oo socdaalaaya
Oo sin bari aaddey,

Waxaan ka soo qaaday
Inan yaroo uur leh
Uur la-garanwaa' leh
Oo ardaa jiifta
Oo Allahayow leh
Oo ummulayeey leh,

Waxaan isaga dhiibey
Laba tukoo sahan ah
Oo socdaalaaya
Oo sin bari aaddey.

Kanina waa dheeg suugaaneed ka mid ah waxyaalaha curruurtu isku maaweeliyaan, gaar ahaan marka hablaha yar yari adhiga ama maqasha la joogaan:

Saaka Sayla yar baan ka soo kacay
Sayla weyn baan socod ku soo maray
Aar saloolanayaan ku soo baxay
Aar salaama calaykum baan idhi
Aar salaanta ma qaado buu yidhi
Qool yar baan qaadoon ku qawdhabey
Qayladuu qaadaan qosol u dhacay.

Mar kalena waxa ay yidhaahdaan:

Uurey uurey
Aagaan biijo
Saab la aroora
Sina ceel geeya
Saakana waatan.

BERI REERKAYAGU GUUR

Tanina waa hees kale oo habluhu isu jiibiyaan, ku heesaan oo qaadaanna xilliyada ay maqasha ama adhigaba la joogaan ee daajinayaan.

Beri reerkayagu guur, haawiyee
Guuryoo galbeed qabey, haawiyee

Waxaraha wad lay yidhi, haawiyee
Waday oo wadaan waday, haawiyee

Tiriyoo tiraa maqan, haawiyee
Tebayoo tiraa maqan, haawiyee

Tiro qoor cas baa maqan, haawiyee

Doon doonay oo helay, haawiyee
Doob meel hurday helay, haawiye
Doobaw ayaad tahay? Haawiye
Doob Ciise Maxamuud, haawiyee

Adiguna ayaad tahay? Haawiyee
Samatara Ugaadeen, haawiyee

May raaci buu yidhi, haawiyee
Kuma raacayaan idhi, haawiyee

Jeedal iyo jebaabjebi, haawiye

Iska daba rokookibey, haawiyee

Guryahoodi lay gee, haawiyee

Buul yar meeshan laga taag, haawiyee
Ri'da meher la soo qabey, haawiyee
Mindi lagu xangaraf sii, haawiyee
Misig diirran lay dhiib, haawiyee

Hudhay oo hudhaan hudhay, haawiyee
Hudhay oo halkeer dhigay, haawiyee

Anna wayga daacuun, haawiyee
Isna waa ka daba dhiig, haawiyee

Xuunsho way mashxarad timi, haawiye
Mulac waa malxiiskii, haawiye

Siilaanyo waa gabadh, haawiyee
Salaantiina waa taas, haawiyee.

ROOBOW RIGLOOW SOO DA'!

Xilliga jiilaalka marka dunidu abaarsato ee arladu kululaato, ayay carruurtu, gaar ahaan marka habluhu adhiga hadh geliyaan badanaa marka ay cirka daruur ku arkaan ku ducaystaan oo qaadaan heestan roob-doonta ah:

Rooboow rigloow soo da'
Ri'yo darariyow soo da'

Allow roobka noo keen
Mid lagu reeyo noo keen
Ku ri'yo dararsha noo keen
Ku ceesaamo giirgiiran
Geeskooda ka xumbeeya
Aqalkayaga dabadiisa
Ka xareedsha noo keen

Mid odayada bidaarta leh
Badh naga laaya noo keen.

Roobka di'iddiisa nolosha oo dhan baa ku xidhan. Baalalley biyo batalaq. Xilliga roobku curto ee uu si waafi ah u hoorrimaad hibitiqleeyo, arladana wada maansheeyo; ee geeduhu farow dheer, caleen iyo ugbaad bixiyaan, xooluhuna isku feedh dhalaan, ayaa lagu tilmaamaa marxaladda uga sarraysa ee farxadda iyo riyaaqa dadku ay gaadhaan heerka ugu fiiqan ee figta ugu sarraysa. Xilligaana waxa ay odhan jireen:

Rooblow Rooblow ma run baa?
Roob baa da'aye ma run baa?

Rooblow rooblow ma run baa?
Lays wada raacye ma run baa?

XUUNSHOOYINKAA XOOLAA LA MOODAA!

Marka ay hablaha yar yari adhiga la joogaan ayay isu jiibiyaan heestan soo socota. Laba hablood ayaa midiba geed fuushaa. Maaweelo ahaan iyo adhiga oo ay dawacada kaga hiraan darteed ayayna u adeegsadaan.

Gorayooyinkaa geel baa la moodaa
Alla waa runteedoo waa la moodaa

Xuunshooyinkaa xoolaa la moodaa
Alla waa runteedoo waa la moodaa

Duddumooyinkaa daaraa la moodaa
Alla waa runteedoo waa la moodaa

Alla taagooyinkaana buuraa la moodaa
Alla waa runteedoo waa la moodaa.

NIN YAROO NIN WEYN DILEY MA ARAGTEEN!

Tanina waxa ay ka mid tahay maaweelada iyo madadaalada carruurta lagu af iyo aqoon baro. Maskaxdooda ayaa lagu godliyaa, laguna koriyaa. Waxaa carruurta la barayaa magacyada xayawaannada, dhirta iwm.

Nin yaroo nin weyn diley ma aragteen?
Dabagaalle geel wada ma aragteen?
Dhawdhawley dhaamisa ma aragteen?
Duddumooyin daaro leh ma aragteen?
Maygaag magaalo leh ma aragteen?
Shan masoo maqaarro leh ma aragteen?
Mulac maalin geeddiya ma aragteen?

GEEL JIROW DHUGUFOW DHEGEYSO!

Geel jiruhu badanaa waa nin calool adag, axmaqna ah oo naxariistu ku yar tahay. Adhi jirtaa neceb, waayo geela ayuu ku soo daayaa adhiga, halkii uu ka celin lahaana hablaha la jooga ayuu ul dabada u qabtaa oo dhengedeeyaa. Fal celintii adhi jirtuna waxa ay noqotay aflagaaddadan iyo habaarkan is biirsanaya:

Geel jirow dhugufow dhegeyso
Dhuusa haangaallow dhegeyso
Geelu kaa cararyeey dhegeyso
Dhiilku kaa lunyayeey dhegeyso
Qaydku kaa gubayeey dhegeyso
Qaawanaan rooreey dhegeyso
Geel jirow dhugufow dhegeyso.

MAROODI CADHOOLE

Waa sheeko xariir carruurtu ku af barato oo ku saabsan maroodi laga dhacay hal uu lahaa. Dabagaalle ayaa hasha kala baxsaday. Maroodigii ayaa cartamaya oo camal wareeraya, soona hujuumaya dad, duunyo iyo dhirba. Xooggiisa iyo cadhadiisa marka lala yaabo, ayay carruurtu ku xasilinaysaa ama dejinaysaa heestan:

Maroodi maroodi
Maroodi cadhoole
Markii col la sheego
Cadaadda ku meere
Hashii cosob waatan!

QAYBTA 3AAD

NOLOSHA CASRIGA IYO HAWEENKA SOOMAALIDA

Ummaddeennu jidkii
Kii islaamnimadii
Ahabtii faralkii
Asalkii dhaqankii
Isirkeedu lahaa
Way ka soo ambatoo
Aarankay dubatey.

Ubaxeey hablihii
Ololaa ku socdoo
Ubaxeey sannadkii
Boqollaal ugub baa
Axankooda qashoo
Ammintiiba kolley
Inan baa dhimatoo
Aqal baa dumayoo
Udub baa jabaya!

Adduunyadu maanta waa xaafad yar oo ku taalla tuulo yar. Waa qoobad yar oo la is wada feedh deggan yahay, la isna wada gaadhi karo. La is wada arki karo oo la is wada maqli karo. La is wada taaban karo. La is wada urin karo, la isna wada dhadhamin karo! Waa adduun dareen wadaaggiisa iyo iska war hayntiisu deg deg badan yihiin. Horumarka

technology-yadu waxa uu sahley isu soo dhoweynta, is barashada, wada xidhiidhka, dhib iyo dheef is waydaarsiga, wada macaamilka iyo wada noolaanshaha dadyowga adduunka iyo is daawaysigooda oo dhinac ah ama dhanka kale is qalaynta dhaqammadooda, caadooyinkooda, taariikhdooda, diimahooda, fekerka in-araggooda iyo noloshooda docdii laga eego dacalladeeda kala geddisan ee fidsan. Arrintaasi waxa ay jidaynaysaa in loollan iyo hujuun xagga maanka iyo maskaxda ku taxmaya la isku qaado, la iskuna muquuniyo oo aan teello la isu dhigan. '*Ninkii seexdaa sacii dibi dhalay*.' Ninka turuqa iyo xoogga weyn ee xagga haynta iyo dhaqaalaha ka qaniga ahi waxa uu ka iibinayaa, sandullena u dhacsiinayaa fikirka adduun araggiisa iyo sida uu nolosha u dareemayo ee uu la rabo hannaan socodkeeda, inuu duuduub iska shaandhayn la'aan uga tafaariiqaysto ama qaato ninka jilicsani; ka xoogga yar ee saboolka ah ee ka gaabinaya ama sardhada haddeer ka soo kacay ama soo baraarugaya ee ka dheelallowsan legdankaas nololeed iyo horumarkiisa ku socda xawliga afar qaadka ku jira ee dheeraynaya.

Dadka soomaalidu waxa ay ka mid yihiin dadyowgaas dunida kuwooda ugu itaalka yar, uguna sii liita, kuwooda ugu nugul xagga ka hayaamidda ama dayactirasho la'aanta dhaqankooda, afkooda iyo sooyaalkooda iyo haddana dhinaca kale kuwooda ugu dhegaha adag xagga qalo-bixinta iyo ku milanka ama la qabsiga dadyowga kale dhexdooda iyo dhaqammadooda. Taasi waa arrin is burinaysa, hayeeshee waa xaqiiqo ka soo baxaysa wacaasha soomaalida ka dib markii lagu carceeray ee lagu sii libdhay qurbaha iyo qaxootinnimada. Haweenku haddaba waxa ay ka mid yihiin nugulkaas soomaalida, waxaase u dheer ku dhex asqawga duufaanta iyo ku hafashada daadadka ka soo rogmanaya mawjadaha baxaadegaya ee afkaarta maanta adduunka ka ciidaminaysa ee ku saabsan aragtida dumarnimada quwaysa, sarraysiisa, ka badbadisa ee karkaarrada weydaarisa, afka qalaadna loo yaqaan *Feminism*! Aragtidan iyo afkaaraha la hal maala ee maanta dunida ku soo xoogeysanayaa waxa ay ku saabsan yihiin waxa loogu yeedho Xorriyadda Haweenka iyo xeerar ama qawaaniin arrintaas xardhaya, qurxinaya oo badhitaar ku sameeya xoojin ahaan, kuwaas oo ay horseed u yihiin waddamada Reer Galbeedku, sida Sinnaanta Ragga iyo Dumarka, Xeerka Qoyska iwm.

Aragtidan dumarnimada xoojisa ee hubaysaa waxa ay ku fidday caalamka oo dhan. Innaga xaggeenna iyo taariikhda soomaalida ee casriga ah waxaa soo galay lifaaqyo jiidanaya eebooyin sun iyo waabay leh oo ka soo jeeda aragtidaas iyo afkaaraha la hal maala. 11-kii Jenaweri 1975 waxaa soomaalida u beryey subax ula dhalay oo ku salaantay murugo iyo uur ku taallooyin dayaxa, cadceedda, hawada, dhirta, dhulka iyo cirkuba ka ashkatoodeen; cabasho ka sameeyeen. Waxaa subaxdaas dawladdii millateriga ahayd ee Maxamed Siyaad Barre horjoogaha u ahaa ku dhawaaqday wixii logu yeedhi jirey Xeerka Qoyska ee ku astaysnaa sinnaanta ragga iyo dumarka. Xoog ayay damacday in dawladdaasi ku muquuniso dadka soomaalida ee muslimka ah oo ku mariso si fudud shuruuc noocaas ah, iyada oo taageero ka haysata dawladdii weynayd ee shuuciga ahayd ee kala daadatay hortii 1990-naadka ee Midowgii Soofiyeeti (USSR). Dhiilladii ugu weynayd ayaa ka dhacday waddanka 23/01/1975 markii dhegta dhiigga loo daray culimadii diinta ee ka badheedhay, kuna gacmo saydhay baaddilkii iyo xaq darradii dawladdu la hindiwaasaysey. Culimadu dembi ma gelin ee waxa ay difaaceen aayaadka Qur'aanka Kariimka ah ee lagu gabbood falayey, la nasakhayeyna ee qeexa saami qaybeedka iyo qori tuurka magta iyo dhaxalka ragga iyo haweenka. Dadku rag iyo

dumarba uma riyaaqin tallaabooyinkaas dawladdii kacaanku ku dhaqaaqday, haween badan oo diinta fahamkeeda wax kala socdeyna dhegaha ayay ka furaysteen oo wax saamayn ah kuma aanu yeelan xeerkaasi.

Culimadii diinta ee ka gadooddey meel-ka-dhacyadaas diinta islaamka loo geysanayey toban ka mid ahaa waxaa lagu fuliyey xukun dil ah, waana la laayey markii ay ka noqon waayeen mawqifkoodii diidmada qayaxan ahaa ee ku aaddanaa xeerkaas qoyska. Waxa ay culimadaasi kala ahaayeen Alle ha u wada naxariistee:

1. Shiikh Cali Xasan Warsame
2. ,, Axmed Sh. Maxamed Walaaleeye
3. ,, Ciise Xasan
4. ,, Axmed Liibaan
5. ,, Muuse Yuusuf
6. ,, Aadan Ciise
7. ,, Cali Jaamac
8. ,, Maxamed Siyaad Muuse
9. ,, Saleebaan Maxamed Jaamac iyo
10. Shiikh Yaasiin Cilmi Cawil

Diinta Islaamku waxa ay ganafka ku dhufaynaysaa oo ka muddaharaadaysaa aragtidaas ku saabsan sinnaanta ragga iyo haweenka, iyo xeerarka loo dejiyey arrimaha qoyska ee aragtidaas salka ku haya iwm. Diinta Islaamku waxa ay haweenka nolosha ka siisaa kaalin iyo doorar muhiim ah. Tusaale ahaan meelaha sartu ka qudhmayso ee afkaarahaas dumarnimada buunbuuniya iyo diintu isku diidayaan, waxaa ka mid ah arrinta magta iyo dhaxalka, xidhiidhka marwada iyo ninkeeda, sida hoggaanka guud ee qoyska, xidhiidhka iyo hannaanka wada macaamil ee labka iyo dheddigga iwm.

Sida Diinta Islaamku jidaynayso magta haweeneydu waa ta ninka badhkeed, dhaxalka dheddigguna waa ka laboodka badhkiis oo halkaas kuma sinnaan karaan. Hase yeeshee diintu nolosha kuma kala faddisho labka iyo dheddigga. Ninka iyo haweeneyduba waa laba aadane oo u gudboon aasaaska nolosha iyo jiritaankeeda ruuxiga ah. Keliya waxaa la kala guddoonsiiyey xilal iyo waajibaadyo u kala soocan, taas baanay ku salaysan tahay magtooda iyo dhaxalkooduba. Tusaale: Hoggaanka sare ee qoysku waa mas'uuliyad ninka la guud saaray. Marriinka iyo masruufka oorida iyo carruurta isagaa laga rabaa; ha dhalo ama ha oofto. Wax alle wixii hawl ah ee guriga dibaddiisa looga baahdo, ninka ayaa la raaciyey. Waa waajibaad laga doonayo in uu si xil-kasnimo ah uga soo dhalaalo. Haweenayduna waa wasiirkii arrimaha gudaha ee qoyska. Waxaa la raaciyey oo laga doonayaa in ay ka soo baxdo hawlaha guriga iyo agaasinkooda. Maaha hawl fudud lafteedu, sida ta ninka laga doonayo, ayay tanina u baahan tahay mas'uuliyad iyo xil-kasnimo ilaalinteeda iyo ku xisaabtankeeda leh. Halkan waxaa soo gelaya in lagu baraarugsanaado meelaha ay ku kulmaan waajib gudashooyinku ee ay iska gooyaan, una baahan in la is qabadsiiyo. Haweenaydu waxa ay ninkeeda ka kaabtaa, una sahashaa waajib gudashadiisa oo si dadban iyo si toos ahba waxa ay ugala qayb qaadataa hawlihiisa dibadda. Ninkuna sidaas oo kale waxa uu ka gargaaraa afadiisa hawlaha guriga oo dhan min kushinka ama kijada ilaa cuntaysiinta ama ciyaarsiinta iyo

koolkoolinta ubadka. Waxaa u dhex ah hawlaha oo dhan oo wada tashi iyo is-buuxin u wada baahan. Waa laba lammaane oo dhib iyo dheef wadaag ah. Waa laba xil gudasho oo aan kala maarmin, iskuna sidkan sida hal iyo nirigteed ama isugu dhafan sida ul iyo diirkeed oo aan la kala jeebi karin, isna ceshada oo isugu dheelli tiran sida labada dhoomood (haamood) ee awrka dhaanka ah, waana laba cawro oo is astura. Uma gol lihi in aan halkan dersi diini ah ku falanqaynno oo mawduucayguba maaha, hase yeeshee waxa ay ujeeddadu daarran tahay in aynu iftiiminno is-diiddooyinka ka soo jeeda fikradaha iyo afkaaraha kala geddisan ee ka soo butaacaya ilaha caadooyin iyo dhaqammada bulshooyinka iyaguna kala duwan iyo sida ay raadka ugu yeelanayaan mawduuceennan ku saabsan kartida haweenka soomaalida, gaar ahaan docdeeda ku taxmaysa kaalintooda ku aaddan nolosha casriga ah iyo wacaalaha maanta ee adduunkan isu wada bidhaamaya sidii lo' bannaan isugu timi oo wada daaqaysa.

Diinta islaamku mudnaan weyn iyo meel xafidan oo sharaf leh ayay haweenka nolosha uga astaysaa, kana siisay. Waxyaabihii soo if baxeeda isla markiiba ay wax ka qabatayna, waxaa ugu horreeyey sugidda xuquuqda haweenka oo cagta hoosteeda ku jirtey soo if bixiddii islaamka ka hor. Lama liidi jirin oo keliya ee waa la nolol duugi jirey oo marka inantu dhalato, ayaa meelaha qaar la aasi jirey, sida Jasiiraddii Carbeed ee diintu ka soo shaac baxday. Runtii dhaqammadii hore ee bulshooyinka caalamka in badan oo ka mid ahi, waxa ay quweyn jireen in dumarku ay si walba ragga uga liitaan, ugana hooseeyaan. Waxaa kale oo jirta oo hubaal ah in dhaqammadaas duugga ah ay weli maanta wax ka sii nool yihiin oo hadhaagoodii ka ciidaminayo meelo badan oo dunida guudkeeda ka mid ah.

Dhulalka ay soomaalidu degto waxaa haddaba lagu tirin karaa meelaha laga heli karo hadhaaga isirro ay raggu dumarka ku liidaan ama ay ka hulaaqaan meel-ka-dhacyo ku jihaysmi kara sharafta iyo xaqa haweeneyda. Tusaale ahaan soomaalida dhexdeeda waxaa dad badani hablaha ka hor-qabateeyaan in ay wax bartaan, qaar kalena maba aqoonsana in habluhu xaq u leeyihiin in ay tacliinba yeeshaan. Waxa aan anigu u soo taagnaa shaahid ahaan oo aan sheeko igu ahayn dabayaaqadii 1970-naadkii iyo horraantii 1980-naadkii oo ku beegnaa xilliyadii waxbarashadayda dugsiyadii Soomaaliya hablo waxbarashada ku wanaagsanaa oo weliba qaarkood ka mid ahaayeen ardaydii dugsiga oo dhan ugu tacliinta wanaagsanaa, uguna waxbarashada jeclaa oo intii dugsiga dhexe lagu jirey ama markii uu dhammaaday laga fadhiisiyey waxbarashadii, loona diidey in ay sii wataan; jaamacad ha joogtee; ilaa dugsi sare in ay gaadhaan. Hablahaas oo ay aad da'doodu u yarayd, waxaa 'gal dad liq ah' ama 'laf dhuun gashay' ku noqday oo tacliintoodii u qoonsaday nin 'iska roga ah' oo khaliijka berigaas waxoogay shillimo ah kala soo hulleelay. Hablahaas waxa xaalkoodu ahaa 'gees iyo gafuur'. Rabitaan dookh ma jirin xaggooda. Iska illow sahii caashaqa iyo laab la kaciisii. Xitaa maskaxdoodu weli uma diyaar garaysnayn, kumana soo dhicin oo weli kuma dhalan, mana soo gelin 'hammigii iyo qammigii' laydha iyo alalaaska guurku.

Run ahaan waxaa la doc faruuray himiladii iyo rajadii hablahaasi ay higsi ahaan bidhaansanayeen. Waxaa la afuufay oo la damiyey ilayskii shamac u daarnaa. Waxaa la curdin dhadhiyey dookhii jidka ugu soo maleegnaa; u soo socdey, waxana la af duubay rabitaankoodii ay markaas raadkiisa ku taagnaayeen; waxbarashadoodii. 'Inani waa guur

u joog' baa la yidhaahdaa. Waa run oo waa guur u joog, guurkuna waa astaan wanaagsan oo tilmaan u ah taranka aadamiga iyo ku xasilitaanka nolosha, waana muhiim kale in hablaha iyo inammadaba loo diyaariyo guur wanaagsan; si xigmad iyo xeel dheeriyi ku jirto. Hayeeshee arrintan hablahaasi taas muhiimka ah kuma xidhiidhsami karto, waayo inanta yar ee dhawr iyo toban jirka ah ee waxbarashada u golongolsan ama heellan ee sin dheerta ah, wakhtigii ku habboonaa aqoon raacashadana ku jirta, waxba guur iyo jujuubkiis iyada uma aha, habeenna ma wadaagaan. Waxaan xusuustaa in xitaa hablahaas qaarkood loo hooyey oo loo guri geeyey si dudduuc iyo khasab ah nin oday ah oo dhali kara oo aabbahood la da' ah ama guyaalba kor uga sii weyn. Waa gogol bil khasab ah oo laga dhaxaysiinayo dheddig 15 jir ah iyo labood 45 jir ah! Immisaa gaangaambiya soo kacaysey; kaaha quruxdeedu soo ifayey oo laac iyo labeen lahayd jujuub noocaas ahi ku dhacay. Immisaa taas awgeed nafteeda halis iyo mahlako u gelisey. Immisaa noloshiiba isu qoonsaday oo ama is deldeley ama dab is qabadsiiyey ama sunba qooshtay (walaaqday) oo sidaas murugada leh ku baxay, uguna guurey dhulka hoostiisa ama qubuuraha geeddi ku degey! Immisa ayaa hebla yar oo kale oo dheg iyo dhaban lahayd nolosha ku hagaastay; ku curdan dhadhay oo arrintaasi firdhasho ahaan u xero weydaarisey oo si xun suuqa ugu sinbiriirixatey, aakhirkiina ku libidhay; ku fogaatey, kana soo laaban kari weydey. Immisa kale ayaa iska dul qaadatay, samirna magansatay oo ilaa maalinkan maanta ah iyo inta ay nolol ku gaadhaanba qalbiga ka gocasho ooyaya oo kolba xusuus murugo leh maankoodu soo tufayaa oo kolba la soo mirkacayaa! Tiro koob isagu ha inoo joogee, waxaa u bogaadin ah haddiiba hablahaas cidi ku baraarugsan tahay, ogtahayna in masiibo iyo ibtilo ku hawaarsadeen oo haleeleen oo laga war qabo amaba lala dareen wadaagayo. Taasi waxaa lagu tilmaami karaa meel-ka-dhac iyo caddaalad darro waalidku, gaar ahaan aabbuhu ku takooray inantiisa oo leh xuquuqda iyo xaqa waxbarashada.

Meel-ka-dhacyada raggu dumarka kula dul kufaan waxaa kale oo ka mid noqon kara gacan-ka-hadalka bahalnimada ah ee ragga qaar ilaa haddeerto; casrigan haweenka kula kacaan. In kasta oo si muuqata loo dareemi karo in arrintaasi ay beryahan dambe dib u gurasho ama hoos u dhac samaynayso, haddana waxaa weli laga dhex helaa ragga soomaalida rag afooyinkooda gacanta ku daaliya oo dila; garaaca oo gacan-qaadka iyo halgaaddu had iyo goor gacantooda ka soo horreeyaan, arrintaas foosha xunna ku dhaqankeeda qabatimay oo ku dhaqma. Si nac weyni iyo axmaqnimo ah ayaa mararka qaarkood fara saarku u dhacaa. Lafaha ayay ragga qaar dumarka guraan. Qaar kale wejiga ayay si bahalnimo ah uga dilaan, una gaadhsiiyaan nabarro halis ah. Falalkaasi oo dhami waxa ay u dhacaan si naxariis darro ah, ragguna haweenka ugu tamar iyo taag sheeganayaan. Waxaa la odhan karaa xoogga iyo turuqyadooda waaweyn ayay raggaasi haweenkooda iyo maatidooda ku biyo dhiijiyaan, una adeegsadaan oo ku tijaabiyaan. Dumarka qaar ayay nafsaani ahaan uga dhaadhacday in haddii aanay raggoodu dilin, ragguba aanay iyaga (dumarkaas) wax jacayl ah u hayn! Waxaa haweenkaasi maskaxda ku guntadeen in dilitaanku ka mid yahay jacaylka laftiisa. Waa caado duug ah oo la soo kala dhaxlay, welina hadhadeedu (hadhaageedu) oollimaadkaas ku leedahay bulshada dhexdeeda. Waxaa kale oo halkan soo gelaya gefafka ka ratibma Gudniinka Fircooniga ah ee hablaha soomaalida ilaa maanta waalidiintoodu, siiba hooyooyinku kula kacaan.

Dhinaca kale marka qoyska soomaalida inani u dhalato weli ilaa haddeerto looguma farxo sida loogu riyaaqo marka uu inan u dhasho! Dhalashada hablaha badiba ma jecla soomaalidu. Ragga intiisa badani sida qaalibka ah kuma sii ag negaadaan haweeneyda hablo dhalka badan. Way la guursadaan ama way furaan oo ka tagaan! Waa la colaadiyaa oo geeska lagu feedhaa iyada iyo hablaheedaba. Waxaa loo bixiyaa naanayso badan oo lagu af lagaaddeeyo. Dembiga keliya ee haweeneydaasi gashay ee loo hayo, eedaynta iyo guhaaddana ay ku galabsanaysaa waa dhalashada hablaheeda ee aanay iyadu shuqulka ku lahayn. Marka horeba dhalashada carruurtu waa sed Alle bixiyo. Alle awooddiisa waxaa uu ku bixiyaa inammo miidhan oo siiyaa qoysaskii uu Isagu doono, qaar kalena waxaa uu ugu deeqaa isku jir ahaan hablo iyo inammaba, qaar kalena hablo miidhan, qaarna waxba ma siiyo oo ma-dhalays buu ka dhigaa. Taas caddaynteeda waxa aynu ku haynaa cilmiga diinta islaamka. Teeda kale cilmiga sayniska laantiisa taranka aadamiga u qaabilsani waxa ay caddaynaysaa ilmaha abuurmayaa hadba wiil ama gabadh kii uu noqonayo inuu aabbuhu mas’uul ka yahay oo aanay hooyadu wax shaqo ah ku lahayn. Isu tagga aabbaha iyo hooyada ka dib xilliga isu galmoodkooda waxaa dhaca ayaa saynisku leeyahay fal gal la mid ah kuwa isku dhisyada kiimikaad ee kimisteriga oo kale, fal galkaas oo ka imanaya kulanka xayawaanka manawiga ah ee manida aabbaha la socda iyo ogxanta ama beedka hooyada. Laanta Cilmiga Bay’oolajiga u qaabilsan taranka aadamigu waxa ay caddaynaysaa in ay jiraan 46 hidde-side (Chromosomes) oo taranka aadanaha ku saabsani. 44 ka mid ah hidde-sidayaashu waxa ay u taagan yihiin astaamaha iyo dabeecadda uu qofka abuurmayaa yeelanayo. Labada hidde-side ee soo hadhaya waxaa loo yaqaan hidde-sideyaasha taranka ee sinjiga ama sinji-sideyaal. Waxa ay sinji-sideyaashu kala xambaaraan ahaanshaha laboodnimo ama dheddignimo. Waxaa u kala taagan hide-sideyaasha taranka ee sinjiga labada xaraf ee X iyo Y. Xarafka X-du waxa uu u taagan yahay dheddigga, Y-duna laboodka. Sida uu haddaba cilmiga saynisku caddaynayo waxaa aabbuhu sitaa mar walba XY oo ah isku dhaf dheddig iyo lab ah, hooyaduna mar kasta XX oo ah dheddig sooc ah. Haddaba marka uu ilmuhu dhalanayo waxaa fal gal ka dhex dhacaa oo isu taga mid ka mid ah hidde-sideyaasha aabbaha iyo kuwa hooyada midkood. Haddii labada lammaane Alle wiil ka dhex abuurayo waxaa kulma sinji-sidihii aabbaha ee laboodka u taagnaa ee Y-da iyo kuwii hooyada midkood (X) oo mar kasta u taagnaa dheddigga. Haddii abuurta ilmuhu gabadh noqonaysana waa X-dii aabbaha iyo X-dii hooyada oo dheddig wada ah. Halkaas waxaa inooga bidhaamay in aanay hooyadu wax shuqul iyo shaqo ah ku lahayn hablo dhalista lagu eedeeyo, lagu colaadiyo ama lagu cadheeyo. Waxaa cad in ay arrintu ku xidhan tahay hadba sinji-sidaha aabbuhu soo daayo ee uu ukunta hooyada u dhiibo. Inkasta oo aan isagaba (aabbaha) taas wax saarkeeda loo aanayn karin oo aanu xukumi karin X-da ama Y-diisa hadba midda uu soo saarayo, awoodna aanu taas u lahayn oo ay arrin ka fog tahay (xagga Alle taal), haddana waxaa cad in haddii cid lagu eedayn kari lahaa hablo dhalka uu aabbaha yahay qofka ka mas’uulka ah ee eeddaas hooyada ka xiga.

Sida cad ee aynu xagga sare ku soo tibaaxnay waxaa muuqanaysa in diinta islaamka iyo aragtida cilmiga saynisku aanay is burinayn, iskana hor imanayn ee ay is waafaqayaan, isna raaci karaan. Waxa ay labaduba beeninayaan oo duminayaan, had iyo goorna ka hor imanayaan caadooyinkaas hadhaaga ah ee aragtida dhaqanka, waxaanay burinayaan duminna doonaan kuwa cusub ee soo gadaal baxaya sida geed gurma go’an ah. Halkan waxaa soo gelaysa aragtida dumarnimada sarraysiisa. Maanta waxaa afkaartaas iyo

fasahaadka ay bulshooyinka ku keentay ka ledi la' oo ka qaylinaya rugaha ay fadhido aqoonta waddamada reer galbeedku. Akhlaaqdii, anshixii, asluubtii, hab dhaqankii iyo qaab dhismeedkii qoyska ayaa ka sii burburaya waddamada galbeedka. Beer laxawsigii xoraynta dumarku waxa uu jideeyey in dumarkii ka haajiraan kaalintii ay nolosha iyo kobcinta bulshada kaga qummanaayeen iyo doorarkii ay ku asturnaayeen, kuna sharfanaayeen. Waxa ay halkaas uga hayaameen meel aanay meel kale ku gaadhi karin! Intooda badan dumarka galbeedku waxa ay ka baxeen guryihii, waxaanay is tubeen oo hogteen bannaanka. Waxa ay isku dhereriyeen raggoodii, tartanna la galeen oo tallaabadii ay qaadaanba la tallaabsadeen. Waxa qaar dumarkaas ka mid ahi wershedahooda casriga ah ka tunteen xiniinyihii labka. Qaar kalena waxa ay u muruqyo goosteen sidii ragga. Dabadeed waxaa soo baxay qof sawaaban oo meelna dumar uga eg, meel kalena dhiskii laboodka ka leh, waa labeeb; wax u dhexeeya lab iyo dheddig. Raggu maanta wax buu iska doontaa oo wuu isla aqal galaa meelo badan oo waddamada galbeebka ka mid ah, dumarkana sidoo kale waxaa loo oggolaaday in ay is guursadaan si sharciga waddamadaas waafaqsan! Cilmiga dhabta ahi ma oggolaan karo candadawlnimada intaas le'eg, diin xaq ah iyo manhajkeedana iskaba daa!

Dhashii carruurta iyo tarantii dadka ayaa waddamada galbeedka hoos u dhac muuqdaa ku yimid. Qoyska reer galbeedku ma rabo wax ka badan laba carruur ah, qaarna ubadba ma doonayaan in ay dhalaan. Dumarka iyo ragga in badan oo ka mid ahi guurkiiba way ka da'fureen oo cosobsiga iyo iska wada noolaanta ayay ka door bideen. Raggii iyo dumarkii way is qaban waayeen, waayo waxa ay u dhaqmeen isku si'. Halkii tabane iyo togane isa soo jiita oo is daara, isna il buuxsha laga ahaan lahaa ayaa mid ahaan la isugu soo biyo shubtay, dabadeedna waa la kala boodey, xiisihii iyo macaankii ayaa gamaaray oo bakhtiyey. Wax kasta oo la candadawlo ayaa sidaas iska noqda. Arrintani waa ta keentay in rag badan oo reer galbeedka ka mid ahi ay sidii hablaheenna u heerin tagaan oo dumar ay guursadaan u doontaan waddamada Afrikada Madow ama waddamada Bariga Fog ama Koonfurta Bari ee Qaaradda Aasiya iwm. Waa guul darro weyn haddii aad geyigaaga geyaan ka weydo!

Innaga qudheenna soomaali ahaan casrigu waxa uu inoola soo galay, innaguna sooray caadooyin cusub oo dhib iyo dheefba leh. Sida aynu kula kulmi doonno dheegga soo socda ee Haweenka iyo Waxbarashada. Waxaa nus qarnigii u dambeeyey lagu soo sunsumay magaalada, waxaana samaysmay xidhiidho iyo dhaqammo cusub. Caalamka kale ayaa saamayn ku yeeshay dhaqankii dhaladka ahaa ee soomaalida. Wax baa la bartay. Buugaag kala duwan ayaa la akhristay, waxaana la daawaday aflaam kala duwan oo xambaarsan farriimo kala duwan.

Soomaalida ceeb iyo fool xumo ayay ahaan jirtey marka la arko haweeney xilli dambe guura bahallaysa oo dhaqankeedu ku arooro in ay casarkii carrowdo, habeen badhkana soo hoyato. Hal-abuurka soomaalidu, gaar ahaan suugaantu waa isirka keliya ee ku dhiirrada naqdiga dhaqammada taban ee bulshada ka dhex ilmo roganaya. Awoodda sarbeebtiisa ayaa suura gelisa inuu farta ku fiiqo oo si asturan u dhaleeceeyo ama uga digo muuqaal kharriban oo dadka qaar caadaysigiisa ku dhaqmayaan. Dhawr tusaale ayaynu halkan ugu tegi doonnaa. Tusmada ugu soo horraysaa waxa ay tilmaamaysaa in

gabadh xilli xun socota, soona hoyata oo habeen badh had iyo goor gurigooda timaaddaa aanay bed qabin, aanay caadi ahayn oo wax weyni ka si' yihiin.

Xilliyada wax-saareenka
Iyo saacadaha reebban
Sabadiyo rugteey joogtey
Gabadh timi ma saalloona
Ku salliya Rasuulkiinna
Salka dhiga guryaa seexda!

Tusaalahan labaadna waxa uu is weydiinayaa oo la yaabban yahay adduunyadan cayn wareeggu ku yuurursaday ee ina-rag casarka soo hoyanayo ee guriga imanayo, haweenkiina suuqa ku maqan yihiin ee saqda dhexe soo xero gelayaan!

Saqda dhexe hadmaa dumar
Suuqa soo marmari jirey
Ragguna seexan jirey meel
Hadmaa sidatan loo rogey!

Tusaalahan kalena waxa uu is barbar dhigayaa gabadh ku lebbisan dharkii dhaqanka iyo hablo hawada la ciyaaraya oo sidii salamadhlaha u socda.

Hu'giyo dharku haybta waa ka badh
Hablihii kacay qaar hawaa lumisay
Xilkii hooyo way ka heermeen
Hummaaggay run moodayaan hodaya
Hebliyo hebla hiil ka sugi mayo,
Hankaygu ka weyn hinaasaha
Waxaad haysataa jidkii hore
Sidaan hubo waad hal adag tahay
Hambalyaan kugu siiyey hirashada.

Tusaaleyaasha sare oo dhami waxa ay farta ku fiiqayaan dhaqammo taban ama xun xun oo hablaha ama haweenka soomaalida qaar yeesha loogu duur xulayo, kuwa kalena loogu digayo. Hayeeshee waxaa la ogaadey in gabadh kasta oo qalloocataa uu maroorkeeda ina-rag mas'uul ka yahay, waana laba mid uun oo ama kii qallooca ka qaban lahaa ee toosin lahaa ayaa kula socda, una seeto dheeraynaya ama ka seexday oo aan kuba baraarugsanayn xilkiisa, ama nin kale oo qarad kale leh ayaa qalloocaas inanta ku wada oo kaga faa'iidaysanaya. Inanta saqda dhexe iyo goorta xun maqan ama socotaa waxaa ka dambeeya ina-rag oo ay ka timid. Gabadh kasta oo xumaatana nin uun baa xumeeya. Inanta la dhalliilayaa waxa ay lafteedu yeelanaysaa doorkeeda, waayo xumaanta la durayo iyadaa falaysa oo eeddu ku soo ururaysaa, qolyaha kalena dembiga kaalintooda ayay yeelanayaan. Arrintaas waxaa si qota dheer oo dhugmo toosan leh uga warramaysa maansada Indha Badan ee Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) iyo sababta hogga ay ka curatay oo ah xaqiiqo dhab ah oo aan mala awaal ahayn.

Magaalada Dirir Dhabe ayay goobtu ahayd, waana badhtamihii 1980-naadkii. Ubax X. Cumar Buraale waa inan yar oo ka soo jeedda qoys soomaaliyeed oo sabool ah. Qolooyin dhinaca Soomaaliya ka soo tallaabay oo jabhadii SNM iyo SSDF ka tirsanaa, ayaa lagu soo dhoweeyey gurigaas ay ku noolayd Ubax yar. Ragga guriga iman jirey ma ahayn rag baahiyi hayso oo fara madhan. Waa iska qurbe oo kale oo guriga ayay u soo hadh tagaan oo loo goglaa, si ay ugu barjeeyaan (qayilaan), waanay galaa bixi jireen oo iskaga nasan jireen guriga. Ubax waxa ay ahayd inan yar. Ishu xaggeeda ma dhugan jirin. Lama kala ogeyn in ay joogto iyo in ay maqan tahay. Lama kala ogaan jirin in ay wax cuntay iyo in ay gaajoonayso, in ay wax u baahan tahay iyo in kale. Ilaahay ka sakow cid xaalkeeda la socota oo og waxaa ka jirey qoyskeeda oo keliya.

Ubax way kortay. Waxa ay la kacday joog iyo qurux mar keliya u xuub siibtey sida inan gashaanti ah oo xilligii guurka iyo arrimihiisa isu diyaarinaysa. Mar qudha ayaa ina-rag ku wada baraarugey Ubax yar. Raggii shalayto kolba dhinac ka dhaafi jirey, ayaa isha hoosta kaga wada xadaya oo bilaabay ilaaqtan iyo in ay la kaftamaan, in ay hadiyado ula soo kala horreeyaan, in ay baahideeda iyo rabitaankeeda wax ka weydiiyaan iyo in ay Ubax isku garbiyaan, gurigiina lagu kala bixi waayo hadh iyo habeen oo la dul hogto!

Maxamed Ibraahim Hadraawi, waxa uu ka mid ahaa dad far- ku-tiris ah oo xaaladdaas hore ee barbaaritaanka Ubax iyo tan dambe ee kaalin galkeeda la socdey, xogogaalna u ahaa waayaheeda iyo godolba duruufihii nolosheeda ku xeernaa. Hadraawi waxa uu xidhiidh dhow la lahaa Ubax ilaa maalintii ay garaad yeelatay. Waxa uu ka mid ahaa dhawr qof oo Ubax ay u ged baxdo oo kala sheekaysato waxa maalin kasta soo mara ee ku soo kordha. Halkaas waxaa ka dhalatay 1987-kii maansada Indha Badan oo ka warramaysa ololihii Ubax ku socdey, tabaha iyo xeeladaha ay hablaha ugu dhabbacdaan ee ku ugaadhsadaan shabeel naagoodyada badan ee ragga soomaalidu, gaar ahaan kuwa gurigii yaraa ee Ubaxda yar iyo reerkooda saboolka ah ee Dirir Dhabe docaha ka soo kala kulaalayey. Kuwii Ubax oo abaar joogta oo carruur ah, ishuna ka han fog tahay la kulmay ee dhinaca ka dhaafi jirey, maantana berisamaadkeeda ku hambaberey ee ku ag xoonsan sidii xer Alle tuugaysa. Abwaanku waxa uu maansadiisa Ubax X. Cumar Buraale ugaga digayaa halista hareeraheeda taalla oo Ubax lafteedu badhkeed xogogaal u tahay, waxaana jirtey beryahaas magaalada Dirir Dhabe gabadh Ubax jiiraankooda ah oo inta shabeel naagood beerkeeda dooxay; boggeeda qooyey, ka dibna ka gelgelin doontay oo ku dafiray uurkii markuu soo baxay, inantiina markii ay ummushay ay ilmihii dooxa dhigtay oo ka dibna eeyi cuntay! Dardaaran waayeelnimo ayuu Hadraawi siinayaa Ubax, waanu ka afeefanayaa in ay Ubax oofiso abhintiisa iyo taladiisa odaynimo iyo in ay ka baxdo, iyo in ay Ubax ogaato in adduunku hadhowto sugayo idlaadka sheekadeeda. Ubax maansadu way dhaafaysaa oo waxa ay la hadlaysaa hablaha oo dhan, una digeysaa, waxaanay maansadu tummaati iyo waran caaro afaysan leh ku tur turqaysaa ina-ragga meheradda ka dhigta hilbaysiga iyo askax ama unuun ka gurka hablaha, hadhkooda iyo baradoodana ka saara ee xumeeya, suuqana sidaas ku geliya ee nolosha sureerkeeda u qoonsada ee ka sumeeya.

Ubax X. Cumar Buraale haddeer waa hooyo carruur badan yeelatay, si wanaagsan oo sharaf iyo milge leh u guursatey inan geyaan ah oo soomaali ah oo aan ka mid ahayn raggii degel fadhiga ahaa gurigii yaraa ee Dirir Dhabe. Ubax, seygeeda iyo

carruurtooduba waxa ay ogaalkey ku nool yihiin dalka Maraykanka, Indha Badanna waxa ay tidhi:

God abeeso ninkii
Illinkeeda degow
Taladaadu iyaa
Ma allow sahal baa?

Arraweelo markay
Laba eefka lahayd
Igadh geela haddii
Nin aroorsan lahaa
Amarkeedu hor yiil
Odhan mayno kolley
Awooddii rag dhintay
Sii agaasimatoo
Aakhiruu ku maqnaa
Ugaaskay dhaxashee,
Arrimii dhacay qaar
Utintooda haddeer
Lama oogi karoo
Abba looma hayee
Sheekadaase iskeed
Ma amaahan karree
Halka aahdu ku taal
Waa la sii axadhaa
Godob oofa ruqdaa
Aabbudhkeeda riddoo
Aloolkay jaratoo
Ibahay furatoo
Aslimayno dhaliil
Idhankeedu durkee
Imminkaynnu hubnaa
Waxa eegga jiree
Awgayow taladii
Ifka maw rogannaa?

Naca jooji arbow
Eela weynta ha layn,
Ayaxow ayaxow
Ayaxow weligaa
Ayda waad dhilataa
Eelna waad ka tagtaa,
Aafadaada miyaan
Aagna looga gudbayn?

Ashkirow farasow
Aayar baa la socdaa
Orodkaagu labaa
Agab-laad ku jirtaa
Haw abraarin sidaas.

Ban aroori kaxaa
Mar ugbaadku simaa,
Dhal aboodi halkuu
Ogxantiisa dhigtaa
Aadanuu mar jantaa
Meel aboor degey baa
Mar iftiin ka baxaa
Gole aammus badnaa
Mar mar baa idhi taas
Anda-qaad ku bataa.

Ma aqaan ma aqaan
Ma aqaanno darkii
Isagii han-hinnaa
Waxa loo egmadee
In dhoweydba sidaas
Afartiisa rugood
Agab baa la dhigtoo
Oommanaa fadhiyee
Ifafaalaha guud
Abshir baa dhalatee
Waxan awda hayaa
Ma ishaara san baa?
Ma abaabul shar baa?
Onkod gaaxdey miyaa?
Ma cir soo olkamaa ?
Ma iliilo socdaa?
Ma xer tuugi Allaa?
Ma hayaan ulan baa?
Ma dagaal uganoo
Laysu eeba gurtaa ?
Ma col awdalan baa?
Ma ibleys qaxayaa?
Ma insaa ma jinnaa?
Ma ardaa ma shinnaa?
Ma aleelo qubtaa ?
Ma adeeri dhashaa?

Ma arraa ma urraa?
Ma awaare kacaa ?
Ma ufaa ma dabayl?
Ma asmaa ma Xanuun?

Ubaxeey Ubaxeey
Indha yaab badanaa
Kugu soo ururoo
Kugu eegma batee
Maxay soo uriyeen?
May ayaamaha qaar
Kugu soo ururaan
Immisaa jirey waa'
Oontu kuu tirsanayd
Immisaa jirey waa'
Arradkaagu sinnaa
Immisaa jirey waa'
Noloshaadu adkayd
Immisaa jirey waa'
Ajarkaagu furraa
Immisaa jirey waa'
Abaalkaagu sugnaa
Immisaa jirey waa'
Ayaankaagu dednaa
Immisaa jirey waa'
Adduunkaagu madhnaa
Immisaa jirey waa'
Ishu kaa han fogeyd!

Wax-aqoolka haddeer
Uskag baa ku jiree
May ayaamaha qaar
Korka kaa asturaan,
May ayaamaha qaar
Wuxuun kuu illiyaan
Uurku wuu ku madhnaa
May wuxuun Ubaxeey
Afka kuugu ridaan
Adoogaa dabadii
May agoonnimadii
Aabbe kaaga noqdaan,
May Ilaahay hortii
Irbad kuugu huraan,
Alif waa derejee
Aqoon may ku geshaan
Erey may ku faraan

Loo adeegsado meel
Aayahaaga hor yiil
May ammaan ka dhigaan!

Abeer baanad ahayn
Oogadaan ku billayn
Awrtan qooqday haddeer
Abaar baa kulanteen

Ummaddeennu jidkii
Kii islaamnimadii
Ahabtii faralkii
Asalkii dhaqankii
Isirkeedu lahaa
Way ka soo ambatoo
Aarankay dubatey.

Ubaxeey hablihii
Ololaa ku socdoo
Ubaxeey sannadkii
Boqollaal ugub baa
Axankooda qashoo
Ammintiiba kolley
Inan baa dhimatoo
Aqal baa dumayoo
Udub baa jabaya.

Arartaydu malaa
Asaraar ma gashee
Ubaxeey warar baa
Agahaaga jiroo
Olloggaaga badh baad
Xog-ogaal u tahoo
Adigaaba yaqaan
Gabdho oodda rogtee
Bal albaabkan garaac
Ummul baa huruddee
Wax ku oogan xanuun
Aamanuun gubayoo
Umal baa shidayoo
Ammuurii dhacay bay
La asqaysantahoo
Ilmahay dihataa
Xalay eydu cuntee,
Naxariista illayn
Anshax baa dhaliyee,

Haddii uurka habreed
Astaan gaara lahaa
Hooyadii amranayd
Arxan goysey markuu
Xeer illow ku dhacoo
Ubadkii magantaa
Haadku eeganayaa!

Eerashoy bi'iwaa
Iil dhexdiisa haddaan
Obocdeedu qubnayn
Sow ma soo olosheen
Aaway beer debecii
Aabi baa lumiyee
Arladeenna miyaa
Naas irmaani jiraa?

Shan afraad shan afraad
Birta kii ka aslaa
Oori deydeyayee
Aroosow magacaa?
Ilko dhiigle maxaa
Lagu aamminayaa?
Dhego awdmey miyey
Odayeyntu gashaa?
Irdha qaado ragow
Naftaad aasi taqaan
Waad abuuri kartaa.

Rag miyaad Ubaxeey
Alabkiisa taqaan?
Asaydaada mar buu
Ashqaraar huwiyaa,
Al-alooska gobeed
Waa ka aar gudashoo,
Lama ooyo dhurwaa
Ishinkuu legdadee,
Gabadh iilatay hooy
Ayaanteeda madow
Alwadkeedu ninkuu
Alalaas geliyaa
Uur ku taallada wuu
Wuu ka iidsan yahoo
Iman maayo halkuu
Ka alaabo gurtee,
Ool waxay ka sidaan

Ergo waa ta dhahdee
Eedi hayga hadhee
Waan afeefanayaa.

Ubaxeey bahalaa
Ku ilaashanayoo
Ubaxeey hororraa
Ku ugaadhsanayoo
Araraa kugu dhow
Orgobaa fadhiyoo
Aarna waa gudayaa
Iimo kaa deyayaa
Geenyo aammus taqaan
Tuugba waa eryadaa,
Mar baa ayrada geel
Oohow! loogu digaa,
Anfariirka dareen
Adhibaaba didee
Ahmin baa la gataa
Hilbahaaga Ardooy
Lama iibsan karee,
Aanadaada ha deyn
Rag ul baa celisoo
Ka adkayso qudhay
Ammaantaadu tahee

Waa arooryo horoo
Orka kuu baxayaa
Amba qaadka salaad
Weeye loo addimee,
Hadal waa la abyaa
Waa la soo ururshaa
Arrintaada Marwooy
Wixii iiga ekaa
Horaan kuugu idhee,
Arbacuunkani waa
Abhintayda danboo
Waa ilayska haddeer
Addinkaagu halkuu
Ku abbaaran yahoo
Waa ammaano dadeed
Amarkaan ku faroo
Waa asaaska halkaan
Ka awaala digoo
Axdigaas culus baan
Adhaxdaada furee,

Sheekadaada ogow
Idlaadkeeda hadhow
Adduunkaa sugayee,

Af-dhabaandhab haddaad
Oofin weydo xilkaas
Way ahaan jirtey saas.

Sida aynu meelo hore ku soo xusnay, waxaa jirta in ragga iyo haweenka soomaalida hawsha iyo shaqada qoysku u kala qaybsan tahay oo qofba meel qaabbilsan yahay, isna buuxiyaan oo qofba ka kale ka sugayo badhitaar iyo gacan siin. Hase yeeshee waxa ay nolosha casriga iyo wacaasha waayuhu isku qasayaan, iskuna mulaaqayaan dhammaan wixii xuduudo iyo xayndaab ahaa ee u dhaxayn jirey hawl maalmeedka qoyska ee la kala gudboon ninka iyo afadiisa, taas oo maanta ka dhigan raqba waa ku raggeed. Waxaa taas looga jeedaa in labada lammaane; ninka iyo xaaskiisu; ay hawsha qoyskooda ka galaan qofba halka uu ka soo gaadho, wakhtigay doonto ama waxa ay doonto ha ahaatee. Nolosha casrigu waxa ay ku keentay haweenka soomaalida xaalad aad u adag oo halis gelinaysa jiritaankii qoyska, waayo sidaynu wax ka soo taabannay waxa ay garowshiinyo iyo gacantii ay filayeen ka waayeen inta badan raggii soomaalida, taasina waxa ay jidaysey in ay haweenku ku keliyeystaan hawlihii qoyska ee dhexda u ahaan lahaa labada lammaane ee ninka iyo ooridiisa.

Dambaskiyo waxaan Aadanow digo u xaadh xaadhey
Shuqul dumar lahaan jirey waxaan uga diqoon waayey
Doqonniimadaa xune wixii dan ihi ma liitaane!

Tuducyadan sare waxaa laga hayaa geesi lagu xifaaleeyey hawl hoosaad ku soo fara baxsatay oo xagga docda qoyskiisa kaga timid. Si wanaagsan ayuu ugu jawaabayaa, uguna caqli celinayaa nin la yidhaahdo Aadan iyo rag kale oo dantiisa ku af lagaadeeyey. '*Dirxigu dantiisuu qudhunka ugu jiraa*!' Waa dan madhaafaan ah waxa ii geeyey ee aan ugu jiraa digada; dhiriqda adhiga iyo dheriga dambaskiisa, ayuu ku leeyahay ee ogaada niman yahow doqonniimo maahee!

Marka la eego nolosha casrigan waxaa garowshiinyo la'aanta dhinaca ragga intiisa badan ka imanaysa lagu tilmaami karaa arrin ka soo jeedi karta isku dhacyada iyo is-diiddoyinka nolosha casriga lafteeda iyo dhaqammada kala duwan, iyo ragga soomaalida oo badiba wax ku cabbiraya hal-beegyadii hore ee nolosha iyo dhaqanka ee ku waajahnaa hawl maalmeedka ninka soomaaliga ah oo maanta wax weyni iska beddeleen markii ay magaalada ku sii milantay. Tusaale ahaan marka ay hooyadu magaalo ku hayso dhawr carruur ah (6-8 isku raq ah) oo iyana (hooyadaasi) xaalkeedu yahay mijini gashay; mijini baxday sannadna wallac ah, sannadka xigana ummul ah. Hawlaha badan ee u yaalla waxaa ka mid ah kala geynta iyo isu daba marinta carruurta iskuulladii iyo malcaamaddii, weliba qurbuhu waa ka sii xag jiraa dalka gudihiisa, waxaa laga sugayaa adeeggii, cunto karintii, nadiifintii iyo kala hagaajintii guriga ay u soo hoydaan ilaa tobanka qof ah ee dhar leh, ee dhuuni leh, ee maacuun leh, ee dhigasho leh, ee dhaqasho leh, ee gogol leh, ee kab iyo karin leh iwm. Marka carruurtu soo rawaxdo waxaa u bilaabmaysa hawl cusub, sida cuntaysiintii, kala habayntoodii, la eegista waxa ay shaqo guri u soo qaateen ee berrito laga rabo iyo u diyaarinta hawsha iskuulka ee berrito ee buug leh, ee qalin leh,

istiikad ama masaxaad leh, ee qalin qor ama xururufley leh, ee dhar loo kaawiyadeeyo leh, ee cunto ay sii qaataan leh iwm. Kumaa ballan dhakhtareed leh oo ilkaha laga hayaa waxa ay ka mid noqon kartaa hawlaha dheeraadka ah ee sida maalinlaha ah u soo baxa ee hooyada dusha ka saaran . Miyaanay gar iyo daw ahayn in hooyadaasi aabbihii ubadkaas la dhalay gacan siin ka quuddarayso, ka doonto oo ugu duddo haddii ay ka weydo? Ka warrama haddii ay aabbaha ku soo mudhuxsadaan hawlahaasi, ma inuu gole ka fulaa baa oo barbarkiisa inta karaankiisa ah ka qabtaa baa mise waa inuu ku dhereriyo hal-beegyo iyo si ay beri hore ahaan jirtey oo aan maanta door ahayn?! Waxa ay u muuqataa in loo baahan yahay in odayga iyo inanka soomaalidu dib u eegaan xidhiidhka ay la leeyihiin guriga; oorida iyo ubadka, qiimeyna ku sameeyaan doorarkooda maanta iyo nolosha casriga ah, si looga samata baxo dheelliga maanta laga qaylinayo iyo murugga nolosha qoyska soomaalida asqaysiinaya ee dul gawdiida.

Wuxuu ereyga 'Dheelli' i xusuusiyey bandhig faneed uu dhowaan magaalada London ku soo bandhigay curshaawiga da'da yar ee gabyaaga qayuuriga ah ee Cali Axmed Raabbi (Cali Seenyo). Abwaanku waxa uu bandhiggaas u bixiyey: *Dhan haddaad ka dheellido noloshaadu duug ma leh!* Bandhiggu waxa uu bulshada ku baraarujinayaa in aanay suurtoobaynin in jiritaanka qoysku raago ama jirriddiisu adkaato haddii uu dheelli ku yimaaddo doc ka mid ah labadiisa docood; aabbaha iyo hooyada kii dheelligu ka yimaaddaba.

Dhinaca haweenka soomaalida iyo nolosha casrigan waxaa ka soo kordhaya welwel iyo walaac ku saabsan haweenka qaar muujinaya dareen aan huwanayn ama aan hagoognayn hillaabtii xilkasnimo iyo xurmadii loo baahnaa, gaar ahaan kuwa qurbaha jooga, una arka inuu casriga yahay fursad dahabi ah oo u soo gacan gashay, ayna kaga dibaaqi karaan ragga soomaalida aargoosi ahaan wixii ay ka tirsanayeen gabbood fal iyo xad gudubyo. Waxaa la odhan karaa taasi waa afkaar bugta oo caabuq diloodey, kana arradan oo ka qaawan xilkasnimo oo dhan, xurmo, xishmad iyo xaq dhawr intaba. Aarsiga iyo kala cad goosashadu waa ficilooyin iyo fal celin indho la' oo ka baxsan xayndaabka samaanta iyo wanaag falidda ee dadnimada iyo diintuba quweeyaan.

Aan mar kale ku celinno oo nidhaahno suugaanta soomaalida iyo abwaankeedu waa isha ugu indhaha fiiqan ee yeelata indhaha 'gudin quraarta' oo kale, kana turjunta mar kasta waaqaca, dareenka iyo guuxa dad weynaha. Fanku waa isha u taagan naqdinta wax-ku-oolka ah ee dhismaha ah iyo soo bandhigga muuqaallada taban ee bulshada dhexdeeda ka hanaqaadaya. Abwaankii hal-muceedka ahaa ee dhowaan Alle ha u naxariistee geeriyoodey Ibraahim Aw Saleebaan Maxamuud (Gadhle) ayaa beri dhoweyd uumiyaha ku sooray bandhig masrixi ah oo la magac baxay: '*Ragow aarsi haween u adkaysta markiinna!*' Runtii bandhiggu lama qabo haweenka fikraddaas aarsiga ku salaysan, kuna hubaysan. Mana qabo in haweenka soomaalidu gumaysi ay ka gilgilanayaan ku hoos jireen oo haddana ay gaadheen xornimo taam ah! Hayeeshee waxaa bandhig faneedku toosh dul qabanayaa oo ku iftiiminayaa afkaartaas maroorta iyo dumarka inta u rixinaysa ee sidii lax oslaysa dhilifka u ruxaysa cidhib la'aanta iyo cawaaqib xumidooda, waxaanu uga digayaa afkaartaas haweenka inta badan ee wanaagga u taagan ee aan guuxooda ka dheerayn ee cagaha dhulka ku haya. Kala garo bad iyo webi, biyahooda kala saar. In salaaddu weligeed, kala tahay sunniyo faral, u ogow sax iyo maan!

Gabagabadii nolosha magaalo-galeennimo ee casrigan, gaar ahaan markii ay dhaceen masiibooyinka colaadaha iyo eedaha sokeeye, iyo bara kacyada qaxootinnimo, waxaa ka dhex muuqday sidii dayax buuxa oo shan iyo tobnaad ah oo manaafacaadkooda iyo waxtarkoodaba la taabtay oo loo aayey haweenka soomaalida intooda badan. Dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba waxa ay dumarku kaga firfircoonaadeen raggii sida aynu ku soo dul marnay meelo hore, goor dhowna ugu tegi doonno meelo kale oo soo beegan. Arrimaha waxbarashada iyo xoogsiga muruq iyo maskax maalnimo labadaba waxa ragga soomaalida kaga sii hormaraya oo kaga sita haweenka soomaalida. Hase yeeshee Tixgelin ku habboon kartidooda raggu xitaa uma quudhaan in ay siiyaan, una hibeeyaan haweenkooda. Marka ay dumarku waayeeloobaan, ayna hawl-gabaan lama mariyo xaqii iyo daryeelkii u qalmi lahaa wax-qabadkoodii iyo kaalintii ay kobcinta bulshada horumarkeeda ay ka soo qaateen. Si kastaba ha ahaatee haweenku waa lafdhabartii guriga iyo jiritaankiisa, bulshada iyo muunad u samaynta bilicdeeda, ilwaadkeeda iyo sureerka quruxdeeda, mana suurta gasheen in gurigaas dugsigiisa lagu nasto, laguna naalloodo oo lagu istareexo haweeneyda la’aanteed. Marka qoyska ay haweeneydu ka maqan tahay waxaa la yidhaahdaa gurigu waxa uu la’ yahay labada indhoodba, waxaana sima madow iyo mugdi, busaarad iyo fool xumo oo dhan iwm, marka uu ninku maqan yahayna waxaa la yidhaahdaa il buu gurigu la’ yahay, isha kalena si fiican waxba ugama arki karo oo waa il caad saaran yahay ama cawaran. Dhaqanka reer guuraaga soomaalida iyo kan dambe ee benderka ee casriguba waxa ay isku raacsan yihiin oo ka marag furayaan in gurigu yahay haweenka, haweenkuna yihiin guriga, kartidooda, doorarkooda, haybaddooda, milgahooda, karaamadooda iyo qiimayaashooduna ay halkaas (GURIGA) si xooggan ugu urursan yihiin, kana soo fidiyaan laamaha iyo faraqyada wax qabadkooda iyo hibooyinkooda sida aynu ku soo aragnay bilowga buuggan Guri Waa Haween qaybtiisa 1aad, kuna arki doonno qaybihiisa soo foolka leh.

WAXBARASHADA IYO HAWEENKA

Hablihii Dhool iyo lahaa Dhuuxa iyo Kordahab
Dhawaaq iyo socodba hablihii u dhawrsanaa
Ninkii dheehdaa qalbigu u dhashanaani jirey
Ledayey ninkii dhaliyo kii la dhaqayey reer
Markii dhaqankii qurxoonaa la sii dhil dhilay
Dhiggoodu halkii uu maray sahanku uu dhib galay
Dhan tacliineed markii dhiilo loogu shubay
Maxaa dhadhankii macaanaa dhunkaal u rogey!
Dhalliishu dhankay ka timid ee dheelku naga hayaa
Dheddigga maahee raggaa noo horkacay dhabbada
Mas’uuliyaddii dhigoon shayna dhawranayn
Dhisaynin walaashi iyo tii uu dhaqan lahaa!

Waxbarashada iyo dugsiyada casriga ahi xilli aan fogeyn ayay ka bilaabmeen arlada soomaalida, gaar ahaanna magaalooyinka waaweyn ayay ku soo horreeyeen. Waxbarashada keliya ee da'da iyo fac weynida leh ee dhulalka soomaalida ka tis-qaadday ugu horrayn, raadkana ku lahayd ilaa wakhti fog waxa ay ahayd aqoonta iyo cilmiga diinta islaamka. Rag aan badnayn ayaa fursad u heli jirey in ay wax ka bartaan cilmiga iyo aqoonta diinta islaamka. Dadku xoolo dhaqato reer guuraa ah ayuu ahaa, wakhtina looma heli jirin in carruurta xitaa la siiyo waxbarashada aasaasiga ah ee diinta islaamka.

Nin weyn oo gadh madoobe ah, ayaa badanaa xerow noqon jirey oo raaci jirey nin caalim ah oo cilmiga qur'aanka iyo axaadiista gudbiya ama waxaa loo waxbarasho doonan jirey culimadii islaamka ee Harrar iyo galbeedka fog fadhigoodu ahaa. Shiikh Yuusuf Al-Kowneyn ayaa raad wanaagsan laga hayaa oo lahaa daah-furkii malcaamadaha carruurta qur'aanka lagu baro. Sh. Yuusuf Al-Kowneyn wuxuu ahaa ninka '*Alif Ba'da*' carabida u beddeley ee afsoomaaliga ka dhigay, sameeyeyna: '*Alif wax ma leh, Ba' hoos ku hal leh*' ama '*Alif la kordhebey, Alif la hoos dhebey, Alif laa godey iwm*'. Bilowgii malcaamadaha qur'aanka sida dugsiyada casriga ah oo kale, waxaa lagu bilaabay inammada oo keliya, ma jirin bilowgii hablo wax bartaa arlada soomaalida.

Isha waxbarashada casriga ah ee soomaalida waxaa biyaheeda calcalyada xareedda ahi ka soo maaxdaan laagaha iyo jidhaamaha webiga *Nile* ee waddamada Suudaan iyo Masar. Labada waddan iyo dadkooduba waxa ay soomaalida la soo lahaayeen xidhiidh sokeeye; ehelnimo iyo saaxiibtinnimo oo ilaa maanta xididka geedkiisu qoyan yahay oo aanu qallalin. Aabbihii waxbarashada casriga ah ee soomaalida Maxamuud Axmed Cali iyo macallimiintii kale ee ugu horraysey ee dugsiyadii iyana ugu horreeyey waxbarashadu, waxa ay ka soo wada dhinbiil qaateen ifkii aqooneed ee shamacyadiisu ka daarnaayeen magaalooyinka Kharduum iyo Qaahira.

Waxbarashada casriga ahi waxa ay la kowsatey soo gelitaankii gumaystayaasha reer Yurub ee arlada soomaalida, waxaana bilowgii laga lahaa ujeeddo iyo qarad diin fidin salka ku haya. Wadaad masiixi ah ama baaderi, ayaa waxbarashadaas hor kuutinayey. 1891-kii ayaa dugsiyadii ugu horreeyey ee noocaas ahaa laga kala furay magaalooyinka xeebta kulaalaya ee Berbera iyo Bulla-xaar, 1905-tiina magaalada Saylac. Waxaa dugsiyadaas lagu bilaabay inammo aanay tiradoodu badnayn oo ay ka mid ahaayeen X. Faarax Oomaar, Xuseen Kaatoli, Ciise Faranji, Axmed Cali (Maykal Maryama Aabbihiis), Fideer, Maxamuud Diiriye Suul Laawe iyo qaar kale. Dugsigii Dhaymoole ee Berbera duleedkeeda ku oolli jirey ayaa ugu caansanaa dugsiyadaas oo markii dambe wada xidhmay oo socon waayey, ardaydii ku jirteyna waxaa loo qaaday dhanka magaalada Cadan dugsi Baaderi oo ku yaalley.

Markii ay xidhmeen dugsiyadii Baaderigu, waxaa keliya oo waddanka ka jirey dugsiyo gaar ah oo ay dhigtaan carruurta Hindida iyo Carabtu. Magaalada Berbera ayaa dugsi ku yaalley kuwaas ka mid ahaa. Aabbihii Waxbarashada Maxamuud Axmed Cali waxaa uu fursad iyo nasiib u helay inuu galo oo wax ka barto dugsigaas Hindida iyo Carabtu wada lahaayeen, kuna qaato waxbarashadiisii aasaasiga ahayd. Sannadkii 1919 ayaa Maxamuud Axmed Cali waxbarasho ugu kicitimay waddanka Suudaan, waxaanu tacliintiisa sare ka bilaabay magaalada Kharduum kulliyad ku taalla oo lagu barto

macallinnimada oo loo yaqaanney Bakhta Al-Ruda. Dhammaadkii tobanlihii 1920-naadkii ayuu Maxamuud ka soo laabtay waxbarashadaas.

Maxamuud Axmed Cali waxaa uu ku baruurugsanaa ahmiyadda ay leedahay in ubadka soomaalida loo helo waxbarasho ka duwan tii Baaderiga, waxaanu fahamsanaa, kana dheregsanaa khilaafkii ka dhex aloosnaa soomaalida iyo maamulayaashii gumaysiga. Si haddaba xeegana xeego u noqoto, ilkana u nabad galaan, waa in Maxamuud isu soo jiidaa labada dhinac: Waalidka ubadkiisu waxbarasho la'aanta la kadeedan yahay iyo nimanka shisheeye ee u taliya. Maxamuud Axmed Cali waxaa uu isku taxallujiyey in maamulkii gumaysigu taageero u fidiyo rugihii waxbarashada soomaalida ee dhaladka ahaa, kuwaas oo ahaa malcaamadihii qur'aanka, si waalidiintu isugu soo taagaan in ay ubadka u oggolaadaan in ay ka qayb qaataan barashada aqoonta kale ee caadiga ah, Maxamuudna gadh-wadeenka ka ahaa.

Maxamuud Axmed Cali wuxuu halgan dheer oo dhib badan u galay sidii uu aqoon ugu ababin lahaa ubadka soomaalida hablo iyo inammaba iyo sidii loogu heli lahaa goobo waxbarasho oo la isugu keeno marka ay malcaamadaha ka soo aflaxaan. Maxamuud waxaa uu geli jirey safarro dhaadheer dhulka oommanaha ah ee surmiga iyo harraadku yaalliin ee xoola raacatada soomaalida, si uu uga soo ururiyo carruur waxbarashadaas kaalintooda ka qaadata. Waxaa uu kaxaysan jirey rakuub (awr la fuulo) ama faras, waxaanu dhex mari jirey dhulka daaqsinka ah ee reer guuraaga. Waxaa uu weydiisan jirey in ay siiyaan oo ku daraan hablo ha joogaane 20, 10 ama 5 wiil iwm oo waxbarashada ka qayb gala. Inta badan waxaa uu la kulmi jirey hungo oo waa loo diidi jirey, meelaha qaarna waxaa uu kala kulmi jirey or iyo canbaarayn. Dadku waxa ay ka biyo diidayeen waxbarashadii Baaderigu hormuudka ka ahaa ee bilowgii, Maxamuudna waxaa uu aqoonsanaa, una muuqatey baahida loo qabey in la abuuro waxbarasho casri ah oo la jaan qaadi karta dhaqanka iyo diinta oo aan ahayn taas hore ee laga wayiigayey ee baaderiyeysnayd.

1929-kii oo ku beegmaysa ayaamihii Maxamuud Axmed Cali ka soo laabtay Suudaan iyo waxbarashadiisa waxaa geestii soomaalida ee Ingiriisku xukumayey ka furnaa dhawr dugsi oo maamulka gumaysigu maal gelin jirey. Niman wadaaddo ah ayaana dugsiyadaas carruurta ugu dhigi jirey afka carabida iyo xisaabta. Dhanka kale ee Talyaanigu xukumayey waxaa xilligaas ka hanaqaadsanaa dugsiyo badan oo hoos tegayey Kiniisadaha Talyaaniga, waxaanay dugsiyadaasi ka furnaayeen magaalooyinka Muqdisho, Marka, Baraawe, Jilib, Afgooye, Baydhabo, Raas Xaafuun iyo meelo kale. Talyaanigu kalama kulmin koonfurta dhibaatadii iyo diidmadii waxbarashada ee Ingiriisku kala kulmay waqooyiga. Dhinaca koonfurta waxaa doorka Maxamuud Axmed Cali mid la mid ah ku lahaa Macallin Jaamac Bilaal oo dedaal weyn u galay tis-qaadka dugsiyada waxbarashada casriga ah magaalada Muqdisho iyo nawaaxigeeda. Fartii Cusmaaniyada iyo Cismaan Yuusuf Keenadiid, ayaa xoog ku lahaa meelo ka mid dhulalka soomaalida, gaar ahaan gobollada badhtamaha.

Sannadihii 1930-naadkii waxaa kordhaysey tirada dugsiyada waxbarashada, waxaana dugsiyo cusubi ka furmeen magaalooyinka Berbera, Burco iyo Hargeysa. Xilligii dagaal weynihii 2aad ee dunida waxaa badiba magaalooyinka waaweyn ka furmay dugsiyo kale

oo cusub, waxaanu Ingiriisku bilaabay inuu maal geliyo 19 malcaamadood oo ku yaalley magaalooyinka Hargeysa, Burco, Berbera iyo meelo kale. Waxaa xilligaas ka dib soo iftiimayey dareen hoosta ka xarriiqaya in indho ka duwan kuwii hore lagu eegayo dugsiyadaas laabta la soo kacaya ee waxbarashada. Waxaa furmay dugsiyadii Shiikh iyo Cammuud oo lagu qaadan jirey tacliinta dugsiga sare. Dagaalkii 2aad ee dunida ka dib ayay habluhu bilaabeen in ay si rasmi ah dugsiyada u tagaan oo ay wax bartaan. Sannadkii 1952 ayaa magaalada Burco laga furay dugsigii hablaha ee ugu horreeyey arlada soomaalida. Ka dibna waxa ay ka furmeen magaalooyin kale oo Hargeysi ugu horraysey. Ragga culimada ah ee furitaankii dugsiyada iyo kobcinta waxbarashada dhiirri gelinta badan siiyey waxaa ka mid ahaa Sh. Ismaaciil Faarax oo magaalada Burco malcaamadaha iyo dugsiyadii ugu horreeyey macallin ka ahaa. X. Muuse Ismaaciil Galaal oo joogey idaacadda ayaa aftahannimadii Alle ku galladay iyo aqoontiisii dhaqanka iyo af soomaaliga ku xoojinayey u bislaynta dadka waxbarashada. Abwaankii weynaa ee Cabdillaahi Qarshe ayaa isna kaga qayb qaadanayey hal-muceedyadiisii xoogga iyo saamaynta badnaa: '*Aqoon la'aani waa iftiin la'aane, ogaadaay ogaadaay, dugsiyada ogaadaay; oo aadaay oo aadaay waalaalayaal oo aadaay'!* Dhiirri gelinta waxbarashada waxaa qayb ka ahaa soo if bixii ciyaaraha *Sport*-ka iyo taabba qaadkoodii oo soo jiidasho ku sameeyey da' yartii soomaalida, halkanna waxaa iga soo qoollaaliyaya doorarkii wax-ku-oolka ahaa ee aabbihii Sportiga Cabdi Siciid Xuseen oo ka mid ahaa dadkii Cadan wax ku bartay ee ka soo wareegey xilliyadii u dhexeeyey labadii dagaal weyne ee dunida. Cabdi Siciid waxaa uu sameeyey kooxo Sporti oo tartama, hoosna taga oo ka yimaadda goobaha waxbarashada.

Raggii kale ee kaalinta ku lahaa hirgelinta iyo kobcinta waxbarashada casriga ah, Maxamuud Axmed Calina ku lammaanaa waxaa ka mid ahaa Sh. Xasan Maygaag Samatar, Maxamed Shire iyo Cali Jirde oo ka mid ahaa qolyihii ugu horreeyey ee qalinka ku raadka bartay iyo qolyihii kuwaas ku sii xigey, ayna ka mid ahaayeen Yuusuf X. Aadan Cilmi, Ismaaciil Yuusuf Samatar-Gaandi iyo Maxamed-ruun Sh. Madar. Hablihii ugu horreeyey ee lagu furay Dugsigii Hablaha ee magaalada Burco, kana aflaxay dugsigaas waxaa ka mid ahaa: **Deeqa Col u joog**, **Raaqiya X. Ducaale**, **Shamis Xuddoon**, **Saakin Jirde Xuseen** iyo **Kaltuun Iimaan**. Si waxbarashada loogu dhiirrado hablaha dugsigaasi lagu bilaabay intooda ugu badani waxa ay ka yimaaddeen qoysaskii ugu ladnaa, uguna caansanaa Somaliland min gobolka Sool ilaa Awdal inta u dhaxaysa.

Waxbarashada casriga ahi waxa ay soo martay jidkaas dheer, waxaana lagu soo bixiyey waxaas oo dedaal ah oo kala dildilo iyo dacallo rogan. Waa waxbarashada faceedu kaas yahay, haweenka soomaaliduna aanay ku qadin ee qaybta ka soo qaateen xilliyo bilowgeediiba ku dhow. Gobannimada ka dib ayay haweenku ku soo xoomayaan goobaha waxbarashada, waa xilliyadii ay bilaabantay in miyiga laga soo guuro, magaalooyinkana lagu soo gurmo ee qamaamay, si wax dheef ah looga raadsado midhihii gobannimada la qaatay 1960.

1960-kii oo soomaalida qaarkeed xornimo ka heleen gumaystayaashii Ingiriiska iyo Talyaaniga, waxaa kordhay tirada dugsiyadii waxbarashada iyo tii ardaydaba, waxaana waxbarashada iyo dugsiyaduba si muuqata ugu wada baaheen dalka wixii ka dambeeyey 1969-kii markii ciidamadu talada waddanka qabsadeen. 21-kii Oktoobar sannadkii 1972

oo ku beegnayd sannad guuradii 3aad ee ka soo wareegtey markii ciidamadii Maxamed Siyaad Barre madaxda u ahaa waddanka inqilaabka ku qabsadeen, ayaa si ficil ah loogu dhaqaaqay hirgelinta qoraalka af soomaaliga oo ku suntan guushii ugu weynayd ee soomaalidu ku tallaabsato intii ay xornimadeeda qaadatay, ahna aayatiinka iyo dheefta ugu qiimaha badan ee maanta la hayo, lana xusuusnaan doono. Dawladdii kacaanka ahayd waxa ay dugsiyada waxbarashada ku fidisay ilaa tuulooyinka yar yar, waxaana la qaaday ololihii Cidhibtirka Jahliga ee barashada qorista iyo akhriska far soomaalida. Rag iyo dumarba waxaa ka soo baxay tallaabadaas dadkii ugu badnaa taariikhda ee waxna qori kara, waxna akhriyi kara. Hablo badan ayaa nasiib iyo fursad u helay in ay weelkooda darsadaan biyaha ka dhacaya dhibicda hoglaha roobka ah ee ku dul hooray degaannadooda hore u engegnaan jirey.

Ayaan lagugu gaadin
Oo yay ku gaadin
Godadka labanlaabma
Iska giiji shaqallada.

Gumaysi iyo la jire
Fartayadu ninkay gubi
Guushayadu ninkay dhibi
Gidaarka madaxa ha ku dhuftee,
Maxaa iga galay; waxba!

Halkan hoose waxaa ka muuqda shaxanno is barbar dhig ku samaynaya hablihii dugsiyada waxbarashada ku jirey sannad dugsiyeedkii 1959/1960 iyo sannad dugsiyeedkii 1987/1988. Waa laba tiro koob oo ay qaadday wasaaraddii waxbarashadu oo aan ka soo daalacday buugga Haweenku Waa Hoy iyo Hooyo boggiisa 89aad ee uu leeyahay qoraaga culus ee Khaalid Cali Guul Warsame.

Tiro koobka Sannad dugsiyeedkii 1959/1960

Dugsiyada Hoose…………………………. 4,732 Hablood
Dugsiyada Dhexe…………………………102 Hablood
Dugsiyada Sare……………………………57 Hablood
Jaamacadda……………………………….0%

Heerka korodhka hablaha waxbarshada ka qayb qaadanaya waxaa uu cirka isku shareerayaa nus qarni ka dib marka aynu eegno tiro koobkan kale ee la sameeyey, weliba iyada oo xilligan la qaaday tiro koobkan dambe uu ahaa xilli aanu waddanku degganayn guud ahaan oo qalalaase siyaasadeed, dagaallo sokeeye iyo gadoodyo dad weyne ku getfanaayeen waayaha iyo wacaasha dadka iyo dalka, gaar ahaanna qaybo ka sii mid ah, sida gobolladii waqooyiga.

Tiro koobka Sannad dugsiyeedkii 1987/1988

Dugsiyada Hoose…………………………104,700 Hablood

Dugsiyada Dhexe………………………….85,600 Hablood
Dugsiyada Sare……………………………43,205 Hablood
Jaamacadda………………………………..30%

Celcelis ahaan waxaa hablaha dugsiyada dhigtaa sannadkii 1987/1988 ka ahaayeen wadarta guud ee ardayda 40%, jaamacaddana 30%. Sida wax waliba waddanka beryahaasi u sii dumayeen ayay tayada waxbarashaduna sii liicaysey maalinba maalinta ka sii dambaysa ilaa laga gaadhayey shaf dhul ku dhufashadii iyo sagxad qaniinkii burburka guud. Hayeeshee waxaa ay ahayd tallaabo loogu dhaqaaqay dhinaca tubta horumar beegsiga. Dabcan waa la turunturrooday, waa la kufay, kubka iyo bawdana waa la iska barkaday oo laga jabay! Hase yeeshee hirgelintii qoraalka afka hooyo waa raandhiis madhax ama hadho yeeshay oo ka soo doogey burburkii dhacay, una kayd galay si libin ku geeraar leh, waxaana ka soo baxay oo ka aflaxay in badan oo bulshada ka mid ah oo dumar iyo ragba leh oo waxna ku akhriya, waxna ku qora oo isku cabbira afkooda hooyo quruxdiisa, hodantinnimada sarbeebtiisa, duur xulkiisa, miiddiisa iyo macaankiisa.

Dhanka kale waxaa iyana jirey hablo aan yarayn oo saami weyn ka qaatay deeqo waxbarasheed oo ardayda loogu diri jirey waddamada dibadda. Hablo badan ayaa lib ka soo hooyey waxbarasho jaamacadeed oo dibadda loogu diray, bulshada oo ubadka iyo gurigu ugu horreeyaanna ku bilay oo ku biiriyey aqoontii ay soo kasbadeen. Waxbarashada iyo korodhka aqooneed ee haweenku sameeyeen, waxa ay u fureen albaabbo badan oo hore aanay u garaaci jirin. Waxa ay noqdeen macallimiin iyagu carruurta wax bara oo kaga sita rag badan dhinaca wax u gudbinta iyo la macaamilka ubadka dugsiyada waxbarashada. Waxa ay ka qayb galeen arrimaha dawliga ah iyo maamulka xafiisyada. Kartidii haweenka ee ku ekayd gurigu waxa ay u tallowday oo gaadhey meelaha loogu dan qumiyo, lagu aslo ee agaasimo danaha guud ee ummadda iyo hawlaha la xidhiidha, iyaga oo haweenku meelaha qaar ragga kaga firfircoonaaday oo si la yaab leh uga soo dhalaalay. Xejinta iyo ilaalinta ammaanada, sida hantida guud ee la wada leeyahay ayay haweenku ragga kaga wacnaadeen. Wax is daba marinta iyo musuqmaasuqa ragga soomaalida diloodey waa ka beri (waa ka bed qabaan) oo waa ka nadiif haweenka soomaalidu, iyaga oo gacanta ku qabtay oo maamulay wasaarado, hay'ado, bangiyo, wakaalado iyo meelo hantiyi ka buuxdo. Halka ragga lagaga soo heli jirey xatooyo xoolo ama hanti qaran ah oo ay lunsadeen iwm, weli lama maqal haweeney fool xumadaas lagu soo eedeeyey ama lagu xamanayo in ay wax is dhaaf dhaafin ay samaysay ku xoolaysatay, guryana ka dhisatay, sida rag badani sameeyeen, welina sameeyaan!

Nimco waliba nusqaanteed leh! Ma habboona in indhaha laga laliyo in haweenka wax barta qaarkood dhalliilo la gola yimaaddeen. Waxaa ugu daran in haween badan oo wax bartay is waafajin kari waayeen hawlahaas guud ee ay kaalinta ku yeesheen iyo kuwii iyaga u gaarka ahaa ee dumarnimadoodu ugu horrayso. Aqoontii ay korodhsadeen ayaa ku hubaysay oo gelisey qab iyo isla weyni ay la dheelli kuurkuursadaan, lana daalaa dhacaan. Waxaa haweenkaas qaar ka mid ahi ka sal kacaan la noolaanshihii labka iyo la macaamilkiisii sida nin iyo ooridiis. *'Wax ma tare tumaalkayagow, waar mudac iyo mindaad baratee, walaal wax ma noo tumaysaa!'* Xiniin yar oo macmal ah ayay

haweenkaas qaar tuntaan; samaystaan oo la soo baxaan! Waxaa dabadeed dhacda in ay gogosha hurdo ku wada wadaagi kari waayaan iyaga iyo raggii ay u dhaxeen. Cilladdu waa labada qof ee xiniintu shidayso iyo wadaaggooda gogosha oo ledis la'aani ka taranto, dabadeedna kala dhaqaaq ka yimaaddo. Halkaas waxaa ka soo baxa haween wax bartay oo ubad yaraani haleesho ama sidii hasha geela galoof noqda oo ubad la'aanba ku soo dhaca, taasina waxa ay noqon kartaa khasaare ka weynaan kara faa'iidada ay heleen. Waxaase buuxa haween badan oo wax bartay isna waafajiyey labada waajib gudasho, ubad wanaagsan iyo guryo wanaagsanna habeeya, abya oo aanay jirin wax loo dhigaa iyo wax ka xumaadaa midkoodna.

SAAMAYNTA DAGAALLADA SOKEEYE IYO HAWEENKA

Ma og tahay nacaybka la huurshey
Ooryaha asayda hagoogtey
Hooyada baroorta naf mooddey
Aanada ilmaha ku hadaaqay
Garashiyo hablaha dhaxdin seegay!

Dagaallo sokeeye marka ay dhacaan had iyo goor dadka oo dhan saamayn xun ayay ku yeeshaan, hayeeshee haweenku way ugu sii nugul yihiin saamaynta iyo raad reebka colaadaha sokeeyaha. Haweenka soomaalidu waxa ay dirirta iyo burburka kala kulmeen hadimooyin iyo hagardaamooyin gelbinaya guul darrooyin waaweyn. Dhimashada, dhaawaca, rafaadka, silica iyo saxariirka, aafaadka iyo ooda lulka, leel leelka iyo luuf luufka dhacay waxa ay dumarku ka badsadeen ina-rag oo ahaa ama u badnaa ka ku foogan isagu ee meheradda ka dhigtay dirirta iyo hurinteeda. In kasta oo si aan toos ahayn oo dadban haweenka qaarkood ugu milmayeen colaadaha iyo eedaha sokeeyaha, haddana waxaa run ah in degaan kasta oo laba kooxood ama laba qabiil foodda isku daraan dhimashada iyo dhaawaca labada dhinac soo gaadhaa ay haweeneyda u saamayso si isku mid ah oo dhinac walaalkeed ku dhinto, dhinaca kalena inankeedii ama dhinac aabbaheed ku dhaawacmo, dhinaca ka soo hor jeedana ninkeedii tagooguhu ku jabaan. '*Kugu dhimayoo kaa dhimay waa huq; hilbahaygi baa is cunaaya'!* labada is diliya ee dabka, rasaasta iyo baaruudda isku hurgufaya, islana hor fadhiya ee aan is bixinayni waa inankeedii iyada laga soo jaray iyo walaalkeed rumaad, waa aabbaheed laxmi ah iyo ninkeedii indha kuusha u ahaa! Waa afartii ina-rag ugu xigey cidda gawracu dhex yaallaa. Kee bay u gurmataa, kee bayse ka gurmataa? Kee bay u hiilisaa, kee bayse ka hiilisaa? Kee bay libtiisa u riyaaqdaa, kee bayse jabkiisa ka murugootaa? Mar walba iyada waa u jab, waana u murugo! Mana jirto hadimo iyo uur ku taallo ka weyni, waana guuldarro iyo ciil oo maradeedii buu dab u qabsaday oo ku hulaaqday, kuna ololaysa.

Hurgumada iyo xanuunka dagaallada iyo eedaha sookeeyaha, waxaa dad hortii qaylo dhaan dheer ka tebiyey abwaanka weyn ee Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) oo ah aqoonyahan macallin ah oo ku talax tegey afka soomaaliga iyo u abtirintiisa, quruxdiisa iyo hummaagyada farshaxankiisa. Horraantii 1980-naadkii oo ku beegnayd markii dagaallada sokeeye ku baaheen meelo badan oo ka mid ah dhulalka soomaalidu degto,

gaar ahaan dhulka Hawdka sare ee xoolo daaqeenka ah, ayuu abwaanka Gaarriye si qota dheer oo qiiro weyn iyo farshaxannimo sarraysa leh uumiyaha ugu soorayaa maansadan qiimaha leh ee taariikhiga ah ee la magac baxday Hagar-laawe. Maansadu waxa ay si sokeeyennimo ah uga hadlaysaa xaaladda colaadda iyo dirirtaas holcaysey. Waxaa uu ku hal qabsanayaa labada abwaan ee Cabdullaahi Macallin Dhoodaan iyo Maxamed Ibraahim Hadraawi, waxaanu yidhi: .

Hal madow araar iyo maanso
Harawaati roob iyo mawjad
Murti iyo higgaad nabad doon ah
Waayaha haddeer ku salaysan
Ahna diirad keebka hagaysa
Berritana nin nool u hal-hays ah
Haya calal falaax mar kaleeto
Dhoodaanna heestu ha gaadho.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war
Ma og tahay habaaska dalluumay
Ma og tahay horweynka la qaaday
Ma og tahay in hawd laga guurey
Ma og tahay gabdhaa wada heermey
Ma og tahay rasaasta hallowday
Ma og tahay hoggaanka la eeday.

Ma og tahay Hadraawi ma kuu war
Ma og tahay hireyda wireyda
Hadhiciyo berdaa laga caagey
Haradiyo biyaha godobaysan
Naylaha haraaryadu laysay
Shimbiraha dhirtii hadhsan waayey
Hiidiyo hayaayda baxaysa.

Ma og tahay nacaybka la huurshey
Ooryaha asayda hagoogtey
Hooyada baroorta naf mooddey
Aanada ilmaha ku hadaaqay
Garashiyo hablaha dhaxdin seegay.

Ma og tahay habaarka dhisaalan
Mahadhada dagaalka sokeeye
Dhallintiyo halyeeyada le'day
Gacalkiyo hilbaha is xasuuqay.

Wadhi wadhi hoheey cakuyeey hoh!
Habbisada dadkayga la saaray
Haan haanta loo kala soocay

Ma huraanka laysku lisaayo
Hurdankiyo gabaare gurdayska
Halaq baa ku raad gadanaaya
Isagaa hubkaysugu dhiiba
Hanaddada sidaas ku shidhaysta
Dabadeed hamuunta ku reeba.

Isagaa habeen iyo maalin
Godobtiisa reer huwinaaya
Hadba shaadh qabiil u tolaaya.

Wadhi wadhi hoheey cakuyeey hoh!
Qoriyahow hubsiimo la'aanta
Qoriyahow hinaase la boodka
Qoriyahow hawaawi dhacaagu
Jugtu waa waxaan la hagaasay!

Meeshiyo Hargeysiyo Jubba
Qoriyahow halkaad cuskataaba
Waa haar korkayga ku taalla
Waa meel jidhkayga habaysa
Dhaawaca anaa u hafeefta
Giddi waa halbowle i qoomman.

Wadhi wadhi hoheey cukuyeey hoh!
Umalkiyo naftayda hadraysa
Hammigiyo sidaan u tol beelay
Hiqdu waa anoo ledi waayey.

Haybtaydi baa is cunaysa
Garabkaygi bays wada heeray
Maradaydi baygu huraysa
Kugu dhimayoo kaa dhimey waa huq
Rati heeryadiisa ku foofay
Hungo waa sidaan ahay maanta
Dhanna heedhe iima fayooba.

Immikana haddaan la heshiinnin
Hibashada haddaan la daweynin
Hebel yaa lahaa la illaawin
Himiloy wallee gabbalkaa dhac
Talo fara ka haaddaay mooyi
Calan yahow waxaad tahay loo hadh.

Aniguna hadhow iyo faallo
Halistaa inaan ka afeeftay

Oo weliba hiif iga gaadhey
Hagar-laawe ii geli buugga
Taariikhda aan wax hilmaamin.

Dhinaca kale waxaa haweenka ku bannaanaatay kaalin culus oo raggii banneeyeen markii ay dagaallada qabteen iyo markii dambe ee ay meheradda ka dhigteenba. Dagaalku wuu ka gudbey heerkii keeb la yuururka ahaa, waxaanu galay xeelado iyo xaalado cusub oo aan laga geyoonayn ilaa laga gaadhayo heerkiisa fadhi ku dirirka ah qaybtiisa siyaasadda iyo haloosigeeda. Dumarka waxaa maanka iyo muuqaba kaga yaalla haarihii iyo doogihii dakharrada dagaallada iyo eedaha sokeeyaha ka soo gaadhey ha qaxaan oo dibad ha bayhoofaan ama waddankii ha joogaane. Waxaa intaas u raacay oo ku soo mudhuxsaday kaalintii iyo doorarkii ragga ee ku saabsanaa maaraynta, jaangooyada, maamulka iyo agaasinka, hilaadinta, horseedka iyo hawadinta hawlaha qoyska iyo ubadka. Hooyadii oo tabaalo, tacluus iyo daal nafsaani ahi aanay ka maqnayn oo maskaxdeeda qiiq iyo qaylo ka baxayaan , ayaa laga doonay oo ku khasbanaatay in ay buuxiso kaalintaas murugsan ee ninku kaga gudbanaan jirey ee ku bannaanaatay!

Waxaa dhacday in haweenkii guryaha ka dareeraan oo suuqa fadhiistaan, si ay ula legdamaan, una soo saaraan masruufkii iyo marriinkii ubadka iyo mararka qaarkood kii ninka. Magaalo kasta oo waddanka ka mid ah waxaa lagula kulmayaa hooyooyin iyo hablo gashaantiyo ah oo tafa xaydan oo ordaya, guryahoodana aan soo hadh gelin oo habeenkii uun ku soo hoyda. Qiyaas ahaan in ka badan 70% waddanka dumarka ayaa gacanta wax ku haya oo wax soo saara ama shaqo iyo xoogsi u kallaha. ‘*Kefedaha dalooliyo mindaa daabka la hayaa, nafta dooji mooyee xarrago laga dawaaree!’* Gidaarkan waxaa ka cawlan hooyo la fadhida kildhi shaah ah, girgire dhuxulaysan iyo faraajiin oo ku haysata. Docdeeda meel aan ka dheerayn waxaa kabadh qaad ka buuxo la fadhida gabadh gashaanti ah oo dheg iyo dhabanba leh oo ah kuwii boqolka geela ah, faraska iyo qoriga rayfalka ah loogu geli jirey. Halkaas waxaa uga sii muuqda gambada haweeney dul taagan calallo hun ah ama maryo duug ah (Who Died) oo ku sayaxaysa *‘kaalayoo ka dooro! Ka xusha intaan la xaabsan!*’. Halkeerna waxaa xoogaa basal ah iyo tamaandho xabuub ag kuududda haweeney aad u da’ weyn oo haddii aanay macooyo ahayn hubaashii ayeeyo ah! Inta u dhaxaysa haweenkaas waxaa dhex muluqmuluq leh oo mushaaxaya raggii oo wada shaadh-caddaynaya oo mirda mirdoole aan xil saarrayn u badan, hurdada ku soo bariistay oo soo wada dhaashtay, haddeerna raggu waa wada baryo ama shaxaad tag ka quudaya ama xasilinaya mijintii qaadka ahayd ee maanta iyo sigaarkeedii dumarkaas bacadka iyo dabayshu dhalan rogeen ee wada qayiran kor iyo kal; tin iyo cidhib dhankii loo dayaba!

Qaxa, dalandoolka, dhuyaalka iyo ku sii libidhka qurbuhu waa ka mid hadimooyinka iyo haaraha wejiga kaga yaalla haweenka soomaalida. *Nin daad qaaday xumbo cuskey!* Immisaa haad iyo haanraawe dalandoolkii ku hilbaystey oo meel dhexe ku hawirantey. Immisaa lama degaannada waaweyn kulka hanfigoodu cunay oo raq iyo ruux meel ay jaan iyo cidhib dhigeen la waayey. Immisay baddu liqday! Immisaa daadadka iyo duufaanta ka dhasha isku dhacyada iyo is jiidhka dhaqammada kala duwani qarqiyeen oo la tageen oo sidii dhul xaaluf iyo nabaad guur ku dhuftay lisan iyo rifan ku dhaceen, kana dhalan doorsoontay xagga maanka iyo muuqa oo maanta is la’; is waydey oo meelahaas

dabayli sidataa oo walhanaya. Immisaa waashay oo dhaqaaqday cid iyo ciirsi la’aanna ku maqan oo tasowdey ama aan tirsanayn. Intaas iyo ino kale oo ka badan oo jirta, ayaa haddana waxa ay haweenku noqdeen isir qurbahana raggii kaga firfircoonaaday. Carruurtii iyo ababintoodii haweenka ayay ku soo baxsatay. Inta badan way yar tahay in la arko aabbe kaalintaas door muuqda ka qaadanaya. Way jiraan mar walba aabbeyaal wanaagsan oo ubadkooda iyo qoyskooda si hufan ugu sidkan oo kaalintooda buuxiya inta karaankooda ah, hase yeeshee waxaa loo socdaa oo laga hadlayaa waa inta badan iyo sida qaalibka ah.

Waddan kasta meelaha soomaalidu ku dhaqan tahay ee qurbaha waxaa lagula kulmaa had iyo goor hooyo ubad la silcaysa, la saxariirsan oo suuqa laba ama saddex carruur ah oo maryo haylo ah sita iyo afar bacood oo adeeg ah wada waldaaminaysa; wada jiidaysa oo gacmuhu dheeraadeen. Waxba kuma jabnaateen oo ciilka iyo cadhadu ma kobocsanaadeen haddii ay hooyadaasi og tahay in odaygeedii wax macno leh iyo milge kaga maqan yahay oo kadeedka iyo tacabku sidaas ugu soo fara baxsadeen. Waxaa ay og tahay inuu joogo oo aanu waxba iyaga iyo xitaa naftiisa ugu maqnayn. Xalayto oo dhan ayuu dab jeex ahaa oo soo jeedey. Wuu barjaynayey (qayilayey) oo saaka ayuu carruurta hurdada u daba maray markii ay soo tooseen ee iskuulka qabanayeen. Haddana (galabtii) wuu soo kacayaa oo marka carruurtu dugsiga ka soo laabato ayuu daba marayaa oo darkii ceelka u aroorayaa (merfishkii qaadka), caawana marka carruurtu seexato ayuu guriga isku soo beegayaa, haddii aanu dab jeexuba merfishka ka dhicin oo aanu ku dhixin! Ka warran ababintii, korintii, kobcintii maanka iyo garaadka ubadka. Hooyadu waxa ay uga adkaan kartaa in ay afka wax u riddo, dhaxantana wax uga geliso. Aabbihiina waa kaas tuurtii dayacan koray! Dugsiyada waxbarashada waxaa la is weydiiyaa in carruurta soomaalidu aabbayaal leeyihiin iyo in kale: Ma wada agoon baa ubadku? Mise raggii baa ka wada maqan? Sidee taasi macquul u wada noqon kartaa? Xaaladda kala noolaanshaha aabbaha iyo hooyada ayaa soo raacda arrintaas ciidan xumida aabbaha ee qoyska iyo ubadka. Taas oo ruxan xoog leh ku haysa qaab dhismeedka guriga ama qoyska sida aynu qormada qoyska iyo qurbaha ugu tegi doonno, waxaana kala fogaadey dareenkii ubadka iyo kii waalidka, waxaa kala qaloonaya dhaqankii iyo afkii waalidka iyo kii carruurtooda, waxaa dhacay shil weyn!

Aqallada ximraa sudhan
Sigashay ku beridaa
Dadku solanka maantii
Sahwi buu ku joogaa
Saqda dhexe habeenkii
Sardhaduu ku lulan yahay
Surmi bay ku huruddaa
Ama ciil la kala socey
Ama cadho la kala soof.

Maxay ku hirtaan carruurtu. Afkooda lama baro oo in ay af qalaad ku hadlaan ayaa door la bidaa aqoon darro ama haleelitaan la’aan midkay doonto ha noqotee. Dhaqankooda, taariikhda sooyaalka ummaddooda iyo soo jireenkooda wanaagsan cidina wax ugama sheegto waalid iyo wadar kale midnaba. Waxa ay arkayaan, maqlayaanna qaylada, buuqa

iyo is qabsiga waalidka iyo fool xumooyinka dagaallada sokeeye ee Tv-ga iyo jaraa'idku ka soo tebiyaan sawir ahaan dalkoodii. Labadaas ayay isku darsadaan, dabadeedna waxa ay waayaan wax ay dugsadaan iyo wax ay ugu hamradaan waalidkood iyo wadarta kaleba! Way iska dhasalaalaq dhaqaaqaan, waxay doonaanna sameeyaan, eeddana iyagu ma leh oo cid baan waxba ku weelaysan, waxba ku shuban, waxna maskaxdooda ku daabicin, waayo ubadku waa weel ama quraarad madhan ama xaashi cad, waxaana loogu tagaa had iyo goor oo laga helaa wixii lagu shubto ama lagu qoro.

Dhasha saxanku hayn waa
Surbacaadka raac raac
Lagu qaad far iyo suul
Mar salaadda jiidh jiidh
Marna umalka seeraar
Tu sawaaban yeel yeel
Dadku segeger mood mood,
Sunbo loogu yeedh yeedh,
Dulucduna ka samirkiyo
Nin wax saaray maahee
Sinji-hirashadiisiyo
Saamaynta wadartiyo
Xogta garashadaan solin,
Sumad baanay weli helin
Cidna lagula saayiro!!

Marka laga yimaaddo kaalintaas barbaarinta ubadka ee dumarku la dhacdhacayaan, waxaa soo raaca oo haweenku ragga kaga sii horumarayaan xagga waxbarashada iyo xoogsiga muruqa iyo maskaxda. Habluhu way kaga wanaagsanaadeen waxbarashada inammada oo waxaa jira hablo badan oo qurbaha guulo waaweyn ka soo hooyey dhanka waxbarashada, meel kastana waxaa la dareemayaa haween dadaalaya, xirfado la soo baxaya oo waxbaranaya, shaqaynaya oo wax soo saaraya, waxna taraya dadkii kaga dambeeyey waddankii. Waxaa la tilmaamaa reerka gabadhi u soo dhooftay in manaafacaadkeeda la wada dhadhamiyo oo aan lagu qadin agteeda, halka ay suurta gal tahay in ay ku hungoobeen oo lagu qaday reer ay shan wiil u soo dhoofeen.

Hal-abuurka haweenka soomaalidu kama gaabiyo waayaha iyo wacaalaha nolosha dhib iyo dheef, samaan iyo xumaan wixii godolba la joogo. Ifraax Maxamed Cabdillaahi (Ifraax Cirro) waxa ay ka mid tahay haweenka qurbaha ku nool, colaadaha iyo eedaha sokeeyuhuna la fal galeen nolosheeda ee saamaynta weyn ku yeesheen. Carruurnimadkeedii ayay ku indho dillaacsatay dagaallo, qax, qaxar, leel leel iyo luuf luuf iwm. Maansadan xagga hoose ku qoran oo la magac baxday Hoog ayaynu halkan ku eegi doonnaa. Waxa ay Hoog ka soo jeeddaa oo ka hadlaysaa dhacdo run ah. Ifraax Cirro ayaa ka sheekaynaysa sidii ay ku dhalatay maansadeeda Hoog, waxanay ku bilaabaysaa ereyadan: *'Waxa ay ahayd ammintu goor barqo ah. Waxaa dhacayey baraf aad u xun oo dhaxanuu walwaalayo iyo dabaylaba gelbinaya. Gurigayga yar ayaan la joogaa inan yar oo walaashay ah oo aan timaha u dabayey. Aniga oo isla baraadla' oo walaashayda yar timaheeda dhubbad qaadaya, ayaa waxaa soo dhacay telefoonkaygii yaraa ee*

gacanta. Waan ku haadey markii uu dhawr goor iska daba dhacay oo waan qabtay. Halloo! Gabadh aad u yoolsan oo werwer codkeeda ka muuqdo ayaa igala hadashay oo i tidhi Ifraax xaggeed joogtaa? Guriga in aan joogo ayaan u sheegay, maxaase dhacay Bisinka'e!?'

Ifraax Cirro waxa ay ka sii warramaysaa war dhiillo sideen ah oo naxdin iyo murugo u sahan ah. Ifraax Cirro: '*Waxa ay gabadhu ii sheegtay in gabadh kale oo xaafadda jiiraankayga ahayd ay waalatay oo carartay oo la la' yahay! Soo bax oo noo soo gurmo aan baadi doon tagnee ayay ii raacisay.'*

Naftu way dhibsanaysey in ay dibadda ugu baxdo carcarta barafka ka dhacaya cidhifka shishe ee waqooyiga qaaradda Yurub. Hayeeshee waxa ay Ifraax Cirro tibaaxaysaa in ay baxday oo baadi doon badan la wada galay, gabadhii waalli dhaqaaqdayna la helay. Ifraax waxa ay ka hadlaysaa sidii gabadha loo helay: '*Waxa aannu ku soo baxnay gabadhii waallatay oo khadka tareenka isku tuuraysa. Waxa ay isku dul jeex jeexaysaa oo waddada ku tuuraysaa dharkeedii, shaadirkeedii, xijaabkeedii, jalaabiibkeedii iyo wixii ay sidatey oo dhan! Waxaannu isku daynay in aannu qaqabanno. Saddex dumar ah oo kalena Guulluhu wuu noo keenay. Waxaannu isku daynay in aannu waddada tareenka ka qabanno, kuna tiirinno tiir dheer oo waddada qarkeeda yuubnaa. Waannu u taag iyo maare weynney oo waxa ay ahayd gabadh culus oo xoog badan. Wiil yar oo kurey ah oo isna noo yimid, ayaannu qaylo dhaan ugu dirannay niman joogey maqaaxi soomaalidu isugu timaaddo oo ku taalla meel aan naga dheerayn.'*

Inankii waxaa gurmad ahaan u soo raacaya saddex nin oo goobtii ku soo biiraya. Waa la wada waldaaminayaa gabadhii dhinnayd oo ahayd ummul aan weli afartan bixin, haysatana laba carruur ah oo aabbahoodna ka maqan yahay. Cabbaar markii la sidey ayay dhulka qabsatay oo la dhaqaajin kari waayey. Waa lagu rafaaday oo daalay, xaaladdan iyo natiijadeeda oo ah ta maansada Hoog ka dhalanayso Ifraax Cirro ayaa sii ambaqaadaysa, waxaanay tidhi: '*Annaga oo wada tacabsan oo murugo iyo naxdini rafaadka kale noo weheliyaan, ayaa nin saddexdii nin ka mid ahi kaftan iyo haasaawe bilaabayaa. Waxa uu ku tiraabayaa hadallo qalbiyada qoomaya, weliba aniga kayga ruxan ku keenaya! Waxa uu odhanayaa: ''Naayaadhaheen waa dumarka naagtu xoog badanaa, mana waallee miyay masayrsan tahay oo waa lala guursadey*?!''

Ifraax iyo hablihii kaleba ereyadaasi way ka gubteen, waxana isu qaban waayey hadalkii ninka iyo xaaladdii lagu sugnaa, gaar ahaanna gabadhaasi xanuunsanaysaa ku jirtey! Waa nac weynidii iyo digashadii ina-rag lagu aqoon jirey. *Bahal ceedhin ma daayo, ninna caaddi ma baajo!* Markii gabadhii la guryo geeyey, ayaa waxaa sheeko dhex maraysaa Ifraax Cirro, Saaxiibaddeed iyo labadii nin ee kale. Waxaa laga sheekaysanayaa qurbaha iyo wacaashiisa, gaar ahaan sida uu xidhiidhka ragga iyo dumarku u dhalan rogmadey waayadan dambe. Ifraax iyo arrintaas mar kale, waxanay tidhi: *'Wixii xunba Xaawaa leh. Nimanku waxa ay dusha ka fuuleen haweenka qurbaha iyo dhulalka shisheeye carruurta ula soo daaduumay ee la silcaya ee iyagu (raggu) ay dhulkoodii xabbadda kaga soo bara kiciyeen ee burburiyeen. Inta ay is xoojeeyeen oo golxiyo tuur isu yeeleen, ayaa waxa ay labadii nin isu jiibiyeen oo isku yidhaahdeen*: *'Waar naagaha wax dhib ahi ma haysato ee kibir iyo ka badbadin ayaa haya oo ogaan iyo bilcaanni ayay isu wada waalayaan oo*

ubadkii iyo guryihii bay ka adkaan la' yihiin!'. Waa halkaas bay Ifraax tidhi hogga ay ka curatay heestan Hoog oo soo baxday Oktoobar sannadkii 2000.

Maansadan Hoog waxa ay Ifraax Cirro ugu hiilinaysaa gabadhaas waallidu haleeshay, waxanay geeska ku feedhaysaa oo ganafka ku dhufanaysaa hadalladii nimanka ka soo kala yeedhayey oo ay u aragto in ay yihiin deelqaaf iyo gefaf kale oo raggu dumarka ugu darayaan kuwii hore, dhibaatooyinkii ay hore u soo markiyeen, sida gubidda guryahoodii, gumaadidda iyo kala gaabinta ubadkii ay dihdeen, isla jiidhista dhulkoodii iyo hantidoodii, sida in ay maanta hadhadoodii feenanayaan, kuna sii dirqiyayaan inay dibadyaalnimo iyo dulsaarnimo baaqi ahaan ugu sii negaadaan dhul shisheeye mar haddii intii uu ina-rag gacantiisa iyo maankiisa ku dumiyey weli ay burbursan yihiin iwm. Hoog oo arrimahaas sii sharxi doontaa waxa ay tidhi:

Hooyadan hu'geediyo
Hantideedi laga dhacay
Hoygeedi laga gubey
Habeenkii yimaaddana
Uu horteeda deyn yaal
Kii hiil u noqonlaa
U hub qaatay iyadii
Hanaddadeedi gawracay
Hilbahoodi loogee
Giddi habar dugaaagiyo
Haanraawe siiyee
Haynteedii boobee
Hadh cad bililiqaystoow,

Inay hoog la deris tahay
Hadimana ku idishahay
Miyuu hadal ka joogaa!!!

Hooyadan habawdee
Hawo kale u duushee
Heedaddaw la dhooftee
Loo hagar baxaynee
Hammi uu ku badanyee
Heeryada la saaree
Heetinaysa socodkee
Hanfigiyo kulaylkii
Hafiyeen dabayluu
Marna barafku hoolee
Dhuuxeedi heensaday
Ku habsaday qabawgii,

Inay hoog la deris tahay
Hadimana ku idishahay
Miyuu hadal ka joogaa!!!

Hooyadan la heeree
Hanaqyada adeegiyo
Halbowlaa la gooyee
Hororkiyo waraabuhu
Intay soo hoggaansheen
Hurintooda keeneen
Hadal ugu sargooyeen
Annagaa ku hananoo
Hanti kuu huraynoo
Ubadkana u hagar bixi,
Hogga bohosha hoosee
Waabeeyo hilan tahay
U hadoodileenee
Hablihii ay dihatiyo
Halyeygay xanbaartayna
Aanay hooyda! odhan karin.

Inay hoog la deris tahay
Hadimana ku idishahay
Miyuu hadal ka joogaa!!

Dagaallada, colaadaha iyo eedaha sokeeyaha , burburkii dhacay iyo qaxa lagu fogaadey ee qurbaha, guud ahaan, waxaa ka soo baxay in haweenka soomaalidu meelo badan kaga sitaan, kagana wanaagsanaadeen ragga soomaalida oo meelo badan nolosha kaga

fashilmay ama kaga sii guul darraysanaya. Kaalinta maamulka iyo maaraynta qoyska ayaana u halis badan, ugu dayac badan, uguna khasaare badan haddii aan dib loo jalleecin, waayo maaha kaalin ay sina u buuxin karaan oo haweenku kelidood dabooli karaan, waxaana qiimaha iyo culayska kaalintaas aabbaha ee qoyska garwaaqasan kara, dareemi kara, si habboonna u fahmi kara hooyooyinka la dalaa dhacaya ababinta iyo korinta ubadka ee maarayntii marriinka iyo masruufkuba ku soo baxsadeen ee agoonta haya ama aabbayaashii ka maqan yihiin sidii ay doonaanba ha u maqnaadeene. Qiimayaasha sarreeya ee hooyannimadana waxaa dareemi kara, garwaaqsan kara ninka ay ku soo fara baxsadaan kelidii ababinta iyo korinta ubadku ee hooyadu ka maqan tahay ama xabaali ha ka qariso ama si kaleba ha uga maqnaato'e. Barbaarinta carruurtuna waa aasaaskii qoyska iyo bulshadaba, kamana maaranto is buuxinta iyo iskaashiga labada lammaane ee aabbaha iyo hooyada iyo kula eerashada wadarta guud ee kale sida dawlad, dal, urur ama degmo iwm.

QOYSKA SOOMAALIDA IYO QURBAHA

Daryeel kama dhex muuqdo oo meel waliba way dal-dalooshaa. Waa wada qabyo iyo baylah. Dhankii aad ka eegtaba waxaa maanka iyo dareenkaaga gudaha mud-mudaya mudacyo af-dhuuban, docdii aad u kacdana waxaa kaa soo celinaya mindiyo afaysan oo xiiraya, cabsi ayaad dareemaysaa oo sanqadh tirashada ayaad door bidaysaa, waana meel uu mugdi simay oo aan lahayn iftiin lagu soo hirto iyo wax kale oo la weheshado midkoodna. Jacaylkii iyo isku qanacsanaan oo dhami daaqadda ayay ka baxeen. Weji dadab quus ah iyo dibno qaniin fool-goosi ah ayaa isku soo mutuxan oo beddeley isku soo hilowgii iyo isu soo riyaaqii laga dhex quuddarrayn lahaa aabbaha iyo hooyada qoysas badan oo ka mid ah soomaalida u soo bara kacday ee ku nool dalalka shisheeye ee Yurub, America, Canada iyo Austrelia. Sida ay soomaali badan u khiyaamaynayaan nafahooda iyo lafaha ubadkooda, ayaanad mooddaa inuu uga hiilinayo, ugana horjeedo hab-nololeedkan kakan ee xiimaya ee ay soomaalidu ku soo dhex dhaceen ee qurbuhu.

Cartan waa aabbe ka soo bara kacay dhulka xoolo daaqeenka ah ee ay soomaalidu degto markii ay dirirta sokeeye soomaaliya ka qaraxday. Dal-ku-gal ama fiise ayaa waddanka Ingiriiska uga soo baxay. Magaala madaxda dalka Itoobiya ee Addis-ababa oo ahayd magaaladii ugu horraysey ee uu salka dhigo intii uu noolaa, ayaa waxa uu ku ahaa habeen-dhax. Dhawr bilood ka dibna waxa uu ka soo degey magaalada isku murugsan ee adag ee London. Keligii Cartan ma ahayn oo waxa la socdey oo safarkaas dheer la soo galay dhawr carruur ah iyo hooyadood oo uu ka soo dhuyaaliyey kudaal ahaan halkii ay xoolaha ku dhaqan jireen. Haddaba waxaa uu haatan Cartan muddo toban sannadood ka badan ku nool yahay oo carruur kalena uguba dhalatay Magaalada London. Ilaa muddadaa Aabbaahaasi (Cartan) wuu is la' yahay oo wuu is doondoonayaa, welina isma uu helin oo wuu is-waayey. Isaga iyo afadiisii ayaa isla il daran. Way is af garan la' yihiin oo xitaa af-soomaaligii iskuma fahmayaan. Marka uu midkood geel u heeso, ayaa kooda kalena gorayo u heesayaa. Turjumaan ma haystaan, luqad kalena kuma hadli karaan oo xitaa farta Ingiriisida ma kicin karaan, kuma hadli karaan oo weli lama aanay qabsan. Is-faham la'aantaas labadaasi waalid ka dhex aloosani waxa ay ku butaacdey oo hafinaysaa degaanka ubadkooda ay ula soo hayaameen dibadahan shishe iyo Yurub.

Guriga qoyskaasi ayaa waxa uu u muuqdaa goob ay dirir sokeeye ka oogan tahay, waxaana hirdan iyo dagaal uu ku dhex marayaa saddex ciidan oo uu midba kooda kale ka horjeedo, iskana caabbiyayo. Waa odayga, islaanta iyo ubadkooda. Marba laba xoog ayaa foodda isku daraya, mararka qaarkoodna saddexduba way isla jiidhayaan oo way isku dhex duqaynayaan. Odayga qoyska oo Cartan ahi waa Atoore had iyo goor fadhi-ku-dirir ah. Markasta waxaa afkiisa ka soo horraysa Dalqadda oo waxa uu xaaskiisa ku halgaadaa 'waan ku furay'. Dhawr goor ayuu si dhayalsi ah afadiisa u dalaaqay oo uu guriga uga baxay. Laba iyo saddex goorba way ka badan tahay inta goor ee uu afkiisa kaga tiraabay dalaaqda xaasku. Haddana waxa uu u haystaa in haweeneydaasi ay weli xaas u sii tahay. Sida dalaaqdu ama furriinku uu agtiisa uga fudud yahay, ayay rajactuna ama soo celintuna ugu sahlan tahay; sida uu dalaaqu afkiisa uga soo horreeyo ayaa dibnihiisana ereyga xumi saaran yahay; sidaas ay xumaantu uga soo horrayso, ayaa gacantiisa halgaadduna uga soo horraysaa. Waxaas oo xumaan ah ayaana shiiqinaysa intii wanaagsanayd ee aabbahaasi yeelan lahaa.

Ma qaro iyo baaxad yara dhibaatooyinka iyo aafooyinka ku yuurursaday ee hadhaynaya hannaanka qaab-dhismeedkii qoyska soomaalida ee qurbuhu. Cambaro waa haweenay aan iyada lafteedu xasarad yarayn. Iyada, odaygeeda iyo ubadkooduba waxa ay Ingiriiska ku soo galeen dariiq la mid ah kii qoyska reer Cartan ay ku yimaaddeen, hase yeeshee waxa ay labada qoys ku kala duwan yihiin halka Reer Cartan ay xoola raacatada reer guuraaga ah ka ahaayeen intii aan Yurub la soo gelin, qoyskan kale waxa uu isagu ahaa magaalo-galeen amaba reer magaal benderka ku dhaqnaa. Labada qoysba waxa ay ku asqoobayaan dawaar-nololeedka xiimaya ee kakan ee ay Yurub ugu yimaaddeen! Cambaro waxa ay durbadiiba la dhacaysaa, una guuxaysaa markii loo sheegay ee ay ogaatey in degaankan cusub ay dumarku awood dheeraad ah ku leeyihiin, raggana sidii ay doonaan ay ka yeeli karaan. Marka uu Cambaro odaygeedu il gurracan ku eegaba waxa ay iyana ku eegtaa sagaal indhood oo ka sii gurracan. marka uu hadalku sii tarmana waxa ay taabataa lambarka xasaasiyadda ee saddexda sagaalaad ka kooban (NO:999). Dhawr jeer ayay Cambaro Xilli wax-saareen ah oo cawo-daran ah ninkeeda guriga dibadda ay dhigaysaa, dharkiisana ay bac madow ugu guraysaa oo albaabka u hor dhigaysaa, waxaana aakhiritaankii lagu kala xasilayaa in la kala noolaado, lana kala degganaado. Haddaba waxa isku soo baxsanaya Cambaro iyo ubadkii qoyskeeda, odaygiina suuqa ayuu iska gelayaa oo waxaa uu iska dhiibayaa meel kale, waxaana iska nasinaya oo isu beddelaya murqaanka merfishyada qaadka iyo walaaca iyo walbahaarka dibad-yaalnimadiisa. Cambaro iyadu waxa ay raacdaa adduunyada, waxanay aad isugu mashquulisaa oo wax kasta oo kaleba ka hormarisaa ururinta giniyaadka Isterliiniga ah. Waxa ay Cambaro ku jirtaa hagbad madaxaa ha ku furto ah oo aan dhammaad lahayn inta ay dhimanayso. Kalkeeda waxa ay qaadataa kuusas Giniyaad ah; 10K ilaa 20K!; Toban ilaa Labaatan Kun oo Giniga Isterliiniga ah! Dusheeda waxba ugama quudho, guriga iyo ubadkeedana kama daryeesho oo inta ay doorkeeda soo qaadataba dhammaanteed way masaafurisaa oo badda ayay ka tallaabisaa oo waxaa lagu bixiyaa dayntii duddumo casri ah (Daar kala sarraysa) oo waddankii looga taagey, kuna kacday ilaa 60 kun oo doolar oo u dhiganta 35K (shan iyo soddon kun) oo Giniga Isterliiniga ah.

Dhinaca kale Cambaro uma kala abtiriso dharka qaboobaha iyo kan xilliga kulaylaha ee ubadkeeda, waayo uma hayso lacag ay dhawrkii biloodba mar ay dhar soo geliso, waayo waxaa laga sugayaa hagbaddii oo aan jixin jixin lahayn, waxa soo galaana uma qaybsamaan quudinta maalinlaha ah ee dhuuniga ubadkeeda iyo hagbaddaas oo iyadu ah ta wax kasta mudnaanta ka leh. Carruurta waxaa ka muuqda dayac iyo dar-xumo, arrad iyo nafaqo la'aan iwm. Cambaro waxa ay taas ku eedaysaa qaboobaha iyo ubadka oo aan xilliga kulaylaha soo hadh gelin oo dibadda meeraysta, sidaasna nafaqo ugu duuli la' dahay. Carruur badan oo ka mid ah ubadka ay soomaalida qurba-joogga ahi dibadaha ku hayaan, ayaa waxa ay dugsiyada waxbarashada kala soo rawaxaan cadho iyo umal ballaadhan, suuqa ayaana ubadkaasi ku dhaliya muhasho iyo hamuun xoog leh oo ka soo jeedi kara rabitaanka dareenkooda gudaha. Waxa ay carruurta soomaalidu arkayaan ubadka kale ee ay isku fasalka ama filkaba yihiin oo ka dhar wanaagsan oo hadba loo soo lebbiso noocii u dambeeyey. Waddamadan Yurub iyo Galbeedka dadkuba waa iska 'Mode'-raac, carruurtuna waabay ka sii xag jirtaa oo bil kasta waxaa suuqa la soo geliyaa buc-shirad loo heesayo, una jihaysan ubadka oo dookhooda lagu iib-gelinayo.

Run-ahaantii carruurta soomaalida laguma dhererin karo suuqaasi xaamiga ah ee dookh-raaca ah, waxaase ubadka wax u noqon lahaa oo macne u samayn lahaa haddii sannadkiiba laba jeer dookhooda la ciyaarsiiyo, loona iibiyo waxa uu qalbigoodu la jiro ee caadiga ah, waayo waxa ay suuqa ku arkayaan wax badan oo qalbigooda soo jiidanaya, una baahan yihiin, sida dharkii dhallinyarada ee xarragada iyo casriga, hu'gii dhaxanta, kii kulaylaha, dharkii xilliga roobabowga iyo kii xilliga diirrimaadka qaboobe-xigeenka ah, dharkii ciyaaraha iyo caalamkii carruurta oo dhan.

Cambaro waxa ay isla liitaan ubadkii ay haysey ee ay aabbahood bacda madow dharka ugu gurtay ee ay gabaddanada u saartay. Arrintan ku saabsan dookha carruurta iyo muhashadooda suuqa, ayaa dhibaato weyn ku haysa oo aanay akhriyi karaynin, waayo Cambaro il qudha ayay sideedaba wax ku aragtaa, waana tii hagbadda daa'imanka ah. Dhawr jeer ayaa bileyska xaafaddu Cambaro gurigeeda ku soo booqday, waxaana looga soo dacwoodey ubadkeeda oo lagu eedaynayo in ay dukaamada xaafadda ama suuqa kaleba wax ka qaad-qaadeen amaba ay wax ka xadeen. Cambaro aad ayay uga xumaataa arrintaas, uga xanuunsataa.Waxa ay carruurta kula haddaa waldeys iyo canaan weji-ka-fiiqis ah. Ma awoodi karto in ay garato sababta ay ubadkeedu u tuugaysanayaan, waxanay ku qanacsan tahay in aanay gaajo kelliftaa jirin oo ay guriga wax ay cunaan u yaalliin. Waxase Cambaro ka maqan in gaajada carruurtu aanay ku koobnayn baahida iyo damqashada caloosha oo qudha.

Xaqiiqadiina waalidiin badan oo soomaalida qurba-joogga ka mid ahi ma dhaaddana, kumana baraarugsana xidhiidhka adag ee ka dhaxayn kara alaabta dhal dhalaalka badan ee indha-sarcaadka leh ee suuqa wadhan iyo hamuunta carruurta iyo dhallinyarada ku indha-dillaacsanaysa caalamkan dookh-raaca ah. Waxaa waalidiin badan ka maqan baahida loo qabo in la yareeyo hamuuntaas iyo muhashada laab-qaadi karta da'yarta soomaalida ee qurba-joogeenka maanta. Waalidiinta soomaalida qurba-joogga ah waxaa la gudboon in ay dib u eegaan qaab-nololeedkooda qurbaha oo haatan u muuqda mid ragaadsan oo curyaan ah, oof-wareenna ku yuurursaday.

Waxaa qumman oo lagama maarmaan ah in la hagaajiyo xidhiidhka xubnaha qoyska, gaar ahaan sokeeyennimada aabbaha iyo hooyada iyo labada waalid iyo ubadkooda. Waxaa kale oo madhaafaan ah in la helo aqoonley ka taageerta waalidiinta la qabsiga dawaar-nololeedkan xiimaya ee qurbaha iyo Yurub, waxaana arrin biyo kama dhibcaan ah u muuqanaysa in la xoojiyo isku xidhnaanta waalidiinta iyo meelaha dadka soomaalida loogu tala galay in loogu adeego, sida masaajidyada iyo meelaha kale ee ay ururrada soomaalida ee adeegyada bulshada qaabbilsani ka hawl galaan, iyada oo la kordhinayo tayada goobahaasi iyo ta dadka ka adeegayaba. Habkaas iyo wixii kale ee soo raaci kara, ayaa waxa ay u sii jan-jeedhsanayaan xakamaynta waxyaalaha fududeeya burburka qoyska qurba-joogga soomaalida iyo tasowga ama lumitaanka ubadkiisa. Baaba'a gurigana bulshadaa u dhaawacan.

Goblantooy adduunyooy
Hadba gebi dhacleeyaay
Kolba gees u guuraay
Intii aan gu' noolaa
Ama aan garaadsadey
Goonyaha dalkaygiyo
Geyigayga kama dhicin
Labood gogol wadaagiyo
Hablahoo is guursada!!!…….

Waa dheeg ka mid ah hal-abuurka haweenka soomaalida, gaar ahaan waa maanso wax ka iftiiminaysa kala fogaashaha ka dhex beermi kara waalidiinta soomaalida ee qurbaha iyo ubadkooda, iyo halista arrintaasi keeni karto oo ku sinmaysa kala go'itaan iyo kala dhaqaaq isa seeg ku keeni kara oo kala go'doomin kara aabbe iyo wiilkiisii ama inantiisii, iyo hooyo iyo wiilkeedii ama inanteedii oo isku waddan ama magaalo wada jooga. Halkanna waxa aynu ku milicsan doonnaa maanso kale oo arrimahaas ku xidhiidhsan. Waa maanso la magac baxday Guullow.

Maansada Guullow waxaa tirisay Ifraax Maxamed Cabdillaahi (Ifraax Cirro), iyada ayaana ka hadlaysa godka ay ka curatay iyo abbaarteeda ay ku biyo shubayso labadaba. Ifraax oo ammuurtaas ka hadlaysaa waxa ay ku bilowday: '*Waxa ay ahayd goor gabbal dhac ah. Suuqa ayaan ka soo galab carraabayey. jidka ayaan waxaan kula kulmay dhallinyaro aannu soo wada rafiiqnay. Dhallintu sheeko dareenkayga gilgishey oo gubtey ayay dhubbad qaadayeen. Yaab iyo amankaaggu way badnaayeen. Miyaan dheelalawsanahay mise warkaa dhegtayda ka weynaadey oo mari la'! Waa lama-arag iyo arrin ugub ah! Waxa aan aad u dhadhansanayey sheekadii ay dhallinyaradu is dhaafsanayeen. Anigu sheekada kuma jirin oo waxaa aan ahaa dheg maal keliya. Goor dambe ayaan sidii qof hurdo ka soo baraarugey la galay sheekadii oo erey yaab ka muuqdo ku darsaday sheekadii yaabka lahayd: Wiil soomaali ah iyo wiil kalaa is guursadayaa'!!!*

Waa sheeko dhab ah oo aan mala-awaal ahayn, kana dhacday beri dhoweyto mid ka mid ah waddamada qaaradda Yurub meelaha soomaalida qurba-joogga ahi ku dhaqan yihiin.

Hooyo qurba joogga ka mid ah oo haysata dhawr carruur ah ayaa lama-aragtu gurigeeda ku soo bariidinaysaa! Ifraax Cirro oo sheekadii sii ambaqaadaysa, ayaa arrintaas ka hadlaysa: '*Inankii carruurteeda u weynaa; curadkeedii; waa kii ay ka filaysey inay gargaarkiisa ku nasato, ayaa xaajo mahadho, uur ku taallo iyo calool ka soo dhac ah ula soo gola fadhiistay. Guur way la jeclayd inankeeda, guurkan uu la gableeyahayse hooyadii kuma farxi doonto oo isba wuu og yahay. Hayeeshee waa 'indho bir' oo waxa ay dhallinyaradii ii sheegeen, mar dambena aan sii xaqiijiyey in inanku hooyadii u sheegay in uu doonayo in ay wiil kale is guursadaan!*

Hooyadii markii ay warkaas inankeeda afkiisa ka qaadday ayay sida la tibaaxay miyir ugu dambaysey! Way miyir beeshay! Ifraax iyo mar kale: *'Maalmo ka dib markii ay soo miirowday, madaxa ayay hooyadii marada ku duubatay, afka ayay gacanta saartay oo muusannow kula dhex dhacday dadkii soomaalida ahaa ee ay is yaqaanneen ama deriska ahaayeen culimo iyo caammaba, si inanka loola qabto oo loogu caqli celiyo, taasi waxba ma soo kordhin oo waxa ay sii kala fogeysey inankii iyo hooyadii oo dagaal iyo guhaatan ka dhex dhacay, kala dhaqaaqay oo kala go'ay!'*

Ifraax Maxamed Cabdillaahi (Ifraax Cirro) waxaa ay sheekadaas murugada iyo xanuunka gaarka ah leh ka hal-abuuraysaa maansadan Guullow la magaca baxday oo ay ku cabbirayso dareenkeeda ku saabsan arrintaas laboodka sinta bidix ka laafyoonaya ee sidii dheddigga isu dhigaya iyo dheddigga sidii laboodka iska yeel yeelaya ee qurbaha ka dhoolla tusanaya iwm. Ifraax waxa ay taas barbar dhigaysaa dhaqankeenna iyo sida aan geddaas looga aqoon geyigeenna. Waxaa kale oo maansadu u gudbaysaa oo wax ka tilmaamaysaa dhibaatooyinka kale ee kala duwan ee qaxootiga iyo qurbaha yaalla. Waxa ay maansadu curatay 20/03/2002, waxanay tidhi:

Geeridu xaq weeyoo
Ruuxii galbada ee
Dega guriga aakhiro
Garoo waad ka gama'daa
Guullaad u baridaa
Godka inuu u nuuree
Wax ah guul darriyo ciil
Gurboodkiyo carruurtoo
Laga xaday garaadkoo
Gaalo garabsi mooddoo
Gacalo hooyadood iyo
Geesigii gardaadshiyo
Raggii geedka tegi jirey
Gondaa ay ka rogayaan!

Go'aankaygu wuxuu yahay
Galab inaan ka guuree,
Guulloow Allahayoow
Adigaa gargaaroon
Keligaa ku Garabsiga
Guddoonkii ku siiyee
Geestaada ila qabo.

Goblantooy adduunyooy
Hadba gebi dhacleeyaay
Kolba gees u guuraay
Intii aan gu' noolaa
Ama aan garaadsaday
Goonyaha dalkaygiyo
Geyigayga kama dhicin
Labood gogol wadaagiyo
Hablahoo is guursada,
Meydkoo godkiisii
Hadba lagala giigoo
Aadmigu gigaayoo
Kolba gees garoocdoo
Hadba gobol la goostana
Geestayada kumaan maqal.

Go'aankaygu wuxuu yahay
Galab inaan ka guuree,
Guulloow Allahayoow
Adigaa gargaaroon
Keligaa ku garabsiga
Guddoonkii ku siiyee
Geestaada ila qabo.

Garaadkay sidaan qabo
Geyigiisi hooyiyo
Guryasamo nin joogoo
Geel dhalay ku maalaa
Gallad iyo nasiib lee
Geeri go'an salkeediyo
Gego laga hayaamoo
Gumaysigu ku badan yaan
Goobyaalayaayoo
gaydha iyo dhaxantaa
Gelbinaaya ruuxdoo
Geestaan jalleeciyo
Goobtaan is taagaba
Shisheeyaa i gawdhshoo
I guhaadinaayoo
Igu feedha geeskoo
Indhaa igu gubaayoo
Gobo,diisu ay tahay
Gallad hayga filanoo
Gogol aan ku siiyiyo
Gasiin hayga dhawrine
Gurigayga ii dhaaf.

Go'aankaygu wuxuu yahay
Galab inaan ka guuree
Guulloow Allahayoow
Adigaa gargaaroon
Keligaa ku garabsiga
Guddoonkii ku siiyee
Geestaada ila qabo.

QAYBTA 4AAD

QUN-U-RAACA MAGACYADA HAWEENKA SOOMAALIDA

Wax kasta oo adduunka ahi noole iyo ma nooleba magac ayay leeyihiin oo loo bixiyaa. Waxaa jira magacyada dadka loo bixiyo, kuwa meelaha, kuwa xilliyada, jihooyinka, kuwa xayawaanka, dhirta, kuwa xubnaha jidhka, kuwa qalabyada iwm. Magacyada dadka ayaa ugu muhiimsan, dadka adduunkuna magacyo ayay la kala baxaan. Quruun kastaa magacyo u gaar ah ayay si u gaar ah ula baxdaa, waxaase jira magacyo quruumaysan oo ummado badani wadaagaan, waxaanay magacyadaasi u badan yihiin kuwo dhinaca diimaha salka ku haya oo ka soo jeeda asal ahaan. Halkan waxa aynu ku soo qaadan doonnaa magacyada haweenka soomaalida intii aynu ka gaadhi karno ama aannu xusuus ku ururinnay.

Magacyada soomaalidu lab iyo dheddigba, waxa ay ka soo kala jeedaan asal ahaan laba ilood oo kala duwan: Ta hore waa il dhalad ah oo ku salaysan afka iyo dhaqanka soomaalida iyo ta kale oo ah il dibadda ka soo gashay oo salka ku haysa ilbaxnimada iyo taariikhda islaamka iyo dhaqammada ku taxmaya iyo magacyo aan badnayn oo fara-ka - tiris ah, kana soo jeedi kara ilbaxnimooyinka kale ee adduunka. Bixinta magaca soomaalidu macne iyo ujeeddo ayay u cuskan jireen oo qofka magaca la isagama bixin jirin, waase loo meel deyi jirey oo sida aynu hadhowto arki doonno macne iyo munaasabad ayaa lagu fadhiisin jirey. Magacyada dhaladka ah ee dhaqanka soomaalidu waxa ay u qaybsami karaan laba qaybood: Magacyo hore oo duug ah oo hadda isticmaalkoodu yaraaday, qaarna sii lumayaan oo aan hadda lala bixin iyo magacyo casriga la socda oo ah kuwa loogu isticmaalka badan yahay. Magacyada dibadda ka soo galay waxaa ugu muhiimsan, uguna saamayn badan magacyada ku abtirsada ilbaxnimada islaamka iyo afka carabida oo ah afkii diintu ku soo degtey, kuna fidday, cilmigeeduna ku xafidan yahay sida Qur’aanka Kariimka ah. Waxaa kale oo jira magacyo soomaalidu adeegsato oo ka yimid ilbaxnimooyin kale, sida kuwii Masaaridii hore ee Faraaciinta, Faarisiyiinta, Yuhuudda ama Yurubtaba.

Tusaale ahaan magacyada dhaladka ah waxaa ka mid ah Guhaad, Guure, Carraale, Samatar, Guuleed, Ayaanle, Beyddan, Baada, Cutiya, Ayaan, Filsan, Ubax iwm. Magacyada Guhaad, Samatar, Beyddan, Baada iyo Cutiya waxaa la tilmaami karaa in ay ka mid yihiin magacyada qadiimka ah ee dhaladka ah ee soomaalida. Kuwa kale Guuleed, Ayaanle, Filsan, Ayaan iyo Ubaxna waxa ay ka mid yihiin kuwa dhaladka ah ee casriga ah, haddeerna la isticmaalo. Magacyada soomaalida dibadda ka soo galayna waxaa ka mid ah Faadumo, Khadiija, Caasha, Maxamed, Cali, Faysal, Fu’aad, Axlaam, Nawaal, Ashwaaq, Ammuun, Ismahaan, Hani, Laki, Raabbi iwm. Magacyada Faadumo, Caasha, Cali iyo Maxamed waa magacyo islaami ah oo diinta la yimid. Fu’aad, Faysal, Axlaam iyo Ashwaaqna waa magacyo carbeed oo dhaqan derisnimo iyo wada macaamil keenay. Magacyada kale Raabbi, Ammuun, Ismahaan, Laki, Adna, iwm waxa ay ka soo jeedaan ama ka hadheen ilbaxnimooyin kale, sida ilbaxnimooyinkii Faraaciinta, Yuhuudda ama Roomaankii Yurub ka ciidamin jirey iwm.

Magacyada haweenka soomaalida ee aynu halkan ku soo qaadi doonnaa waxa ay cagacagaynayaan lix boqol oo magac oo kala duwan oo isugu dhafan kuwii hore ee qadiimka ahaa iyo kuwan hadda aad loo adeegsado ee casriga ah. Waa magacyo dhalad iyo soo galeytiba leh. Waxaannu soo ururinnay intii ugu badnayd magacyada haweenka soomaalidu la baxaan ee aannu hellay, waxaana loo kala qaybiyey magacyada ka

bilaabma shaqallada iyo kuwa shibbanayaasha ku socda. Xarfaha magacyadu ka kacaan shibbane iyo shaqalkaba qaarkood waa faqiir suke ama agoon ah, qaarna waa qani beel dhan ah oo udbaheedii iyo dhigaheediiba wadata oo guuraysa sida aynu dhowaan hoos ugu tegi doonno.

Magacyada ka kaca (Shaqalka) : A, E, I, O, U

Magacyada haweenka soomaalida ee xarfaha shaqallada ka kaca ama ku bilowda ee halkan ku urursani waxa ay kor u dhaafayaan 60 magac oo kala duwan. Marka la eego xogta aannu hayno ee magacyada shaqallada ka kaca ku saabsan waxaa ugu hodan ama ugu badan xarafka A'da oo aannu ka helnay in ka badan 30 magac, waxaana ugu faqiirsan ama ugu yar xarafka U'da oo laga hayo 9 magac oo keliya, halka xarfaha E'da iyo O'dana aannu ka weyney xitaa hal magac oo keliya xarafkiiba. Xarafka I'da magacyada ka kacaa qudhiisu ma yara oo 24 magac ayaa halkan kaga urursan.

Guud ahaan magacyada alifka ama shaqalka ku socda ee haweenka soomaalida waxa ay ka kooban yihiin magacyo ka soo jeeda sida aynu soo xusnay afka iyo dhaqanka soomaalida, islaamka, af carabi iyo qaar aan badnayn oo ka yimi meelo kale. Magacyada haweenka soomaalida loo bixiyaa waxa ay u badan yihiin magacyo sifaynaya quruxda, ammaan ku taxan muuqa, midabka iyo qotonka ama hab-dhiska jidhka iwm. Dhinaca kale waxaa jira magacyo wax ka tibaaxaya xaaladda magacu ku baxay sida ay ahayd, tusaale ahaan xaaladdii qoyska ay inantu u dhalatay, gaar ahaan hooyadu ku sugnayd; filitaankeeda, himiladeeda, rajadeeda iwm. Magacyadan qaar waxa ay tilmaamayaan wakhtiga ama amminta inantu dhalatay, qaar kalena sansaanta inanta iyo ifafaalayaasheeda, dabcigeeda, cidda ay u eg tahay iwm, magacyana waxa ay ku qotomaan xigasho la soo qaatay oo kaliya, waana xus iwm.

Magacyada quruxda ama ammaanta waxaan tusaale uga soo qaadan karnaa Aragsan oo ah tii isha u roonayd, Aslan oo midab tilmaamaya waa tii aslanayd, midabkeedu ka asalka cas ee quruxda badan u ekaa sida marka weelka ama dhigaha iyo udbaha la aslo u ekayd. Ashkiro waa tii quruxdeedu midab fardoodka cas ahayd. Iftin waa tii nuuraysay.
Iido, Isniino iyo Axado wakhti ayay tilmaamayaan oo waa maalin iida ama Isniin ama Axad ah inantii dhalatay. Amran, Ayaan, Axlaam, Istiqlaal, Umal, Amal, Amaal, Ummal-khayr iwm waxa ay u taagan yihiin sida ay ahaayeen xaaladihii hablaha loo bixiyaa ay ku dhasheen.

Asma, Aasiya, Istanbuul, Ammuun Iwm. waa magac xus ah oo macne taariikhi ahi ka dambeeyo ama meel laga soo qaatay, sida Ammuun oo ahayd boqoraddii faraaciinta xilliyada qaar, Aasiya oo ahayd xaaskii Fircoon oo Alle ka magan geli jirtey sharka ninkeeda (Fircoon) ama Istanbuul oo ah magaalo taariikhi ah oo ku taal dalka Turkiga, ahna halkii ugu raad dambaysey boqortooyada Islaamiga ahayd ee Cismaaniyiinta oo mar ka calan wallayn jirtey caalamka islaamka oo dhan ama Asma oo ka mid ahayd hablihii muslimiinta ahaa ee magaca lahaa xilligii ay diinta islaamku faafidda ku jirtey.

Dhawr magac ayaynu sifahooda is dul taagi doonnaa tusmo ahaan xarfaha alifka ama shaqalka ka kaca ee dumarka soomaalida Tusaale: *Addeeca:* Isirka magacan halka dhoobadiisa laga soo qaaday waa afka carabiga, waana magac diini ah oo guun ah, dhalan rogna ku dhacay, waana tii baarriga ahayd, tii addeecaysey Alle, waalidkeed iyo ninkeeda iwm, waana magac soo koobmay oo aan hadda cid badani la yaalaa bixin. *Abyan*: Waa magac kale oo guun ah, waana soomaali dirkiisu oo ragga, geela iyo dumarkuba waa **la bixiyaa**. *Hadal waa la abyaa, waa la soo urursha a!* Abyan inanta loo bixiyaa macne ahaan waa tii u horraysey, waa curaddii, quruxna way noqotaa oo tii horyaalka ahayd. *Idman*: waa magac soomaali guun ah, waana tii la sii naadiyey, la sii sheegay ama iyaduba iska sii badheedhay ee is muujisay, waxa ay u macne dhow dahay Badheedha, inta badanna waxaa loo bixiyaa inanta wiilal miidhan ka horreeyeen oo niyadda ayay aabbaha iyo hooyadu ka sii ishaartaan dhalashadeeda. *Amran:* magacan asalkiisu waa carabi, waa tii amranayd, tii amaaradda ama astaanta gaara lahayd, waxaana loo bixiyaa inanta calaamad gaar ah ku dhalata, taas oo waalidku, gaar ahaan hooyadu ula qastido in ay tahay amaarad ama astaan barakaysan oo samaan iyo wanaag u taagan. Hablaha magac kale ayaa loogu ladhaa ama labeeyaa, sida Caasha-Amran, waana magac hadda lala baxo oo casri ah.

Hadda bal aynu isla eegno magacyada haweenka soomaalida ee alifka ama shaqalka ka kaca. In ka badan 60 magac ayaa halkan hoose ku kaydsan. Dhaayaha akhristaha ayaa loo dhaafayaa oo ay doorkiisa tahay inuu dhuuxo oo ruugo, kala hufo oo kala haadiyo, una kala saafto magacyada mid duug ah ama qadiim ah, mid cusub ama casri ah iwm, waana kuwan magacyadii:

Aamina, Aasiya, Aayah, Asad, Abxado, Abshiro, Abyan, Abyoon, Arliyo, Adna, Addeeca, Aragsan, Ardo, Askaro, Asiili, Aslan, Asli, Ashraax, Ashkiro, Ashwaaq, Afraxo, Asma, Amaal, Amja, Amiira, Amran, Ammuun, Aniisa, Axado, Axlaam, Ayaan, Iido, Iisho, Iimaan, Ijaabo, Ijo, Idil, Idman, Isir, Isra, Istaahil, Istarliin, Istanbuul, Istiqlaal, Ismahaan, Ishaaro, Iftin, Ifraax, Iqbaal, Iqra, Ikraan, Ilwaad, Ilhaan, Indha u roon, Indhadeeq, Isniino, Ubax, Ubbolacag, Udgoon, Ugaaso, Ugbaad, Ulasan, Ulfi, Umal, Ummal- khayr.

Magacyada Shibbanaha Ka Kaca (BTJX…WHY)

Marka la eego magacyada haweenka soomaalida ee ka kaca shibbanayaasha waxaa halkan ku weelaysan in ka badan shan boqol oo magac oo kala duwan oo ka kooban 21-ka shibbane ee far-soomaalida. Sida magacyada alifka ama shaqalka ka kaca oo kale ayaa kuwa shibbanayaashuna u kala hodansan yihiin, waxaana rikoodhka jebiyey magacyada dheddigga ee ku socda xarafka ‘S’ oo aannu ka soo hellay in ka badan 50 magac. Lixda xaraf ama shibbane ee ugu faqiirsan ama ugu tirada yar dhankaas magacyada haweenka soomaalidu waxa ay kala yihiin xarfaha ‘Y’ (5 magac), ‘KH’ (7 magac), ‘J’ (10 magac), ‘T’ (11 magac), ‘W’ (13 magac) iyo ‘G’ (15 magac). Shibbanayaasha soo raacaya ‘S’-da ee magacyada dumarka intooda badani ka kacaan waxaa ka mid ah ‘B’ (47 magac), ‘C’ (43 magac), ‘X’ (33 magac), ‘M’ (33 magac), ‘F ’ (32 magac), ‘N’ (28 magac), ‘R’ (27

magac), Sh, (24 magac), ‘D’ (24 magac), ‘K’ (22 magac), ‘Q’ (22 magac) ‘H’ (20 magac), ‘L’ (19magac), iyo shibbanaha ‘Dh’ oo haysta 17 magac.

Bal hadda aynu u hollanno oo is dul taagno tusmooyin ku saabsan macnaha iyo sifooyinka magacyada haweenka ee xarfaha shibbanayaasha ku socda qaar ka mid ah, iyada oo ay dhici karto in magacyada qaar ay sifooyin badan iyo macneyaal kala geddisan labadaba yeelan karaan, haddana waxa aannu isku deyi wax ka tibaaxa qaarkood. Tusaale: *Baada:* isirkiisu waa soomaali, waana magac fac weyn oo duug ah, welina dumarkii loo bixiyey wax ka sii nool yihiin oo la maqlo islaan loogu yeedhayo. Macnihiisu waa tii raagta, cimri dhererna Alle ku galladaysto. Xagga cimri dhererka iyo ducada waxa ay wax ka wadaan magacyada kale ee Qaafo iyo Weris iwm. *Baar:* dirsoociisu waa soomaali badhax la’. Waa magac fil roon, welina si aan badnayn loola baxo. Baar waa figta ugu sarraysa ee geedka, nuxurkuna waa tii hablaha ugu sidatey ama ugu sarraysey iwm. Waxa ay wax wadaagaan magacyada Sarrays, Koraad, Shankarroon iwm. *Badhaadha*: magacu waa soomaali qadiim ah, welina loola baxo si aan baahsanayn. Macnihiisu waa badhaadhe iyo berisamaad; waxanay isku ujeeddo yihiin magacyada Barwaaqo, Sareedo, Nimco, Beyddan iwm. *Barni:* Waxa uu magacani tilmaamayaa midabka iyo quruxda inanta. Barni waxaa loo yaqaan timir midabkeedu qurux badan yahay oo cas yahay, aadna loo jecel yahay cunitaankeeda. Midabka iyo damcad wanaagga timirta ayaa inantana loogu magac darayaa oo xabbad timir ah oo Barni-dabacad ah lala mesaal dhigayaa. *Basra:* Waa magac soomaalidu la baxdo, waana magaca magaalada labaad ee dalka Ciraaq. Magaalada Basra iyo nawaaxigeeda waxaa ka baxda timir qurux badan oo dhadhankeeda soomaalidu jeceshahay oo ah ta loo yaqaan Barni-dabacadda, taas baanay ku xidhiidhsan tahay in magacan lala baxaa. *Bariisa:* Waxaa magacan loo bixiyaa inanta bariisada hore (aroortii) reerka ku soo waaberiisata ee ammintaas dhalata xoolihii oo aan weli kala dareerin. *Bedey:* Waxaa loo bixiyaa inanta tii ka horraysey uu Alle la noqday, waa tii la soo bedey ama tii hore u saqiirtay lagu soo beddeley, raggana xaaladdan oo kale Bede ama Beddel ayaa loo bixiyaa. *Balax:* Waa tii midabkeedu caddaa ee boodhka ahaa, waxanay sifada caddaanka tilmaamaysa wax ka wadaagaan magacyada ay ka midka yihiin Bullo, Dhool iyo Dhuux. *Berdan:* Waa magac soomaali filkiisu weyn yahay, welina lala baxo. Macnihiisu waxa uu la hal-malaa, waxna la wadaagaa magacyada Deggan, Dekeeya, Culus, Cutiya, Sellin, Miyir oo wuxuba tilmaamaya degganaan iyo dhawrsanaan.

Magacyada ka kaca B: *Baada, Baar, Baarcad, Baahila, Batraan, Batuulo, Baxsan, Barrey, Badhaadha, Badheedha, Bariisa, Barkhado, Barni, Barwaaqo, Basra, Basma, Balax, Bahja, Baynax, Beyddan, Beerlula, Beegsan, Bedey, Bedra, Berdan, Beydariin, Biibi, Biciido, Bila, Biladdaya, Bilan, Binti, Boolo, Bogaad, Buuxa, Buteeya, Budeeya, Bureeqa, Burcado, Busaad, Buseela, Bushaaro, Bushra, Bulli, Bullo,Buneey.*

Tanaado: Waa magac asalkiisu soomaali yahay. Waa tii gudubtey, guulaysatey, waxanay la macne tahay Faa’isa oo isirkeedu af carabi ka soo jeedo. *Timiro:* Waa tii midabkeedu casaa ee xabbadda timirta ah ee barnida ah u ekaa. Midabkan casaanka oo qurux looga gol leeyahay magacyo badan ayaa ku biyo shuba, sida Asli, Aslan, Basra, Barni, Xiddo, Madheedho iwm. Tooxyar: Isirka magacu waa soomaali, waxaana loo bixiya inanta

dhuuban, dhilan ee aanu qotonkeedu dheerayn. Xagga dhuubnida waxa uu magacu wax kala wadaagi karaa magacyada kale ee Dhexyar, Dhilan, Dhuubo iwm.

Magacyada ka kaca T: *Tagsan, Tarraxa, Tanaado, Tayasiir, Tayo, Tiriig, Timiro, Toolmoon, Tooxyar, Toosan, Tusmo*.

Jinow: Waa magac soomaali. Jinowgu afka soomaaliga wuxuu leeyahay dhawr macne. Mar waa geed caleentiisu xoog u dhanaan tahay labada qaboonood (subaxdii iyo galabtii) oo xoolaha iyo dadku cunaan, macne labaadna waa caanaha geela ee karuurka ah oo damcaddooda macaan ee dhadhanka leh loo xiiso, lana jecel yahay. Macnahan dambe ee caanaha karuurka ku saabsan ayuu magaca Jinowna la hal-maalaa. Jinow inta badan waxa uu raacaa magaca inanta loogu wanqalo oo hooyadeed ugu ladhaa sida Cambaro-Jinow iwm.

Magacyada ka kaca J: *Jamaad, Jamiila, Janno, Jawaahir, Jawhara, Jimco, Jinow, Jookho, Joollo, Juweeriya.*

Xaadsan: Dirsooca magacu waa soomaali, waana magac duug ah, welina sii ciidaminaya oo lala baxo si aan badnayn. Macnihiisu waa tii ceebta ama xumaanta caariga ka ahayd, sifadaasna waxa uu magacu la wadaagaa Ceebla', Saxarla', Saluugla', Midhifla' iwm. *Xiddo:* Waa magac soomaali fac weyn. Midabka cawlan ama casuusta ah, ayuu tilmaamayaa, gaar ahaan waxaa loo bixiyaa inanta timaheeda iyo midabkeedu cawlan yihiin. *Xogla':* Waa magac soomaali duug ah, waxaana loo bixiyaa inanta aabbaheed hoydo ama geeriyoodo inta ay caloosha ku jirto ama dhalashadeeda ka hor. Xogla' iyo Warla' ama War-moog waa isku macne, raggana xaaladdan oo kale Odowaa ayaa ka mid ah kuwa loo bixiyo.

Magacyada ka kaca X: *Xaabeeya, Xaadsan, Xaafuun, Xaali, Xaawa, Xabbado, Xabiiba, Xaddiyo, Xareedo, Xarla, Xasna, Xafsa, Xalan, Xaliimo, Xalwo, Xamaro, Xamda, Xamdi, Xamsa, Xannaan, Xayaad, Xiis, Xiddo, Xirsiyo, Xigaal, Xildiido, Ximmiro, Xorriyo, Xogla', Xujo, Xurmo, Xusliya, Xusna.*

Magacyada ka kaca Kh: *Khabar-moog, Khadiija, Khaliila, Khayro, Khadaro, Khadra, Khamiiso*.

Dalays: Waa soomaali isirka magacu, waana magac fac weyn, welina hablaha loo bixiyo si aan baahsanayn. Dalays waa tii awddey kaalin bannaanayd, kana sarraysey hablaha la filka ah. Waxaa kale oo magacu tilmaamayaa dherer iyo midab ku dhafan oo maarriin dhalaalaya ah. Xagga midabka madowga ah ee ifaya waxa ay magacan ka wadaagi karaan Yusur iwm.

Magacyada ka kaca D: *Daado, Daacado, Dahabo, Dalays, Dallaayo, Dawli, Dayibo, Dawo, Dawlo, Dayaxo, Deeqa, Deggan, Degmo, Dekeeya, Diiddan, Diirran, Diraaco, Dihin, Doonbiro, Duco, Dugsiiya, Dugsoon, Dulmar, Duniyo.*

Ramla: Waa carabi isirkiisu. Waa ciid macnuhu oo looga jeedo qurux iyo weynaan sida dhulka oo kale ama badnaan iyo taran iwm.

Magacyada ka kaca R: *Raaxo, Raadiya, Raaqiya, Raalliyo, Raan, Raayo, Rajo (Rajaa), Rashiido, Racwi, Rabiica, Rafiica, Rafiiqa, Rako, Ramla, Raxiima, Raxma, Raydabo, Riso, Riyaad, Riyaaq, Riyo, Roobo, Rooxaan, Rooxo, Roodo, Roon, Rummaan, Ruun, Ruqiya, Ruweyda.*

Magacyada haweenka soomaalida ee ku socda xarafka ‘S’ oo ah kuwa ugu badan, waxaa intooda badani ka soo jeedaan afka carabiga iyo ilbaxnimada islaamka, kuwa dhaladka ahina kuma yara, kuwa kale ayaase hadhaynaya. *Sarrays:* Waa magac soomaali qadiim ah, welina lala sii baxo si kooban. Waxa uu la macne yahay Dulmar, Koraad, Baar iwm oo intuba tilmaama qiimayn sarraysa. *Sellin*: Waa magac soomaali loo wada bixiyo haweenka, ragga iyo geelaba. Socod iyo degganaan ayuu macnihiisu ku taxmayaa, waa tii jaanteedu miisaanka lahayd, waa Culus cagta si qunyar ah u rogta ama u qaadda. *Suudi:* asalka magacu waa soomaali, waxaana loo bixiyaa haweenka, ragga iyo geelaba. Suudi waa meel cidla’ ah, sanqadhna aan lahayn, waxaana loo bixiyaa inanta aan la kala ogayn in joogto iyo in ay maqan tahay sanqadh yaraan awgeed ama u dhalata sidaas aan la dareemi karin. *Suuri/Suur:* Waa magac soomaali. Qurux cunaha maraysa oo aan saxasho lahayn ayuu xambaarsan yahay. Waxaa loo bixin karaa haweenka, ragga iyo geelaba, waxaanu la macne noqon karaa magacyada Suleekha, Siraad iwm.

Magacyada ka kaca S: *Saado, Saafi, Saaqa, Saakin, Saamiya, Sabaad, Sabaax, Sabiina, Saxarla, Saxan, Sacdiya, Sado, Sadca, Sareedo, Sarrays, Sargo’an, Safa, Safiya, Sagal, Salaado, Salma, Saluugla, Samatara, Samawada, Samiixa, Samiira, Samsam, Saynab, Sahlan, Sellin, Seyda, Siteey, Siciido, Sidciya, Siraad, Sifaad, Siman, Siina, Soohan, Sonkorey, Suubban, Suudi, Suur, Suuri, Subeeda, Subkan, Sucaad, Sucdi, Sudciyo, Suleekha, Sulubo, Sureer, Sumaya, Suhayda, Suheer, Suhuur*.

Shaadiro: Waa magac soomaali. Midab ayuu wax ka tibaaxayaa, waana madowga dugulka ah ee isha ka hurda. Shaqlan iwm ayay sifada tilmaamaysa madowgaas wada wadaagaan.. *Shahmaad:* Waa magac hooyadu had iyo goor bixintiisa yeelato, macnihiisuna waa tii aan muranka lahayn; Muranla’. *Shacni*: Waa magac soomaali qurux iyo iftiin u taagan. Haweenka , ragga, geela iyo lo’daba waa loo bixiyaa.

Magacyada ka kaca Sh: *Shaadiro, Shaadiya, Shaaca, Shaafi, Shaal, Shaanshiya, Shaxshaxley, Shacni, Sharaf, Shariifo, Shafeeca, Shamis, Shamsa, Shema, Shankarroon, Shaqlan, Shahmaad, Shifo, Shinaas, Shoobo, Shoobto, Shumeey, Shuun, Shukri*.

Dheeraad: Waa soomaali asalkiisu, waana magac filroon oo weli lala baxo. Macnihiisuna wuxuu u dhow yahay Dulmar, Sarrays, Koraad, Foolaad, Shankarroon, Filkarroon iwm. *Dheeg*: Waa magac soomaali da’ weyn, welina la bixiyo, dibna isu casriyeynaya. Dheeg afsoomaali ahaan waa dhinac ama sinta sida aqalka dheeggiisa, hasha dheeggeeda iwm. Waxaa kale dheeg macnihiisu noqon karaa wax wax kale laga soo jeebay, laga soo sannifay ama laga soo qaatay iwm. Magac ahaan waxa uu noqon karaa macnihiisu tii muuqatey ee aan la hadhayn karayn ama tii ku bannaanayd ee u ekayd hooyadeed ama

aabbaheed ama midba labadeeda waalid dhinac ka shabbahaysey ee uga ekayd iwm. Marka ay wada dhashaan laba hablood oo mataanaysani ayaa ta hore Dheeg loo bixiyaa. Mataanta labaadna waa Dhudi. Dheeg waxaa kale oo loo bixiyaa haweenka, ragga iyo geelaba. *Dhudi*: Asalkiisu waa soomaali fac weyn, welina aan boodhka iyo habaaska ku dhex asqoobin oo hablaha loo bixiyo. Macnihiisu waa dhuubni iyo qorqornaan ama sar yaraani weheliso, waxa ay wax ka wadaagaan dhinaca qorqornaanta iyo sar yarida magacyada kale ee Dhilan, Sargo'an, Dhuubo iwm.

Magacyada ka kaca Dh: *Dhaashan, Dhaado, Dhaayo, Dhaqan, Dhammays, Dhammo, Dheeraad, Dheeg, Dheemman, Dheeho, Dhigan, Dhilan, Dhimbilo, Dhoofa, Dhool, Dhuux, Dhudi.*

Cutiya: Waa soomaali da'weyn isirkiisu, waxaanu macnihiisu u taagan socodka deggan. Dhinaca degganaanta waa kala mid Deggan, Berdan, Dekeeya, Miyir ama Culus iwm. *Cayo*: Magaca asalkiisu waa soomaali fac weyn. Cayo waa geedo jilicsan oo roobka ugu horreeyaa ka soo saaro markiiba dhulka oollimaadka ama degelka ah iyo sabada reerka. Waa geedo isu sima sida geelu marka uu duudka simo u qurux badan yahay oo kale. Macnaha looga jeedaa magacuna waa tii sida cayada ama xamashka u sinnayd. Waxaa kale oo sifada magacu tibaaxaysaa dhega nuglaan iyo debecsanaan. *Cawrala'*: Waa magac qadiim ah oo soomaali ah. Waa tii aan ceebta iyo xumaanta lahayn, waana la mid Ceebla', Calowla', Saxarla', Midhifla' iwm. *Calowla'*: Isirka magacani waa soomaali duug ah. Calowgu waa wax aan saafi ahayn oo isku jir ah. Caaneeyada iyo maraqa ayaa calowga yeesha. Macnaha magacu waa tii saafiga ahayd, waana Saxarla', Midhifla' Saafi, Xarla', Hufan iwm.

Magacyada ka kaca C: *Caasha, Caaliya, Cabban, Cabiir, Cabdiyo, Cadar, Caddey, Calas, Calaso, Calowla, Calwiya, Carrafo, Carfi, Carfoon, Carwo, Casiisa, Caqli, Cambaro, Canab, Cawedo, Caweys, Cawilo, Cawo, Cawrala, Cawlo, Cayo, Cayla', Ceebla, Ciiltira, Cibaado, Cilleeya, Cilmiyo, Cosob, Colow, Cutiya, Cuddoon, Cudbi, Cureeja, Cusubo, Cugan, Culan, Culimo, Culus.*

Gaasira: Waa magac soomaali asalkiisu. Waa tii quruxdeedu wax shiiqinaysey ee hablaha kale quruxdooda hadhaynaysey ama hoos u dhigaysey, waxanay astaantaas wadaagaan magaca kale ee Dulmar iwm. *Gallado*: Waa soomaali isirkiisu. Deeq Alle bixiyey ayuu magacu u taagan yahay, waxanay ehel yihiin magacyada kale ee Hibo ama Deeqa iwm.

Magacyada ka kaca G: *Gaadsan, Gaasira, Gargaara, Gallado, Galoos, Gamaala, Geelo, Geyfan, Gobey, Gobaad, Gobdeeq, Gobdoon, Guddi, Guddoon, Guduudo*.

Filsan: Waa magac casri ah oo asalkiisu soomaali yahay. Waa filkeeda ugu san; ugu wanaagsan. *Farow*: Waa magac soomaali. Waxaa loo bixiyaa inanta hilibka iyo qotonka isku dhafan leh, waana tii hilboonayd, gammaankana waa loo bixiyaa, waxaanay isku macne yihiin Farooyo. *Foolaad*: Waa magac soomaali hore, casriganna hablaha loo bixiyo. Hormuudnimo ayaa magacu tilmaamayaa, waana tii hor dhalatay ama horseedka u ahayd ama curadda ahayd ee la dhalatay sacaadada iyo barwaaqada iwm.

Magacyada ka kaca F: *Faadumo, Faa'isa, Faakhir, Faay, Faayo, Fatuum, Fatuux, Fatxa, Farax, Farxaan, Fariido, Farooyo, Farow, Fartuuma, Farduus, Farxiya (Fatxiya), Faryaad, Fahiima, Fahma, Faynuus, Fayruus, Felis, Fiido, Filis, Filsan, Filkarroon, Foos, Foosi, Foosiya, Foolaad, Fulli, Fulki*.

Qaafo: Waa soomaali filkiisu weyn yahay, waana tii magaceedu carceero ee dunida wada gaadho ee raago, waxaanu dhinaca kale magacu soo bandhigayaa qurux iyo qorqornaansho qotonka iyo jaaha inanta la xidhiidha, waxaanu magacu xagga quruxda kala bah noqon karaa magacyada kale ee Qoran, Qalanjo, Qumman ama Qureesha. *Qarad:* Waa magac badanaa hooyadu gaar u bixiso, waana tii ka jawaabtay hooyada muraadkeedii, qastigeedii oo ahaa in ay ubad yeelato. *Qaleeya*: Asalkiisu waa soomaali soo jireen ah, welina loo bixiyo ragga iyo dumarkaba. Waxaa loo bixiyaa inanta la dhalata inammada badan ee ka horreeyey iyada. Inantu inammadii ka hor dhashay ayay qalaysay oo badhaxday ama lagu daray oo ay bishay (Bila ama Bilan), waxaana la yidhaahdaa way tarraxday oo markaana waa Tarraxa. Raggana Qaley, Iidaan ama Tarrax ayaa ka mid ah kuwa loo bixiyo xaaladdan oo kale marka gabdho badani ka horreeyeen xagga dhalashada.

Magacyada ka kaca Q: *Qaafo, Qaali, Qaaliya, Qaayiba, Qaahira, Qadan, Qarad, Qaladla, Qalanjo, Qaleeya, Qarni, Qalbi, Qamar, Qani, Qaniyo, Qoran, Qorraxo, Qorsho, Qormo, Qureesha, Qumman, Quweys.*

Karuur: Waa magac soomaali. Magacan waxaa looga jeedaa oo la macne yahay midabka cad iyo damcadda macaan ee caanaha geelu marka ay ugu wanaagsan yihiin ee loogu jecel yahay ee dhanaanka jinowga ah ay yihiin. Karuur waxaa loo bixiyaa haweenka, ragga iyo geelaba. *Keysi*: Waa magac soomaali fac weyn. Waa tii kaafiday, ku fillaatay halkii ay buuxin lahayd. Waa kaafiya, Kaafi ama Kaamila. Haweenka, Ragga iyo geelaba waa loo bixiyaa. *Kinsi*: Waa magac soomaali isirkiisu, waxaanu u taagan yahay qaniimad, barwaaqo iyo khasnad ku soo beegantay oo la helay inanta loo bixinayo calool galkeedii ama dhalashadeedii. *Kawsar*: Isirkiisu waa afcarabi xagga diinta islaamka inaga soo galay. Macnihiisu waxaa uu ka soo jeedaa biyaha jannada. Waadi ama webi ka mid ah kuwa jannada ayaa la inoogu sheegay magaciisa Kawsar. Soomaalidu waxa ay ula baxdaa haweenka, ragga iyo geelaba.

Magacyada ka kaca K: *Kaadisa, Kaafi, Kaafiya, Kaaftoon, Kaamila, Kaaha, Kariima, Karuur, Kaliilo, Kaltuun, Kalsoon, Kalgacal, Kawsar, Keef, Keysi, Kiin, Kinsi, Koos, Koraad, Kordahab, Kutubo, Kutubey*.

Lafti: Waa magac da'weyn, soomaalina abkiisu yahay, si dhif iyo naadir ahna loola baxo. Macnihiisu waa tii asalka ahayd, dhaladka ahayd, la iska dhalay, waana la mid noqon kara Asiili iwm. *Laqanyo*: Waa magac soomaali fac weyn oo qadiim ah, welina aan la bixiddiisu dabar go'in. Macnihiisu waa tii quruxda laqlaqda ah lahayd; curdanka iyo carta cusubi ku dheehnayd iwm.

Magacyada ka kaca L: *Laac, Laashin, Labeen, Ladan, Lafti, Laqan, Laqanyo, Laki, Layi, Layla, Leexo, Lebi, Leymuun, Liimo, Looga, Luula, Luul, Lufti, Lulwa*.

Maydhan: Waa magac soomaali asalkiisu. Waa tii xallaanta ku dhalatay ee aan xabka iyo xumaanta lahayd ee ‘daadaxda’ ahayd. Waxaa magacu la bah yahay magacyada kale ee ay ka mid yihiin Nadiifo, Xalan iwm. *Madheedho*: Waa tii midabkeedu casaa ee midhaha madheedhku marka ay bislaadaan u ekayd. Waxa uu magacu sitaa quruxda midabkaaas ka sakow sifooyinka ay ka mid yihiin dun wanaaggu, geed adaygnimadu ama labootinnimadu, gobannimadu iwm oo marna inanta laga dheehdo sansaankeeda marka ay dhalataba, marna duco ahaan loogu magac niyoodo oo loo saadinayo aayaheeda dambe inay noqoto mid qaadata ama sifooyinkaas yeelata hadba tii loo jeedo. *Magool* : Waa tii u dhigmaysey manka dhirta iyo ubaxa. Haweenka, ragga iyo geelaba waa loola baxaa. *Midhifla’*: Waa magac soomaali duugoobey asalkiisu. Waa tii aan ceebta lahayn ama caariyada ka ahayd xumaanta. Waxa uu magacu la bah noqon karaa magacyada Saxarla’, Ceebla’, Calowla’ iwm . *Mullaaxo*: Mar waxaa uu macnihiisu noqon karaa tii laga soo jeexay hooyadeed ee u ekayd, marna waa tii soohnayd dhuubni darteed sida maydhaxda galool mullaaxdeeda. Waxaa u dhigmi kara macne ahaan magacyada Hufan, Habsan, Habboon, Toolmoon iwm.

Magacyada ka kaca M: *Maandeeq, Maan, Maano, Maddiino, Markabo, Marwo, Maryan, Madheedho, Maceey, Magool, Mako, Malabo, Malayko, Malyuun, Mansuura, Mahado, Maydhan, Maymuun, Miido, Miiggan, Miciina, Midhifla, Milgo, Miyir, Muxubbo, Mudan, Muraayo, Murriyo, Muslimo, Mullaaxo, Mulki, Muumina, Muna.*

Nabado: Waxaa loo bixiyaa inanta tilmaanta nabadda ku caana maasha. Calool galkeedii ama dhalashadeeda ayaa ku beegnaa xilli colaad laga soo doogey oo nabadi soo hor yeelatay. Nabaddii ayay la kowsatey. Nasteexo ayaa u macne dhow. Ujeeddooyinka kale ee magacu ku bixi karo waxaa ka mid ah in loo bixiyo hablaha ay ku curtaan dumarka godob-reebta loo yaqaan ee halkii dhiiggu ku daatay xabkooda lagu burursho, marar kalena waa saadaalo nabadeed oo xilliga colaadda ayaa nabadda loogu yeedhyeedhayaa magac bixinta inantaas dhalatay. *Negaad*: Waa tii lagu xasilay muran ama laab-la-kac qoyska dhexdiisa ka aloosnaa ka dib markii ay dhalatay, laguna degey ee socdaal ama geeddigii lagaga oolay.

Magacyada ka kaca N: *Naadiya, Naado, Nabado, Najax, Najma, Nadiira, Nadiifo, Naruuro, Najwa, Nasab, Nasiim, Nagiiba, Nasteexo, Nasra, Nasiib, Nasriin, Naciima, Nafiisa, Naqwo, Nawaal, Negaad, Nimco, Noolays, Nooleeya, Nuura, Nuuriin, Nuuriya, Nuuney.*

Weris; Soomaali isirkiisu weeye. Waa magac qadiim ah, welina waa lala baxaa. Magacu duco ayuu hoosta ka xarriiqayaa. Waa tii jirta ee joogta muddo dheer, magac iyo tafiirna reebta, Waa Qaafo magaca ay docdaas bahnimada ka wadaagi karaan. Weris waxaa loo bixiyaa haweenka, ragga, lo’da iyo geela. *Wiyilo*: Waa magac soomaali qadiim ah. Qotonka iyo hilibka inanta ayuu magacu tilmaamayaa, waxaana loo bixiyaa inanta miisaanka weyn iyo xoogganaanta ku dhalata. Magacyada ay sifadaas wadaagaanna waxaa ka mid ah Farow, Farooyo iwm.

Magacyada ka kaca W: *Waafi, Wacan, Wacdiyo, Warsan, Warla', Walanqad, Waar-moog, Wahiiba, Weris, Werda, Werdi, Wiilo, Wiyilo.*

Hira: Waa soomaali isirkiisu, waxaanu magacu wax ka tibaaxayaa muuqa iyo midabka inanta loo bixinayo. Waa midab madow oo sida hirka u soo bidhaamaya, dhalaalkiisu u soo widhwidhayo. waana tii lagu soo hiranayey muuqeeda. *Haweeya*: Waa tii la isku arkay quruxdeeda, tii damaca iyo hawada abuurtay, tii cid walba hawaysey. *Habsan*: Waa soomaali abkiisu, waana casri u dhigma macne ahaan Habboon, Toolmoon iwm.

Magacyada ka kaca H: *Haajira, Habboon, Habsan, Harawo, Haldhaa, Hana, Hani, Haweeya, Heego, Hibaaq, Hibo, Hiddo, Hira, Hinda, Hindisa, Hoobaan, Hodan, Hoodo, Hodma, Hufan*.

Yusur: Asalkiisu waa soomaali qadiim ah, si koobanna weli loola sii baxo. Waa midabka maarriinka madowga sii xiga ah ee dhalaala, jinniga iyo soo jiidashadana yeesha.

Magacyada ka kaca Y: *Yaasmiin, Yasir, Yusra, Yusur, Yurub.*

Ugu dambayntii waxaa jira magacyo ka mid ah kuwa hablaha loo bixiyo oo marna raggu la wadaagi karaan, marna geelu, mar kalena ragga iyo geelu. Waxaa ugu badan magacyada ka dhexeeya haweenka, ragga iyo geela. Waxaannu haynaa in ka badan 30 magac oo dumarka, ragga iyo geelu wadaagaan,waana sidan:

Abyan, Bila (Bile), Tayasiir, Xiis, Deeqa (Deeq), Dhaqan (Dhaqane), Dawlo (Dawlad; ragga iyo geela), Raan, Saakin, Sarrays (Sarreeye), Sellin, Siraad, Suudi, Suuri/Suur, Shacni, Shukri, Dheeg, Dhuux, Calas, Cawedo (Cawed), Cosob (Cosoble), Culus (Culusow), Qoran (Qorane), Kaamila (Kaamil; ragga iyo geela), Karuur, Kawsar, Keysi (Keyse), Magool, Maydhan (Maydhane), Miyir, Nadiifo (Nadiif; ragga iyo geela), Hira (Hirad), Yasir. Waxaa halkan soo raacaya magacyo saddexda qolaba loo bixiyo, hase yeeshee ragga magac kale loogu ladho ama loo raaciyo sida, Xaali, saafi, Gobaad, Kiin, Hodan iwm.

Magacyo kale oo door ahna waxaa gooni u wadaaga dumarka iyo geela, waxaana ka mid ah: Isir, Bogaad, Toosan, Dalays, Deggan, Dulmar, Dhammays, Dheeraad, Dheeho, Casiir, Caweys, Qarni, Galoos, Foolaad, Quweys, Maandeeq, Nasab, iwm.

Magacyo kale waxa ay ka dhexeeyaan oo la wada baxa dheddiga iyo laboodka aadanaha, sida Asad, Ayaan (Ayaanle), Ubax (Ubaxle), Tarraxa (Tarrax), Xalan (Xalane), Shariifo (Shariif), Shaafi, Samatara (Samatar), Samawada (Samaale), Cabban (Cabbane), Cilmiyo (Cilmi), Geelo (Geelle), Gobdoon, Foos, Foosi, Kaaha (Kaahiye), Nasra (Naasir), Nuura (Nuur), Hufan (Hufane).

Hablaha Geeska Afrika

Maansada Hablaha Geeska Afrika waxa ay si qummaati ah weynayso u dul saaraysaa oo nalka ku daaraysaa kartida haweenka soomaalida. Hablaha Geeska Afrika waxa ay leedahay: Guri Waa Haween oo la'aantood gurigu ma jireen, dugsigiisana laguma naalloodeen oo laguma istareexeen, Gegi ciyaareedna waa geriyaad (meel ban ah oo cidla' ah, geedna aan lahayn) haddii aanay dumar ka boodayn. Gogoli wehel ma leh haddii aanay Guud-Haldhaaley kula joogin goortaas, ninna geesi ma noqdeen guubaabada haweenka la'aantood, noloshana ninna guul kama gaadheen haddii aanay gaari garab joogin! Soomaalidaa hore ugu maahmaahday oo tidhi: Haween baa rag is dhaafsha iyo nin maalin ma gaadhid oo waa ninka kaa faraska wanaagsan, maalinta dagaalka ninkaasi kaa teg. Ninna sannad ma gaadhid oo waa ninka kaa sahanka ama daaqsinta wanaagsan, ninkaasina sannadkaas kaa xoolo wacnaa. Ninna weligaaba ma gaadhid oo waa ninka kaa afada ama oorida wanaagsan. Haween baa rag is dhaafshey**.** **Guri Waa Haween**, waana Kartida Haweenka Soomaalida. **The Bedrock of the Family**, Somali Woman and Her Potential Role in the Society). Maansadan Hablaha Geeska Afrika waxaa curiyey abwaanka weyn ee miiggan, qayuurigana ah Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) sannadkii 1973 markii uu xidhnaa xabsigii Qansax dheere ee Gobolka Bay.

Ma geyoon ma gamashiyin
Ma gommodin ma gaagixin
Ma gabloolin maan gudhin
Mana gabin hankaygii
Gabaygiina maan deyn
Geeraarradaydii
Imminkaan gardaadshoo
Weli maan gunaanadin.

Murti nimaam gunteediyo
Baran gogol-dhiggeedoo
Gonda degi aqoonoo
Garab-daar lahayn baa
Gawl-gawla hadalkoo
Kolba dhinac garoocdee,
Sida Webi Ganaanoo
Cirka godollo maaloo
Biyihii ku gaaxdiyo
Gebiyadii ku soo degey
Ku darsaday gufaaciyo
Guulaama diriroo
Gelli jabay habeenkii
Kolba gacan ma soo rogay
Qudhaciyo galoolkii
Gunta xididka maw jaray
Dhulka wada galaal iyo
Gabbalaha ma kaga tegey.

Afartaa geddaydii
Dhaha laygu garan jirey.

Gurmashada dagaalkiyo
Gulufkiyo colaadaha
Goobaha naf waagiyo
Halka laysku gawraco
Marka gorodda lays daro
Haddaan dumarku goonyaha
Guubaabo kicinayn
Sida galowga dhiilloon
Illayn geesi qayrkii
Birta kuma gumaadeen!

Gu´ hagaagey oo da´ay
Dhulka geedo jiifaan
Gurya-samo barwaaqa ah
Haddii geeddi lagu furo
Dhallinyaro is gurataa
Gurdan raaca fiidkii
Gole weyn ku kulantoo
Cagta garan-garteediyo

Isu geysa jiibkoo
Googooska luuqdiyo
Gedda sacabka loo jaro
Hablahaa u gaaroo
Garashada codkoodaa
Qof gaboobey kicisoo
Gelbiskiyo mashxaraddaa
Gama'´kaa ilaashee,
Haddaan gabadhi boodeyn
Illayn gegi ciyaareed
Wax ma dhaanto geriyaad.

Haddaan guudka laga jirin
Gudihiisa xaabkiyo
Cayayaanka laga gurin
Marwo dumar garka u xidhan
Illayn guri dugsoon ma leh

Gaadaha habeenkii
Kelidaa galgalashiyo
Ged-geddoonka dhalisoo
Adigiyo go´aagaa
Hadba dhinac u guuroo
Barkintaad gabbood iyo
Gaashaan ka dhigataa
Haddaan guud haldhaaley
Kolba gacan la saarayn
Illayn gogoshu wehel ma leh.

Kuma galo adduunyada
Ninna goonni-socodkoo
Marwo garasho dheer baa
Ninka raga u gudinoo
Iyadaa guddoonkiyo
Gadh-hayaa naftaadiyo
Gaadiidka reerkiyo
Gurgurshaaga noqotoo
Arrin kula gorfaysee
Haddaan gaari kula jirin
Illayn noloshu guul ma leh.

Gocashada xanuunka leh
Waxaan uga gol leeyahay
Go'i waa barbaareey
Gobi waxay ku dhaqantaa
Garab waxay ka dhigataa
Gallad waxay ku dheeftaa
Samo waxay ku gaadhaa
Gololada haweenkee
Hiddaheenna gaarka ah
Hablihii gabowgiyo
Geerida ku sugi jirey,
Hablihii garayskiyo
Xidhan jiray guntiinada,

Hablihii gu' iyo dayr
Sida baarqab golongolay
Dhexda xadhig ku goyn jirey,
Hablihii garaaraha
Gaatan-socodka laafyaha
Sida gorayga ciideed
Gelbin jirey tallaabada,
Hablihii gun iyo baar
Isha gacalo-eegtaa
Gama' aanay ledi jirin,

Hablii talada guunkiyo
Gunti jirey xishoodkee
Hadalkoodu gaabnaa,
Hablihii gef hooyiyo
Qarsan jirey guhaaddee
Hadday goddollo soomaan
Ama gaajo liitaan
Cidi aanay garan jirin,
Hablihii gammaan faras
Iyo geela ugubka ah
Guur-doon ka bixin jirey,
Hablihii Gargaariyo
Guuleed ku curan jirey,
Goldaloolo iyo ceeb
Hablihii ka guban jirey.

Hablahaan gankoodiyo
Hilbahooda gadi jirin,
Haddii aad gumeysaan
Guul guul ku laysaan
Godol qudha ku mooddaan
Gabbalkooda dumisaan
Hadba tooda goosha ah
Ganacdeeda jebisaan
Dadku gabanno-xooriyo
Garacyaley yidhaahdaan,

Innagoo gumowniyo
Dhaqan guurey weeyaan.

Gocashada xanuunka leh
Waxaan uga gol leeyahay
Godob aabbe falay baa
Ubadkiisa gocondhiyo
Gumar shidan ku noqotoo
Gebi dheer ku dumisee
Ninka inan ma-geyda ah
Gol-qaniin ku maalee
Gurrac kaga danaystow,
Waxaad gaaxsanaysiyo
Gashigaad cunaysiyo
Xumahaad gelaysaa
Ruuxay ka go'an tahay
Gabadhaada weeyee
Gefka aad falaysiyo
Waxaad geysanaysaad
Galab kale ka sheekayn.

Gebagebada sheekada
Bal aan soo gunaanado
Guddoonsiiyo jiiftada
Gebigeed adduunyada
Gobol-gobol u qaadoo
Hablo weerar geli kara
Hablo geela dhicin kara
Hablo geesi dili kara
Gobannimana hanan kara
Hablo talada goyn kara
Garta madal ka niqi kara
Garashana iskaga mid ah
Quruxdana ka wada gob ah
Geesteenna mooyee
Geyi kale ma joogaan!

Ilaha Xigashada iyo Raad Raaca Buugga

Xog Ururin: Daraasad madax bannaan oo qoraagu sameeyey, sida Waraysiyo, Wada Sheekaysi iyo Faallooyin xog is-waydaarsi ah oo qoraagu la yeeshay dad war-qabeen ah oo kala duwan xilliyo kala duwan: Dadka qoraagu la kulmay ama xidhiidh kale la yeeshay, xog badan oo ay hayeenna uu buuggan u adeegsaday waxaa ka mid ah Maxamed Ibraahim Ismaaciil-Dhuuhe, Ibraahim Ismaaciil Faarax-Laqan, Tusmo Xasan-Low, Khadiija Maxamed-Qoodaaf, Ifraax Maxamed Cabdillaahi (Ifraax Cirro), Khadra Daahir Afqarshe, Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), Maxamed Yuusuf Cabdi (Keyse), Yuusuf Cismaan Cabdille (Shaacir), Maxamed Xasan (Alto), Cabdillaahi Jaamac Galaal, Maxamed Cabdillaahi Riiraash, Xasan Macallin Maxamuud Cige, Dhuux Digaale Ducaale, Ibraahim X. Ducaale Cabdalle, Canab Jibriil Gaaxnuug, Canab Xasan Aadan, Saynab Maxamuud Yuusuf (Saynab Dhoocil), Hinda Ciise Axmed, Siraad Maxamuud Ducaale, Ifraax Cawil Cali Kabadhe, Cabdirisaaq Cabdillaahi X. Cumar-Camey, Ismaaciil Faarax-Laqan, Cali Raabbi Ducaale Af-xakame iyo Cabdi Samad Axmed Food.

Qoraallo: Maqaallo qoraaga buuggani leeyahay, horena ugu faafay xilliyo kala duwan mareegaha warbaahinta ee Internetka iyo Jaraa'id kala duwan oo ay Jamhuuriya ugu horrayso, waxaana maqaalladaas ka mid ah: Aabbihii Waxbarashada, Madhxinta Af soomaaliga, Guri Waa Haween, Guri Ba'ay, Saddex Bay U Soo Kala Joogeen, Gunno Xujaysan iyo Hargeysa Waxaa Ku Curdan Dhadhay Waddaniyaddii. Maqaalladaas waxaa qaarkood ku negi yihiin oo lagu booqan karaa Mareegaha www.aftahan.com

Cajalado: Silsiladdii Maansada Siinley - ururin iyo duubid abwaanka Yuusuf Cismaan Cabdille (Shaacir)

Buugaag: Dhigaallo iyo buugaag kala duwan oo qoraagu akhriyey daraaso ahaan, qaarkoodna uu ka soo xigtey xog buuggu adeegsadey, kuwa kalena uu ka soo dhimbiil qaatey, waxaana buugaagtaas ka mid ah kuwan hoos ku taxan:

Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), *Hal Karaan*: *Diiwaanka Maansada Hadraawi*, Sept. 1993, Oslo
Khaalid Cali-Guul Warsame, *Haween Waa Hoy iyo Hooyo,* 2005, Drogen
Maxamed Baashe X. Xasan, *Hal Ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi & Suugaantiisa,* May 2004, London
Karen Blixen, *Out of Africa*, 1937, London
Yaasiin Jaamac Nuux (Suldaan), *Nabadshe: Maansada Nabadaynta & Milicsi Suugaaneed*, 2005, London
Axmed Faarax Cali (Idaajaa), *Diiwaanka Maansadii Deelley***:** *Ururin iyo Faallo*
Shukri Cabdulwali Maxammad, *Tarbiyadda Wanaagsan ee Carruurta* Stockholm
Maxamed Sh. Xasan, Scansom, *Diiwaanka Gabayada, Cadadka Afraad***,** Sweden
Faarax Maxamuud Maxamed, *Xasuus Qor*: *Taxanaha Taariikhda Soomaaliya*, 2004, USA, Colombus, Ohio
Cabdillaahi Cawed Cige, *Ladh: Taxanaha Cirsan-ka-yeedh*, 2005, Baggio
Khaliif Ashkir Diini, *Guur iyo Garaad*, 2004, London
Xuseen Cabdi Xalane, *Far Guri*, Mineapolis, USA.
Georgi L. Kapchits, *Hubsiimo Hal Baa La Siistaa: Maahmaahaha Soomaaliyeed*, 2002 Moscow, Russia
Cabdulqaadir Cusmaan Maxamuud (Oromo), *Sababihii Burburka Soomaaliya,* 1999, Canada
Maxamed Daahir Afrax, *Dal Dad Waayey iyo Duni Damiir Beeshay: Soomaaliya Dib Ma U Dhalan Doontaa?* London.

Waan akhriyey buuggan ***Guri Waa Haween***. Buug ka weyn; waa abwaan yare (short encylopedia), waayo xilligan dad aan tiro badnayn baa dhaqanka reer guuraaga soomaalida yaqaan; in ka sii yarna waxa ay la socdaan saamaynta nolosha magaaladu ku yeelatay nolosha reer guuraaga ee soomaalidu ku dhisan tahay. Dhinac buugggu wuxuu abuurayaa ogaansho deegaaneed (environmental awareness); dhinacna wuxuu boorka ka jafayaa ilaha af soomaaligu ka soo butaaco oo ah nolosha miyiga, noloshaas oo murti-nololeed oo badan aan weli lagala soo dhex bixin.

Liibaan Cabdiraxmaan Axmad, Qoraa, Cilmi-baadhe Afka iyo Dhaqanka Soomaalida Manchester, UK

…………………………………………………………………………………………….

The life of people in the countryside is based on the contribution and ability of each person in the community: men, women and children. In this book Maxamed Baashe shows us the role of women in the society and in particular the poetry and songs they compose and perform. This is the first book to look specifically at this and is an important contribution to Somali cultural studies.

Dr. Martin Orwin, Lecturer in Somali and Amharic Languages, Somali Culture and Language Researcher at the School of Oriental and African Studies (Soas), London, UK

……………………………………………………………………………………………

Muddo dheer ayuu taagnaa eber qiraalka uu labka soomaaliyeed u hayo doorka haweenku ku leeyahay dhiska noloshoodu. Dharaarta la arko ee labka soomaaliyeed qiro; ee si aan hagar lahayn uu isula soo mutuxo kaalinta haweenku leeyahay, "***Guri Waa Haween***" waxa maalintaas loo aqoonsan doonaa irriddii ugu horraysey ee qiraalkaas laga soo galay. Waa buug aan ku tilmaami karo dhagixii loogu baaqay ninkii la wareegayey lafta uu dhuuxeeda hungurigu ka galay; wuxuu ku jabsadana waayey ee uu ku baxay hal-hayska ah "Laflow waa dhagax". Hadal iyo murti qoraaga Maxamed Baashe X. Xasan wuxuu ina yidhi "Labkow Guri Waa Haween".

Cabdillaahi Cawed Cige, Qoraa ku xeel dheer Afka iyo Dhaqanka Soomaalida, Liverpool, UK